Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta Rasmiga ah

الرسمية الجريدة

Official Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 11aad** **Muqdisho, APRIL 2024** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BILAHA SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**BILAHA**

**FEBRUARY-MARCH**

**2024**

# TUSMO


**SHARCI LR. 18** Taariikh: 13/03/2024

SHARCIGA QAXOOTIGA & MAGANGELYAO DOONKA Bog 1

**SHARCI LR. 19** Taariikh: 13/03/2024

SHARCIGA XISAAB-XIRKA MIISAANIYADDA 2022 Bog 21

**SHARCI LR. 20** Taariikh: : 13/03/2024

SHARCIGA HOWLGABKA iyo LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA ee DAWLADDA Bog 82

**SHARCI LR. 21** Taariikh: 13/03/2024

SHARCIGA KU BIIRISTA URUR GOBOLEEDKA DHAQAALAHA BARIGA AFRICA Bog 118

**SHARCI LR. 22** Taariikh: 13/03/2024

SHARCIGA ILAALINTA iyo MAAREYNTA DEEGAANKA Bog 137

**SHARCI LR. 24** Taariikh: 31/03/2024

WAX-KA BEDELKA CURUBYADA 1AAD, 2AAD, 3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA Bog 191

**SHARCI LR. 003** Taariikh: 09/03/2023

SHARCIGA HA'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD-SUGUDDA QARANKA Bog 236

**XEER MADAXWEYNE LR. 150** Taariikh: 18/10/2023

XILKA QAADIS ERGAYGII GAARKA AHAA EE XASILINTA IYO ILAALINTA ARRIMAHA RAYIDKA IYO MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE XASLINTA IYO ILAALINTA ARRIMAHA RAYIDKA Bog 237

**XEER MADAXWEYNE LR. 151** Taariikh: 24/04/2023

WAREEJIN IYO DALLACSIIN SARKAAL Bog 238

**XEER MADAXWEYNE LR. 152** Taariikh: 16/11/2023

MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 240

**XEER MADAXWEYNE LR. 153** Taariikh: 16/11/2023

SOO WAREEJIN SARKAAL Bog 241

**XEER MADAXWEYNE LR. 154** Taariikh: 16/11/2023

SOO WAREEJIN SARKAAL Bog 243

**XEER MADAXWEYNE LR. 155** Taariikh: 27/11/2023

MAGACAABISTA TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BADDA IYO DIFAACA XEEBAHA & XIL-KA-QAADIS KU-SIMIHII TALIYAHA CIIDANKA BADDA IYO DIFAACA XEEBAHA Bog 244

**XEER MADAXWEYNE LR. 156** Taariikh: 27/11/2023

MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 246

**XEER MADAXWEYNE LR. 157** Taariikh: 29/11/2023

MAGACAABIS LA-TALIYAHA SARE EE MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA DASTUURKA Bog 247

**XEER MADAXWEYNE LR. 158** Taariikh: 29/11/2023

QIIMAYN IYO KU QAADASHO DARAJO CIIDAN Bog 248

**XEER MADAXWEYNE LR. 159** Taariikh: 29/11/2023

SOO WAREEJIN SARKAAL Bog 249

**XEER MADAXWEYNE LR. 160** Taariikh: 29/11/2023

MAGACAABIS LA-TALIYAHA SARE MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA DIB-U-HESHIINTA Bog 251

**XEER MADAXWEYNE LR. 161** Taariikh: 10/12/2023

MAGACABIS GARSOORAYAAL MAXKAMADAHA GOBALKA BANAADIR Bog 252

**XEER MADAXWEYNE LR. 162** Taariikh: 10/12/2023
MAGACAABIS WAKIILADDA XEER-ILAALIYAAHA GUUD EE QARANKA Bog 254
**XEER MADAXWEYNE LR. 163** Taariikh: 24/12/2023
KU QAAADASHO DARAJO DERAJO CIIDAN Bog 256
**XEER MADAXWEYNE LR. 164** Taariikh: 24/12/2023
DALLANSIIN SARKIIL XIGEENO Bog 258
**XEER MADAXWEYNE LR. 165** Taariikh: 10/12/2023
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 260
**XEER MADAXWEYNE LR. 166** Taariikh: 31/12/2023
DALLACSIIN SARKAAL Bog 261
**XEER MADAXWEYNE LR. 167** Taariikh: 03/01/2024
SOO WAREEJIN IYO QIIMAYN DARAJO ee CIIDANKA BOOLISKA FEDERAALKA Bog 262
**XEER MADAXWEYNE LR. 168** Taariikh: 04/01/2024
KU QAADASHO DERAJO Bog 428
**XEER MADAXWEYNE LR. 169** Taariikh: 07/01/2024
DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEEN Bog 266
**XEER MADAXWEYNE LR. 170** Taariikh: 10/01/2024
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 268
**XEER MADAXWEYNE LR. 171** Taariikh: 10/01/2024
WAREEJIN SARKAAL Bog 270
**XEER MADAXWEYNE LR. 172** Taariikh: 16/01/2024
SOO WAREEJIN IYO QIIMEYN DARAJO EE CIIDANKA BOOLISKA FEDERAALKA Bog 272
**XEER MADAXWEYNE LR. 173** Taariikh: 17/01/2024
MAGACAABIS GUDDIGA QARAN EE DIFAACA MADAX-BANNAANIDA IYO MIDNIMADA DHULEED EE SOOMAALIYA Bog 274
**XEER MADAXWEYNE LR. 174** Taariikh: 05/02/2024
MAGACAABISTA LABADA KU-XIGEEN EE HANTI DHOWRAHA GUUD J.F.S Bog 275
**XEER MADAXWEYNE LR. 176** Taariikh: 11/02/2024
MAGACAABIS GARSOORE Bog 277
**XEER MADAXWEYNE LR. 177** Taariikh: 13/02/2024
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA SOMALILAND Bog 278
**XEER MADAXWEYNE LR. 178** Taariikh: 19/02/2024
WAREEJIN MAS'UULIYADDA MASJIDKA ISBAHAYSIGA ISLAAMKA Bog 279
**XEER MADAXWEYNE LR. 179** Taariikh: 19/02/2024
MAGACAABID XUBIN KAMID NOQONAYSA XUBNAHA MAAMULKA BANKIGA DHEXE (NON-EXUCUTIVE DIRECTORS) Bog 280
**XEER MADAXWEYNE LR. 180** Taariikh: 21/02/2024
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 281
**XEER MADAXWEYNE LR. 181** Taariikh: 21/02/2024
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 283

**XEER MADAXWEYNE LR. 182** Taariikh: 21/02/2024
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 285
**XEER MADAXWEYNE LR. 183** Taariikh: 11/03/2024
APPOINTMENT OF PRESIDENT ADVISOR FOR DEVELOPMENT PROGRAMSS Bog 287
**XEER MADAXWEYNE LR. 184** Taariikh: : 11/03/2024
WAREEJIN SARKAAL Bog 288
**XEER MADAXWEYNE LR. 185** Taariikh: 19/03/2024
MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA & AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA HORUMARINTA IYO DIB-U-DHISKA SOOMAALIYA Bog 289
**XEER MADAXWEYNE LR. 186** Taariikh19/03/2024
CAFIS MADAXWAYNE Bog 291
**XEER MADAXWEYNE LR. 187** Taariikh: 23/03/2024
APPOINTMENT OF SOMALIA REPRESENTATIVE TO THE ORGANIZATION OF THE ISLAMIC CO-OPERATION Bog 296
**XEER MADAXWEYNE LR. 188** Taariikh: 27/03/2024
DALLACSIIN SARKAAL XIGEEN Bog 297
**XEER MADAXWEYNE LR. 189** Taariikh: 31/03/2024
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 298
**XEER MADAXWEYNE LR. 190** Taariikh: 31/03/2024
MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE ARRIMAHA CAAFIMAADKA NAFAQADA Bog 299
**XEER RA'ISUL WASAARE LR. 152** Taariikh: 16/03/2024
XEER: QARAARKA DHAMMEYSTIRKA DHAQANGALINTA SHARCIGA SHAQADA WASAARADDA ARRIMAHA DIBADDA Bog 300
**XEER RA'ISUL WASAARE LR. 153** Taariikh: 16/03/2024
XEER: SIYAASADDA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMAYNTA Bog 331
**XEER RA'ISUL WASAARE LR. 154** Taariikh: 21/03/2024
XEER: HABRAACA DIIWAANGALINTA IYO SUGIDDA MILKIYADDA GAADIIDKA DHULKA Bog 360

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

MADAXWEYNAHA JFS
RECEIVED
21 MAR 2024
BY: SAACID SAXIIX

**SHARCI LR. 18** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**
**SHARCIGA QAXOOTIGA & MAGANGELYO DOONKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0483/B11/24**, ku taariikheysan **24/01/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka''Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka''.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-34-2024
TAARIIKH: 21-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Guuleh
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR. 18** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**
**SHARCIGA QAXOOTIGA & MAGANGELYO DOONKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0483/B11/24**, ku taariikheysan **24/01/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka''Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka''.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



# SHARCIGA QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO DOONKA

## CUTUBKA 1AAD: QODOBBO HORDHAC AH

### Qodobka laad:
### Magaca Sharciga

Sharcigan Waxaa lagu Magacaabaa Sharciga Qaxootiga iyo Magangalyo Doonka.

### Qodobka 2aad:
### Awoodda soo saarista iyo Baaxadda Dhaqan-galka

Sida uu dhigayo Qodobka 37 (2) ee Dastuurka KMG, Barlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa soo saarayaa Sharciga Qaxootiga oo laga hirgalin doono Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya dhammaan dhulkeeda, Badda iyo Berrigaba, Sharcigaas oo nidaaminaya arrimaha la xiriira qaxootiga iyo magangelyo-doonka.

### Qodobka 3aad:
### Eray-bixin

Erayada halkan ku xusan waxaa loo micnaynayaa sida soo socota haddii aan si kale loogu qeexin Sharcigan dhexdiisa:

1. "Golaha Rafcaanka" waxaa loola jeedaa Golaha Rafcaanka ee Qaxootiga lagu dhisay Qodobka 32aad ee Sharcigan.
2. "Codsade" waxaa loola jeedaa qof codsi u soo gudbiyay si waafaqsan Sharcigan si loogu aqoonsado loona ilaaliyo magangelyo-doon ama qaxooti ahaan.
3. "Magangelyo" waxaa loola jeedaa in gabbaad iyo ilaalin ay Dowladda Federaalka ah siiso shakhsiyaadka qaxootinimo loogu aqoonsan karo si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo si waafaqsan Heshiisyada Caalamiga ah ee la xiriira aqoonsashada iyo ilaalinta magangelyo-doonka iyo qaxootiga.
4. "Magangelyo-doon" waxaa loola jeedaa qof sababo siyaasadeed, dagaal ama dhibaateyn uga soo taga dalkii uu caadi ahaan degganaa oo u soo safra Soomaaliya si uu u helo gabbaad, ilaalin iyo qaxootinimo, si waafaqsan sharcigan.
5. "Carruur/ubad" waxaa uu la mid yahay macnaha lagu siiyey Qodobka 29 (8) ee Dasuurka.
6. "Maxkamad" waxaa loola jeedaa Maxkamadda Sare ee heer Federaal taas oo ah Maxkamadda ugu Saraysa Dalka ee Heer Federaal, sida ku cad Qodobka 108 ee Dastuurka.
7. "Hay'adda/Commission" waxaa loola jeedaa Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka ee lagu dhisay Sharci Lr.02 ee soo baxay 21/02/2016
8. "Madaxa Hay'adda/Commissioner" waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Maamulka iyo Sarkaalka ugu Sarreeya ee Fulinta ee Hay'adda

Qaxooti iyo Barakacayaasha Qaranka.

9. "Guddi/Committee" waxaa loola jeedaa Guddiga Go'aaminta Xaaladda Qaxootinimo ee lagu dhisay Qodobka 27aad.
10. "Dalkii uu horey caadi ahaan uu u degganaa" waxaa loola jeedaa dalka uu si joogto ah u degganaa, oo uuna ku haystey ilaalin.
11. "Dalka uu dhalashadiisa haysto" marka laga hadlayo qof haysta dhalashada wax ka badan hal dal, waxaa loola jeedaa mid kasta oo ka mid ah dalalka uu qofkaas dhalashada ka haysto.
12. Xubnaha qoyska" waxaa loola jeedaa:
    (b) Xaaska/ninka ama xaasaska qof qaxooti ah.
    (t) Ilmo kasta oo uu masuul ka yahay, walaalka ama walaasha qofka qaxootiga ah kaas oo ay da'diisu ka yar tahay toban iyo siddeed sano.
    (j) Awoowe, ayeeyo, waalid, ilmo uu awoowe u yahay, oo qofka qaxootiga ah kula nool halka uu deggan yahay mas'uulna uu ka yahay.
13. Koox waxaa loola jeedaa: dad la cararay cabsi maangal ah kuwaas oo aan lid ku aheyn diinta Islaamka, dhaqanka Soomaaliyeed iyo Shuruucda Dalka.
14. "Qaxooti" waxaa loola jeedaa shakhsi ama koox la cararaya/cararaysa cabsi sal leh oo ah in lagu waxyeelaynayo sabab la xariirta: midab, diin, dhalasho, ka mid noqosho koox ama urur siyaasadeed, kaas oo dibedda ka jooga dalkii uu u dhashay, awoodin ama haysan ilaalinta dalkii uu u dhashay; qofkaas oo aan haysan degenaansho, joogana dal dibedda ka ah kii uu u dhashay oo ay hay'ad awood u leh ugu aqoonsatay si waafaqsan xeerkan ama si waafaqsan sharciga xuquuqul-insaan oo caalami ah ama mid goboleed oo la xiriira xaaladda qaxootinimo kaasoo ay tahay in ay u hoggaansanto Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
15. "Xeer-nidaamiyeyaal" waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyeyaal uu dejiyo Wasiirka Arrimaha Gudaha oo hoos imaanaya Sharcigan.
16. "Dastuurka" waxaa loola jeedaa Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya 2012.

## Qodokba 4aad: Ujeedada Sharciga

Ujeeddada Sharcigan waa in:

1. Uu noqdo xeer iyo qaanuun guud oo loo adeegsado aqoonsashada iyo ilaalinta qaxootiga iyo magangelyo doonka; iyo
2. Lagu saleeyo Shuruucda Guud ee loo adeegsanayo aqoonsashada, ilaalinta iyo maareynta qaxootiga iyo magangelyo- doonka.

## Qodobka 5aad:
## Mabaa'diida Hagaysa

Aqoonsashada iyo ilaalinta qaxootiga iyo magangelyo-doonka ee Sharcigan dhexdiisa

waxaa hagi doona mabaa'diidan soo socata:

1. Ixtiraamidda karaamada asalka ah, madax-bannaanida shakhsi ahaaneed, oo ay ka mid tahay in uu qofku xor u ahaado go'aansashada waxa uu doonayo, madax-bannaanida shakhsiyaadka.
2. Sinnaan iyo takoor la'aan.
3. Ixtiraamidda kala duwanaanshaha iyo aqbalidda shakhsiyaadka anaafada ah
4. Waa in si weyn loo tixgliyaa sida danta ugu wanaagsan ay ugu jirto carruurta.
5. Mid-ahaanshaha qoyska.
6. In aan khasab lagu celin Karin iyo
7. Iskaashi caalami ah oo laga yeesho arrimaha la xiriira magangelyada iyo dib-u-dejinta.
8. Waafaqsanaanta dhaqanka Soomaaliyeed iyo Shuruucda Dalka.

## CUTUBKA 2AAD: AWOODAHA SHARCI, XUQUUQAHA İYO WAAJIBAADYADA KU SAABSAN ARRIMAHA LA XIRIIRA MAGANGELYO-DOONKA İYO QAXOOTIGA

### Qodobka 6aad:
### Awoodda Bixinta Magangelyada ama Qaxootinimada

1. Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa Sharcigan u siinayaa awood ay u madax bannaan tahay oo magangelyo ama qaxootinimo ku siiso ama ugu diiddo qof kasta ama shakhsiyaad kasta oo tilmaamo gaar ah wadaaga.
2. Go'aan kasta oo ay Dowladda Federaalka ah iyada oo adeegsaneysa awooddeeda ay magangelyo ama qaxootinimo ku siiso qof ama shakhsiyaad tilmaamo gaar ah wadaaga si waafaqsan Sharcigan waa fal nabadgelyo iyo mid bani'aadamnimo, waana in aanu qof ama dal u fasiran mid isaga lagu colaadinayo, ama in uu yahay fal cadaawad ama gardarro ay waddo Dowladda Federaalka ah.

### Qodobka 7aad:
### Waajibka Hay'adda Ka Saaran in ay Iskaashi La Sameyso Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga

Hay'addu iyadoo gudanaysa hawsheeda sida uu dhigayo Sharcigan, waxay iskaashi la yeelanaysaa Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga.

## CUTUBKA 3AAD: HABRAACA SOO CODSASHADA, GO'AAMINTA İYO U AQOONSASHADA QAXOOTINIMADA

### Qodobka 8aad: Soo-codsashada Qaxootinimada

1. Qof kasta ayaa qaxootinimo u soo codsan kara si waafaqsan Sharcigan haddii uu qofkaas dhex joogo dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Qof kasta oo soo gala Soomaaliya oo doonaya in uu dalka ku joogo qaxootinimo si waafaqsan Sharcigan, waa in islamarka uu soo galo Soomaaliya ugu dambeyn soddon maalmood gudahooda oo ka bilowda taariikhda uu soo galay asagoo tagaya hay'addaha soo socdo midkood:
   (b) Saldhigyadda ama baraha kontorool ee Booliska uu leeyahay.
   (t) Xarumaha hay'adda Qaxootiga Qaranka.
   (j) Xarumaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaaliya.

3. Mid kasta oo ka mid ah Hay'addaha lagu cayimay faqradda Labaad (2), oo qofka codsi soo gudbinaya uu u yimaado oo uu ogeysiiyo in uu doonayo in uu soo codsado magangelyo si waafaqsan Sharcigan, waa in uu sida uu dhaqsida badan ee suuragalka ah codsadaha ugu soo diraa xafiiska Hay'adda ee ugu dhaw si uu u soo gudbiyo codsi rasmi ah oo uu ku codsanayo magangelyo.
4. Marka loo soo diro Hay'adda iyada oo la raacayo faqradda (3), Madaxa Hay'adda waa in uu —
   (b) Codsadaha kaar ama waraaq aqoonsi qaxootinimo ugu sameeyaa qaabka loogu talagalay taas oo caddaynaysa in uu yahay magangelyo-doon;
   (t) Codsadaha uu, isaga oo adeegsanaya luuqad uu fahmayo, ogeysiiyaa xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha uu ku leeyahay Sharcigan dhexdiisa;
   (j) Codsadaha siiyaa macluumaadka iyo hagitaanka lagama maarmaanka ah ee la xiriira habraaca loo marayo codsiga qaxootinimada
   (x) Codsadaha siiyaa macluumaad la xiriira joogitaanka iyo halka uu Soomaaliya kaga yaallo xafiiska ugu dhow ee Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga; iyo
   (kh) Haddii ay lagama maarmaan tahay, codsadaha uu gacan ka siiyaa la xiriirridda wakiil matalaya Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga.

5. Codsiga lagu codsanayo magangelyada uu dhigayo Sharcigan waa in uu u qornaadaa qaabka loogu talogalay, waana in ay ku jirtaa bayaan sheegaya in macluumaadka ku jira codsiga run yahay.

## Qodobka 9aad:
## Xaq-u-lahaanshaha in La Dhegeysto

Ka-hor inta aan go'aan laga gaarin codsi kasta, Guddiga Go'aaminta Qaxootinimada waa in codsadaha siiyaa fursad lagu dhegeysto waana in haddii ay lagama maarmaan tahay ay siisaa turjumaan.

## Qodobka 10aad:
## Mamnuucidda in Xaaladaha Qaar Tallaabo Sharci ah Laga Qaado Codsadaha

1. Waa in qof kasta ama xubin kasta oo qoys ka tirsan aan tallaabo sharci ah looga qaadin sabab la xiriirta in uu sharci-darro ku joogo Soomaaliya: --

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

(b) Haddii qofka uu soo gudbiyey codsi rasmi ah sida uu dhigayo Qodobka 8aad oo uu ku codsanayo in loo aqoonsado qaxootinimo, illaa go'aan laga gaaro codsiga, halka ay ku habboon tahayna, qofkaasi ka soo dhammeysto Xuquuqda Racfcaan ee uu dhigayo Qodobka 31aad; ama

(t) Haddii qofka noocaas ah noqdo qaxooti.

**Qodobka 11aad:**
**Shuruudaha U-aqoonsashada Qaxootinimada**

1. Qofka waxaa qaxootinimo loo aqoonsan karaa haddii: —
   (b) Ay jirto cabsi muuqata oo ah in uu la kulmayo ciqaab ku saleysan sinji, diin, dalka uu u dhashay, sababtoo ah asagoo kasoo jeedo koox, bulsho ama la yimid fikir siyaasadeed, asagoo ka waayey ilaalin ku filan naftiisa, maalkiisa iyo xuquuqdiisa.
   (t) Weerar uu dal kale ku soo qaadey, qabsasho, xukun shisheeye ama dhacdooyin kale oo carqaladeeya kala-dambeyntii guud ahaan ama qayb kamid ah dalka uu ka soo jeedo ama dhalashadiisa haysto, uu qofku ku khasbanaado in uu ka tago dalka uu caadi ahaan u degganaa si uu magangelyo uga doonto dal ka baxsan dalkii uu asal ahaan ka soo jeeday ama uu dhalashadiisa haysto; ama
   (j) Qofka qaxootinimo loogu aqoonsaday waajib ka dhashey heshiis ay qayb ka tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya, ama sharci dhaqangal ka ah Soomaaliya ka hor intii aanu bilaaban Sharcigan.

2. Marka uu qofku haysto dhalahsada dalal mid ka badan, ereyga "dalka uu u dhashay" waxaa loola jeedaa mid kasta oo ka mid ah dalalka uu dhalashada ka haysto, waana in aan qof loo arkin in uusan haysan ilaalinta dalka uu u dhashay haddii, iyada oo aaney jirin sabab macquul ah oo tilmaaysa jiritaanka cabsi muuqata, uusan qofkaasi ilaalin ka doonan mid ka mid ah dalalkaa uu ka haysto dhalashada;

**Qodobka 12aad:**
**Aqoonsashada Koox, Qulqul Ballaaran iyo Ilaalin Ku-meelgaar ah.**

1. Madaxa Hay'adda waxaa uu haddii uu u arko in shakhsiyaad koox gaar ah ay buuxinayaan Shuruudaha u-aqoonsashada qaxootinimada si waafaqsan Qodobka 10aad, waxa uu ku dhawaaqi karaa in shakhsiyaadka noocaas ah ay yihiin qaxooti loo qaateen ah xataa haddii codsi rasmi ah oo loogu aqoonsanayo xaaladdooda qaxootinimo aysan soo gudbin dhammaantood ama midkood.
2. Marka uu Madaxa Hay'adda soo saaro baaq waafaqsan faqradda (1), Madaxa Hay'addu waa in qoraal uu ku ogeysiinayo baaqa u soo saaro si hubineysa in ogeysiiska si sax ah loo war-gaarsiiyo ama lagu baraarujiyo, hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowlliga ahayn ee u habboon ee ka mas'uul ah arrimaha la xiriira magangelyo-doonka iyo qaxootiga, iyo shakhsiyaadka noocaas ah ee uu baaqu

khuseeyo.

3. Marka qof laga soo reebo dadka baaqa loo soo saaray si waafaqsan faqradda (1) kama reebeyso in qofkaasi uu Guddiga ka codsado in ay u aqoonsadaan qaxootinimo si waafaqsan Sharcigan.
4. Haddii ay dhacdo in dad badan oo magangelyo-doon ah ay ku soo qulqulaan Soomaaliya, waa in Madaxa Hay'adda uu isaga oo la tashanaya Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u- heshiisiinta, soo saaraa amar magangelyo-doonka u oggolaanaya in ay degaan soomaaliya iyaga oo ah shakhsiyaad ilaalin ku-meelgaar ah la siiyo iyada oo aan looga baahneyn in marka hore xaaladdooda qaxootinimo loo go'aamiyo si waafaqsan Qaybtan;
5. Baaqa loo soo saaro si waafaqsan faqradda (4) waxaa uu shaqeynayaa muddo laba sanadood ah oo ka bilaabata taariikhda la soo saaro baaqa, ama ilaa ay meesha ka baxdo sababta keentay qulqulka xooggan ee ay Soomaaliya kaga soo qulqulayaan dalka ay ka soo jeedaan ama caadi ahaan deggan yihiin shakhsiyaadka baaqa la soo saarey la xiriiro;
6. Joojinta ilaalinta ku-meelgaarka ah ee Madaxa Hay'adda bixiyey isaga oo raacaya faqradda (4) kama reebayso shakhsi ka mid ah kooxda magangelyo- doonka ah ee baaqu la xiriiro in uu Guddiga ka codsado in u oggolaado in qaxootimo loogu aqoonsado si waafaqsan Sharcigan;
7. Marka dad magangelyo-doon ah loo oggolaado in ay degaan Soomaaliya si waafaqsan faqradda (4), waa in ay shakhsi ahaan u yeeshaan dhammaan xuquuqaha iyo xoriyaadka, loolana dhaqmo si waafaqsan sida guud ee loola dhaqmo magangelyo-doonka iyo qaxootiga ee tilmaamayo Sharcigan;

**Qodobka 13aad:**
**Dejinta Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga**

1. Madaxa Hay'adda waa in uu isaga oo la tashanaya Hay'adaha Dowladda, kuwa aan dowliga ahayn iyo Hay'addaha Caalamiga ah fududeeyaa in xarun qaabilaad ama xero la dejiyo qaxootiga loo wareejiyo magangelyodoonka ku soo qulqula Soomaaliya, waxaana xaruntaasi qaabilaadda ama xerada, haddii amniga qaranka iyo kala-dambeynta ay waajibineyso, waxaa laga dhigi karaa meel ka fog halka ay dalka ka soo galeen ama xuduudda, ama meesha uu Madaxa Hay'adda oo latashanaya bulshooyinka degaanka ee martigelinaya, uu go'aamiyo;
2. İyada oo aan wax loo dhimin macnaha guud ee foqradda (1) shakhsi magangelyo-doon ah waxaa uu si khiyaari ah u degi karaa xarun qaabilaad ama xero qaxooti;
3. Marka magangelyo-doon soo gudbiyo codsi uu ku doonayo in loogu aqoonsado qaxootinimo, inta la sugayo go'aanka laga qaadanayo codsigiisa, waxaa uu leeyahay xaqa xornimada dhaqdhaqaaqa, haddii aan loo xannibin sababo la xiriira amniga qaranka, kala-dambeynta ama caafimaadka guud ee dadweynaha;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**Qodobka 14aad:**
**U-diididda Qaxootinimada**

1. Waa in aan Qof loo siinin qaxootinimo si waafaqsan Sharcigan haddii qofka;

(b) Uu galay dembi ka dhan ah nabadda, dembi dagaal, ama dembi ka dhan ah bani'aadamnimada oo ku qeexan mid ka mid ah Shuruucda caalamiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay dhinac ka tahay, oo ay ku jiraan qodobbo ku saabsan arrimo la xiriira dembiyada noocaas ah;

(t) Uu dembi culus oo aan siyaasad ahayn ku soo galay dibadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka hor intii uusan iman oo aan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u aqoonsan magangelyo doon ama qaxooti ahaan;

(j) Uu dambi culus oo aan siyaasad ahayn ku galay gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ka dib imaanshiyihiisa ama ku qaabilaadiisa Soomaaliya Qaxooti ahaan;

(x) Lagu helo in uu galay falal dembi ah oo ka dhan ah ahdaafta iyo mabaadi'ida Qaramada Midoobay ama Midowga Afrika; ama,

(kh) Isaga oo haysta dhalashada dalal mid ka badan, uusan ka raadsan ilaalin mid ka mid ah dalalkaa uu qofkaas ka haysto dhalashada, oo uusanna haysan sabab macquul ah oo ku saleysan cabsi muuqata oo ah in uu la kulmayo ciqaab, oo uu magangelyo uga soo doono Soomaaliya;

**Qodobka 15aad:**
**Kala-noqoshada Qaxootinimada**

1. Haddii Guddigu uu ku qanco in ay jiraan sababo macquul ah oo loo aamini karo in Qof loo aqoonsaday qaxooti ay ahayd in aan sidaa loo aqoonsan, ama ay meesha ka baxday qaxootinimadiisa si waafaqsan Sharcigan, Guddigu waxa uu waqti kasta, uu qofkaas kala noqon karaa qaxootinnimada;
2. Ka hor inta uusan qaadan go'aan ah in uu qaxootinimada uu qof ugala noqdo si waafaaqsan faqradda (1) Guddigu waa in: -

(b) Qofka uu ogeysiiyaa ugu yaraan soddon maalmood ko hor in uu ku talo jiro in uu kala noqdo qaxootinimada; iyo

(t) Qofka uu siiyaa fursad logu dhegeysto, oo uu ku soo bandhigo caddeyn ama macluumaad uu ku difaacayo qaxootinimadiisa ama eedeyn kasta oo kale oo isaga/iyada ka dhan ah;

3. Ka dib marka uu dhegeysto qofka ay la xiriirto kala noqoshada qaxootinnimada, Guddigu waa in uu go'aankiisa oo qoraal ah ku wargeliyo qofkaas, isaga oo la wadaagaya sababaha uu u cuskaday;
4. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Guddigu gaaray si waaaqsan Qodobkan waxaa uu soddon maalmood oo ka bilaabato taariikhda uu helo ogeysiinta qoraalka ah ee go'aanka, rafcaan u qaadan karaa Golaha Rafcaanka.

**Qodobka 16aad:**
**Ka-suulidda Qaxootinimada ee Xaaladaha Qaar**

1. Qofku ma Sii ahaanayo qaxooti uu aqoonsan yahay Sharcigan haddii qofkaasi:-
   (b) Uusan u qalmin in loo aqoonsado qaxootinimo mid ka mid ah sababaha lagu sheegay Qodobka 14aad daraaddood;
   (t) Qaxootinimada loogola noqdo si waafaqsan Qodobka 15aad;
   (j) Si khiyaari ah uu diyaar ugu noqdo in uu ka faa'iideysto ilaalinta dalka uu haysto dhalashadiisa;
   (x) Ka dib markii uu horey u lumiyey u dhalashadii dal, uu si khiyaari ah dib ugu helo dhalashadii dalkiisa;
   (kh) Uu helo dhalashada dal kale, oo uu ilaalin ka helo dalka cusub ee uu dhalashadiisa helay;
   (d) Si khiyaari ah noloshiisa ugu dhiso dalkii uu ka soo tegey, ama dal dibadda ka ah oo uu ku negaaday, cabsi uu ka qabo dhibaateyn daraaddeed;
   (r) Aan loo Sii aqoonsan karin qaxootinimo maaddaama xaaladihii keenay in loo aqoonsado qaxootinimo ay meesha ka baxeen, laakiin uu weli diiddan yahay in uu ilaalin ka helo dalka uu dhalashadiisa haysto; ama;
   (s) markii uu lumiyey dhalashadii dal, uu diido in uu ku noqdo dalka uu horey si caadi ah uu u degganaa;

2. Xukunka faqradda (1) (s) waa in aan lagu xukumin qof sabab lagu qanci karo u hoysta in dhibaateyn horey loogu geystay daraaddeed u diidey in uu ka faa'iideysto ilaalinta dalkiisa, ama uu ku noqdo, hadba tii ay arrintu la xiriirto;
3. marka is-beddellada aasaasiga ah ee ay ka hadleyso faqradda (1) (r) ay ka dhacaan dalka uu dhalashadiisa haysto ama dalka uu horey si caadi ah ugu noolaan jirey qof qaxooti ah ama dad tilmaamo gaar ah wadaaga oo qaxooti ah oo magangelyo laga siiyey Soomaaliya, Guddigu waa in uu isaga oo kaashanaya Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga, uu daraaseyn iyo xaqiijin ku sameeyaa:
   (b) nooca is-beddellada; iyo
   (t) in is-beddelladu ay yihiin kuwo muddo gaaban soconaya ama ay yihiin kuwo waaraya;

4. Marka uu sameynayo daraaseynta isaga oo daba jooga faqradda (3), Guddigu waa in uu tixgeliyaa xaaladaha loo cuskaday bixinta u aqoonsoshada qaxootiga ama kooxda qaxootiga ah ee tilmaamaha gaarka ah wadaaga, midda ay tahayba;
5. Ka dib daraaseynta iyo xaqiijinta, Guddigu waa in uu, isaga oo kaashanaya Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga, go'aamiyaa;
   (b) In aqoonsiga qaxootinimo ee qofka qaxootiga ah ama kooxda dadka tilmaamaha gaarka ah wadaaga ee qaxootiga ah ee ay arrintu la xiriirto ay meesha ka baxayso islamarkiiba iyo in kale;
   (t) Haddii laga hadlayo koox dad qaxooti ah oo tilmamaamo gaar ah wadaaga,

sida xuquuqaha shakhsiyaadka qaxootiga ah ay u leeyihiin in codsiyadooda ay ku doonayaan qaxootinimada mid kasta gaarkiisa loo eego; iyo

(j) Cawaaqibka iyo waxyaabaha kaga imaan kara qaxootigc shakhsi ahaan amo koox shakhsiyaad tilmaamo gaar ah wadaaga oo qaxooti ah (midda ay tahayba) ee uu saameeyey go'aanka keenaya in laga noqdo qaxootinimodii loo oggolaaday;

## CUTUBKA 4AAD:
## XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADYADA MAGANGELYO- DOONKA İYO QAXOOTIGA LA AQOONSADAY

### Qodobka 17aad:
### Xuquuqda Sinnaanta iyo Takoorid-la'aanta

1. Sharciga waa loo siman yahay, waxaana uu qof kasta xaq u leeyahay ilaalin sinnaan ku dhisan iyo in loo sinnaado waxtarka sharciga, iyada oo aan cidna lagu takooreynin sababaha lagu xusay faqradda (2).
2. İyada oo aan wax loo dhimin macnaha guud ee faqradda (1), magangelyo-doonka iyo qaxootiga waa in aan loo geysan takoor toos ah iyo mid aan toos ahaynba sabab kasta ha looga qiil dhigtee, haddii ay tahay da', sinji, midab, jinsi, naafanimo, gobol, dalka uu u dhashay, xubinnimo koox bulsho gaar ah ama fikir siyaasadeed;

### Qodobka 18aad:
### Xuquuqda soo gelidda, magangelyo-doonka iyo qaxootiga

1. Qof kasta oo buuxiyay shuruudaha ku xusan qodobka 11aad ee sharcigan wuxuu xaq u leeyahay in uu soo galo dalka, loona aqoonsadao magangliyo - doon mana jirto sifo sharci ah oo loogu diidi karo qaxootinnimada haddii:
   (b) Qofkaasi ay u badan tahay in uu halis u galo dhibaateyn ama jirdil loogu geysanayo sinjigiisa, diintiisa, dalka uu u dhashay, xubinnimadiisa koox bulsho oo gaar ah ama fikir siyaasadeed daraaddood; ama
   (t) Noloshiisa, amaankiisa jireed ama xorriyaddiisa, ay u badan tahay in, halis loo geliyo sababo la xiriira weerar uu dal kale ku soo qaaday, qabsasho, xukun shisheeye ama dhacdooyin kale oo carqaladeeya kala dambeyntii guud ahaan ama qayb kamid ah dalka uu u dhashay ama uu horey caadi ahaan u degganaa;

2. Inkasta oo ay jirto faqradda (1), haddana qof qaxooti ah ama magangeliyo- doon ah ayaa loo diidi karaa in uu soo galo Jamhuuriyadda Federaaka Soomaaliya, laga eryi karaa ama laga celin karaa Soomaaliya oo la geyn karaa dal kale, ama laga qaadi karaa tallaabooyin kuwaas la mid ah haddii ay jiraan sababo macquul ah oo uu ku qanci karo Wasiirka Arrimaha Gudaha kuwaas oo muujinaya in qofka magangelyo-doonka ama qaxootiga ah;

(b) Uu halis ku yahay amniga qaranka;
(t) Ay maxkamad awood u leh ku heshey dembi culus, iyo in go'aankii ugu dambeeyay iyo dembi-ku-helistaa aan rafcacn kale looga qaadan maxkamad iyada ka sarreysa; ama
(j) Dembiga lagu helay qofka magangeliyo-doonka ama qaxootiga ah, ee looga hadlay faqradda (t), uu yahay mid halis ku ah bulshada;

3. Marka uu go'aaminayo in qof magangeliyo-doon ama qaxooti ah uu halis ku yahay amniga qaranka iyo in kale, ama halis ku yahay bulshada, Wasiirka Arrimaha Gudaha waxaa uu tixgelin doonaa;
(b) Mabaa'diida qawaaniinta caalamiga ah;
(t) Shuruucda iyo protocollada caalamiga ah iyo kuwa goboleed ee qabanaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dalka qofka codsadaha ah lagu maxkamadeeyay laguna helay dembiga, la xiriira;
(x) Xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee shakhsiga; iyo
(kh) Kor-u-qaadidda iyo ilaalinta xuquuqaha magangelyo- doonka iyo qaxootiga;
(d) Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo
(r) Sharciga dalka uu qofka codsadaha ah lagu maxkamadeeyay laguna helay dembiga;

4. Qofka aan ku qancin go'aanka uu Wasiirka Arrimaha Gudaha qaatay si waafaqsan qaybtan waxaa muddo kow iyo labaatan maalmood ah oo ka bilaabata marka uu soo baxo go'aanka, waxa dibu-eegis ka codsan karaa inay ku sameyso Maxkamadda Sare ee heer Federaal;

**Qodobka 19aad:**
**Xaqqa Magangelyo-doonka**

1. Qofka magangelyo-doonka ah ee si waafaqsan Qodobka 8aad u soo codsada in loo aqoonsado qaxootinimo waxaa uu xaq u leeyahay in uu sii joogo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
(b) llaa Guddigu go'aan ka gaarayo codsigiisa; ama;
(t) Haddii guuleysan waayo codsigiisa, illaa ay kaga dhammaanayaan dhammaan xalalka maamul iyo kuwa sharci ee arrintaas la xiriira;

2. Iyada oo aan wax loo dhimeyn sharci kasta oo qoran oo sheegaya taas beddelkeeda, qof kasta oo maganelyo-doon ah iyo dhammaan xubnaha qoyskiisa waxaa lagu dhaqayaa Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Qof kasta oo magangelyo-doon ah waxa xaq u leeyahay; -
(b) In la siiyo kaar aqoonsi oo ka markhaati-kacaya qaxootinimadiisa, iyo;
(t) Waxbarasho

4. Xuquuqaha magangelyo-doonka ee lagu cayimey faqadaha (1) iyo (3) waxaa sidoo kale la siinayaa qoysaska magangelyo doonka ah;



## Qodobka 20aad:
## Xaqa Qaxootiga

1. Iyada oo aan wax loo dhimin sharci kasta oo qoran oo tilmaamaya taas beddelkeeda, ayaa qof kasta oo qaxootinimo loogu aqoonsado Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhexdeeda, iyo xubnaha qoyskiisa, waa in ay helaan xuquuqaha iyo xorriyaadka ay dhigayaan Shuruucda caalamiga ah ee la xiriira qaxootiga ee ay tahay in ay u hoggaansanto Soomaaliya;
2. Qof kasta oo qaxooti ah iyo xubnaha qoyskiisa (haddiiba uu leeyahay) waa in ay;
   (b) Helaan xuquuqda ah in ay sii joogaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gudaheeda muddada loo aqoonsan yahay qaxootinimada oo tilmaamayo sharcigan;
   (t) La siiyo kaarar aqoonsi oo ka markhaati kacaya qaxootinimadooda;
   (j) La siiyo dokumenti Safar oo ay ugu safri karaan Soomaaliya dibaddeeda si waafaqsan mucaahaddooyinka iyo Heshiisyada ay tahay in ay u hoggaansanto Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya; iyo
   (x) Waa in ay helaan xuquuqo kale, kana soo baxaan waajibaadyada kale ee ku xusan;

      (i) Qodobbada Heshiiska Qaramada Midoobay ee La Xiriira Qaxootinimada 1951,
      (ii) Borotokoolka La Xiriira Qaxootinimada, 1967, iyo;
      (iii) Heshiiska Ururka Midowga Afrika ee Lagu Maamulayo Arrimaha Gaarka u ah Dhibaatooyinka Qaxootiga Afrika jooga, 1969.

## Qodobka 21aad:
## Xuquuqaha Xubnaha Qoyska

1. Si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo qoran, xubnaha qoyska ee qofka qaxootiga ah waxa ay xaq u leeyihiin in ay sii joogaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya muddada qofka qaxootiga ah uu joogo Soomaaliya, waxaana ay yeelanayaan dhammaan Xuquuqaha iyo waxtarka kale ee uu helayo qofka qaxootiga ah;
2. Haddii xubin ka tirsan qoyska qofka qaxootiga ah uu Soomaaliya u sii joogo sababta ku xusan faqradda (1), oo uu qoyska uu ka tirsan yahay kaga baxo sabab Guur gaaridda da'da qaangaarka, ama ay meesha ka baxdo ku- tiirsanaantiisii qofka qaxootiga ah, waxaa uu isna xaq u leeyahay in uu Sii joogo Soomaaliya;
3. Haddii qof qaxooti ah ay kala tagaan xaaskiisa/ninkeeda, qof kasta oo waxyar ka hor geerida ama furriinka ku joogay Soomaaliya sababta ay tilmaameyso faqraddan isaga oo ah xubin ka tirsan qoyska qofka qaxootiga ah, qofkaas waxaa uu xaq u leeyahay in uu Sii joogo Soomaaliya;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 22aad:**
**Ilaalinta Gaarka ah ee ay Helayaan Dadka Nugul**

1. Hay'addu waa in ay qaaddaa tallaabooyinka ay u aragto in ay lagama maarmaan u yihiin in la ilaaliyo xuquuqaha magangelyo-doonka iyo qaxootiga si waafaqsan Sharcigan iyo Shuruucda kale ee Dalka iyo qawaaniinta Cadamiga ah ee xuquuqaha aadanaha ee ay tahay in ay u hoggaansanto Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Iyada oo gudanayso waajibaadyada uu saarayo Sharciga, Dowladda Federaalku waa in ay dadaal gaar ah ku bixisaa ilaalinta danaha Dadka nugul, oo ay ka mid yihiin haweenka, carruurta aan la wehelin iyo kuwo oy kala maqan yihiin qoyskoodu, waayeelka, shakhsiyaadka naafada ah iyo Dadka kale ee nugul ee leh baahiyo gaar ah oo u baahan in la ilaaliyo.

**Qodobka 23aad:**
**Dib-u-celin Khiyaari ah**

Qof kasta oo magangelyo-doon ama qaxooti ah waxaa uu xaq u leeyahay in uu si iskiisa ah u doonto dib-u-celin si khiyaari ah looga celinayo Soomaaliya laguna celinayo dalkii uu dhalashadiisa haysto ama uu horey caadi ahaan u degganaa si ammaan ah oo sharaf ku dheehan tahay.

**Qodobka 24aad:**
**Waajibaadyada Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga**

Qofka magangelyo-doonka ama qaxootiga ah waxaa waajib ku ah in uu ixtiraamo uuna u hoggaansamo shuruucda Dalka iyo xeer-nidaamiyeyaasha waqtigaa dhaqangalka ka ah Soomaaliya, iyo in u hoggaansmao Shuruucda caalamiga ah ee qabanaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 25aad:**
**Dal-ka-cayrinta Qaxootiga Marka ay Jiraan Xaaladaha Qaar.**

1. Iyada oo aan wax loo dhimin sida guud ee u hadlayo Qodobka 18aad, qof qaxooti ah oo si sharci ah ku deggan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in aan laga cayrin dalka marka laga reebo sabab la xiriirta amniga Qaranka iyo nidaamka dalka;
2. Go'aanka dalka looga cayrinayo qof qaxooti ah iyada oo la dabajoogo faqradda (1) waxaa gaaraya Wasiirka Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, iyada oo lala tashanayo Madaxa Hay'adda waana in uu gaaraa si waafaqsan qawaaniinta dalka, kuwa caalamiga ah iyo mabaa'diida guud ee tallaabo-qaad maamul oo xaq ku dhisan;
3. Marka ay joogto faqradda (2), iyo ka hor inta uusan gaarin Wasiirka Arrimaha

Gudaha go'aanka la xiriira Qodobkan, waa in qofka magangleyo doonka ah ama qaxootiga ah ee uu go'aanku la xiriiro siiyaa fursad ku soo bandhigo kiiskiisa, uuna kaga jawaabo eedeymaha isaga ka dhanka ah ee loo soo jeediyay;

4. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Wasiirka Arrimaha Gudaha gaaray si waafaqsan Qodobkan waxaa uu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare, marka la codsado in dib-u-eegis lagu sameeyo go'aanka, waa in la hakiyaa fulinta go'aankii wasiirka illaa Maxkamadda ay ka gaarto go'aan kama- dambeys ah iyada oo Maxkamaddu ay soo saareyso laba middood;
   (b) In ay adkeyso go'aanka lagu ceyrinayo qofka qaxootiga ah; ama
   (t) In ay buriso go'aanka lagu ceyrinayo qofka qaxootiga ah, oo ayna amar ku bixiso in la aqoonsado qaxootinimadiisa;
5. Maxkamaddu waxa ay, iyada oo ka duuleysa codsiga uu soo gudbiyey qofka laga soo saarey amar lagu ceyrinayo, waxa ay joojin kartaa fulinta amarka muddo ay Maxkamaddu u aragto in ay caqli-gal tahay si qofka qaxootiga ah loo siiyo waqti uu ku raadsado dal kale oo uu tegi karo oo aan ahayn dalka la doonayo in lagu celiyo.

### Qodobka 26aad:
### Xabsi-ku-hayn Ku-meelgaar ah Muddada La Sugayo Cayrinta

1. Qofka ceyrintiisa laga soo saaray amar waafaqsan Qodobka 25aad waa la soo qaban karaa waana la xiri karaa marka uu amar ka soo saaro Madaxa Hay'adda ka hor inta aan la cayrin haddii Madaxa Hay'addu uu fikirkiisu yahay;
   (b) In la soo qabto Lana xiro qofka qaxootiga ah haddii ay lagama maarmaan u tahay fulinta cayrinta; ama
   (t) Haddii aan la soo qaban Lana xirin, in qofka qaxootiga ah halis ku noqonayo amniga qaranka ama kala-dambeynta.

## CUTUBKA 5AAD: GUDDIGA GO'AAMINTA QAXOOTINIMADA

### Qodobka 27:
### Dhisidda iyo Xubnaha Guddiga

1. Waxaa la dhisayaa Guddi loo yaqaanno Guddiga Go'aaminta Qaxootnimada oo ka koooban Sagaal (9) xubnood oo ay seddex (3) dumar tahay waxayna noqonayaan sidan soo socta:
   (b) Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka, oo noqonayana guddooomiyaha Guddiga.
   (t) Wakiil ka socda Hay' adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka oo noqonaya Xoghaynta Guddiga.
   (j) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

(x) Wakiil ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda JFS.
(kh) Wakiil ka socda Wasaaradda Amniga Gudaha.
(d) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Dibadda
(r) Wakiil ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
(s) Wakiil ka socda Wasaaradda Caddaaladda; iyo
(sh) Wakiil ka socda Taliska Ciidanka Booliska Federaalka.

2. Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka wuxuu soo Magacaabayaa Guddiga marka uu helo soo jeedinta Guddomiyaha Hay'adda.
3. Wakiil ka socda Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga ayaa lagu martiqaadi karaa in uu noqdo xubin Goobjoog ka ah kulamada guddiga.

**Qodobka 28aad:**
**Hawlaha Guddiga**

Hawlaha guddiga waxaa ka mid ah:

1. Kormeeridda iyo go'aaminta aqoonsashada qaxootinimo ee shakhsiyaadka Soomaaliya ku ah magangelyo-doon iyo qaxootiga si waafaqsan Sharcigan,
2. Go'aaminta dhammaan codsiyada u-aqoonsashada qaxootanimada, isaga oo awood u leh in uu;
3. In uu kuwa soo codsada u aqoonsado qaxootinimo; ama uu diido codsiga;
4. Go'aanno ka qaato arrimaha la xiriira;
   (b) Kala noqoshado u-aqoonsiga qaxootinimada iyo cayrinta qaxootiga;
   (t) Tixgelinta iyo go'aan-ka-qaadashada codsiyada dib-u-midoobidda qoyska ee ay soo codsadaan shakhsiyaadka qaxootinimo loogu aqoonsaday Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 20aad;
5. Uu Madaxa Hay'adda kala taliyo arrimaha la xiriira qaxootiga, oo uuna muddo kadibba warbixinno u soo gudbiyo Madaxa hay'adda ugu yaraan sanadkiiba mar;
6. Qabto hawlaha kale ee uu Madaxa Hay'adda ugu xilsaaro si waafaqsan Sharcigan ama sharci kasta oo kale ee dhaqan-galay;
7. Marka ay qabanayaan hawlaha, shirarka, shaqooyinka iyo arrimihiisa kale waa in Guddigu u qabtaa si waafaqsan Xeer-nidaamiyeyaasha;

**Qodobka 29aad:**
**Go'aamada iyo Hadal-qoraallada Guddiga;**

1. Marka uu gudanayo hawlihiisa, Guddigu waa in uu u hoggaansamaa habraaca uu dhigayo Sharciga, iyo Xeer-nidaamiyeyaasha;
2. Iyada oo aan wax loo dhimin macnaha guud ee faqradda (1), Guddigu waa in uu hubiyaa in dhammaan habraacyada loogu talo galay si buuxda ay u ilaaliyaan saraakiisha ay hawshoodu tahay, in;
   (b) Codsade kasta la siiyo fursad macquul ah oo ku soo gudbiyo kiiskiisa/keeda;
   (t) Turjumaan aqoon u leh, luuqad uu fahmayo codsadaha, joogo mid kasta oo

ka mid ah dhammaan marxaladaha dhegeysiga;

(j) Go'aamada la xiriira qaxootinimada in loo qaato si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo dhaqan-gal ah;

(x) Kiis kasta oo loo soo gudbiyo Guddiga waa in go'aan looga gaaro iyada oo aan lala daahin, haddii ay si kasta wax u dhacaan, waa in go'aan looga gaaro sagaashan maalmood oo ka bilaabata maalintii codsiga loo soo gudbiyey Hay'adda;

(kh) codsadaha waxaa qoraal lagu ogeysiinayaa;

i. Natiijada codsigiisa ama codsigeeda;
ii. Haddii codsiga la diidana, sababaha go'aankaa looga qaatey;
iii. Habraaca rafcaan looga qaadan karo go'aanka; iyo,
iv. Muddada ay tahay in rafcaan looga qaato;

(d) Galalka kiisaska go'aan ka-qaadashada qaxootinimada waxaa ay ahaanayaan sir oo cidna lalama wadaagi karo iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin qofka qaxootiga ah; iyo

(r) Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga ayaa lagu martiqaadayaa si ay korjoogto uga noqoto kulammada Guddiga Go'aaminta qaxootinimadda;

3. Diiwaannada iyo hadal-qoraallada kulamada Guddiga waa in ay ahaadaan sir laguna hayaa meel amaan ah, waana in la qaadaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu hubinayo in aan halis la gelin amniga magangelyo-doonka;

## CUTUBKA 6AAD: GOLAHA RAFCAANKA QAXOOTIGA

### Qodobka 30aad:

### Dhisidda iyo Xubnaha uu ka Kooban Yahay Golaha Rafcaanka

1. Waxaa la dhisayaa Gole Rafcaan oo loo yaqaanno Golaha Rafcaanka Qaxootiga oo hawshiisu ay tahay in uu dhageysto oo uu go'aan ka qaato rafcaannada loo qaato si waafaqsan Sharcigan;
2. Racfaanka waa in uu ka koobnaadaa guddoomiye iyo ugu yaraan afar xubnood oo uu soo magacaabayo Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Dib- uheshiisiinta kadib marka uu helo soo jeedinta Madaxa Hay'adda, Waxaana ansixinaya Golaha Wasiirada;
3. Xubnaha Golaha Rafcaanka loo magacaabay si waafaqsan faqradda (2) waa in ay ka koobnaadaan shakhsiyaad aqoon iyo waayo-aragnimo u leh sharciga qaxootiga, socdaalka, arrimaha dibadda, amniga qaranka, maamulka degaanka, xuquuqaha aadamaha iyo arrimaha qaxootiga, laakiin waa in aan xubin ka tirsan Guddiga aan loo magacaabin in ay ka mid noqoto Golaha Rafcaanka;
4. Golaha Rafcaanka waa in, marka ay gudanayaan hawlahooda ku xusan Sharcigan, ay ahaadaan kuwo dhexdhexaad ah oo madax-bannaan, waa in aaney shakhsi ama maamul kale ka amar qaadan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**Qodobka 31aad:**
**Hawlaha iyo Awoodaha Golaha Rafcaanka**

1. Hawlaha Golaha Rafcaanka waa inuu dhegeysto oo uuna go'aamiyo rafcaannada laga soo qaato go'aamada Guddiga.
2. Markago'aan ka qaadanayo rafcaan loo keenay Golaha; Rafcaanka, Golaha Rafcaanka waxaa uu;
   (b) Ku raaci karaa go'aankii Guddiga;
   (t) Laali karaa go'aanka Guddiga, hadba sida ay xaaladdu tahay waxaana uu arrinta dib ugu celin karaa in mar kale la tixgeliyo; ama
   (j) Fari karaa in arrinta mar kale la dhageysto oo go'aan laga qaato;

3. Golaha Markuu soo gaaro racfaan lasoo qaatay waa inuu dedejiyaa Go'aan ka gaarista racfaankaas muddo aan ka badneyn sagaashan cisho;
4. Awoodda golaha racfaanka wuxuu ku egyahay go'aan ka gaarista racfaanka loo soo qaatay si waafaqsan sharcigan;
5. Golaha racfaanka waa inay qoraal ku gaarsiiyaan racfaanlaha sababaha ay ugu raaceen go'aankii guddiga ama ay ugu khilaafeen si waafaqsan sharcigan;
6. Haddii aan lagu sheegin Sharcigan ama Xeer-nidaamiyeyaal, waa in Golaha Rafcaanku uu nidaamsadaa habraaciisa;
7. Golaha racfaanka haddii ay uga baahdaan hay'adda Qaxootiga ee qaramadda midoobay talo, waxay kasoo qayb gelin karaan fadhiyadooda;

**Qodobka 32aad:**
**Dib-u-eegis Garsoor**

1. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Golaha Rafcaanka waxaa uu muddo soddon maalmood gudahood ah go'aanka arrimaha sharciga la xiriira oo kaliya uu rafcaan ugu qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Heer Federaal, go'aanka Maxkamadda ayaana ah kama-dambeys,
2. Maxkamaddu waxaa ay awood u leedahay in ay dhageysato ayna go'aamiso arrimaha lagu xusay Qodobbada 31, 32 iyo 33 ee Heshiiska La Xiriira Qaxootinimada, 1951.

**CUTUBKA 7aad:**
**QODOBBO QUBANE AH**
**Qodobka 33aad:**
**Shuruucda Aan Loo Adeegsan Karin**

Sharci, xeer-nidaamiye, amar iyo tilmaan kasta oo aan la jaanqaadi Karin Sharcigan looma adeegsan karo arrimaha uu xeer ka dejiyay Sharcigan.



**Qodobka 34aad:**
**Xeer-nidaamiye Maamul.**

1. Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa soo **saaraya** Xeer-nidaamiye Maamul oo waafaqsan sharcigan kadib marka uu helo soo jeedinta Madaxa Hay'adda, si loogu dhaqan-geliyo qodobada sharcigan.
2. Iyada oo aan wax loo dhimin sida guud ee ay u hadlayso faqradda (1), Xeernidaamiyeyaasha laga soo saaro Sharcigan waxaa ay xeerin doonaan, arrimo ay ka mid yihiin —
   (b) Habraaca loo marayo rafcaanka iyada oo laga faa'iideysanayo Xuquuda rafcaanka ee uu ka hadlayo Sharcigan;
   (t) Habraacyada Guddiga Go'aan-ka Gaarista kiisaska Qaxootinimada;
   (j) Habraacyada Golaha Rafcaanka iyo habraacyada rafcaanka;
   (x) Qaabka iyo habraaca loo soo codsanayo iyo habraaca loo tixgelinayo codsiyada qaxootinimada;
   (kh) Dhisidda guddiyada, iyo u-xilsaaridda guddiyadaas ee hawlaha la xiriira qaabilaadda, daryeelka iyo waxtaridda qaxootiga;
   (d) Qaabka iyo sida aqoonsi iyo dokumentiyada safarka loogu sameynayo qaxootiga iyo xubnaha qoysaskooda;
   (r) Qaabka uu noqonayo amar ama ogeysiis kasta oo loo baahan yahay in qaxootiga loo siiyo si waafaqsan Sharcigan;
   (s) Habraaca ilaalinta Iyo dhexgelinta qaxootiga ee bulshooyinka martigelinaya si loo gaaro xalal waara, isku-tiirsanaan iyo isku-filnaansho ay gaaraan qaxootiga; iyo
   (sh) llaalinta haweenka, carruurta aan la wehelin, dadka naafada ah iyo kooxaha kale ee liita ama nugul.
   (dh) In ay ku qeexnaataa xadigga qaxooti ee uu qaadan karo dalku iyo muddada qofka qaxootiga ah uu dalka joogi karo, sidoo kale dalalka qaxootigooda la aqbali karo iyo dalalka qaxootigooda aan la aqbali Karin.

**Qodobka 35aad:**
**Baabi'in**

Sharcigan waxaa lagu baab'inayaa dhammaan Shuruucda iyo xeerarka ka horimaanaya ee dhaqan galka ka ahaa Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 36aad:**
**Dhaqan-galka Sharcigan**

Sharcigan waxa uu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

2 9 MAR 2024

BY: SAACAD SAXIIX

**SHARCI LR. 19** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**
**SHARCIGA XISAAB-XIRKA MIISAANIYADDA 2022**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0484/B11/24**, ku taariikheysan **24/01/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Xisaab Xir Miisaaniyadeedka 2022.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in xisaab-xir lagu sameeyo Miisaaniyaddii 2022.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa la ansixiyay Xisaab Xirka Miisaaniyadda 2022-da.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-35-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**GUDDIGA MIISAANIYADDA, MAALIYADDA, QORSHEYNTA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA IYO LA-XISAABTANKA HAY'ADAHA DOWLADDA EE GOLAHA SHACABKA**

**iyo**

**GUDDIGA DHAQAALAHA, MAALIYADDA, GANACSIGA WARSHADAHA, ISGAARSIINTA IYO DALXIISKA EE AQALKA SARE**

# WARBIXINTA XISAAB XIRKA SANNAD MIISAANIYADEEDKA 2022

Janaayo 21, 2024

## 1) GOGOLDHIG

Guddiga Maaliyadda ee Laba Aqal BJFS waxa uu halkan idin kula wadaagayaa warbixinta Akhrinta 3aad ee ***Xisaab Xirka Sannad Miisaaniyadeedka 2022***, iyadoo saldhig looga dhigayo doodii iyo talo-soojeedinta ee xubnaha Labada Aqal ee BJFS ka diibteen Akhrinta 2aad.

## 2) DIB-U-AKHRINTA XISAAB XIRKA 2022

Wadarta Guud ee Miisaaniyaddii 2022 la qoondeeyay waxa ay ahayd **$944,859,564**, waxaa sooxarooday dhakhli dhan **$769,237,849** isla markaana waxaan soo xaroon lacag dhan **($175,621,715)** taasi oo u dhiganta hoos u dhac gaaraya **(19%)** ku-talagalka miisaaniyada guud eedalka.

Dhanka Kharashaadka saadaashi miisaaniyadda 2022 oo ahayd **$929,924,527,** waxaa kabaxay wadar dhan **$731,434,866**, taas oo ka dhigan in uu jiro hoos u dhac gaaraya **($198,489,661)** oo u dhigma **(21%).**

| Faahfaahin | Ku-talagalka 2022 | Dhabta 2022 | Farqiga | Boqoleyda(%) |
|---|---|---|---|---|
| **Dakhliga Guud** | $944,859,564 | $769,237,849 | ($175,621,715) | (19%) |
| **Kharashaadka Guud** | $929,924,527 | $731,434,866 | ($198,489,661) | (21%) |

## 2.1) DAKHLIGA 2022

| Faahfaahin | Ku-talagalka 2022 | Dhabta 2022 | Farqiga | Boqoleyda(%) |
|---|---|---|---|---|
| **Wadarta Guud ee Dakhliga** | **$944,859,564** | **$769,237,849** | **($175,621,715)** | **(19%)** |
| Dakhliga Canshuuraha | $173,699,181 | $181,691,842 | $7,992,661 | 5% |
| Dakhliga aan Canshuuraha ahayn | $76,399,293 | $80,977,903 | $4,578,610 | 6% |
| **Wadarta Dakhliga Gudaha** | **$250,098,474** | **$262,669,745** | **$12,571,271** | 5% |
| **Dakhli Kale** | | | | |
| Dakhli Kale (Assets Recovery) | - | $3,285,354 | $3,285,354 | 100% |
| Dakhli Dayn ah (SRD) | - | $44,040,950 | $44,040,950 | 100% |
| **Wadarta Dakhliga Kale** | - | **$47,326,304** | **$47,326,304** | 100% |
| **Deeqaha** | | | | |
| Deeqaha labada Dhinac | $39,600,000 | $37,100,000 | ($2,500,000) | (6%) |
| Taageero Kab-Miisaaniyadeed (Deeqaha Dhinacyada Badan) | $169,697,685 | $134,310,645 | ($35,387,040) | (21%) |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Wadarta Deeqaha Taageerada Miisaaniyadda** | **$209,297,685** | **$171,410,645** | **($37,887,040)** | (18%) |
| **Deeqaha Mashaariicda** | | | | |
| World Bank | $454,901,075 | $280,522,607 | ($174,378,468) | (38%) |
| African Development Bank | $14,193,738 | $4,937,177 | ($9,256,561) | (65%) |
| European Union | $345,508 | $155,949 | ($189,559) | (55%) |
| UN | $16,023,084 | $2,215,422 | ($13,807,662) | (86%) |
| **Wadarta Deegaha Mashaariicda** | **$485,463,405** | **$287,831,155** | **($197,632,250)** | (41%) |

Sida ku cad jaantuska kore:

1) **Dakhliga Canshuurta** waxaa la filaayey inay kasoo xarooto lacag dhan $173,699,181 balse dhabta soo xarootay ayaa noqatay $181,691,842, waxaana jira koror dhan $7,992,661 oo u dhigma 5%. Sidoo kale, qiyaasta dakhliga aan canshurta ahayn waxa uu ahaa $76,399,293 hase ahaate dakhliga dhabta ah ee soo xarooday ayaa noqday $80,977,903 waxaana jira koror gaaraya $4,578,610 oo u dhigma 6%.
2) **Deeqaha dibadda ee laba dhinac** ayaa waxaa la filaayey inay noqoto $39.6M balse dhabta soo xarootay waxay noqotay $37.1M, waxaana jira hoos u dhac gaaraya ($2.5M) oo u dhigma (6%).
3) Sidoo kale **deeqaha dhinacyada badan (Multilateral Grants) ee kabka miisaaniyadda** oo la saadaalinayey in la helo dakhli dhan $169,697,685 ayaa waxaa kasoo xarooday $134,310,645 oo kaliya taas oo ka dhigan in uu jiro hoos u dhac gaaraya ($35,387,040) oo u dhigma (21%).
4) Dhanka **Deeqaha mashaariicda** waxaa la filaayay in ay ka soo xarooto lacag dhan $485,463,405 hase ahaate dhabta kasoo xarootay ayaa noqotay $287,831,155 taas oo muujinaysa in uu jiro hoos u dhac gaaraya ($197,632,250) oo u dhigma (41%).

## 2.2) KHARASHAADKA 2022

| Faahfaahin | Ku-talagalka 2022 | Dhabta 2022 | Farqiga | Boqoleyda(%) |
|---|---|---|---|---|
| Adeega Shaqaalaha | $266,016,979 | $259,578,811 | ($6,438,168) | (2%) |
| Iibka Agab iyo Adeega | $232,247,363 | $140,670,112 | ($91,577,251) | (39%) |
| Kaalmo (Dhaqaale + Bulsho) | $252,860,953 | $194,051,420 | ($58,809,533) | (23%) |
| Dheef-korka & Dhulsaarka Kale | $12,935,782 | $12,690,618 | ($245,164) | (2%) |
| Deeqaha Dowladda Dhexe | $132,355,417 | $111,242,917 | ($21,112,500) | (16%) |
| Kharashaadka kale | $4,796 | - | ($4,796) | (100%) |
| Kharashaadka Rasumalka | $33,503,237 | $13,200,988 | ($20,302,249) | (61%) |
| **Wadarta Guud** | **$929,924,527** | **$731,434,866** | **($198,489,661)** | (21%) |

Sida ku cad jaantuska kore:

1) **Adeegga Shaqaalaha (Mushaarka)**: Mushaarka shaqaalaha ayaa ahaa Kharashka ugu badan ee baxay Sanad Maaliyadeedka 2022, kaas oo ku talagalkkiisu ahaa $266,016,979, hayeeshee waxaa dhab ahaan la bixiyay wadar dhan $259,578,811, halka farqiga uu noqday ($6,438,168), una dhiganta (2%) hoos u dhac ah.
2) **Agabka iyo Adeega:** Ku talagalka wadarta kharash Agabka & Adeegga Sanad Maaliyadeedka 2022 wuxuu ahaa $232,247,363, waxaana dhab ahaan la isticmaalay $140,670,112, taas oo farqiga ka dhigeysa ($91,577,251) una dhiganta (39%) hoos dhac ah. Guud ahaan kharashka sanadka 2022, waxaa muuqata in hoos u dhaca ugu wayn u uku yimid isticmaalka Agabka iyo Adeega oo ah kharashka loogu talagalay hab-sami u socodka howlaha maalinlaha ah ee dowladda.
3) **Kaalmo (Dhaqaale + Bulsho)**: Deeqaha laga helo Deeqbixiyaasha oo loogu talagalay mashaariicda waxaa ku talagalkeedu ahaa $252,860,953, waxaana la isticmaalay kharash dhan $194,051,420, halka farqigu uu gaarayo ($58,809,533), kaas oo noqonayo hoos u dhac (23%). Hoos u dhacan wuxuu muujinayaa in aan si weyn looga faa'iidaysan lacagaha mashaariicda taas oo hoos u dhigtay adeegga dowladda ee dadweynaha.
4) **Dheef-korka & Dhulsaarka Kale**: Kharash bixinta Deymaha sanadka 2022 waxaa la odorosay $12,935,782 waxaana dhab ahaan la bixiyay $12,690,618. Farqiga u dhaxeeya wuxuu noqday ($245,164) oo u dhiganta (2%).
5) **Deeqaha Dowladda Dhexe**: Wadarta kutalagalka Deeqaha Dowladda Dhexe ay siiso Dowlad Goboleedyadu wuxuu ahaa $132,355,417, hayeeshee waxaa dhab ahaan la bixiyay $111,242,917, halka farqiga aan la bixin uu noqday ($21,112,500) oo u dhiganta (16%).
6) **Ra'sulmaalka** waxaa loo qoondeeyay lacag dhan $33,503,237, waxaana la isticmaaley kharash dhan $13,200,988, waxaan la isticmaalin ($20,302,249), una dhiganta (61%). Tani waxay ka dhigantahay in la isticmaalay seddex meelood hal meel kaliya laga isticmaalay qoondadi Sanadka.

### 3) Talo-soojeedinta Guddiga

1) Wasaaradda waxaa la farayaa in Xisaab xirka ay usoo gudbiso Goloyaasha ugu dambeyn 30ka Juun.

2) Wasaaradda waxaa la farayaa in Golayaasha usoo gudbiso lifaaqyada Xisaab Xiradda deeqaha ay siiso Dowlad Goboleeyada iyo Gobolka Benaadir ay ka baxa khasnada Dhexe ee dalka.

3) Wasaaradda waxaa la farayaa in Golayaasha usoo gudbiso lifaaqyada Xisaab Xiradda mashaariicda marta Khasnada Dhexe ee dalka taasoo aada Dowlad Goboleeyada iyo Gobolka Benaadir.

4) Wasaaradda waxaa loo soojeedinayaa in Golayaasha ay la wadaagto warbixin faahfaahsan oo ku saabsan mashaariicda dalka.

5) Wasaaradda waxaa la farayaa in Madaxa Kabidda (Contingency) ay u bixiso sida uu qabo Xeerka Qoondada Miisaaniyadda ee Golayaasha ansixiyeen.

6) Wasaaradda waxaa la farayaa in ay ku saleeyso Miisaaniyadda deeqaha laba dhinac ah (bilateral) ama dhinacyada badan leh (multi-lateral) kuwa laga hayo ballanqaad rasmi oo qoraal ah keliya.

7) In dhammaan dukumintiyadda miisaaniyadda iyo xisaab-xirka lagu soo gudbiyaa afka rasmiga ah ee dalka (Af-soomaali) ka hor inta aan la keenin golayaasha.

Ugu dambayn, Guddiga Maaliyadda Labada Aqal ee BJFS wuxuu si xushmad iyo qadarin ku dheehan tahay ugu codsanayaa xubnaha Labada Aqal ee BJFS in ay ansixiyaan Warbixinta Akhrinta 3aad ee Xisaab Xirka Sannad Miisaaniyadeedka 2022.

**Lifaaq:** Is-barbardhiga Miisaaniyadda iyo isticmaalka Hay'addaha Dowlada ee sanad maaliyadeedka 2022.

| Code | Description | Budget / Estimate | Actual / Expenditure | Available Balance | Percentage |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | **Waaxda arrimaha maamulka** | **358,072,026** | **306,256,886** | **51,815,140** | **86%** |
| 10100 | Xafiiska Madaxtooyada | 13,849,606 | 12,385,534 | 1,464,072 | 89% |
| 10201 | Xafiiska Baarlamaanka - Golaha Shacabka | 22,792,921 | 22,434,642 | 358,279 | 98% |
| 10202 | Xafiiska Aqalka Sare | 4,619,380 | 4,393,513 | 225,867 | 95% |
| 10300 | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha | 18,475,139 | 16,857,137 | 1,618,002 | 91% |
| 10400 | Wasaaradda Arrimaha Dibadda | 4,157,853 | 4,148,992 | 8,861 | 99.79% |
| 10401 | Safaaradaha | 6,217,550 | 5,491,318 | 726,232 | 88% |
| 10500 | Wasaaradda Maaliyadda | 90,668,920 | 65,841,383 | 24,827,537 | 73% |
| 10501 | Xisaabiyaha Guud | 2,535,526 | 2,509,279 | 26,247 | 99% |
| 10502 | Adeegga Guud ee Dawladda | 108,414,279 | 106,051,221 | 2,363,058 | 98% |
| 10503 | Agaasinka Xarunta Warbixinta Maaliyadeed | 1,107,000 | 1,039,950 | 67,050 | 94% |
| 10504 | Hay'adda Qandaraasyada Dawladda | 500,000 | 0 | 500,000 | 0% |
| 10600 | Wasaaradda Qorshaynta | 17,976,456 | 17,641,323 | 335,133 | 98% |
| 10601 | Hay'adda Tirakoobka Qaranka | 11,365,092 | 9,124,737 | 2,240,355 | 80% |
| 10700 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | 14,106,788 | 3,945,945 | 10,160,843 | 28% |
| 10701 | Guddiga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Soomaaliyeed | 1,557,200 | 703,962 | 853,238 | 45% |
| 10702 | Hay'adda Diiwaangalinta Dadweynaha | 735,523 | 293,523 | 442,000 | 40% |
| 10800 | Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta | 2,208,306 | 2,131,261 | 77,045 | 97% |
| 10900 | Wasaaradda Cadaaladda | 2,095,634 | 1,069,511 | 1,026,123 | 51% |
| 10901 | Ciidanka asluubta | 10,079,440 | 9,917,416 | 162,024 | 98% |
| 11001 | Maxkamadda Sare | 2,305,297 | 2,258,730 | 46,567 | 98% |
| 11002 | Maxkamadda Gobollka Banaadir | 1,773,356 | 1,738,669 | 34,687 | 98% |
| 11003 | Maxkamadda Rafcaanka | 907,428 | 857,821 | 49,607 | 95% |
| 11005 | Guddiga Adeegga Garsoorka | 257,312 | 223,410 | 33,902 | 87% |
| 11100 | Xeer Ilaaliyaha Guud | 1,514,163 | 1,504,644 | 9,519 | 99% |
| 11200 | Garyaqaanka Guud | 668,784 | 628,985 | 39,799 | 94% |
| 11300 | Hantidhawraha Guud | 3,333,344 | 3,161,134 | 172,210 | 95% |
| 11400 | Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka | 4,050,384 | 3,189,203 | 861,181 | 79% |
| 11500 | Wasaaradda Dastuurka | 2,211,799 | 962,317 | 1,249,482 | 44% |
| 12100 | Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka | 682,560 | 600,144 | 82,416 | 88% |
| 12200 | Guddiga Dib -u -heshiisiinta Qaranka | 501,132 | 462,053 | 39,079 | 92% |
| 12300 | Guddiga Madaxa -bannaan ee Doorashooyinka Qaranka | 3,260,780 | 2,253,475 | 1,007,305 | 69% |
| 12400 | Guddiga Xuquuqul Insaanka | 100,000 | 0 | 100,000 | 0% |
| 12500 | Dib -u -eegista Dastuurka M.Banan iyo Imp. Komishanka | 699,596 | 562,471 | 137,125 | 80% |
| 12600 | Guddiga Shaqaalaha Rayidka Qaranka | 1,495,479 | 1,455,490 | 39,989 | 97% |
| 12700 | Guddiga M. Banaan ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa | 848,000 | 417,693 | 430,307 | 49% |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| **2** | **Waaxda arrimaha amniga iyo difaaca** | **171,722,223** | **169,968,797** | **1,753,426** | **99%** |
| 20100 | Wasaaradda Gaashaandhigga | 2,211,643 | 2,159,373 | 52,270 | 98% |
| 20101 | Ciidanka Xoogga Dalka | 96,403,834 | 96,096,057 | 307,777 | 99.68% |
| 20102 | Maxkamadda Ciidamada | 1,462,000 | 1,461,981 | 19 | 100.00% |
| 20103 | Hay'adda Naafada iyo Agoonta ciidanka | 115,000 | 60,000 | 55,000 | 52% |
| 20200 | Wasaaradda Amniga Gudaha | 1,557,227 | 1,246,893 | 310,334 | 80% |
| 20201 | Ciidanka Booliska | 45,993,240 | 44,965,382 | 1,027,858 | 98% |
| 20202 | Hay'adda sirdoonka qaranka | 18,883,639 | 18,883,570 | 69 | 100% |
| 20203 | Hay'adda Socdaalka iyo jinsiyadaha | 5,095,640 | 5,095,541 | 99 | 100% |
| **3** | **Waaxda arrimaha dhaqaalaha** | **83,396,579** | **56,987,808** | **26,408,771** | **68%** |
| 30100 | Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta | 6,703,452 | 3,565,966 | 3,137,486 | 53% |
| 30200 | Wasaaradda Macdanta | 1,568,912 | 1,525,926 | 42,986 | 97% |
| 30201 | Hay'adda Patroolka Soomalia | 836,520 | 478,501 | 358,019 | 57% |
| 30300 | Wasaaradda Beeraha | 2,098,176 | 1,726,101 | 372,075 | 82% |
| 30400 | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta | 3,550,558 | 1,079,638 | 2,470,920 | 30% |
| 30500 | Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda | 2,120,824 | 1,528,289 | 592,535 | 72% |
| 30501 | Cilmi -baarista Badda Soomaaliya | 605,008 | 561,832 | 43,176 | 93% |
| 30502 | Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumaysiga | 110,776 | 101,864 | 8,912 | 92% |
| 30600 | Wasaaradda Warfaafinta | 6,234,794 | 5,968,131 | 266,663 | 96% |
| 30700 | Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda | 1,848,060 | 1,839,034 | 9,026 | 100% |
| 30701 | Hay'adda Isgaarsiinta Dalka | 1,166,604 | 913,050 | 253,554 | 78% |
| 30800 | Wasaaradda Hawlaha Guud & Dib -u -dhiska | 31,427,444 | 18,599,057 | 12,828,387 | 59% |
| 30900 | Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada | 2,452,676 | 2,348,690 | 103,986 | 96% |
| 30901 | Hay'adda saadaasha iyo duulista hawadda | 15,344,242 | 11,222,834 | 4,121,408 | 73% |
| 31000 | Wasaaradda Dekadaha iyo gaadiidka badda | 1,668,084 | 1,221,259 | 446,825 | 73% |
| 31001 | Maamulka dekadda Xamar | 1,021,300 | 959,883 | 61,417 | 94% |
| 31100 | Wasaaradda Warshadaha & Ganacsiga | 2,776,850 | 2,483,636 | 293,214 | 89% |
| 31101 | Hay'adda tayadhawrka Soomaaliyeed | 1,862,300 | 864,117 | 998,183 | 46% |
| **4** | **Waaxda arrimaha bulshada** | **316,733,699** | **198,221,376** | **118,512,323** | **63%** |
| 40100 | Wasaaradda Caafimaadka | 58,583,344 | 11,375,284 | 47,208,060 | 19% |
| 40200 | Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | 20,532,770 | 11,041,209 | 9,491,561 | 54% |
| 40201 | Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed | 7,757,003 | 7,622,028 | 134,975 | 98% |
| 40202 | Akadeemiyada Cilmiga iyo Fanka Soomaaliyeed | 1,239,461 | 1,126,058 | 113,403 | 91% |
| 40203 | Akadeemiyc -Goboleedka Af-Soomaaliga | 1,363,256 | 387,472 | 975,784 | 28% |
| 40300 | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada | 223,955,351 | 164,871,758 | 59,083,593 | 74% |
| 40400 | Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha | 969,360 | 648,999 | 320,361 | 67% |
| 40500 | Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha | 2,009,474 | 828,429 | 1,181,045 | 41% |
| 40501 | Hay'adda Naafadda Soomaaliyeed; | 323,680 | 320,139 | 3,541 | 99% |

**********Dhammaad**********

# DOWLADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Warbixinta iyo Xisaab xirka Sanad Maaliyadeedka ku dhamaaday 31-ka December 2022

WAXAA SOO DIYAARIYEY XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA

## Tusmada Buugga

**I. KALIMADA WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA ..... 3**

**CADAYNTA WAAJIBAADKA ..... 5**

**II. FAALO GUUD..... 6**

**III. MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA ..... 17**

**IV. MUUQAALKA ISBARBARDHIGA SAADAASHA MIISAANIYADA IYO NATIIJADA DHABTA AH 18**

**V. MUUQAALKA KHARASHAADKA HAWLAHA DOWLADDA ..... 20**

**VI. MUUQAALKA QULQULKA LACAGTA CADAANKA AH ..... 21**

**1. MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DOWLADA ..... 22**

**II. FAAHFAAHIN IYO SHARAXAAD KHUSEEYSA XISAAB XIRKA ..... 30**

**LIFAAQA A– MUUQAALKA HANTIDA IYO DAYMAHA MAALIYADEED (KU MEEL GAAR)..... 42**

**LIFAAQA A.1- FAAHFAAHINO LA XIRIIRA MUUQAALKA MOWQIFKA MAALIYADEED ..... 43**

**LIFAAQA B- WARBIXINTA LACAGAHA AAN KU JIRIN QOONDADA DOWLADDA..... 45**

**LIFAAQA C – MUUQAALKA DAYMAHA KHARASHAADKA 31 DECEMBER 2022 ..... 53**

**LIFAAQA D – MUUQAALKA DAYMAHA DIBEDA SANADKA MAALIYADEEDKA KU EG 31.12. 2022..... 54**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

**MOF/OM/040/2023** **April 30, 2023**

**Kalimada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

Sanadihii ugu danbeeyey Soomaaliya waxa ay ku talaabsatay horumaro dhinacyo badan ah oo ay ka mid yihiin xasilinta dhaqaalaha guud, yaraynta daymaha la ina ku leeyahay ee aadka u culsaa iyada oo loo marayo hanaanka dayn cafinta ee wadamada daymaha culus lagu leeyahay ee (HIPC), Diyaarinta shuruucyo kala duwan oo aad muhim u ah oo iyana la qoray sidoo kale waxaa la diyaariyey Istiraatiijiyada yaraynta Heerka Faqiirtinimada. Dhammaan horumaradaa waxa ay ku jireen Qorshaha horumarinta Qaran ee Sagaalaad (NDP9).

Tan iyo sanadkii 2018-kii, Dowladdu waxa ay shaacinaysay oo ay bulshada Soomaliyeed la wadaagaysay Warbixin Maaliyadeed iyo Xisaab xir lagu jaangooyey xeerarka caalamiga ah ee ku xisaabtanka Lacagah cadaanka ah ee cash-basis IPSAS 2017. Sidoo kale waxaa horumar laga sameeyey dhanka mideynta Shax xisaabeedyada Dowladda "CoA" iyada oo la waafajiyey Habraaca Tirokoobka Maaliyadeed ee IMF-ta ee loo yaqaano "GFSM2014". Laga soo bilaabo sanadkii 2021, Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay si joogto ah u shaacisay warbixino maaliyadeed guud oo ay ku mideysanyihiin dhammaan warbixinada maaliyadeed ee Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah DFS.

Si kor loogu qaado kalsoonida bulshada Soomaaliyeed iyo saaxiibada horumarineed ee shisheeye ay ku qabaan hanaanka maaraynta maaliyadda dalka, Dowladda Federaalku waxay dhaqan galisay Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud sanadkii 2019 waxaana la diyaariyey Xeerhoosaadkii Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud sanadkan 2022.

Dadaalo fara badan oo lagu bixiyey dib u habaynta hanaanka dakhliga waxaa intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022 lagu guulaystay in kor loo qaado dakhliga u soo xerooday Dowladda waxa uuna gaaray **USD$769.2 milyan** oo u dhiganta **63%** halka uu ka ahaa sanad maaliyadeedkii hore ee 2012 **USD$472.9 milyan**. sababaha ugu wayn ee kororka lixaadka leh ee dhanka dakhliga ah ayaa ah kororka baaxada dhaqdhaqaaqa hawlaha ganacsi iyo deeqaha laga helay deeq bixiyeyaasha oo korortay kadib markii lagu guulaystay qabsoomidii doorashada madaxtinimada dalka taas oo si isku mid ah kalsooni u galisay bulshada Soomaaliyeed iyo saaxiibada horumarineed ee dalka.

Dhanka Kharashaadka Dowladda ayaa isna kordhay 48% waxa uuna gaaray **USD$769.2 milyan** halka uu sanad maaliyadeedkii hore ee 2021 ka ahaa **USD$472.9 milyan.** kororka dhanka kharashaadka waxaa sabab wayn u ahaa fulinta mashaariic dhowr ah oo laga fuliyey heerarka kala duwan ee dowladda eel eh heer Dowlad Federaal iyo Heer Dowladaha Xubnaaha ka ah DFS.

Dhanka kale mudadii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022 waxaa casriyeen lagu sameeyey qaabka aruurinta dakhliga furdooyinka iyada oo la diyaariyey shaxda taariifooyinka canshuuraha ee loo yaqaan Ad-valorem-ka, waxaa sidoo kale lagu guulaystay in la diyaariyo shuruucda furdooyinka ee qiimeeynta badeecadaha. Gudiga Isgaarsiinta Qaranka ee NCA iyo Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay ku heshiiyeen Shaxda Kharashaadka laga qaadayo shirkadaha bixiya adeegaa Isgaarsinta dalka. Dakhliga sanadlaha ah ee laga filan karo in uu ka soo xeroodo shirkadaha adeegga isgaarsiinta bixiya waxaa lagu qiyaasayaa **USD$6 milyan** sanadkiiba. Si loo balaariyo baaxada meelaha canshuuraha laga aruuriyo, Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay qaadi doontaa canshuurta macaashul macaashka "Turnover tax" iyada oo lagu bilaabayo 2000 oo ka mid ah shirkadaha la diiwaan galin doono sanadka soo socda ee 2023.

**Ministry of Finance**
**Corso Somalia Street, Shangaani District Mogadishu, Somalia**
**P.O. Box 106**
**Email:** mof@mof.gov.so
wwww.mof.gov.so

Dhanka kharashaadka hadii aan eegno, waxaynu soo kordhinay dhowr arrimood oo lagu xakamaynayo kharashaadka. Si shakiga looga saaro hanaanka canshuur dhaafka, Wasaaraddu waxa ay fulisay dhammaan qodobada ku xusan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee khuseeya arrimaha canshuur dhaafka.

Waxaa meel fiican inoo maraya hawlaha diiwaan galinta shaqaalaha aan ku jirin Diiwaanka Maaliyadda Dowladda ee SFMIS-ka. In dhammaan mushaaraadka shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahayn lagu diiwaan galiyo Diiwaanka Guud ee Maliyadda Dowladda waxa sahlaysaa la socoshada iyo xakamaynta tirada guud ee shaqaalaha, heerka mushaarkooda iyo dalacsiintoodaba. Golaha Wasiirada waxa ay u ansixiyeen Wasaaradda Maaliyadda Siyaasada Jaangoynta Mushaaraadka iyo Garaadaha Shaqaalaha iyo wadiiqadii loo mari lahaa dhaqangalinta hanaanka xakamaynta mushaarka shaqaalaha dowladda.

Waxaa la soo saari doonaaa wareegto ay ku cadahay shuruucda iyo hagayaasha hanaanka wax soo iibsiga degdega ah horraanta sanad maaliyadeedka soo socda ee 2023-ka si loo qeexo wax loo aqoon san karo inay yihiin wax soo iibsi degdeg ah "emergency procurement", hababka la ogolyahay ee loo soo iibsan karo waxyaabaha degdega ah waxaa la waajibin doonaa in la isticmaalo hishiisyo iyo qeexitaano baahiyaha oo mideysan taa oo sahli doonta habka wax soo iibisiga isla markaana ka hor tagaysa in ay wax aan loo baahneyn la soo iibiyo. Waxaa socda diyaarinta Sharciga PPP-ga si loo helo hanaan lagu dhiira galin karo maalgashtayaasha shirkadaha gaarka loo leeyahay iyada oo hoos loo dhigaayo khataraha maaliyadeed ee imaan kara lana dhimayo kharashaadka ku baxaya hawlaha maalgashiga.

Dadaalo lagu xoojinayo maamulka iyo maaraynta hantida guud ayaa Iyana socda.Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda Maaliyadda ayaa hogaaminaysa dadaalada lagu tiro koobayo laguna diiwaan galinayo hantida guud ee qaranka iyada oo kaashanaysa Xafiiska Xisaabiyaha Guud dhanka qiimeeynta hantida ma guurtada ah ee qaranka. Kuna shubaya Diiwaanka Maaliyadda Dowladda ee SFMIS-ka.

Ugu danbayntii, waxaan mahad balaaran u gudbinayaa Xisaabiyaha Guud ee Dowladda iyo howlwadeenadeeda ee sida hagar la'aanta ah iskugu hawlay inay soo diyaariyaan Warbixintan Maaliyadeed si waafaqsan xeerarka iyo nidaamyada caalamiga ah ee la isla wada garanayo, una gudbiyey Xafiiska Hantidhowraha Guud ee Dowladda mudadii dastuuriga ahayd ee loogu tala galay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTRY OF FINANCE & TREASURY
WASAARADDA MAALIYADDA & LACAGTA

---

**Dr. Cilmi Maxamuud Nuur**
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

## CADAYNTA WAAJIBAADKA



Warbixinta maaliyadeed ee ku qoran ka bilaabata bogga 23aad kuna eg bogga 41aad waxaa loo soo diyaariyey hab waafaqsan Sharciga iyo xeer nidaamiyaha Maamulka Maaliyadda Dowladda ee 2019 (PFM Act-2019) iyo sidoo kale si waafaqsan Xeerarka Caalamiga ah ee ku xisaabtanka Lacagta Cadaanka ah ee "Cash Basis IPSAS ee sanadkii (2017).

Qodobka 45$^{aad}$ faqradiisa 3$^{aad}$ ee Sharciga Maamulka Maaliyaddu waxa uu farayaa Xafiisk Hantidhowraha Guud ee Dowladdu in uu xaqiijin ku sameeyo Xisaab xirka iyo warbixinta Maaliyadeed ee sanadlaha ah ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud u so gudbiyo kadibna ku soo lifaaqo Warbixinta Xaqiijinta Hantidhowraha una gudbiyo Golaha Baarlamaanka muddo ku siman laba bilood oo ka bilaabata markii Xafiiska Xisaabiayah Guud uu soo gudbiyey Xisaab xirka. Waxa sidoo kale uu qodobka 43aad faqradiisa 1$^{aad}$ farayaa Xisaabiyaha Guud ee Dowladdu in uu wargaliyo dhamaan hay'adaha dowladda, dowladaha hoose iyo shirkadaha dowladu leedahay nidaamka xisaabeed ee laga doonayo in ay dhaqan galiyaan. Si waafaqsan qodobkaas kor ku xusan, Xisaabiyaha Guud ee Dowladdu waxa uu qaatay nidaam xisaabeedyada caalamiga ah ee la isla aqoonsanyahay gaar ahaan Nidaamka ku xisaabtanka Lacagta Caddanka ah ee Cahs Basis IPSAS marka uu diyaarinaayo Xisaab xirka Dowladda.

Sidaas daraadeed, anigoo tixraacaya qodobka 45aad faqradiisa 1aad ee Sharciga Maamulka Maaliyadda ee 2019, Waxaan ku faraxsanahay inaan soo gudbiyo Xisaab xirka Dowladda Federaalka Soomaaliya ee Sanad Maaliyadeedka dhamaaday 31 December 2022

Xafiiska Xisaabiyaha Guud waxa uu markasta soo diyaariyaa xisaab xirka Dowladda anagoo ku soo bandhiga dhamaan macluumaadka iyo faahfaahinada daruuriga u ah fahanka bayaanaatka maaliyadeed ee koobaya dhaqdhaqaaqa maaliyadeed ee dowladda.Hadaba waxaan halkaan ka cadeenayaa in dhamaan xisaabaadka ku qoran warbixinada maaliyadeed ay waafaqsanyihiin xisaabaadka ku qoran buugaagta iyo diiwaanka maaliyadeed ee dowladda.

Waxaan sidoo kale qirayaa in Xisaab xirka Dowladda Federaalka Soomaaliya ee sanad maaliyadeedka ku dhamaaday 31 December 2022 loo soo diyaariyey si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda Dowladda ee 2019 iyo Xeer nidaamiyaha Sharciga Maamulka Maaliyadda ee 2020 iyo sidoo kale Nidaamka Caalamiga ah ee Ku xisaabtanka Lacagta Caddaanka ah ee loo yaqaano Cash Basis IPSAS ee soo baxay 2017.

.....

**Faatuma Cismaan Faarax,**

Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

## II. FAALO GUUD

### 1. Dulmar Guud ee Xisaab xirka.

Xisaab xirka iyo Warbixin Maaliyadeedka la socda waxaa had iyo jeer lagu soo gudbiyaa hawlqabadka Dowladda ee dhinac maaliyadda ee sanadlaha ah. Sidaas darted Xisaab xirkaani waxa uu khuseeyaa hawlaqabadka Dowladda ee sanad maaliyadeedka ku eg 31-ka December 2022 sida ku cad muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka. Sidaas si la mid ah, warbixin maaliyadeedkani waxa uu akhristaha u siinayaa fursad in uu si kooban u helo sida ay u dheceen dhamaan mucaamalaatka maaliyadeed ee ay dowladdu fulisay iyo mowqifka maaliyadeed ee dowladda ee dhamaadka sanad maaliyadeedka 2020. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda ayaa isku keenay warbixin maaliyadeedka guud ahaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowlada kadibna soo saaray warbixintaan.

Xisaab xirka sanad maaliyadeedka 2022 waxaa lagu soo gudbiyey oo lagu soo koobay kaliya ka wabrbixinta hawlaha dowladda ee ku jira qorshaha miisaaniyadda guud ee dowladda ee sanadka 2022 ee uu horay u ansixiyey Golaha Baarlamaanka Soomaaliyeed. **Sidaas darteed iyada oo la eegayo qodobka 1.4.8 ee Nidaamka ku xisaabtanka lacagaha cadaanka ah ee IPSAS, xisaab xirkani waxaa uu quseeyaa kaliya ka warbixinta Dakhliga iyo Kharashaadka ku jiray qorshaha Miisaaniyadda Dowladda ee sanad maaliyadeedka 2022, sidoo kale waxaanan ku jirin oo aan warbixintaan lagu soo darin Dakhliga iyo kharashaadka aan ku jirin Miisaaniyadda ee ay isticmaaleen Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda intii lagu guda jiray isla sanad maaliyadeedka kor ku xusan**. Guud ahaan, saadaasha miisaaniyadda iyo ka warbixinta dhaqaalaha dhabta u soo galay dowladda iyo sidoo kale kharashaadka sida dhabta ah ugu baxay hawlaha dowladda waxaa loo soo bandhigaa sidii ay ugu suurto galin lahayd Dowladda Federaalka Soomaaliya in ay qaadato go'aanada muhiimka u ah horumarinta danaha dhaqaale iyo guud ahaan istiraatiijiyadaha fog ee qaranka. danaha iyo istiraatiijiyadaha qaranka ee muhiimka u ah hormarka dhaqaale ee dalka. Warbixintaan sanadlaha ah waxaa ku dhan guud ahaan waxyaabihii u suurta galay wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda ee u qorsheeysanaa in la fuliyo sanad maaliyadeedkaan.
Hay'adaha Dowladda ee ku jiray qoondada Dowladda ee laga diyaariyey warbixintaan ka eeg faahfaahin tirsi 1.2 (c ) ee warbixintaan.

Waxaa lifaaqa danbe si gooni ah loogu soo bandhigay warbixin gaar ah oo la xiriirta qayb ka mid ah dakhliga ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladu ka heleen ilo ka baxsan miisaaniyadda Dowlada, gaar ahaan qaybtii ay usoo gudbiyeen Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.

### 2. Qaabka iyo Muuqaalada uu ka Koobanyahay Xisaab Xirka.

Warbixinta iyo Xisaab xirkani waxaa loo soo diyaariyey iyada oo la raacayo Nidaamka ku Xisaabtanka lacagta Cadaanka ah ee cash basis-IPSAS 2017. Guud ahaan xisaabaadka dowladda waxaa lagu maamulay laguna saleeyey hab-xisaabeedka lacagta cadaanka ah ee faraya in la aqoonsado mucaamalaatka maaliyadeed kaliya markii si dhab ah lacagta loo helo ama loo bixiyo. Hadaba xisaabrikan waxaa loo so gudbiyey sida uu ay qabto qaybta 1aad ee isla Nidaamka ku Xisaabtanka Lacagta cadaanka ah ee IPSAS taasoo waajibinaysa in macluumaadka soo socda la shaaciyo:

*1. Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka*

Sida uu qabo Nidaamka ku Xisaabtanka lacagaha Cadaanka gaar ahaan faqradaha kala ah 1.3.12 iyo 2.3.13, muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka waa in lagu soo gudbiyaa Wadarta Dakhliga soo galay Dowladda iyo Kharashaadkii ka baxay Dowladda. Sidoo kale waxaa lagu bandhigaa farqiga u dhexeeya dakhliga iyo kharashaadka sanadka si loo soo muujiyo haraaga soo haray (Dheeri/(Dhiman) khasnada dowladda.Waxaa kale oo lagu soo bandhigaa ilaha dakhliga ka soo galo dowladda iyo meelaha lagu kharash gareeyo dakhligaas

*Muuqaalka Isbarbardhigga Kutalaglka iyo Dhabta miisaaniyadda*

halkaan waxaa la isku barbardhigaa kutalagalka dhaqaale ee dowladda iyo dakhliga dhab ahaan usoo gala dowladda. Warbixintani waxa ay tooshka ku ifinaysaa inta uu la egyahay dakhliga soo galay dowladda iyo sida loo kharash gareeyey si waafaqsan qorshihii uu ogolaaday Golaha Baarlamaanku in loo isticmaalo dakhliga dowladda.

2. *Muuqaalka Kharashaadka ee Hawlaha Dowladda*

Warbixintaan oo ah mid ikhtiyaari ah in la soo bandhigo markii loo eegu shuruudaha Nidaamka Caalamiga ah eek u xisaabtanka lacagaha caddaanka ah ee Cash Basis IPSAS 2017, hadna waxaa lagu soo daray warbixinta iyo xisaab xirka sanad maaliyadeedka 2022 si faahfaahin dheeri ah looga sii bixiyo dakhliga guud ee dowladda iyo sida loo isticmaalay iyadoo loo barbardhigay ku tala galkii hore siduu ahaa iyo dhab ahaan sida wax u dhaceen. Warbixintaan waxa ay soo bandhigaysaa Hawlaha Guud ee Dowladda iyo sida iyo ujeedooyinkaa loo isticmaalay dakhligii la soo xereeyey**.**

3. *Xeerarka Xisaabeed*

Waa xeerarka, axdiyada, mabaadi'da, shuruucda u gaarka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya lana dabaqay intii lagu guda jiray diyaarinta iyo soo gudbinta Xisaab xirka Dowladda.

4. *Faahfaahinada iyo Sharaxaada Xisaab xirka*

Faahfaahinada la socda Xisaab xirka waxa ay ka caawinayaan akhristaha in qoto dheer loo fahmo macluumaadka ku xusan Xisaab xirka. Sidoo kale waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin Xisaab xirka.

## 3. Faahfaahino Dheeri ah

Faahfaahinada la socda warbixintan waxa ay ka caawinaayaan akhristaha in uu si qoto dheer u fahmo lacagaha sida kooban ugu xusan muuqaalada maaliyadeed. Qaybtaan waxaa lagu soo bandhigaa qayb ka mid ah xeerarka xisaabeed iyo faahfaahino kale oo sharaxaad dheeri ah bixinaya. Waxaa kale oo laga heli karaa cadaynta in la dhaqan galiyey shuruudaha ku xusan nidaamka ku xisaabtanka lacagta cadaanka ah ee cash basis-IPSAS.

Halkaan hoose waxaa ku xusan warbixinada laga heli karo macluumaad dheeri ah oo loo baahanyahay in la shaaciyo si kor loogu qaado heerka isla xisaabtanka iyo caad saar la,aanta maamulka maaliyadda dowladda.

1. *Muuqaalka Qulqulka lacagta Cadaanka ah*

Muuqaalka qulqulka lacagaha cadaanka ah waxa ay faahfaahinaysa qulqulka lacagaha cadaanka ah ee ama ku baxa ama ka soo xarooda arrimaha hawlfulinta shaqada dowlada, hawlaha maalgashiga, iyo hawlaha maalgalinta. Waxa ay si qoto dheer u faahfaahinaysa sida loo isticmaalay lacagaha cadaanka ah iyo meelaha laga helay sida soo daynsasho ama dib u bixin daymo lagu lahaa dowladda, soo iibsasho hanti ma guurto ah ama iska iibin hanti ma guurto ah.

2. *Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda (Balance Sheet***)**

Muuqaalka mowqifka maaliyadeed ee Dowlada "horay loogu yaqaanan Muuqaalka Hantida iyo Daymaha Dowladda" waxaa lagu soo gudbiyey faahfaahin ku saabsan Hantida iyo Daymaha Dowladda oo muujinaaya saafiga hantieed ee Dowladda oo ah (Farqiga u dhexeeya Hantida iyo Daymaha Dowladda).

3. *Muuqaalka Kharashaadka Daymaha (Mushaar***)**

Muuqaalkaan waxaa lagu soo bandhigaa macluumaad ku saabsan daymaha lagu leeyahay dowladda ee ka dhashay dhanka kharashaadka sida soo daynsasho agab iyo adeeg ama mushaar aan la bixin dhowrkii sano ee la soo dhaafay.

*4. Muuqaalka Daymaha Dowladda*

Sidoo kale halkaan waxaa lagu faahfaahinayaa daymaha dowladaha shisheeye ku leeyihiin dowladda. Daymaha nuucaan ah waxaa loo kala bixinayaa laba qaybood oo kala ah daymo hal dhinac le ah, daymo laba dhinacle ah iyo daymo dhinacyo badan ah. Daymaha laba dhinaclaha ah waxaa loo sii kala qaadayaa laba qaybood oo kala ah daymaha ay leeyihiin dowladaha ku midoobay Paris Club iyo kuwa aan ku jirin PARIS Club.

*5. Muuqaalka Dakhliga aan ku jirin Miisaaniyadda*

Muuqaalka Dakhliga aan ku jirin Miisaaniyadda Dowladda waxa lagu muujinayaa guud ahaan dakhliga soo gala Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda ee an ku jirin miisaaniyadda ee ay ka heleen dhinacyo kale oo ka taageera hawlaha hay'adaa. Halkaan waxaa lagu soo gudbinayaa Wasaaradaha iyo Hay'adaha inta ay usoo gudbiyeen Xisaabiyaha Guud kaliya.

## 4. Dulmar Guud iyo Falanqayn Kooban ee Xisaab xirka sanadka 2022

**Shaxda 1aad Warbixinta Maaliyadeed oo Kooban**

| ***Waxqabadka Maaliyadeed*** | **2022** | **2021** | **2020** |
|---|---|---|---|
| | **USD$** | **USD$** | **USD$** |
| **Dakhli** | 769,237,846 | 472,901,997 | 496,826,962 |
| **Kharashaad** | 731,434,866 | 495,842,745 | 485,287,246 |
| Dheeri/(dhiman) | **37,802,980** | **(22,940,748)** | **11,539,716** |
| **% Isbadal** | 5% | -5%* | 2% |
| **Kutalagalkii Hore** | 929,924,528 | 666,484,657 | 476,150,905 |
| Ku noqoshada Miisaaniyadda | **929,924,528** | **666,484,657** | **685,270,734** |
| **Kharashaadka Dhabta ah** | 731,434,866 | 495,842,745 | 485,287,246 |
| **Kharashadka aan la isticmaalin** | **(198,489,632)** | **(170,641,912)** | **(199,983,488)** |
| **Is bedelka** | 21% | 26% | 29% |
| **Ku noqoshada Missaniyadda** | **944,859,528** | **666,484,657** | **685,270,734** |
| **Dakhliga dhabtaa** | 769,237,846 | 472,901,997 | 496,826,962 |
| Miisaaniyada an la isticmaalin | **(175,621,682)** | **(193,582,660)** | **(188,443,772)** |
| **% Isbadalka** | **-19%** | **-29%** | **-27%** |

*SM 2021 waxuu muuujinayaa hoos udhac 5% ah ee dhanka dakhliga ah marka lala barbardhiga kharashka dhabta ee la galay,hoos udhacaas waxaa lagu daboolay haraaga lacagta cadaanka ah ee sanadki 2020

## 5. Falanqaynta Dakhliga

Dakhliga soo galay Dowladda Federaalka Soomaaliya intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu hoos uga dhacay ku talagalkii lacag gaaraysa $175.6million oo ka 18.5%. sidoo kale waxuu kor kacay 19% markii loo eego dakhliga guud.Dakhligii sanadkii ka horeeyey ee 2021 waxa uu gaaray $472.9 milyan halka uu sanadkaan 2022 uu noqday USD$769.2 milyan. Isha ugu weyn ee uu dakhligu ka soo galay Dowladda waxa uu ahaa dakhliga Deeqaha Dibada waxaa xiga dakhliga laga aruuriyo gudaha wadanka oo ah dakhliga canshuuraha iyo dakhliga khidmadaha.


Dakhliga casnhuuraha iyo khidmadaha kaliya ka so xerooday waxa uu gaaray sanadkaan 2022 $262.6M, oo u dhiganta 34% dakhliga guud. Sidoo kale deeqaha dibada waxuu garayaa 459.2 u dhiganta 60%.

**Shaxda 1aad Dakhliga oo Kooban**

| Dakhliga | 2022 | 2021 | 2020 |
|---|---|---|---|
| **Canshuuraha** | 181,691,842 | 162,766,994 | 139,529,217 |
| **Dakhliga aan Canshuurta ahayn** | 80,977,903 | 66,794,410 | 71,704,628 |
| **Deeqaha Dibedda** | 459,241.797 | 146,975,019 | 285,593,117 |
| **Dakhli Kale (Assest Recovery )** | 3,285,354 | -96,365,574 | - |
| **Dakhli Kale ( SDR)** | 44,040,950 | **472,901,997** | |
| Wadarta Dakhliga | **769,237,846** | | **496,826,962** |

Jaantuska hoose waxa laga dheehan karaa isbarbardhiga ilaha kala duwan ee dakhliga dowladdu ka soo xeroodo oo u qaybsan Dakhliga Canshuuraha, Dakhliga aan Canshuuraha ahayn(ama Khidmadaha) iyo Dakhliga Deeqaha laga helo dibedda oo sanadkaan gaaray 60% ka mid ah dakhliga guud. Dakhliyada ilaha kale laga helay waxa ay ka noqdeen dakhliga guud 34%. Dakhliga kale 6%

**Jaantuska 1aad: Isbarbardhiga Ilaha Dakhliga Dowladda ee SM2022**





*Dakhliga aan Canshuuraha ahayn.*

Sanad Maaliyadeedka 2022 dakhliga aan canshuurta ahayn ee laga helay khidmadaha dowladdu u fuliso bulshada waxa ku kordhay USD$14.2 milyan markii loo barbardhigo sanad maaliyadeedka hore ee 2021

sida ka muuqata shaxda 2aad. Dakhliga aan canshuuraha ahayn waxa uu gaaray $80.9milyan sanad maaliyadeedka 2022, halka uu ka ahaa $66.7 milyan sanad maaliyadeedkii hore ee 2021 sare u kacaas ayaa gaaray 14.2 milyan. Sababaha ugu weyn ee sare u kaca dakhliga aan canshuuraha ahayn waxaa ka mid ah doorashadii ka dhacday dalka sanadkaan oo ay dalka soo galeen muwaadiniin fara badan oo kor u qaaday lacagaha ka soo xerooday duulimaadyada diyaaradaha. Sidoo kale waxaa sanadkaan kordhay dakhliga soo saarista baasaboorada maadaama muwaadiniin badan isku diyaarinayeen ka qeybgalka doorashooyinkii dalka ka dhacay.

**Jaantuska 1aad Isbarbardhiga Dakhliha ee SM2022**




*Dakhliga Canshuuraha*

Dakhliga canshuuraha ee soo xerooday Sanad Maaliyadeedka 2022 waxa uu gaaray USD$181.7 milyan halka uu ka ahaa USD$ 162.8milyan Sanad Maaliyadeedki ka horeeyey ee 2021. Korarka Dakhliga oo gaaray USD$18.9milyan ayaa loo sababeenayaa horumarka laga sameeyey hawlaha dakhli aruurinta iyo fidinta baaxada canshuuraha iyada oo sanadkaan canshuuraha dakhliga shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay oo la kordhiyey. Sidoo kale waxaa kordhay dakhliga laga helay badeecadaha ka soo daga furdada Xamar madaam uu dalka ka soo kabanayeey saameynta caabuqa 19 sanadahii danbe sameyna ku yeeshay habsami u socodka howlaha furdada Xamar .

*Deeqaha Dibedda*

Caawinaada dhaqaale ee ku yimaada qaababka laba dhinaclaha ah iyo habka dhinacya badanta ah waxa a

Maaliyadeedka 2022 waxa uu gaaray USD$459.2milyan oo ka ah (60%) dakhliga guud halka uu Sanad Maaliyadeedkii hore ee 2021 uu ka ahaa USD$147milyan. Sare u kaca gaaray USD$312.2 milyan oo u dhiganta 212% ayaa yimid kadib markii Bangiga Aduunku soo kordhay mashaariic cusub, sidoo kale lacagaha ay isticmaaleen mashaariicdii hore la kordhiyey kadib markii doorashadii madaxtinimada dalka lasoo gabagabeeyey. Waxaa midowga yuruba Budget support ah .


*Daymaha*

Mudadii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa soo galay lacago laga helay Hay'adda Lacagta Addunka ee "IMF" oo gaaraysay 44milyan, lacagahaas oo lagaran ogyahay Special drawing Rights "SDR". Lacagtaas ayay dowladdu u aqoonsatay amah muddo fog ah. Daynta SDR-ku waxa ay dkahliga guud ka tahay 6%.

1. **Falanqaynta Kharashaadka**

Guud ahaan kharashaadka dowlada waxa ay u qaybsamaan afar qaybood oo kala ah, Kharashaadka joogtada ah, Kharashaadka Ra'sulmaalka, Kharashaadka Deeqaha ee ay dowladu siiso Maamul Goboleedyada iyo Dowladaha Hoose iyo kharashaadka dib-u-bixinta daymaha. Jaantuska 3aad waxa uu soo koobayaa qaybaha ugu waaweyn ee kharashaadka Dowladda Federaalka Soomaaliya.

**Jaantuska 2aad Qaybaha Kharashaadka**





Kharashaadka Joogtada ah waa kharashaad intooda badan ku baxa arimaha mushaaraadka shaqaalaha iyo soo iibsiga agab ama adeega hawl maalmeedka dowlada muhiimka u ah. Kharashaadka joogtada ah waxaa kale oo ka mid ah bixinta dulsaarka iyo khidmado kale. Jaantuska hoose waxa uu soo koobaya meelaha uu ku baxo dakhliga soo gala dowladda. Wadarta kharashaadka baxay sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa USD$731.4milyan markii loo barbardhigo sanadkii ka horeeyey ee 2021 kaas oo kharashaadku ahaayeen USD$495.8milyan. Guud ahaan Dowladda Federaalka Soomaaliya kharashaadkeedu waxa uu

kordhay lacag dhan $235.6milyan oo u dhiganta (48%). Kharashaadka ugu badan waxa ay ku baxeen Mushaarka shaqaalaha 259.6 milyan (35%). Halka kale ee kharashaadka ugu badan ku baxeen waxa ay ahayd lacagaha lagu caawiyey bulshada danyarta ah “Social benefit”.

Shaxda 3aad ee hoos ka muuqata waxaa ku faahfaahsan qaybaha ugu waaweeyn ee kharashaadka dowladda sanad maaliyadedka 2022 oo loo barbardhigay sanadihii ka horeeyey ee 2022, 2021 .

**Shaxda 2aad Kharashaadka oo kooban**

| | 2022 | 2021 | 2020 |
|---|---|---|---|
| **Kharashaadka** | | | |
| Mushaarka Shaqaalaha | 259,578,811 | 250,099,404 | 227,014,247 |
| Isticmaalka agabka iyo adeegga | 140,670,12 | 106,059,789 | 80,696,010 |
| Deeqaha la bixiyey | 111,242,917 | 45,850,523 | 80,283,381 |
| | | | |
| Kharashaadka Ra’sulmaalka | 13,200,988 | 16,099,178 | 18,551,695 |
| Bixinta Dulsaaro | 693,045 | 1,440,881 | 14,444,846 |
| Kaalmo dhaqaale | 5,115,305 | 1,271,695 | 2,161,914 |
| Kaalmo arrimo Bulsho | 188,936,115 | 33,715,682 | 62,135,152 |
| Dib u bixin deyna | 11,997,573 | 35,156,428 | 0 |
| **Wadarta** | **731,434,866** | **495,842,746** | **485,287,246** |



## 2. Kharashaadka Ra’sulmaalka

Sanad maaliyadeedka 2022 kharashka ku baxay ra’sulmaalka waxa uu gaaray USD$13.2 milyan halka uu sanadkii hore ee 2021 ka ahaa 16.1 milyan, waxa uu hoose uga sanadkii hore lacag dhan dhacay 2.9milyan oo u dhiganta (18% ).
Kharashaadka ra’sulmaalka ee ugu badan waxa ay ku baxeen

**Shaxda 3aad Kharashaadka Ra'sulmaalka**

| Kharashaadka Ra’sulmaalka | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| **Dhismooyinka deegaanka ah** | 835,695 | 1,968,456 |
| **Dhismeyaal kale** | 95,296 | - |
| **Dhismooyinka ee aan deegaanka ahayn** | - | 151,633 |
| **Qalab xamuul** | 195,650 | 41,390 |
| **Makinado iyo Qalab kale** | 1,861,453 | 4,052,767 |
| **Qalab xafiiseed** | 474,634 | 208,635 |
| **Qalab ICT** | 1,777,201 | 2,610,755 |
| **Softweero and application** | 618,114 | 122,443.00 |
| **Hanti kale oo ma guurto ah** | 7,342,944 | 6,087,760 |
| **Hanti aan muuqan** | - | 855,340 |
| **Wadarta Kharashaadka Ra’sulmaalka** | **13,200,988** | **16,099,179** |

## 3. Ku talagalkii hore ee miisaaniyadda dowladda iyo hharashaadka dhab ahaan u Baxay.

Miisaaniyada Guud ee Dowlada oo ah halka asalka ah ee lagu soo saaro qorshaha maaliyadeed ee sanadlaha ah ee ay dowladu leedahay ayaa lagu jaan gooyaa dakhliga iyo kharashaadka dowlada ee sanadka soo socda. Dhinaca kharashaadka waxaa lagu go’aamiyaa kharashaadka loo baahnaan doono iyo ilaha laga heli doono dakhligii lagu maalgelin lahaaba. Hadaba qorshihii ku talagalka kharashaadka waxa uu ahaa USD$929.9milyan.Ma jirin wax ku noqosho saadaasha miisaaniyadda ah intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka2022.

Shaxda hoose waxa ay tusinaysaa ku talagalka miisaaniyada iyo kharashaadka sida dhabta ah u baxay

**Shaxda 5aad Isbarbardhigga Kutalagalka iyo Natiijada Dhabta ah ee Kharashaadka**

| Nuuca Kharashka | 2022 Kutalagalka USD$ | 2022 Natiijada Dhabta USD$ | Farqiga (Inta aan la isticmaalin) USD$ |
|---|---|---|---|
| Mushaarka shaqaalaha | 266,016,979 | 259,578,811 | -2% |
| Isticmaalka agabka iyo adeega | 232,247,363 | 140,670112 | -39% |
| Deeqaha la bixiyey | 132,355,417 | 111,242,917 | -16% |
| Kharashaadka Ra'sulmaalka | 33,503,237 | 13,200,988 | -61% |
| Dulsaarka iyo deyn celin | 12,935,782 | 12,690,618 | -2% |
| Kaalmo dhaqaale | 5,546,710 | 5,115,305 | -8% |
| Kaalmo arimo bulsho | 247,314,243 | 188,936,115 | -24% |
| Kharshaad kale (Contingency Fund) | 4,796 | - | -100% |
| **Wadarta Kharashaadka.** | **929,924,527** | **731,434,866** | **-21%** |

## 9. Hawlaha Dowladda

Kharashaadka ku baxa hawlaha Dowladda ee loo yaqaano (COFOG) waxa uu muujinayaa sida loo isticmaalay dakhligii dawladda soo galay. Dhaman kharashaadka ku baxay howlaha Dowladda ayaa shaxda hoose lagu soo koobay.

**Shaxda 6aad Kharashaadka Hawlaha Dowladda**

| Qaybaha Hawlaha Dowladda (COFOG) | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Hawlaha Adeegga Guud | 279,181,923 | 168,556,230 |
| Difaaca | 99,777,410 | 92,210,200 |
| Amniga iyo Kala danbayta | 100,399,256 | 95,985,216 |
| Dhaqaalaha | 215,891,465 | 75,316,864 |
| Caafimaadka | 11,375,284 | 21,163,991 |
| Waxbarashada | 20,176,767 | 17,300,745 |
| Arrimaha Bulshada | 1,852,530 | 1,430,732 |
| Arrimaha Diinta, Dhaqanka iyo hiddaha | 2,780,260 | 1,886,576 |
| **Wadarta Kharashaadka Hawlaha Dowladda** | **731,434,866** | **473,850,554** |

## 10. Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed (Muuqaalka Hantida iyo Daymaha Maaliyadeed).

Maadaama Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ay ku dhaqanto Nidaamka ku Xisaabtanka Lacagaha Caddaanka ah (Cash basis IPSAS) Sidaas daraadeed Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ma soo wada bandhigayo dhamaan handitda iyo daymaha maaliyadeed ee dowladda balse waxa si hordhac ah loo soo bandhigo macluumaadka la hayo si halkaas looga sii daro wixii soo kordha mustaqblka.
Shaxda hoose waxa ay muujinaysaa Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda

**Shaxda 7aad Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda**

| Description | USD$ | USD$ | % Isbadalka |
|---|---|---|---|
| **Kaashka iyo kaash u dhigmaha** | 81,001,443 | 43,198,462 | 88% |
| **Daymo maqan** | | | |
| Wadarta Hantida | **81,001,443** | **43,198,462** | - |
| **Daymaha taagan** | | | |
| **Daymaha Kharashaadka** | 52,795,274 | 52,795,274 | - |
| Wadarta Daymaha | **52,795,274** | **52,795,274** | |
| Saafiga Hantida Maaliyadeed | **28,206,168** | **9,596,812** | **88%** |

*(a) Saafiga hantida maaliyadeed waxay la mid tahay wadarta dakhliga iyo wadarta daymaha oo aysan ku jirin daymaha dibeda markii lakala jaro.*

*(b) Daymaha kharashaadka waa daymaha ilaa iyo hada la xaqiijiyey in lagu leeyahay dowlada oo ah daymo dhanka mushaarka shaqaalaha iyo isticmaalka agabka iyo adeega. Daymaha kale waa daymamaha diiwaanka gashan sanad maaliyadeedka 2022 oo an la bixin dhamaadka sanadka.*

## 11. Daymaha Dowlada lagu leeyahay (Public Debt)

Daymaha Dowladda lagu leeyahay waxa ay iskugu jiraan daymo Dhinacya Badan ah, Daymaha hay'adaha ku Jira Dallada ree Paris Club-ka, iyo Daymaha Wadama kale ku leeyihiin Dowladda Federaalka soomaaliya. Daymaha Dhinacya badanta ahi waxa ay isugu jiraan daymo ay leeyihiin hay'adaha maaliyadeed ee caalamiga ah sida Hay'adda Lacagta Addunka ee IMF, Bangiga Addunka. Daymaha hay'adaha ku bahoobay Paris Club-ku waxa ay isugu jiraan wadamo daymo ku leh dalka oo doonaya in la helo wadiiqo saxan oo xal loogu heli karo daymaha aadka u culus ay ay wadamada daymaha qaatay.


Wadarta daymaha dowladda ee dhamaadka sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu yahay $4.4 39bilyan. Daymaha Dhinacya badanta ahi waxa ay ka yihiin wadartaas 23% (1,039.52 billion). Daynlayda ugu waawayn waxa ku jira IMF-ta, AFESD iyo IDA. Daymaha laba dhinaclaha ah waxa weeye $3.39.74bilyan. Hay'adaha ku jira dalada Paris Club waxa ay leeyihiin 77% daymaha laba dhinaclaha ah. Daynlayda laba dhinaclaha ah waxaa ka mid ah Ruushka, Mareekanka, Talyaaniga iyo Faransiiska.Hay'adaha an ku jirin dallada Paris Club iyaguna waxa ay leeyihiin Waxa iyagana ugu waaweyn Sanduuqa Abu Dhabi, wadmada Ciraaq, Boqortooyada Sacuudiga iyo sanduuqA Kuweyd. Santtqa Iraq iyokuwait Bankiga deymaha Serbian to USD 2.53 million.

Shaxda iyo Jaantuskan hoose waxaa laga dheehan karaa qaybaha ay ka koobantahay daymaha dibeda looga leeyahay Dowlada Federaalka Soomaaliya

Dhamaan lacagta ku qoran halkaan waa Billion US$4.440

**Shaxda 8aad Daymaha Dowladda**

| Daymaha | 12/31/22 USD$ | 12/31/21 USD$ | % Isbadalka |
|---|---|---|---|
| Daymaha Dhinacya badanta ah | 1,040 | 1,081 | -0.04 |
| Daymaha Paris Club | 2,662 | 2,678 | -0.01 |
| Daymaha an ahaynParis Club | 735 | 725 | 0.01 |
| Daymaha Ganacsiga-Serbiya | 3 | 2 | - |
| **Wadarta Daymaha** | **4,440** | **4,486** | **-0.03** |




.....

**Faatuma Cismaan Faarax,**

Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

## III. MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA
**Dowladda Federaalka Soomaaliya**

## III. MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA

**Dowladda Federaalka Soomaaliya**

**Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka**

**Ee Sanadka Ku Dhamaaday 31 December 2022**

[Habka loo kala soocay Dakhliga iyo Kharashaadka Waa Habka kala sooca Dhaqaalaha]

| | Note | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|---|
| **DAKHLIGA** | | | |
| Dakhli canshuuro | 1 | 181,691,842 | 162,766,994 |
| Dakhli aan Canshuur ahayn | 2 | 80,977,903 | 66,794,410 |
| Deeqaha Dibedda | 3 | 459,241,979 | 146,975,019 |
| Dakhli Kale (Assest Recovery ) | 5 | 3,285,354 | - |
| Dakhli Dayn ah (SRD) | 4 | 44,40,950 | 96,365,574 |
| **Wadarta Dakhliga** | | **769,237,846** | **472,901,997** |
| **Kharashaadka** | | | |
| Mushaarka Shaqaalaha | 6 | 259,578,811 | 250,099,404 |
| Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | 7 | 140,670,112 | 106,059,789 |
| Kharashaadka Ra'sulmaaka | 8 | 13,200,988 | 16,099,178 |
| Deeqo la bixiyey | 9 | 111,242,917 | 45,850,523 |
| Dulsaar daymo iyo Khidmado kale | 11 | 693,045 | 1,440,881 |
| Kaalmo Dhaqaale | 12 | 5,115,305 | 1,271,695 |
| Kaalmo Bulsho | 10 | 188,936,115 | 39,864,848 |
| Daymo la bixiyey | 13 | 11,997,573 | 35,156,428 |
| **Wadarta Kharashaadka** | | **731,434,866** | **495,842,745** |
| **Dheeri/(Dhiman) Dhamaadka Sanadka** | | 37,802,980 | (22,940,748) |
| **Haraaga Kaashka Bilowga sanakda** | 14 | **43,198,463** | 66,139,211 |
| **Dheeri/(Dhiman) Dhamaadka Sanadka** | | 37,802,950 | (22,940,748) |
| **Haraaga Kaashka Dhamaadka Sanadka** | 14 | **81,001,443** | **43,198,463** |

Sida ku cad faahfaahinta tirsi 13aad lacag gaaraysa US$81,001,413 (SM2022 (SM2021: US$43,198,463) oo ku jirta muuqaalka haraayada bangiga ku haray dhamaadka sanadkaan waxa ay gaar u tahay mashaariicda dibedda laga maalgaliyo.

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab xirka ee ku qoran laga bilaabo boga 22aad kuna eg bogga 41aad waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaab xirka.

.....

**Faatuma Cismaan Faarax,**
Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

## IV. MUUQAALKA ISBARBARDHIGA SAADAASHA MIISAANIYADA IYO NATIIJADA DHABTA AH

**Dowladda Federaalka Soomaaliya**

**Muuqaalka Isbarbardhiga Saadaasha Miisaaniyadda iyo Natiijada Dhabta ah**

**Ee Sanadka Ku Dhamaaday 31 december 2022**

**Miisaaniyad ku dhisan Nidaamka Ku Xisaabtanka Lacagaha Caddaanka ah**

[Habka loo kala soocay Dakhliga iyo Kharashaadka Waa Habka kala sooca Dhaqaalaha]

| | Fahfahin | 2022 Kutalagalki Hore USD$ | Waxka badalka Kutalagalka USD$ | Kutalaglkii Ugu Danbeeyey USD$ | Natiijada Dhabtah USD$ | Farqiga u dhexeeya Kutalagalkii iyo Natiijada Dhabta ah USD$ | % Farqiga |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Dakhli** | | | | | | | |
| Canshuuro | 1 | 173,699,181 | - | 173,699,181 | 181,691,842 | 7,992,661 | 5% |
| Dakhli aan canshur ahayn | 2 | 76,399,293 | - | 76,399,293 | 80,977,903 | -4,578,610 | 6% |
| Deeq laba dhinacle ah-Deeq | 3 | 39,600,000 | - | 39,600,000 | 37,100,000 | (2,500,000) | -6% |
| Deeq dhinacya badan ah-Deeq | 3 | 655,161,090 | - | 655,161,090 | 422,141,797 | (233,019,293) | -36% |
| Dakhli dayn ah | 4 | - | - | - | 44,040,950 | 44,040,950 | 100% |
| Dakhli kale | 5 | | | | 3,285,354 | 3,285,354 | 100% |
| **Wadarta Dakhliga** | | **944,859,564** | - | **944,859,564** | **769,237,846** | **(222,948,022)** | **-24%** |
| **Kharashaadka** | | | | | | | |
| Mushaarka | 6 | 263,238,638 | 2,778,638 | 266,016,979 | 259,578,811 | 6,438,168 | 2% |
| Shaqalaha | 7 | 216,833,090 | 15,414,273 | 232,247,363 | 140,670,112 | 91.577,222 | 39% |
| Isticmaalka agabka iyo adeegga | 12 | 7,546,700 | (1,999,990) | 5,546,710 | 5,115,305 | 431,405 | 8% |
| Kaalmo dhaqaale | 9 | 119,504,205 | 12,850,213 | 132,355,417 | 111,242,917 | 21,112,500 | 16% |
| Deeqo la bixiyey | 13 | 2,500,000 | 10,435,782 | 12,935,782 | 12,690,618 | 245,164 | 2% |
| Daymo iyo Dulsaaro la bixiyey | 10 | 274,965,000 | (27,650,757 | 247,314,243 | 188,936,115 | 58,378,128 | 24% |
| Kaalmo arimo bulsho | | 2,500,000 | (2,495,204) | 4,796 | | 4,796 | 100% |
| Kharashaad kale-Lama filaanka | | | | | | | |
| **Wadarta Kharashaadka** | | **887,087,336** | **9,333,955** | **896,421,291** | **718,233,879** | **178,187,412** | 191% |
| Kharashaadka Ra'sulmaalka | 8 | 42,837,192 | (9,333,955) | 33,503,237 | 13,200,988 | 20,302,249 | 61% |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **Wadarta Kharashaadka** | **42,837,192** | (9,333,955) | **33,503,237** | 13,200,988 | 20,302,249 | 61% |
| **ra'sulmaalka Wadarta Kharashaadka** | **929,924,528** | - | **929,924,528** | **731,434,867** | **198,489,661** | 21% |
| **Saafiga qulqulka Kaashka** | **14,935,036** | - | **14,935,036** | **37,802,980** | **(421,437,683)** | -45% |

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab xirka ee ku qoran laga bilaabo boga 22aad kuna eg bogga 41aad waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaab xirka.

.....

**Faatuma Cismaan Faarax,**
**Xisaabiyaha Guud ee Dowlada**

Iyada oo la raacayo shuruudaha Xeerarka ku xisaabtanka lacagta caddaanka ah ee IPSAS, 2017 farqiga miisaaniyadda waxaa si faahfaahsan loogu sharraxay warbixinnada waxqabadka miisaaniyadda ee lagu daabacay online-ka:*https://mof.gov.so/publications/end-year-budget-fiscal-performance-report-fiscal-year-2022*

## V. MUUQAALKA KHARASHAADKA HAWLAHA DOWLADDA

**Dowladda Federaalka Soomaaliya**

**Muuqaalka Isbarbardhiga Saadaasha Miisaaniyadda iyo Natiijada Dhabta ah**

**Ee Sanadka Ku Dhamaaday 31 december 2022**

[Habka loo kala soocay Dakhliga iyo Kharashaadka Waa Habka kala sooca Dhaqaalaha]

| *Hawlaha Dowladda Ee Habka Kala sooca GFS 14-ka* | **Kutalagalka Miisaaniyadda 2022 US $** | ***Natiijada Dhabta ah* 2022 US $** | ***Natiijada Dhabta ah* 2021 US $** |
|---|---|---|---|
| **Kharashaadka Joogtada ah** | | | |
| Adeegga Guud ee Dowladda | 295,659,800 | 271,661,500 | 160,261,061 |
| Adeegga Difaaca | 100,192,477 | 99,777,410 | 92,210,200 |
| Aminiga iyo kala danbaynta | 115,683,314 | 100,269,024 | 94,475,575 |
| Arimaha Dhaqaalaha | 291,834,086 | 211,586,229 | 74,204,443 |
| Adeeg Caafimaad | 56,851,844 | 10,685,854 | 16,773,930 |
| Adeeg waxbarasho | 29,126,954 | 19,621,069 | 16,508,859 |
| Adeega Arimaha Bulshada | 3,890,354 | 1,852,530 | 1,430,732 |
| Arimaha Diinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska | 3,177,666 | 2,780,260 | 1,886,576 |
| **Wadarta Kharashaadka Joogtada ah** | **896,416,494** | **718,233,879** | **457,751,376** |
| **Kharashaadka Rasulmaalka** | | | |
| Adeegga Guud ee Dowladda | 18,7662,11.08 | 7520393 | 8,295,169 |
| Adeegga Difaaca | - | - | - |
| Aminiga iyo kala danbaynta | 1,956,940 | 130,232 | 1,509,641 |
| Arimaha Dhaqaalaha | 9,283,050 | 4,305,235 | 1,112,421 |
| Adeeg Caafimaad | 1,731,501 | 689,430 | 4,390,061 |
| Adeeg waxbarasho | 1,765,536 | 555,698 | 791,886 |
| Adeega Arimaha Bulshada | | | - |
| Arimaha Diinta, Dhaqanka | | - | - |
| **Wadarta Kharashaadka Rasulmaalka** | **33,503,237** | **13,200,988** | **16,099,178** |
| **Wadarta Kharashaadka** | **929,919,732** | **731,434,866** | **473,850,554** |

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab xirka eek u qoran laga bilaabo boga 22aad kuna eg bogga 41aad waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaab xirka.

.....

**Faatuma Cismaan Faarax,**
Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

## VI. MUUQAALKA QULQULKA LACAGTA CADAANKA AH

**Dowladda Federaalka Soomaaliya**
**Muuqaalka Qulqulka Lacagta Caddaanka ah**
**Ee Sanadka Ku Dhamaaday 31 december 2022**
[Habka loo kala soocay Dakhliga iyo Kharashaadka Waa Habka kala sooca Dhaqaalaha]

| | Fahfahin | 2022 | 2021 |
|---|---|---|---|
| **Qulqulka Kaashka ee Hawlfulinta** | | | |
| **Dakhliga** | | | |
| Canshuuraha | 1 | 181,691,842 | 162,766,994 |
| Dakhliga aan canshuuraha ahayn | 2 | 80,977,903 | 66,794,410 |
| Deeqaha Dibedda | 3 | 459,241,979 | 146,975,019 |
| | | **721,911,542** | **376,536,423** |
| **Kharashka ku baxa Halwfulinta** | | | |
| Mushaarka Shaqaalaha | 6 | 259,578,811 | 250,099,404 |
| Isticmaalka Agabka iyo Adeegga | 7 | 140,670,112 | 106,059,789 |
| Deeqaha la bixiyey | 9 | 111,242,917 | 45,850,523 |
| Kaalmo Dhaqaale | 12 | 5,115,305 | 1,271,695 |
| Kaalmo Bulsho | 10 | 188,936,115 | 39,864,848 |
| Dulsaarka Daymaha | 11 | 693,045 | 1,440,881 |
| | | **706,236,305** | **444,587,139** |
| **Wadarta Kharashaadka Hawlfulinta** | | **15,675,237** | **(68,050,715)** |
| Saafiga Qulqulka Kaashka ee Hawlfulinta | | | |
| **Qulqulka kaashka ee Maalgashiga** | | | |
| Soo ibsasho qalab ra'sulmaal | 8 | 13,200,988 | 16,099,178 |
| Saafiga Qulqulka kaashka ee Maalgashiga | | (13,200,988) | **(16,099,178)** |
| **Qulqulka Kaashka ee Maalgalinta** | | | |
| Daymo / Hormaris (SDR) | 4 | 44,040,950 | 96,365,574 |
| Dakhle kale (asste recovery) | 5 | 3,285,354 | - |
| Dib-u-bixin Daymo | 13 | (11,997,573) | (35,156,428 ) |
| Saafiga Qulqulka Kaashaka ee Maalgalinta | | **35,328,731** | **61,209,146** |
| Saafiga kororka/(hoos u dhaca) Kaashka iyo Kaash U dhigmaha | | 37,802,980 | (22,940,748) |
| **Kaashka iyo Kaash u dhigmaha Sanadka bilowgiisa 1, January** | 14 | 43,198,463 | 66,139,210 |
| **Kaashka iyo Kaash u dhigmaha ee Dhamaadka Sanakda 31, Dec.** | **14** | **81,001,443** | **43,198,463** |

*Sida ku cad faahfaahinta tirsi 13aad lacag gaaraysa US$81,001,443(SM2022 (SM2021: US$41,137,461) oo ku jirta muuqaalka haraayada bangiga ku haray dhamaadka sanadkaan waxa ay gaar u tahay mashaariicda dibedda laga maalgaliyo.*

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab xirka eek u qoran laga bilaabo boga 22aad kuna eg bogga 41aad waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaab xirka.

.....

**Faatuma Cismaan Faarax,**
**XisaabiyahaGuudecDowladda**

# 1. MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DOWLADA

## I. Xeerarka xisaabeed

### 1.1. Warbixin Guud

Xarunta ugu wayn ee ay ku shaqayso xiligaan Dowlada Federaalka Soomaaliya waa magaalada Muqdisho oo isla markaasna ah magaala madaxda dalka. Hay'ada soo gudbisay Xisaab xirkaan waxaa laga heli karaa ciwaankaan hoose oo ah:

Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowlada
Dhismaha Wasaarada Maaliyada
Degmada Shingaani
Muqdisho
Soomaaliya

Hawlaha loo igmaday Dowlada Federaalka Soomaaliya iyo hay'adaha hoos yimaada waxaa ka mid ah in muwaadinka soomaliyeed ka haqabtirto adeegyada dowladeed ee uu ubaahanyahay si joogto ah.

Sharciyada maaliyadeed ee lagu maamulay hawlaha la xiriira maaliyada Dowlada waxaa ka mid ah; :-

6. Sharciga Qoondada Miisaaniyada ee 2022; Iyo
7. Sharciga Maamulka Maaliyadda (2019) iyo;
8. Sharciga wax iibsiga Dowladda ee (Procurement Act)

Desember 2019 Baarlamaanka Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ansixiyey Sharciga Maamulka Maaliyadda Dalka, Sidoo kale Xeer nidaamiyaha Sharciga Maamulka Maaliyadda Dalka ayaa isna la ansixiyey December 2020. Sharciga cusub ee Maamulka Maaliyaddu waxa uu badali doonaa Sharcigii hore ee Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabaadka Dowladda ee 1961 ee markii danbe 1971 wax looga badalay. Sharcigaan cusub waxba u sii adkeenayaa Baahidii loo qabay in la soo saaro warbixin maaliyadeed ee uu farayay sharcigii hore ee la badalay. Sidaas daraadeed waxa uu farayaa in Xisaab xirka loo soo diyaariyo hab waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee xisaabaadka dowladda.qodobka sida ku cad 94aad faqradiisa 2aad, halka qodobka 103aad ee Sharciga cusubi kusii kordhinaayo faahfaahinada dheeriga ah ee loo baahanyahay in la raaciyo xisaab xirka.

### 1.2. Xeerar xisaabeedka dowlada

Xeerarka halkaan ku xusan waxaa loola jeedaa mabaadi'da gaarka ah, waxyaabaha lagu saleeyo aqoonsiga mucaamalada, hishiisyada xisaabeed qawaaniinta maaliyadeed ee ay ku dhaqanto Dowladda Federaalka Soomaaliya marka la diyaarinayo lana soo bandhigayo warbixinada maaliyadeed ee sanadlaha ah. bogaga soo socda waxaa ku qoran xeerarka xisaabeed ee loo cuskaday diyaarinta xisaab xirka iyo warbixinada maaliyadeed ee la socda. Xeer kasta oo halkaan lagu xuso waa habka saxda ah ee si joogto ah loogu isticmaalo mucaamalaadka malaiyadeed ee dalka. Qaar ka mid ah xeerarkaas hoos ka sii akhri

*A) Xeerarka lagu saleeyey Diyaarinta Xisaab xirka*

**Xisaab xirka waxaa uu waafaqsanyahay shuruucda soo socota;**

- Sharciga Maamulka Maaliyada Dalka ee 2019
- Xeerarka Xisaabeed ee Caalamiga ah ee (IPSAS) gaar ahaan Nidaamka Ku Xisaabtanka Lacagaha Caddaanka ah ee 2017.

Si waafaqsan tuduca 1aad iyo qodobla 43aad faqradiisa 2aad ee Sharciga PFM-ka, Xisaab xirkani waxa loo soo diyaariyey hab w aafaqsan dhamaan Xeerarka Xisaabeed ee Caalamiga ah ee la isla garanaayo ee loo

yaqaano International Public Sector Accounting Standards ama (IPSAS), gaar ahaan Nidaamka ku xisaabtanka Lacagta Caddaanka ah ee 2017 ee uu soo saaray Dallada Caalamiga ah ee Dajinta Xeerarka xisaabeed ee Dowladaha ee (IPSASB) ee hoos yimaada Hay'adda Caalamiga ah ee Xisaabaadka ee (IFA) sida ku cad qodobka faahinta xeerarka xisaabeed ee hoos ku xusan.

Marka la dhaqan galiyo shuuucda nidaamka ku xisaabtanka lacagaha caddaanka ah kaliya ee IPSAS warbixinada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah kuwan soo socda;

Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka
Muuqaalka isbarbardhiga Kutalagalka miisaaniyadda iyo Natiijada dhabta ah;
Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinada la socda;
Warbixinada asaasiga ah ee kor ku xusan waxaa lala soo gudbiyay faahfaahino iyo macluumaad kale oo muhiim tahay in la shaaciyo sida uu qabo Xeernidaamiyaha Sharciga Maamulka Maaliyadda ee 2020 qodobkiisa 103aad faqrada 2aad waxaana ka mid ah macluumaadkaas;

- Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda (Balance sheet)
- Warbixinta Dakhliga iyo Krashaadka aan ku jirin Miisaaniyadda Dowladda;
- Warbixinta Daymaha kharashaadka;
- Warbixinta Daymaha Dibedda looga leeyahay Dowladda.
- Warbixinta Qalabka iyo Hantida Maguurtada ah

*b) Mabda'a sii joogtaynta hawlaha Dowladda (Going concern)*

Xisaab xirka dowladda waxaa loo diyaariyey hab waafaqsan mabda'a sii joogtaynta hawlaha dowladda. dhamaan xeerar xisaabeedka dowladda waxaa loo dhaqan galiyey si joogto ah intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka.

*c) Hay'ada warbixinta soo gudbisay*

Sida uu qabo Sharciga Maamulka Maaliyadda ee 2019 qodobkiisa 45aad faqradiisa 1aad ee awooda u siinaya Xisaabiyaha Guud ee Dowladdu in uu soo diyaariyo xisaab xirka. Hadaba Xisaabxirkan waxaa soo diyaariyey Xafiiska Xisaabiyaha guud ee Dowladda, Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda waa in uu soo gudbiyo xisaab xirka Dowladda Federaalka Soomaaliya. Sidaas darteed Xisaab xirkan waxaa soo diyaariyey soona gudbiyey Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.

**Si waafaqsan qodobka 1.4.8 ee Nidaamka ku xisaabtanka lacagaha Caddaanka ah ee cash basis IPSAS**,Xisaab xirkani waxaa lagu soo gudbiyay dhamaan mucaamalaatkii maaliyadeed ee dhamaan hay'adaha Dowlada Federaalka Soomaaliya eek u jira miisaaniyadda Dowladda 2022. Liiska hoose waxaa ku xusan dhamaan hay'adaha dowladda ee ku jiray qoondada miisaaniyadda ee xisaab xirkaani khuseeyo.

**Hay,adda Miisaaniyadda ku jiro Sanad Maaliyadeedka 2022**

| | **Arrimaha maamulka** |
|---|---|
| 1 | Xafiiska Madaxtooyada |
| 2 | Xafiiska Baarlamaanka - Golaha Shacabka |
| 3 | Xafiiska Aqalka Sare |
| 4 | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha |
| 5 | Wasaaradda Arrimaha Dibadda |
| 6 | Safaaradaha |
| 7 | Wasaaradda Maaliyadda |
| 8 | Xisaabiyaha Guud |

| | |
|---|---|
| 9 | Adeegga Guud ee Dawladda |
| 10 | Agaasinka Xarunta Warbixinta Maaliyadeed |
| 11 | Wasaaradda Qorshaynta |
| 12 | Hay'adda Tirakoobka Qaranka |
| 13 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka |
| 14 | Guddiga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Soomaaliyeed |
| 15 | Hay'adda Diiwaangalinta Dadweynaha |
| 16 | Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta |
| 17 | Wasaaradda Cadaaladda |
| 18 | Ciidanka asluubta |
| 19 | Maxkamadda Sare |
| 20 | Maxkamadda Gobollka Banaadir |
| 21 | Maxkamadda Rafcaanka |
| 22 | Guddiga Adeegga Garsoorka |
| 23 | Xeer Ilaaliyaha Guud |
| 24 | Garyaqaanka Guud |
| 25 | Hantidhawraha Guud |
| 26 | Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka |
| 27 | Wasaaradda Dastuurka |
| 28 | Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka |
| 29 | Guddiga Dib -u -heshiisiinta Qaranka |
| 30 | Guddiga Madaxa -bannaan ee Doorashooyinka Qaranka |
| 31 | Dib -u -eegista Dastuurka M.Banan iyo Imp. Komishanka |
| 32 | Guddiga Shaqaalaha Rayidka Qaranka |
| 33 | Guddiga M. Banaan ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa |
| Arrimaha Amniga iyo Difaaca | |
| 34 | Wasaaradda Gaashaandhigga |
| 35 | Ciidanka Xoogga Dalka |
| 36 | Maxkamadda Ciidamada |
| 37 | Hay’adda Naafada iyo Agoonta ciidanka |
| 38 | Wasaaradda Amniga Gudaha |
| 39 | Ciidanka Booliska |
| 40 | Hay’adda sirdoonka qaranka |
| 41 | Hay’adda Socdaalka iyo jinsiyadaha |
| **Arrimaha dhaqaalaha** | |
| 42 | Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta |
| 43 | Wasaaradda Macdanta |
| 44 | Hay'adda Patroolka Soomalia |
| 45 | Wasaaradda Beeraha |
| 46 | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta |
| 47 | Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda |
| 48 | Cilmi -baarista Badda Soomaaliya |
| 49 | Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumaysiga |
| 50 | Wasaaradda Warfaafinta |

| | |
|---|---|
| 51 | Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda |
| 52 | Hay’adda Isgaarsiinta Dalka |
| 53 | Wasaaradda Hawlaha Guud & Dib -u -dhiska |
| 54 | Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada |
| 55 | Hay’adda saadaasha iyo duulista hawadda |
| 56 | Wasaaradda Dekadaha iyo gaadiidka badda |
| 57 | Maamulka dekadda Xamar |
| 58 | Wasaaradda Warshadaha & Ganacsiga |
| 59 | Hay’adda tayadhawrka Soomaaliyeed |
| **Arrimaha bulshada** | |
| 60 | Wasaaradda Caafimaadka |
| 61 | Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare |
| 62 | Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed |
| 63 | Akadeemiyada Cilmiga iyo Fanka Soomaaliyeed |
| 64 | Akadeemiye -Goboleedka AfSoomaaliga |
| 65 | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada |
| 66 | Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha |
| 67 | Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha |
| 68 | Hay'adda Naafadda Soomaaliyeed; |

*d) Lacagta lagu saleeyey xisaab xirka*

Lacagta sida toos ka ah loogu xisaabiyo mucaamalaadka dowladda waa lacagta doolarka maraykanka "USD". Waxaa loo isticmaalaa soo aruurinta dakhliga dowladda sidoo kale waxaa lagu bixiyaa kharashaadka dowladda. Lacagaha lagu qabtay Shilin Soomaaliga waxaa loo bedalay (sarifay) Doolarka Mareekanka, maadaama miisaaniyaddu ay ku saleysantahay Dollarka Mareykanka.

**e) S***anad maaliyadeedka*

Sanad Maaliyadeedka Dowladda Federaalka soomaaliya waxa uu ka bilowdaa 1da Janaayo waxa uuna ku egyahay 31-ka Diseember. Hadba Sanad Maaliyadeedka ay khuseeyso xisaab xirkani waa Sanad Maaliyadeedka ku eg 31-kaDiseembar 2022 oo ay barbar taalo xisaab xirkii Sanad Maaliyadeedkii 2021 si la iskugu barbardhigo

*f) Aqoonsiga Dakhliga*

Dakhliga waxa uu ka koobanyahay dhamaan lacagaha soo gala Dowladda Federaalka Soomaaliya intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka waxa ayna usii kala baxaan, Dakhliga Canshuuraha, Dakhliga aan Canshuurta ahayn iyo Deeqaha Dibedda ka yimaada. Dakhliyadaas waxa loo aqoonsadaa dakhli ahan markii lacagahaas dhab ahaan usoo galaan khasnada dowladda.

*II. <u>Dakhliga Canshuuraha</u>*

Dakhliga Dowladdu waxa uu ka koobanyahay: Dakhliga Canshuuraha, Dakhliga Khidmadaha iyo Deeqaha dibedda. Dakhliga waxaa la aqoonsanayaa marka lagu soo xareeyo Khasnadda Dowladda (TSA)

*1. <u>Dakhliga aan Canshuuraha ahayn</u>*

waa dakhliyada laga helo khidmadaha Dowladdu u fuliso dad waynaha ee aan canshuurta ahayn, waxaana dakhli ahaan loo aqoonsadaa markii dhab ahaan usoo xerooto.

*2. <u>Deeqaha Dibedda</u>*

Dakhligaan waa hishiis ay ku qeexantahay ujeedka loo isticmaali doono dakhligaan ama deeq maaliyadeed ee dowladdu ka hesho hay'ado iyo wadamo shisheeye oo ah mid dhinacya badan ah ama mid laba dhinac le ah. Dakhligaan waxaa la aqoonsadaa kaliya marki uu soo galo khasnada dowladda

3. Daymaha oo lagu soo gudbiyo si waafaqsan Nidaamka ku Xisaabtanka Lacagaha cadaanka ah. Daymaha sanadkaan lagu soo bandhigay xisaab xirkan waa daymaha laga helay Bangiga Dhexe ee Dowladda iyo Daymaha IMF-ta ee loo yaqaano (SDR) waxaana la aqoonsadaa kaliya markii ay kaash ahaan u soo galaan khasnada Dowladda.

*g) Aqoonsiga Kharashaadka*

Kharashaadku waa lacagta ay bixiso dowladdu ama jiho kale ka bixiso dowladda. Sidaas darteed kharashka waxaa la aqoonsan karaa laguna soo gudbin karaa xisaab xirka doowladda markii si dhab ah lacagtu uga baxdo khasnada dowladda ee (TSA)

*III. <u>Mushaarka Shaqaalaha</u>*

Waa lacagaha la siiyo shaqaalaha oo iskugu jira Mushaar, Gunno iyo waxyaabo kale oo la xiriira kharashaadka shaqaalaha. Kharashkaas waxaa la aqoonsadaa kaliya markii dhab ahaan loo bixiyo.

*IV.* *Isticmaalka Agabka iyo Adeegga*

Waxaa loo aqoonsadaa kharash ahaan markii adeega ama agabka dhab ahaan loo bixiyo ama loo helo. Hadii aan lagu bixin intii lagu guda jiray mudadii agabka la isticmaalay ama adeega la fuliyay, waxaa dayn ahaan loogu xifdiyaa Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda wadarta daymahaas iyo cadayntoodaba.

*V.* *Hanti, Qalab iyo Hanti kale oo Ma guurto ah*

Waxa ay iskugu jiraan hantidaani, dhul,warshado, gawaari, qalab iyo wax kasta oo hanti ma guurto ah ee ay dowladdu leedahay. Nidaamka ku xisaabtanka lacagaha cadaanka ah marka lagu dhaqmayo, markii la soo iibsado qalabkaas kor ku xusan waxaa loo aqoonsadaa kharashaad baxay intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka. Sidaas ay tahay hadana waxa ay dowladdu leedahay diiwaan lagu diiwaan galiyo dhamaan wixii hanti ma guurto ah.

*h)* *Kaalmo arrimo Bulsho.*

Sida uu qabo hishiiska IDA ee uu maalgaliyo Bangiga Aduunka, lacag kaalmo arrimo bulsho ah ayaa la bixiyey intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka iyadoo ujeedadu ahayd;

In la siiyo qoysaska dhaqaale ahaan jilicsan lacago cadaan ah sidoo kale in la dhisho hab qaran oo looga gaashaaman karo loogana soo kaban karo aafooyinki ay sababeen musiibooyinka dalka ka jira

In laga hortago dhibaatada uu sababay ayaxa ku habsaday meelo badan korna loo qaado heerka diyaargarowga;

In gacan laga gaysto sidii looga soo kaban lahaa dhibaatooyinka hada jia loona gaari lahaa u adkaysiga dhibaatooyinka dabiiciga ah iyo dhibaatooyinka aadanuhu sababteeda leeyahay ee mudada fog.

*i)* *Kaalmo dhaqaale (subsidy).*

Mashruuca SCALED-UP ayaa laga bixiyey lacag kaalmo dhaqaale ahaa oo lagu helay hishiiska IDA ee uu maalgaliyo Bangiga Aduunka si kor loogu qaado helitaanka dadweynaha adeegyada ay bixiso dowladdu iyada oo si gooni ah loo abaarayo ganacsatada yaryarka ah, shaqaalaysiinta dhalinyarada gaar ahaan dumarka.

Dhamaan lacagaha kaalmada dhaqaalaha ah waxaa la aqoonsadaa marka lacagaha dhab ahaan loo bixiyo.

**j)** *Lacagaha cadaanka ah iyo waxyaabaha la midka ah lacag cadaan ah*

Lacagta kaashka ah “ama caddaanka ah” iyo waxyaabaha kaashka u dhigma waxaa lagu soo bandhigayaa muuqaalka caddaynta mowqifka maaliyadeed ee dowladda ee loo yaqaano “Balance Sheet”. Sidoo kale waxaa lagu soo bandhigaa Muuqalka Qulqulka Kaashka “cahsflow statement” waxa ayna ka koobnayihiin kaashka cadaanka ah “Cash on Hand” iyo dibaajiyada si fudud loogu badali karo kaash markii loo baahdo iyo sidoo kale daynta bangiga “Overdraft” si loogu maareeyo baahiyaha lacageed ee dowladda.
Waxaa sidoo kale ku jira dhamaan haraayada kaashka ah iyo haraayada xisaab bangiyeedyada Dowlada iyo kuwa mashaariicda ee hoos yimaada Khasnada Mideysan ee Dowladda ee ka furan Bangiga Dhexe ee Soomaalia.

*k)* *Sanduuqa Buffer fund-ka ee qaybta ka ah Sanduuqa Midaysan ee Dowladda*

Waxa ay Dowladda Federaalka Soomaaliya ka furtay Sanduuqa Mideysan ee Dowladaa (TSA) Xisaab bangiyeed loo yaqaano Buffer fund, taasoo ka dhalatay talo soo jeedin ka timid Hay’adda Lacagta Addunka ee IMF si loo fuliyo hishiiska dayn cafinta ee SMP si loogu isticmaalo lacagtaas kharashaadka dowladda hadii dakhliga gudaha ee dowladu uu hoos u dhac ku yimaado. Bilaha ama xiliyada uu hoos u dhaco si loo sii joogteeyo hawlaha dowladda ee muhiimka ah waxaa laga soo wareejiyaa xisaab bangiyeedka buffer fund-ka hadba intii baahidu ay tahay.

*l)* *Lacagaha Xaniban*

Lacagaha xaniban waxaa loola jeedaa lacagaha aan loom isticmaali Karin in la iskaga bixiyo daymo ama aan loo isticmaali Karin wax kale ugu yaraan muddo 12 bilood ah. Lacaga ku jira Sanduuqa Buffer Fund-ka kaliya waxaa loo isticmaali karaaa in lagu bixiyo xaaladaha lacag yaridu timaado kaliya. Lacagaha laga isticmaalo lama dhaafin karo xadka ku jira miisaanyada uu ansixiyey Baarlamaanku. Lacagaha laga bixiyo Sanduuqa Buffer fund-ka kaliya waxaa loo wareejin karaa miisaaniyada dowlada kaliya**.**

*m) Isbarbardhiga ku talagalkii hore ee miisaaniyada iyo Natiijada Dhabta ah*

Si la mid ah xisaab xirka dowladda, miisaaniyad sanadeedka dowladda waxay ku salaysantahay nidaamka xeer xisaabeedka (cash basis), miisaaniyaddu waxay raacdaa habka kala sooca mucaamalaadka "classification" ee uu farayo (GFS, 2014 economic classification), waxa ayna sidoo kale khuseeysaa sanad maaliyadeedka ka bilowda ka bilowda 1da Janaayo 2022 kuna eg 31 December 2022.

31-kii December 2022 waxa uu Baarlamaanka Soomaaliya anisixiyey ku talagalkii hore ee miisaaniyada waxa uuna ahaa USD$929,924,527milyan Waxaana lagu mariyey Sharci tirsi 00018/2021. Sanadkaan ma jirin ku noqosho lagu sameeyey miisaaniyadii la ansixiyey.

*n) Mucaamalaatka lacagaha qalaad*

Dhamaan lacagaha qalaad ee soo gala khasnada dowladda waa in loo badalaa doolarka mareekanka iyada oo la isticmaalayo sicirka sarifka ee maalintaas uu marayo. Sidoo kale lacagaha qalaad ee haraaga ku ah khasnada dowladda waa in loo badalaa lacagta doolarka iyada oo la isticmaalayo sicirka sarifka ee dhamaadka sanadka. Isbadalka ku dhaca sicirka sarifka kororsiimo ama hoos u dhac waa in lagu buuxiyaa farqiga u dhexeeya haraaga bilowga sanadka iyo haraaga dhamaadka sanadka. Sidaas oo ay tahay hadana xiliyadan lagu jiro ma dhacdo lacago qalaad oo soo gala xisaabta dowladda oo ahayn mida doolarka.

*o) Sicirka Sarifka Lacagaha Qalaad*

Maa daama lacagta loo isticmaalo mucaamalaatka maaliyadeed ee dowladda uu yahay lacagta doolarka mareekanka, dhamaan xogta maaliyadeed ee ku xusan xisaab xirkaan waa in lagu soo bandhigaa doolar mareekanka USD.Sidaas darteed dhamaan xogta maaliyadeed ku ku xusan xisaab xirka sanadka 2018 waxaa lagu saleeyey Doolarka Mareekanka USD.

| | **2022** | **2021** |
|---|---|---|
| | **USD$** | **USD$** |
| Euros (Euro €) | 0.885 | 0.885 |
| Shillin Soomaali (SOS $) | 22,500 | 22,500 |

*p) Hawlaha shaqo ee Dowlada*

Si loogu soo bandhigo buuga xisaab xirka macluumaad la xariira dhanka howlaha ay qabato dowladdu (By Function) waxaa loo soo bandhigayaa qaab waafaqsan sida uu xeerinayo nidaamka Tirokoobka Maaliyadda Dowladda ee "Government Finance Statistics [the GFS-2014]" ee ay diyaariso hay'adda Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarka (Organization for Economic Cooperation and Development [the OECD]" kuna soo baxa faafinta rasmiga ah ee Hay'adda Lacagta Addunkuna ee "IMF."

*q) Kharash aan la hubin*

Daymaha aan la hubin in lagu yeelan doono Dowlada, ama dacwad maxkamadeed ay ku socoto, si gooni ah ayaa loo diiwaan galiyaa sidoo kale xisaab xirka sanad maaliyadeedka ayaa lagu shaacinayaa hadii saadaashu u

egtahay in kharash bixin ay suurto gal tahay. Hantida sidaas oo kale aan la hubin, lama shaaciyo lamana aqoonsado.

*r) Balan-qaad kharash bixin (Commitments)*

Sida ku cad Sharciga Maamulka Maaliyadda ee soobaxay 2019-kii, waxa waajib ah in la bixiyo kharash hadii jiho kale (ganacsade) loo balan qaado in la siinayo wixii kharash ah oo laga qabo hadii uu adeeg ama agab ka iibiyo hay'ad Dowladeed. Dhamaadka sanad maaliyadeedka 2021 dhamaan balanqaadyadii kharash bixinta waa la oofiyey.

*s) Dakhliga aan ku jirin Miisaaniyada Dowlada*

Dhamaan dakhliyada soo galay Wasaaradaha iyo hay'adaha Dowlada ee aan ku jirin qorshaha miisaaniyada dowlada waxaa si gooni ah loogu shaaciyey xisaab xirkan.sidoo kale Wasaaradaha iyo hay'adaha dakhligaasi soo galay magacyadooda waxaa lagu soo gudibiyey si gooni ah waxaana laga heli karaa **lifaaqa B.**

*t) Daymaha kharashaadka*

Daymaha Kharashaadka waa qayb ka mid ah daymaha dowladda ee aan wali la bixin. Daymaha kharashaadka ee la soo hubiyey sax ahaanshiyahooda waxa lagu soo bandhigay Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda.

*u) Lacagaha y bixiyeen Hay'ado Kale*

Dowladda Fedraalka Soomaliya waxa ay mararka qaar heshaa agab iyo adeeg ay kharashkooda bixiyaan hay'ado kale ee aan Dowladda ahayn. Marka lacagahaas la bixinayo codsiga lacag bixinta waxaa la soo mariyaa diiwaanka maaliyadeed ee dowladda isla codsigaas ayay deeq bixiyeyaashu toos u siyaan lacagtaas cidii loo amary in la siiyo tusaale ganacsade adeeg bixiye ah ama qof la taliye ah mushaarkiisa i.w.m.

Sidoo kale, deeq bixiyeyaashu waxa ay lacgaha toos u siin karaan hay'ad ama qof aan ku jirin diiwaanka dowladda isla markaana hawl u fuiliyey dowladda oo ay ka mid tahay caawinaad raashin ah, hishiis dhisme, gawaari, qalab ama caawin farsamo.

Lacagaha sida tooska ah loo siiyo hay'adahaas ama adeeg bixiyeyaasha aan ku jirin diiwaanka dowladda looma aqoonsado dakhli soo galay dowladda balse waxaa lagu shaaciyaa xisaab xirka kaliya markii si dhab ah loo xaqiiqsan karo tirade lacageed ama adeega u dhigma ee dowladda la siiyey. Ma jirin wax lacag toos loo bixiyey intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022**.**

*h) Xiliga la ogolaaday shaacinta Xisaab xirka*

Wabixinta iyo Xisaab xirkaba waxaa la shaaciyey **30-ka April 2023.** Waxaana ansixiyey **Dr Cilmi Maxamud Nuur,** Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo **Marwo Faadumo Cismaan Faarax**, Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

## II. FAAHFAAHIN IYO SHARAXAAD KHUSEEYSA XISAAB XIRKA

### 1. Dakhliga Canshuuraha

Dakhliga canshuuraha waxaa loo qaadaa qaab toos ah iyo si dadban. Dhamaan dakhliga canshuuraha ee dowlada soo galay waxa uu ahaa;

| | 2022<br>US $ | 2021<br>US $ |
|---|---|---|
| Canshuurta Mushaarka Shaqaalaha | 16,124,660 | 14,290,913 |
| Canshuurta Shirakada | 1,906,302 | 919,548 |
| Canshuuro kale | 631,279 | 579,865 |
| Canshuurta Agabka iyo Adeegga | 25,778,726 | 23,429,410 |
| Canshuurta Furdooyinka iyo Waxyaabaha soo daga | 102,437,864 | 97,365,062 |
| Canshuur kale ee Khatka | 13,731,284 | 11,609,929 |
| Canshuurta Adeegsiga badeecadaha | 6,999,940 | 0 |
| Canshuurta Ganacsiga | 14,081,788 | 14,573,148 |
| **Wadarta Dakhliga Canshuurta** | **181,691,842** | **162,766,911** |

Dakhliga guud ee canshuuraha ee la saadaaliyey in la helo sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$173.6milyan halka dalkiga dhab ahaan loo helay canshuuraha uu noqday US$181.86 milyan taasoo ka dhigan in dakhligu canshuuruhu sareu kacay US$7.9 milyan oo u dhiganta (5%) . Dakhliga canshuurhu waxa uu ka yahay dakhliga guud 25% ee sanad maaliyadeedka 2022

### 2. Dakhliga aan Canshuuraha ahayn-Khidmad

Dakhliga aan canshuuraha ahayn waa dakhliga ay dowladu ka hesho khidmadaha ay fuliso dowladu oo aan ahayn canshuur:

| | 2022<br>US $ | 2021<br>US $ |
|---|---|---|
| Kirad Dhulka iyo Guryaha | 169,600 | - |
| Khidmada Maamulka | 4,544,490 | 5,551,269 |
| Kharashka fiisaha | 7,523,279 | 3,857,105 |
| **Khidmada baasaboorka** | 8,075,195 | 7,307,126 |
| Ruqsadda Ganacsiga & warshadaha | 1,344,581 | 1,254,388 |
| Oggolaanshaha shaqada - Ajaanibta | 434,520 | 679,740 |
| Khidmadda Dekadda - Albayrak | 29,332,006 | 25,589,133 |
| Khidmadda Garoonka Diyaaradaha -Favori | 3,110,280 | 2,790,898 |
| Khidmada Ruqsadda Kallumaysiga | 8,100 | 2,611,146 |
| Khidmada Hagaha Isgaarsiinta | 4.095,242 | 1,151,338 |
| Khidamada duulimaadka Hawada | 15,112,995 | 11,262,186 |
| Khidmada Dekedda | 4,892,516 | 4,740,083 |
| Khidamda Diwaangelinta | 2,335,100 | - |
| **Wadarta Dakhliga aan Canshuurta ahayn** | **80,977,903** | **66,794,412** |

Wadarta dakhliga aan cashuuraha ahayn ee la saadaaliyey in la helayo sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$76.3 milyan balse dakhliga dhab ahaan loo helay sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu noqday US$80.9 milyan taas oo ah sare uga kac gaaraya US$4.5milyan oo u dhiganta (5%). Dakhliga dhab ahaan loo aruuriyay waxa uu ka noqday 11% guud ahaan dakhliga guud.

## 3. Deeqaha Dibeda

Hishiisyada maaliyadeed ee laba dhinaclaha ah iyo kuwa dhinacyo badanta ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ay la gasho dowladaha saaxiibka la ah ayaa lagu caddeeyaa ujeedooyinka loo isticmaali doono deeqaha ama daymaha laga helo jihooyinkaas. Deeqaha la helo maahan kuwo dib loo celin doono balse, daymaha waxaa waajib ah in dib loogu celiyo ciddii lahayd xiliga lagu hishiiyey. Dakhliga deeqaha ama daymaha ah eek u xusan xisaab xirka waxaa la diiwaan galiyay markii kaash ahaan loo helay oo lagu shubay khasnada dhexe ee dowladda. Guud ahaan deeqaha la helay intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2021-ka waxay ku koobanyihiin shaxda hoose;

| | **2022** | **2021** |
|---|---|---|
| | **US $** | **US $** |
| Deeqaha la helay intii lgu guda jiray Sanadka | | |
| Deeqo Laba Dhinacle ah | | |
| Dowlada Turkiga | 27,500.00 | **2,500,000** |
| Dowlada Imaaraadka | 9,600.00 | - |
| **Total** | **37,100,000** | **2,500,000** |
| Deeqo Dhinacya Badan ah | | |
| Bangiga Addunka | **401,115,730** | **138,208,301** |
| Bangiga Hormarinta Afrika | 4,937,177 | 4,283,285 |
| Midowga Yurub (EU) Kabka miisaaniyada | 13,873,469 | - |
| Iskaashiga Aduunka ee Waxbarashada | 2,215,421.71 | 1,983,433 |
| **Wadarta Deeqaha dhinacya badanta ah** | **422,141,798** | **144,475,019** |
| **Wadarta Deeqaha Dibedda** | **459,241,798** | **146,975,019** |

Dakhliga guud ee laga helay dhanka deeqaha dibadda sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$459.2milyan taas oo ka dhigan 34% ka yar saadaashii miisaaniyadda. Deeqaha sanadkaan waxaa laga helay laba jiho oo kali ah oo kala ah Bangiga Aduunka oo laga helay USD$401.1milyan iyo Dowladda Turkiga oo laga helay USD$27.5milyan oo u dhiganta 8% intii laga sugayey.Imaarad Arabta oo laga helay 9.6milyan

***Jabin ama fulin waa qodobo hishiis**:*

Intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedkaan, ma jirin wax hishiis deeq dibadeed ah oo dowladu ay jabisay qodobo ka mid ahaa hishiiska, ama shuruud ku xirnayd oo la fulin kari waayey, taas oo sababtay in la hakiyo ama la joojiyo deeq la siin lahaa dowlada, ama khasabtay in dib loo celiyo deeq horay loo siiyey dowlada.

## 4. Dakhliga Daymaha

Lacagaha dakliga daymaha waxa ay ka koobanyihiin sidan hoose;

| | 2022<br>USD$ | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Deynta Bank Dhexe (CBS) | - | 21,992,191 |
| Dayn IMF-ta (Special Drawing Rights) | 44,040,950 | 74,373,383 |
| **Wadarta guud ee deymaha** | **44,040,950** | **96,365,574** |

**Akoonka SDR**

| SDR Account | 2022<br>USD$ | 2021<br>USD$ |
|---|---|---|
| | | |
| **Haraaga Bilowga Sanadka** | **8,082,410.10** | **-** |
| | | |
| **Dakhli** | | |
| SDR Dakhli | 44,040,949.95 | 74,373,382.61 |
| | | |
| **Wadarta Dakhliga SDR** | **44,040,949.95** | **74,373,382.61** |
| | | |
| **Lacag Wareejin** | | |
| Wareejin (Withdrawals) | 43,000,000.00 | 65,683,366.65 |
| Khidmadda Bangiga | 660,614.25 | 607,605.86 |
| Wareejin | 8,179,095.52 | - |
| | | |
| **Wadarta Lacag Wareejinta** | **51,839,709.77** | **66,290,972.51** |
| | | |
| **Haraaga Saafiga SDR Account** | **(7,798,759.82)** | **8,082,410.10** |
| | | |
| **Haraaga Dhamaadka Sanadka** | **$283,650.28** | **$ 8,082,410.10** |

| | | |
|---|---|---|
| Dayactirka & Hagaajinta | 5,419,303 | 2,601,534 |
| Agabka iyo alaabaha | 6,789,250 | 3,856,839 |
| Kharashaad Safar & shiraarka | 10,888,143 | 5,601,262 |
| Kharashaad waxbarshadda | 4,339,806 | 1,148,835 |
| kharashaad tababarka | | 2,768,335 |
| Ageega Latalinta iyo khidmadda Kale | 43,568,487 | 26,518,983 |
| Kharajka maareynta | 8,095,412 | 5,237,793 |
| xayeeysinta iyo diwaangelinta | 172,073 | |
| shidaalka iyo Saliida | 7,987,866 | 5,843,470 |
| Adheega Hanti dhowraha | - | 782,446 |
| Caafimaad Fayadhowrka | - | 4,917,993 |
| Adeega caymiska | 34,601 | 2,428 |
| Adeega albta iyo qalab milateria | 540,000 | 274,518 |
| Qalabka agabka iyo adeegyadda booliska | 120,000 | 300,000 |
| Qalabka agabka iyo adeegyadda nabadsugida | 3,593,752 | |
| Alaabha iyo adeega kale ee gaar ah | - | 1,938,395 |
| Adeega Hawl-gallada gaarka ah | - | 7,459,348 |
| Kharashaad Kale | 40,389,100 | 30,619,238 |
| **Wadarta Agabka iyo Adeegga** | **140,670,112** | **106,059,789** |

Wadarta guud ee kharashaadka loogu tala galay in ay ku baxdo isticmaalka agabka iyo adeegga dowladda waxa lagu qiyaasay inuu noqon doono sanad maaliyadeedka 2022 US$232.2milyan balse waxaa dhab ahaan loo bixiyey US$140milyan taas oo ka dhigan in kharashaadka agabka iyo adeega la bixiyey ay ka yarayd saadaasha US$91.5milyan oo u dhiganta 40%.

## 8. Kharashaad Ra’sulmaal – Isticmaalka Hanti Ma Guurto ah

Sida qodobka (i) ee xeerka xisaabaadka eek or lagu soo sheegay, dhamaan kharashka ku baxa soo iibsasho hanti ama qalab ma guurto ah waxaa lagu daraa kharashaadka sanadka la bixiyey lacagta. Qiimaha ku baxay soo iibsasho qalab amah anti ma guurto ah sanadkaan waxa ay ahayd;

| | **2022** | **2021** |
|---|---|---|
| | **US $** | **US $** |
| | 835,695 | 1,968,456 |
| Dhismayasha la deegaanyahay | 95,296 | |
| Dhismayasha kale | - | 151,633 |
| Dhisma yaasha aan la deganeyna | 195,650 | 41,390 |
| Qalabka Gadiidka | 1,861,453 | 4,052,767 |
| Makiinado iyo qalab kale | 474,634 | 208,635 |
| alaabta iyo Qalabka guryahay | 1,777,201 | 2,610,755 |
| Qalabka (ICT) | 618,114 | 122,443 |
| **Wadarta Kharashaadka Ra'sulmaalka** | **13,200,988** | **16,099,178** |

Saadaasha kharashaadka ra'sulmaalka ee sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$33.5milyan, balse waxaa dhab ahaan loo bixiyey US$13.2 milyan taas oo ka yar saadaashii US$20.3milyan oo u dhiganta (60.5%).

## 9. Deeq Dowladu Bixisay

Dowlada Federaalka Soomaaliya deeqaha ay bixisay intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedkan waxa ay ahayd:

| | 2022<br>US $ | 2021<br>US $ |
|---|---|---|
| **Deeq la siiyey Dowladu Shisheeye** | - | - |
| Kharash ka mid noqosho Hay'ado Caalami ah | 1,342,666 | 1,197,901 |
| **Deeqo loo diray Maamul Goboleedyada iyo Dowladda Hoose iyo Hay'ado kale** | | |
| Deeqaha Kale (DXDF) | 1,300,000 | - |
| Soomaalilaand | 13,816,190 | 18,000 |
| Maamul Goboleedka Buntlaan | 20,588,798 | 7,822,910 |
| Maamul Goboleedka Jubalaan | 13,859,217 | 6,014,444 |
| Maamul Goboleedka Koofur Galbeed | 18,027,674 | 6,325,581 |
| Maamul Goboleedka Galmudug | 13,656,929 | 4,329,093 |
| Maamul Goboleedka Hirshabeelle | 10,383,632 | 3,232,734 |
| Maamulka Gobolka Banaadir | 18,218,593 | 15,852,993 |
| Rugta Ganacsiga | 555,816 | 528,434 |
| Bangiga Horumarinta Soomaaliya | 555,816 | 528,434 |
| **Wadarta Deeqaha** | **111,242,920** | **45,850,523** |

Deeqaha la siiyey Maamul Goboleedyada waxaa loogu tala galay in lagu kabo miisaaniyadooda waxaana u ansixiyey Baarlamanaaka Soomaliya. Wadarta deeqaha la saadaaliyey in la bixiyo sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$132.3 milyan balse waxa dhab ahaan loo bixiyey US$111.2 milyan taas oo ka yar saadaashii US$21.1milyan oo u dhiganta (16%)

## 10. Kharashaadka Arrimaha Bulshada

| | 2022<br>US $ | 2021<br>US $ |
|---|---|---|
| Kaalmo Bulsho cadaanka ah (Social security benefits in cash) | 96,941,343 | 6,149,166 |
| Kaalmo bulsha | 24,241,281 | - |
| Caawinaad Bulsho (Social Assistance benefits) | 61,753,491 | 33,715,682 |
| | 6,000,000 | - |
| **Wadarta Kaalmada Bulsho** | **188,936,115** | **39,864,848** |

Wadarta kharashaadka arrimaha bulshada ee la saadaaliyey sanad maaliyadeedka 2022 in la bixiyo waxa ay ahayd US$247.3milyan balse dhab ahaan waxaa loo bixiyey US$188.9 milyan oo ka yar saadaashii US$58.3 milyan oo u dhiganta (33%).

### 11. Kharashaadka Bixinta Dulsaar Daymo

| | 2022<br>US $ | 2021<br>US $ |
|---|---|---|
| Dulsaar Daymo-Laba-dhinacle ah | 693,045 | 1,440,881 |
| **Wadarta Adeegga Dulsaarka** | **693,045** | **1,440,881** |

Wadarta kharashaadka bixinta dulsaar iyo khidmado kale ee la bixiyey sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa USD$693,045.

### 12. Kharashaadka Kabka Dhaqaalaha

| | 2022<br>US $ | 2021<br>US $ |
|---|---|---|
| Kaalmo shirkadaha Gaarka loo leeyahay (To non-financial private enterprises) | 5,115,305 | ,271,695 |
| **Wadarta** | **5,115,305** | **1,271,695** |

Wadarta kharashaadka kabka dhaqaalaha ee la saadaaliyey sanad maaliyadeedka 2022 in la bixiyo waxa ay ahayd US$5.5milyan balse dhab ahaan waxaa loo bixiyey US$5.1milyan oo ka yar saadaashii US$431.4 kun oo u dhiganta 2% ka yar ku talagalkii.

### 13. Dib-u-bixin Deymo

| | 2022<br>USD$ | 2021<br>USD$ |
|---|---|---|
| Dib u bixin Deynta Banki Addunka(IDA) | 11,997,573 | 13,164,237 |
| Dib-u-bixin hormaris dayn ah (BDS) | 0.00 | 21,992,191 |
| **Wadarta Daymaha la bixiyey** | **11,997,573** | **35,156,428** |

## 14. Lacagta cadaanka ah iyo Waxyaabaha u dhigma lacag cadaan ah

Lacagaha kaashka ah waxay ka koobanyihiin haraaga xisaabaadka dowladda (Khasnada TSA) ku haraay dhamaadka sanadka ee Bangiga Dhexe, haraaga akoonada hay'adaha dowlada ee hoos yimaada Khasnada dhexe (TSA) iyo haraaga akoonada mashaariicda. Waxaa kaloo ku jira akoonada dibaajiga "deposit" haraaga akoonada dalkhliga lagu qabto ee ka furan bangiyada ganacsiga iyo haraaga lacagaha yaryar ee "Petty Cash" la siiyo Wasaaradaha, iyo Hay'adaha Dowladda dhamaadka sanad maaliyadeedka 2021.

**Magaca Koontada bangiga**

| | **2022 USD$** | **2021 USD$** |
|---|---|---|
| Haraaga Khasnada Dhexe (TSA) | 1,397,670.42 | 2,061,002 |
| Sacaled up Bank Phase II | 1,304,576 | 382,985 |
| Gargara LTD | 962,51.28 | 1,985,810 |
| Road infrastructure (ADF Grant) | 14,3171 | 716 |
| Road infrasture Programe (TSF) | 16,420.45 | 68,920 |
| Shock responsive safey net for human capital | 134,294.3 | 1,824 |
| SCAA | 1,978,452.48 | 92,152 |
| Fishing Revene | 0.00 | 1,507,946 |
| Water for agro pastroral productivity and resilience Biyoole (A) | 265,732.87 | 242,333 |
| Water for agro pastroral productivity andresilience Biyoole (B) | 2,919,131.43 | 1,622,121 |
| DPO | 29,675.186.26 | 11,295 |
| Buffer Acc | 13,484,390 | 0.00 |
| Somalia Crisis Recovery Project-DA-A | 11,160,686.09 | 9,044,738 |
| SISEPCB Project | 478,136.39 | 578,643 |
| Somali Urban Resilience Proj- Ph-2 | 72,803.07 | 261,198 |
| TSF - Crisis Response Programme For National And Regional Mitigation Of Covid-19 Impact | 4,505 | 4,505 |
| ADF - Crisis Response Programme For National And Regional Mitigation Of Covid-19 Impac | 18,297.57 | 18,298 |
| Somalia Shock Responsive safety net for locust Responsive project (SNLRP) | 246,200.30 | 233,370 |
| SURP PHASE II FMS | 194,575.84 | 0.49 |
| La Falgelidda Covid-19 | 0.00 | 900,000 |
| TA regulatory authority engery sector | 147,670.67 | 23 |
| SDR | 113,908.55 | 8,082,410 |
| DEVELOPMENT POLICY OPERATIONS -DPO-INTERNAL | 0.00 | 11,700,000 |
| Special Emergency Assistance Fund for D & F GOV. INTERNAL USD-SDR TEMPORARY | 6,015.52 | 295,466 |

| | | |
|---|---|---|
| Deeqda Imaaraadka | 4,358,500 | 0.00 |
| Road Infrastructure Programme (EU-PAGoDA | 401,063.22 | 0.000 |
| Performance Based Fund | 2,942,745.97 | 0.000 |
| Somalia Electricity Sector Reco Pro | 5,519.14 | 0.000 |
| U-Budget Internal Account | 0.00 | 0.000 |
| Resilience for Food & Nutr Secu HOA - ADF | 37,398.48 | 0.000 |
| Resilience for Food & Nutr Secu HOA - TSF | 39,188.22 | 0.000 |
| Strengthening Public Management & DMP | 356,576.22 | 0.000 |
| Somalia Edu for Hum Capi Dev SEHCD | 153,932.38 | 0.000 |
| Damal Cafimaad FGS-DA-A | 115,223 | 0.000 |
| Statistics Deve Support Project Som | | |
| Statistics Deve Support Project Som | 381,838.57 | 0.000 |
| Sagl project | 43,836,.86 | |
| Drive project | 891,156.58 | |
| Somalia Educ for human capi Dev.B | 315,185.22 | |
| Dakhaliga shidaalka | 1,827,469.04 | 0.000 |
| Ground Water for Resilience-A | 406,800.22 | 0.000 |
| Damal Caafimaad FMS-DA-B | 295,485.22 | 0.00 |
| African Development Bank Phase II | 317.86 | 391,291 |
| Capacity Injection Project | 00.4 | 304,575 |
| Education Sector Program Implementation Grant (ESPIG) | 200,486.80 | 212,941 |
| PFM Phase 2 Scale-Up | 126,913.30 | 187,083 |
| RCRF Phase 2 FGS Bank A/ | 0.00 | 133,639 |
| RCRF WB Surge Suppor | 107,957 | 461,308 |
| SEAP Project | 63,402.81 | 304,210 |
| SFF-LD UN Bank A/c | 211,505 | 267,128 |
| SFF-LD WB Bank | 104 | 104 |
| SIEPMID PROJECT | 52,847.02 | 69,404 |
| Somali Petroleum Technical Assistance Project | 5.07 | 5 |

| | | |
|---|---|---|
| Somalia Urban Resilience Project | 0.06 | 201 |
| SUIPP-AF PROJECT | 0.37 | 22,183 |
| European Union - Budget Support | 0.00 | 0.00 |
| RCRF Phase III - DA-A | 1,879,944.03 | 1,747,316 |
| RCRF Phase III - DA-B | 1,021,223.51 | 1,321 |
| **Total** | **81,001,442.25** | **43,198,462** |

Shaxda kore waxa ku jira USD$41,137,460 ee lacagaha mashaariicd loogu talagalay ee aan loo isticmaali Karin hawlo kale aan ahayn hawlihii loogu talagalay (Restricted project cash balance)

## 15. Faahfaahinta dhaqdhaqaaqa Xisaab-bangiyeedka Buffer Fund-ka

Hishiiska lala galay IMF-ta ee SMP IV sanadkii 2018-kii ayaa dhigayay in la furo xisaab bangiyeed loogu magacaabay “Fiscal Buffer” si loogu sii hayo qayb ka mid ah dakhliga dowladda si loo isticmaalo markii dakhligu hoos u dhaco.

Shaxda hoose waxay soo koobaysaa dhaqdhaqaaqa Xisaab bangiyeedka Buffer fund-ka

**Dhaqaaqa Buffer Dec 2022**

| **Fiscal Buffer Account** | **2022** | **2021** |
|---|---|---|
| | **USD$** | **USD$** |
| | | |
| **Haraaga bilowda Sanadka** | **-** | **13,500,000.00** |
| **Lacag lagu shubay** | **12,312,500.00** | |
| | | |
| **Dakhli** | | |
| ***Lacag laga soo Wareejiyey Dakhliga Gudaha*** | | |
| Dalkhliga Guadaha laga Wareejiyey | 930,471.86 | - |
| ***Lacag Laga soo wareejiyeey deeqaha*** | | - |
| Deeqda EU-da | 111,757.13 | - |
| Deeqda Turkiga | - | - |
| Deeqada Bankiga Addunka (Surge Support ) | | 3,000,000.00 |
| Deeqda Bankiga Addunka(DPO ) | 129,661.00 | - |
| | | - |

| | | |
|---|---|---|
| **Wadarta Lacagaha Lagu shubay** | **1,171,889.99** | **3,000,000.00** |
| | | |
| **Lacag Ka wareejin** | | |
| Buffer Account | | **16,500,000.00** |
| | | |
| **Wadarta Lacag laga wareejiyeey Akonka** | **-** | **16,500,000.00** |
| | | |
| | | |
| **Haraaga Dhamadka Sanadka** | **13,484,389.99** | **-** |

III. **Macluumaad Dheeri ah oo Mudan in la Shaaciyo**

**I. Mashaariicda**

| **Ministry/ Department** | **Project Name** |
|---|---|
| Office of the Prime Minister | |
| | Capacity Injection and Institutional Strengthening Project |
| Ministry of Finance | |
| | Somalia Recurrent Cost and Reform Financing Project - Phase III<br>Special Financing Facility (SFF)<br>Domestic Revenue Mobilization and PFM Capacity Strengthening Project-AF<br>Economic and Financial Governance (EFGP)<br>Somalia Capacity Advancement, Livelihoods and Entrepreneurship, through Digital Uplift Project (SCALED-UP)<br>Somalia Strengthening Inst. for Economic Policy Mgmt. and Infrastructure Development (SIEPMID)<br>Road Infrastructure Programme (RIP)<br>Deepening Dialogue, Technical Assistance and Capacity Building in Somalia Project<br>Somalia Crisis Recovery Project (SCRP)<br>De-Risking, Inclusion and Value Enhancement of Pastoral Economies in the Horn of Africa Project<br>Somalia Strengthening Accountability and Debt Management Project (SADMS) |
| **Ministry of Planning and Economic Development** | |

| | |
|---|---|
| | Water for Agro-pastoral Productivity and Resilience or The “Biyoole” Project |
| | Somali Integrated Statistics and Economic Planning Capacity Building (SISEPCB Project) |
| **Ministry of Interior and Federal Affairs** | |
| | Support to Stabilization (S2S) Project |
| | Somalia Urban Resilience Project (SURP) |
| | Somali Urban Investment Planning Project Additional Financing |
| | Somalia Urban Resilience Project II |
| **Ministry of Water and Energy** | |
| | Somali Electricity Access Project (SEAP) |
| | Somali Electricity Sector Recovery Project (SESRP) |
| | Ground Water for Resilience Project (GW4R) |
| **Ministry of Livestock and Forestry** | |
| | Program to Build Resilience for Food and NutriRon Security in the Horn of Africa |
| **Ministry of Public Work & ReconstrucBon** | |
| | Road Infrastructure Programme (RIP) |
| | Somalia Urban Resilience Project II |
| | Somalia - Horn of Africa Infrastructure IntegraRon Project (SHIIP) |
| **Ministry of Health** | |
| | Damal Caafimad Project |
| | Somalia COVID-19 Emergency VaccinaRon Project |
| **Ministry of EducaBon and Higher EducaBon** | |
| | Education Sector Program Implementation Grant (ESPIG) |
| | Maximum County Allocation Project (MCA) |
| | Somalia Education for Human Capital Development Project |
| | Somalia Empowering Women through EducaRon and Skills Project - "Rajo Kaaba" |
| **Ministry of Labor and Social Affairs** | |
| | Shock Responsive Safety Net for Human Capital Project |
| | Somalia Emergency Locust Response Project (SELRP) |
| | SAGAL Project |

# LIFAAQA A– MUUQAALKA HANTIDA IYO DAYMAHA MAALIYADEED (KU MEEL GAAR)

| | Fahfahin | 2022<br>USD$ | 2021<br>USD$ |
|---|---|---|---|
| **HANTI** | | | |
| **Hantida Mudada dhow** | | | |
| **Lacagaha cadaanka ah iyo waxa u dhigma** | | | |
| Haraa Bangi | **12** | 81,001,442.25 | 43,198,462 |
| Lacago yaryarood ah | | | - |
| **Wadarta lacagta cadaanka ah iyo waxa u dhigmaha** | | **81,001,442.25** | **43,198,462** |
| **Hantida Mudada Fog** | | | |
| **Hanti maguurto ah** | | | |
| Hanti, Warshado & Qalab | | - | - |
| **Wadarta Hantida Maguurtada ah** | | - | - |
| **Wadarta Hantida Guud** | | **81,001,442.25** | 43,198,462 |
| **DAYMAHA** | | | |
| **Daymaha Mudada dhow** | | | |
| Daymo | | | |
| Daymaha Kharashaadka | **1** | 52,795,274 | 52,795,274 |
| **Wadarta Daymaha Mudada dhow** | | 52,795,274 | **52,795,274** |
| **Daymaha Mudada fog** | | | |
| Daymaha Dowladda | **2** | | |
| | | | - |
| **Wadrata Daymaha Mudada Fog** | | | |
| **Wadarta Daymaha Guud** | | **52,795,274** | **52,795,274** |
| **HANTIDA SAAFIGA AH** | | **28,206,168** | **9,596,812** |
| **WAXA UU KA KOOBANYAHAY** | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **SAAFIGA HANTIDA** | | | |
| haraa kasoo wareegay sanadkii hore | **16** | **(9,596,812)** | **13,343,937** |
| Dheeri/(Dhiman) sanadkaan | **16** | 37,802,980 | (22,940,748) |
| Daymo kharashaad | **17** | | |
| **WADARTA HANTIDA SAAFIGA AH** | | **28,206,168** | **(9,596,812)** |

# LIFAAQA A.1- FAAHFAAHINO LA XIRIIRA MUUQAALKA MOWQIFKA MAALIYADEED

## II. Daymaha

| | December 31 st 2022 USD | December 31 st 2021 USD |
|---|---|---|
| **Daymaha Gudaha** | | |
| Daymaha Kharashaadka-Lifaaqa 1aad | 52,795,274 | 52,795,274 |
| Wadarta Daymaha Gudaha | **52,795,274** | **52,795,274** |
| **Wadarta** | **52,795,274** | **52,795,274** |

## III. Daymaha Kharashaadka Mushaarka shaqaalaha

Daymaha Mushaarka Shaqaalaha sanadkaan ku dhamaaday 31-ka December 2021 ee la xaqiijiyey waa US$52,795,274.Waxaa wali waxaa sii socda hawlaha xaqiijinta dhab ahaanshiyaha daymaha mushaarka ee lagu leeyahay dowladda.

**Haraayada Aruuray**

| | December 31 st 2022 USD | *Warbixinta iyo Xisaab xirka sanad maaliyadeedka ku eg 31-ka December 2022* |
|---|---|---|

**December 31 st 2021 USD**

| | | |
|---|---|---|
| Haraaga Bilowga Sanadka- 1 Jan 2020 | **(9,596,813)** | 13,343,935 |
| Dheeri/(Dhiman) dhamaadka sanadka | 37,802,980 | (22,940,748) |
| Daymaha Mushaarka | | - |
| **Wadarta** | **28,206,169** | **(9,596,813)** |

## IV. Hantida-maguurtada ah, Dhismeyaasha iyo Qalabka waawayn.

Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyada oo ka duuleeysa mabda' a isla xisaabtanka iyo hufnaanta ee arimaha warbixinada maaliyadeed waxa ay qaaday talaabooyin dhowr ah ee dhanka maamulka hantida-ma-guurtada ah ee Dowladdu leedahay iyada oo kor loo qaaday awooda Diiwaanka Maamulka Maaliyadda Dowladda ee SFMIS-ka si loogu diiwaan galiyo dhamaan wax alaala iyo wixi hanti-ma-guurto ah si loo xaqiijiyo mabda'a aynu kor ku soo xusnay.

Waxaa la filayaa in la dhamaystiro diiwaanka hantida ma guurtada ah inta lagu guda jiro sanad maaliyadeedka 2023 taa soo saamixi doonta in hantida maguurtada ah iyo dhamaan daymaha guud lagu soo muujiyo Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda "Balance sheet".

## V. Daymaha Dowlada lagu leeyahay (Public Debt)

Daymaha lagu leeyahay Dowladda dhamaadka sanad maaliyadeedka ku dhamaaday 31-ka December 2021 waa US$4.44 bilyan, daymaha dhinacya badanta ah waxa ka yihiin daymaha guud 24% oo u dhiganta US$1,039.52 bilyan. Hay'adaha ugu badan oo daynta ku leh Soomaaliya waa IMF-ta, AFESD iyo IDA. Daymaha laba dhinaclaha ah waa US$3,403.01 bilyan qaybta ugu badana ay. Leeyihiin hay'adaha ku jira dallada Paris Club(79%). Wadamada leh daymaha ugu badan waxa ay kala yihiin Ruushka, Mareekanka, Talyaaniga iyo Faransiiska. Wadamada aan ku jirin dalada Paris Club waxa ay iyaguna leeyihiin US$0.7 bilyan, waxaana leh qaybta ugu badan Sanduuqa Abu Dhabi, Dowlada Ciraaq, Boqortooyada Sacuudi Carabiya iyo Sanduuqa Kuweyt.

Maadaama aan wali lahayn macluumaad dhamaystiran oo ku saabsan hantida lagu maal galiyey daymaha dowladda lagu leeyahay "Public Debt" si la isku waafajiyo looguna aqoonsado Muuqaalka Mawqifka Maaliyadeed ee Dowladda "Balance Sheet" sida uu dhigayo xeerka ama Mabd'a iswaafajinta mucaamalaatka maaliyadeed (Matching Principle), waxaa si gooni ah loogu shaaciyey cadada guud ee daymaha lagu leeyahay dowladda.

# LIFAAQA B- WARBIXINTA LACAGAHA AAN KU JIRIN QOONDADA DOWLADDA

**Dowladda Federaalka Soomaaliya**

**Muuqaalka warbixinta Lacagaha la Isticmaalay balse aan Ku jirin Miisaaniyadda Dowladda**

**Ee Sanad Maaliyadeedka 31 December 2022**

*(Waxaa loo soo bandhigay Hay'adihi Isticmaalay iyadoo loo kala soocsoocay Qaabka Dhaqalaha)*

| | Faahfahin | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|---|
| **Dakhliga (Hay'adaha)** | | | |
| Jaamacadda Umada Soomaaliyeed | **1.1** | 1,565,853 | **1,447,566** |
| Wasaarada Tamarta iyo Biyaha | **1.2** | 1,714,417 | **1,389,842** |
| Xafiska Golaha Shacabka Barlamaanka | **1.3** | 30,008 | **-** |
| Wasaaradda Aminiga Gudaha | **1.4** | - | **160,695** |
| Xafiiska Tiro-koobka Qaranka | **1.5** | - | **421,905** |
| Wasaaradda Xanaanada Xoolaha | **1.6** | 51,760 | **103,520** |
| Wasaaradda Beeraha | **1.7** | - | **598,383** |
| Wasaaradda Caafimaddka | **1.8** | 3,156,762 | 2,234,004 |
| Maamulka Dekedda Muqdisho | **1.9** | 488,214 | 0.00 |
| **Wadart Guud** | | **7,007,014** | **6,355,915** |
| **Kharashaadka** | | 333,222 | 594,081 |
| Mushaarka Shaqaalaha | | | |
| Istcimaal Agabka Adeega | | 2,028,793 | 3,298,642 |
| Rasul,maalka | | 758,965 | 773,515 |
| **Wadart kharashaad** | | **3,120,980** | **4,666,238** |
| Haraag .hoose u dhaca sare u kaca | | 3,886,034 | 1,689,677 |
| Haraga bilowga sanadka | | 1,891,725 | 202,048 |
| **Haraaga Dhamaadka sandka** | | **5,777,759** | **1,891,725** |

## VI. Faahfaahino la xiriira Dakhliga iyo Kharashaadka aan ku jirin Miisaaniyadda Dowladda

Dakhliga soo galau hay'adaha Dowladda ee sanad maaliyadeedka 2020 waa US$7,007,014 (US$6,355,915 sanadkii hore ee 2019). Ilaha dakhliga ayaa halkaan hoose ku faahfaahsan;

**Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed**

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Isha Dakhliga | | |
| Khidmada Ardada | 1,552,529.5 | 1,170,381 |
| Lacagaha Arimaha Bulsho | - | 252,000 |
| Lacagaha Ardada Saxaafada | - | 0 |
| Dakhli ka yimid hawlo gaar ah | 10,401 | 3,500 |
| Dakhli kale | 2,923 | 692 |
| Dakhliga Tababarada | - | 0 |
| Dakhliga Cilmi baarista | - | 0 |
| Deeqaha | - | 513,508.38 |
| **Wadarta dakhliga** | **1,565,853** | **1,940,081** |

**Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha**

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| UNICEF | 1,518,402 | 1,298,589 |
| Save the Children International | 2,500 | 3,750 |
| FOA | 183,010 | |
| ADRA | 10,505 | |
| **Wadarta** | **1,389,841** | **1,302,339** |

**Xafiiska Tiro-koobka Qaranka**

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|

| | | |
|---|---|---|
| SHDS project | - | 256,706 |
| UNICEF | - | 165,199 |
| **Wadarta** | **0.00** | **421,905** |

**Wasaaradda Xanaanada Xoolaha**

| | 2022 | 2021 |
|---|---|---|
| | USD | USD |
| Mashruuca Kormeerka iyo Talaalka | 51,760 | 103,520 |
| **Total** | **51,760** | **103,520** |

**Wasaaradda Beeraha**

| | 2022 | 2021 |
|---|---|---|
| | USD | USD |
| FAO BRIMS | - | 73,860 |
| FOA Outreach | - | 119,553 |
| FAO Data | - | 31,320.00 |
| FAOSIDA | - | 57,881.00 |
| SSG | - | 30,000.00 |
| Save/Admin | | 47,110.00 |
| Save Farmers | | 8,000.00 |
| FAO WFD | | 9,700.00 |
| WFP | | 96,635.00 |
| WFP/WFD | | 8,850.00 |
| WFP/TR/EXP | | 48,964.00 |
| FAO Dharoor | | 7,230.00 |
| FAO Ticket | | 1,200.00 |
| FAO/Strategic | | 58,080.00 |
| **Total** | **0.00** | **540,502** |

**Wasaaradda Caafimaadka**

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| UNICEF | 2,507,964 | 1,687,286 |
| WFP | 37,291 | 240,518 |
| WV | 472,406 | 234,459 |
| AFENET | 43,787 | 65,741 |
| ISLAMIC | 39,045 | - |
| ARAB FUND | 46,800 | - |
| FOA | 9,470 | 6000 |
| **Total** | **3,156,762** | **2,234,004** |

**Maamulka Dekeda Muqdisho**

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| 1% prot service | 488,214 | - |
| **Total** | **488,214** | **0.00** |

**Xafiiskaq Baarlamaanka**

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| UNDP | 30,008 | - |
| **Total** | **30,008** | **0.00** |

**Mushaarka Shaqaalaha**

Wadarta guud ee Mushaarka shaqaalaha USD$1,215,334 ayaa loo barbardhigay USD$1,076,747 oo aha sanadkii hore. Waxaa ku korortay lacg dhan USD$138,587.

**2.1. Mushaarka Shaqaalaha**

| **Jaamacada Umada soomaaliyeed** | **2022 USD$** | **2021 USD$** |
|---|---|---|
| Gunooyin | 232,628 | 256,471 |
| | **232,628** | **256,471** |

**Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha**

| | **2022 USD$** | **2021 USD$** |
|---|---|---|
| Mushaar | 85,714 | 86,964 |
| | **85,714** | **86,964** |

**xafiiska Tiro-koobka Qaranka**

| | **2022 USD$** | **2021 USD$** |
|---|---|---|
| Mushaar | - | 248,400 |
| | **-** | **248,400** |

**Wasaaradda Amniga Gudaha**

| | **2022 USD$** | **2021 USD$** |
|---|---|---|
| Mushaar | - | 5,300 |
| | **-** | **5,300** |

**Wasaaradda Caafimaadka**

| | **2022 USD$** | **2021 USD$** |
|---|---|---|
| Mushaar | 896,992 | 1,583,000 |
| | **896,992** | **1,583,000** |

**Wadarta**

**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**

Wadarta guud Kharashaadka Agabka iyo Adeega waa USD$5,015,116.26 marki loo barbardhigo sanadkii hore 2021 oo uu ahaa USD$2,645,259 waxaa ku korortay lacag dhan $2,369,857.26

**Jaamacada Umada**

| | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Kiro | 37,632 | 33,150 |
| Hawlaha Guud | | 252,433 |
| Saliid iyo Shidaal | 45,371.50 | 37,135 |
| Dayac tir | 71,266.25 | 136,555 |
| Kharashka hawlaha gaarka ah | 266,761.06 | |
| Qalab xafiiseed | 58,102.90 | 88,804 |
| Kharash safar | 39,259.80 | 46,925 |
| Kharashaad hawleed kale | 60 | |
| **Wadarta Isticmaalka Agabka iyo adeega** | **1,240,129** | **974,875** |

**Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha**

| | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| **Isticmaalka Agabka iyo Adeega** | **1,473,459** | **1,322,724** |

**Xafiiska Tiro-koobka Qaranka**

| | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| **Isticmaalka Agabka iyo Adeega** | - | 173,505 |
| Dulsaar | | 14,738 |
| **waddar** | | **173,505** |

**Wasaaradda Amniga Gudaha**

| | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Isticmaalka Agabka iyo Adeega | | $ 155,395 |
| **Wadarta** | | **155,395** |

| Wasaaradda Beeraha | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Isticmaalka Agabka iyo Adeega | - | 598,383 |
| **Wadarta** | **-** | **598,383** |

| Wasaaradda Xanaanada Xoolaha | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Isticmaalka Agabka iyo Adeega | 36,880 | 73,760 |
| **Wadartra Agabka iyo Adeega** | **36,880** | **73,760** |

| Xafiiska Baarlamaanka | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Isticmaalka Agabka iyo Adeega. | 30,008 | - |
| **Wadarta Guud** | **30,008** | **-** |

| Wasaaradda Caafimaadka | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Isticmaalka Agabka iyo Adeega. | 2 ,234,640.26 | 1,232,621 |
| **Wadarta Guud** | **2 ,234,640.26** | **1,232,621** |

**Kharashaadka Ra'sulmaalka**

Kharashaadka soo iibsiga Ra'sulmaalka ee sanadkaan 2022 waxa uu gaaray USD$758,965markii loo barbardhigo sanadkii hore ee 2021 oo uu ahaa USD$736,225. Waxaa ku siyaaday USD$22,740. Faahfaahinta kharashaadka Ra'sulmaalka ayaa halkaas hoose lagu soo bandhigay**.**

**Jaamacada Umada Soomaaliyeed**

| | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Kharashaad Ra'sulmaalka | 721,675 | 736,225 |
| | 721,675 | **736,225** |

**Wasaaradda Caafimaadka**

| | 2022 USD$ | 2021 USD$ |
|---|---|---|
| Kharashaad Ra'sulmaalka | 37,290 | - |
| **Wadarta Raasumaalka** | **37,290** | **-** |

## VII. Haraaga Bangiga

| **Haraaga Akoonada bangiga** | **2022** | **2021** |
|---|---|---|
| | **USD** | **USD** |
| Petty cash balance | 605 | 4,745 |
| Salam bank | 33,446.24 | 333.52 |
| salam bank (Puntland) | 38.50 | 216 |
| Dahabshil bank | 23,810.72 | 3,695 |
| premier bank | 35,768.60 | 74,523 |
| dahabshil International | 5,007 | 5,922 |
| Amal bank | 41,757.20 | 33,716 |
| Salaam XDX | 14,187.10 | 12,910 |
| CBS | 500 | 500 |
| IBS | 51,328.60 | 31,352 |
| Premier Bank PGD Master in Law | 7,896 | 0.0 |
| Premier Bank Master In law | 1,190 | 0.0 |
| Premier Bank Master In SSC | 4,110 | 0.0 |
| Premier Bank Master In Public Health | 11,320 | 0.0 |
| Premier Bank Master In Education | 1,580 | 0.0 |
| Premier Bank English Diploma | | |
| IDB-Dryland | | |
| CBS_Dryland | | 4,190 |
| Water and energy | | 15,425 |
| **Wadarta Haraayada** | **232,544.96** | **375,054** |

# LIFAAQA C – MUUQAALKA DAYMAHA KHARASHAADKA 31 DECEMBER 2022

**Mushahaarka iyo Gunnooyinka 2013**

| Tr. | Magaca Hay'adda | Janury | Febraury | March | April | May | June | July | August | September | October | November | December | Wadar |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Mushaharka Shaqaale Joogtada | | | | | | | | | | | | 904,301.70 | 904,301.70 |
| | | | | | | | | | | | | | | |
| | **Wadar** | - | - | - | - | - | - | - | - | - | - | - | **904,301.70** | **904,301.70** |

**Mushahaarka iyo Gunnooyinka 2015**

| Tr. | Magaca Hay'adda | Janury | Febraury | March | April | May | June | July | August | September | October | November | December | Wadar |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Ciidanka Xoogga Dalka Soomaliyeed | | | | | | | | | 1,779,100.00 | 1,779,100.00 | 1,779,100.00 | 1,779,100.00 | 7,116,400.00 |
| 2 | Ciidanka Asluubta | | | | | | | | | 216,500.00 | 216,500.00 | 216,500.00 | 216,500.00 | 866,000.00 |
| 3 | Hay'adda Nabadsugida Qaranka | | | | | | | | | | | | 457,333.33 | 457,333.33 |
| 4 | Shaqalaha Joogtada ah | | | | | | | | | | | 2,117,678.00 | 2,117,678.00 | 4,235,356.00 |
| 5 | Shaqalaha Ku-meelgaarka ah | | | | | | | | | | | 1,031,067.00 | 1,031,067.00 | 2,062,134.00 |
| | **Wadar** | - | - | - | - | - | - | - | - | **1,995,600.00** | **1,995,600.00** | **5,144,345.00** | **5,601,678.33** | **14,737,223.33** |

**Mushahaarka iyo Gunnooyinka 2016**

| Tr. | Magaca Hay'adda | Janaury | Febraury | March | April | May | June | July | August | September | October | November | December | Wadar |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Ciidanka Xoogga dalka Soomaliyeed | | | | 1,042,900.00 | 1,770,700.00 | 1,770,700.00 | 1,770,700.00 | 1,770,700.00 | 1,895,700.00 | 1,895,700.00 | 1,895,700.00 | 1,895,700.00 | 15,708,500.00 |
| 2 | Ciidanka Booliska | | | | | | | 466,350.00 | 466,350.00 | 466,350.00 | 466,350.00 | 466,350.00 | 466,350.00 | 2,798,100.00 |
| 3 | Ciidanka Asluubta | | | | | | | | 216,500.00 | 216,500.00 | 216,500.00 | 216,500.00 | 216,500.00 | 1,082,500.00 |
| 4 | Hay'adda Nabdsugidda Qaranka | | | | | | | | | | | 457,333.33 | 457,333.33 | 914,666.66 |
| 5 | Shaqalaha Joogtada ah | | | | | | | | | 2,573,322.00 | 2,573,322.00 | 2,573,322.00 | 2,573,322.00 | 10,293,288.00 |
| 6 | Shaqalaha Kumeelgaarka ah | | | | | | | | | 897,869.00 | 1,005,805.20 | 1,005,805.20 | 1,005,805.20 | 3,915,284.60 |
| 7 | Baarlamanka | | | | | | | | 918,600.00 | 918,601.00 | 918,602.00 | 918,603.00 | 918,604.00 | 4,593,000.00 |
| | **Wadar** | - | - | - | **1,042,900.00** | **1,770,700.00** | **1,770,700.00** | **2,237,050.00** | **2,453,550.00** | **6,968,342.00** | **7,076,279.20** | **7,533,613.53** | **7,533,614.53** | **39,305,339.26** |

| | |
|---|---|
| **Koobid** | |
| **Wadarta Kharashaadka la xaqiijiyay** | **54,946,864.29** |
| wadarta la bixiyay sanadka 2019 | 1,326,590.00 |
| **Haraaga bilowga ah 2020** | **53,620,274.29** |
| wadarta la bixiyay sanadka 2020 | 825,000.00 |
| **Haraaga bilowga ah 2021** | **52,795,274.29** |
| wadarta la bixiyay 2021 | - |
| wadarta la bixiyay 2022 | - |
| **Haraaga ugu danbeeya 2022** | **52,795,274.29** |

# LIFAAQA D – MUUQAALKA DAYMAHA DIBEDA SANADKA MAALIYADEEDKA KU EG 31.12. 2022

Somalia Stock of debt at the end of 2021 and 2022.

| Creditor Category / Creditor Name | 2021 | | | | 2022 | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | Face Value | Interest Arrears | Other Fee Arrears | Total Stock | Face Value | Interest Arrears | Other Fee Arrears | Total Stock |
| GRAND TOTAL | 3,307.65 | 1,023.86 | 159.06 | 4,490.57 | 3,286.33 | 1,002.29 | 151.17 | 4,439.79 |
| **Commercial** | **1.51** | **0.93** | **-** | **2.44** | **1.51** | **1.02** | **-** | **2.53** |
| Government of Serbia | 1.51 | 0.93 | - | 2.44 | 1.51 | 1.02 | - | 2.53 |
| **Multilateral** | **724.26** | **350.40** | **6.02** | **1,080.68** | **681.74** | **351.76** | **6.02** | **1,039.52** |
| African Development Fund | 23.80 | - | - | 23.80 | 21.08 | - | - | 21.08 |
| Arab Fund for Economic and Social Dev. | 75.79 | 113.94 | 0.05 | 189.78 | 75.02 | 115.79 | 0.05 | 190.86 |
| Arab Monetary Fund | 76.92 | 227.68 | - | 304.60 | 73.33 | 227.17 | - | 300.50 |
| Int. Fund for Agricultural Development | 24.72 | 7.53 | 0.03 | 32.28 | 23.57 | 7.42 | 0.03 | 31.02 |
| International Development Association | 121.83 | - | - | 121.83 | 104.86 | - | - | 104.86 |
| International Monetary Fund | 359.36 | - | - | 359.36 | 342.60 | - | - | 342.60 |
| Islamic Development Bank | 11.97 | 1.14 | - | 13.11 | 11.41 | 1.09 | - | 12.50 |
| OPEC Fund for Int. Dev. | 29.87 | 0.11 | 5.94 | 35.92 | 29.87 | 0.29 | 5.94 | 36.10 |
| **Non-Paris Club** | **287.56** | **338.68** | **98.53** | **724.77** | **330.09** | **306.87** | **98.53** | **735.49** |
| Abu Dhabi Fund for Developement | 94.10 | 153.43 | 0.02 | 247.55 | 94.22 | 157.40 | 0.02 | 251.64 |
| Government of Algeria | 0.90 | 0.66 | - | 1.56 | 0.90 | 0.66 | - | 1.56 |
| Government of Bulgaria | 5.53 | 5.30 | - | 10.83 | 5.53 | 5.46 | - | 10.99 |
| Government Of Iraq | 31.22 | 62.42 | 98.51 | 192.15 | 31.22 | 62.51 | 98.51 | 192.24 |
| Government of Libya | 11.75 | 23.16 | - | 34.91 | 11.75 | 24.45 | - | 36.20 |
| Government of Romania | 2.27 | 0.25 | - | 2.52 | 2.27 | 0.25 | - | 2.52 |
| Kuwait Fund for Econ. Dev | 82.99 | 38.95 | - | 121.94 | 125.32 | - | - | 125.32 |
| Saudi Fund for Development | 58.80 | 54.51 | - | 113.31 | 58.88 | 56.14 | - | 115.02 |
| **Paris Club** | **2,294.32** | **333.85** | **54.51** | **2,682.68** | **2,272.99** | **342.64** | **46.62** | **2,662.25** |
| European Economic Community (EEC) | 0.35 | - | - | 0.35 | 0.33 | - | - | 0.33 |
| Government of Denmark | 2.97 | - | - | 2.97 | 2.89 | - | - | 2.89 |
| Government of France | 154.21 | - | - | 154.21 | 145.30 | - | - | 145.30 |
| Government of Italy | 624.11 | - | - | 624.11 | 620.31 | - | - | 620.31 |
| Government of Japan | 57.02 | 14.72 | 54.51 | 126.25 | 48.76 | 15.38 | 46.62 | 110.76 |
| Government of Netherlands | 2.23 | - | - | 2.23 | 2.10 | - | - | 2.10 |
| Government of Norway | 0.66 | - | - | 0.66 | 0.61 | - | - | 0.61 |
| Government of Russia | 389.68 | 319.13 | - | 708.81 | 389.68 | 327.26 | - | 716.94 |
| Government of Spain | 40.90 | - | - | 40.90 | 40.90 | - | - | 40.90 |
| Government of UK | 30.38 | - | - | 30.38 | 30.30 | - | - | 30.30 |
| United States of America | 991.81 | - | - | 991.81 | 991.81 | - | - | 991.81 |

Filters: Participant Name = Government of SerbiaPortfolio: All InstrumentsComments:

***Source:*** *DMU, Ministry of Finance*

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXIYO / SENT
27 MAR 2024
BY: SAACAD SAXIIX

**SHARCI LR. 20** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**

**SHARCIGA HOWLGABKA iyo LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA ee DOWLADDA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0490/B11/24**, ku taariikheysan **05/02/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Hindise Sharciyeedka''Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaaaha Rayidka ee Dowladda''.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaaaha Rayidka ee Dowladda.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-33-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guleid
Hantidhowrka Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA HAWLGABKA IYO LIILTIRKASHAQAALAHA RAYIDKA DAWLADDA

2024

# CUTUBKA KOOWAAD
# QODOBO GUUD

## Qodobka 1aad
## Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa **"Sharciga Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Federaalka Soomaaliya".**

## Qodobka 2aad
## Qeexid

1) Sharcigan dhexdiisa marka la isticmaalo magac u yaal lab waxaa soo galaya dheddigga, markala isticmaalo eray wadar tilmaamayana waxaa soo galaya midka kale.

2) Sharcigan dhexdiisa haddii aan si kale loogu sheegin ereyada soo socda waxaa loola jeedaa micnaha mid kasta ku hor qoran:

   b) **Halis-odorose (Actuary):** waxaa loola jeedaa qof u xilsaaran qiimeynta qaanta hawlgabka ee taagan ama mustaqbalka, isla markaasna xubin firfircoon ka ah urur Halis-odorose oo caalami ah lana aqoonsanyahay.

   t) **Qiimeynta Halis-odorose:** waxaa loola jeedaa daraasad uu sameeyo halis-odorase si loogu go'aansado xaaladda dhaqaale iyo isku filnaan ee sanduuqa hawlgabka oo lagu saleeyo mabaad'ida Halis-odorose ee si guud la isula oggolyahay iyo qiimaha munaasabka ah ee Dhigaalka si loo xaqiijiyo in sanduuqa hawlgabku uu mustaqbalka fog u sii jiro si waafaqsan halbeegyada Caalamiga ah ee Halis-odorose.

   j) **Codsade:** waxaa loola jeedaa qof sanduuqa hawlgabka ka codsanaya daryeel hawlgab ama liiltir.

   x) **Shahaadada Qiimeynta Da'da:** waxaa loola jeedaa dukumiinti da'da qofka u caddeynaya si waafaqsan Sharcigan oo ay soo saarto hay'ad Dawladeed oo awoodda soo saarista dhalashada iyo sugnaanta leh.

   kh) **Shahaadada Qiimeynta Naafanimada:** waxaa loola jeedaa dokumiintiga naafanimada qofka u caddeynaya si waafaqsan Sharcigan oo uu soo saaro guddiga caafimaadka ee sunduuqa hawlgabka.

   d) **Mushaarka Asaasiga ama Mushaarka Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa mushaarka go'an ee laqaato xilliga lagu balamay oo laga reebo wixii gunnooyin ah.

   r) **Daryeel:** waxaa loola jeedaa Ilaalinta iyo xaqsiinta dadka hawlgabka ah si waafaqsan Sharcigan.



s) **Ilmo:** waxaa loola jeedaa ilmaha uu dhalay qofka hawlgabka ah ee da' ahaan ka yar (18) sano. Ilmaha waxaa ku jiri kara oo ay ku jiraan kuwa uurka kujira oo dhashay geerida qofka hawlgabka ah ka dib.

sh) **Guddiga Caafimaadka Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa Guddi ka kooban shan qof oo Sharcigan loogu magacaabay inay sameeyaan shaahaadooyinka qiimeynta da'da iyo dadka baahiyaha gaarka qaba

dh) **Dhigaal:** waxaa loola jeedaa xaddi boqolleey ahaan loo muujiyey oo dawladdu ka reebto mushaarka ka qaybgalaha adeegga hawlgabka leh iyo sidoo kale, xaddi boqoley ahaan loo muujiyey oo dawladdu ugu darto ka qeybgale kasta, laguna shubo koontada Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka ee Bankiga Dhexe Soomaaliya.

c) **Naafanimo:** waxaa loola jeedaa xaalad xanuun ama dhaawac maskaxeed, jireed ama dareen oo qofka ka dhigeysa mid aan si joogta ah uqaban karin wax shaqo ah si waafaqsan Sharcigan.

g) **Taariikhda Gelidda Adeegga Rayidka:** waxaa loola jeedaa xilliga ka qeybgale kasta loo shaqaaleeyey adeegga hawlgabka ee Dowladda.

f) **Sanad Miisaaniyadeed:** waxaa loola jeedaa muddada (12) laba iyo tobanka bilood ee sanad walba ka bilaabanaya 1da Jannaayo kuna dhammaanaysa 31ka Diseembar.

q) **Adeeggii Danbe:** waxaa loola jeeda xilliga ka qeybgale laga shaqaaleeyey Adeegga hawlgabka ee Dawladda, laga soo billaabo 1dii Janaayo 2007 ama ka dib;

k) **Mabaad'ida Halis-odorosaha ee si guud la isula oggolaaday:** waxaa loola jeedaa tabaha iyo tirarka, hay'ad halis-odoroskasi caalami ah loo aqoonsanyahay ee lagu qiimeeyo hantida iyo qaanta nidaam hawlgab iyo waliba odoroska sii jirista nidaamka hawlgabka iyadoo laga duulayo xogta dadka, odoroska qulqulka lacageed iyo qiimeynta qaanta iyo hantida

l) **Xukuumad:** waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

m) **Liiltir:** waxaa loola jeedaa xaq la siiyo ka qaybgale gaaray ama aan gaarin da'da hawlgabka, kaas oo aysan u bislaan adeeg hawlgab ku filan si uu u mutaysto daryeel hawlgabnimo.

n) **Wasiir:** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshadda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

w) **Gudigga Kor joogteynta:** waxaa loola jeedaa Gudigga Kor joogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.

h) **Ka qeybgale:** waxaa loola jeedaa qof ka mid ah shaqaalaha rayidka Dawladda oo dhigaal looga gooyo si loogu biiriyo sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka iyo qof kasta oo kale oo sanduuqa hawlgab xaq ugu yeesha helidda daryeel hawlgab ama liiltir si waafaqsan Sharcigan

y) **Adeeg hore:** waxaa loola jeedaa adeeg hawlgab leh oo uu shaqaale hadda hawlgab ah ama hawlgabaya u soo qabtay Dawladda Soomaaliya inta ka horeysa dhaqangalka Sharcigan.

bb) **Daryeel Hawlgab:** waxaa loola jeedaa daryeel dhaqaale ama maaliyadeed oo si bille ah ay Dawladdu u siiso ka qaybgale kasta adeeggii abaalgashiga ee uu ugu soo shaqeeyey Dawladda Federaalka Soomaaliya.

tt) **Da'da Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa qofku marka uu gaaro da'da 65 sano (lixdan iyo shan sano).

jj) **Hantida Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa dhaqaalaha maaliyadeed ee laga qaado ka qeybgalayaasha Dawladda, lacag bixinta gaarka ah ee loogu talagalay qaanta adeegyadii hore, ganaaxyada dhigaal ka la daahiyo iyo wixii deeqo ah ee uu helo sanduuqa hawlgabka iyo sidoo kale, faa'iidooyinka ka yimaada maalgashiga sanduuqa hawlgabka.

xx) **Sanduuqa Hawlgabka:** waxaa loola jeedaa Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda ee lagu dhisay Sharcigan.

khkh) **Hawlgabe:** waxaa loola jeedaa qofka ka fariista ama ka hawlgaba shaqada adeegga hawlgab leh ee Dawladda.

dd) **Xafiis Hawlgab:** waxaa loola jeedaa xafiis u xilsaaran arimaha hawlgabka la xiriira.

rr) **Adeeg Hawlgab leh:** waxaa loola jeedaa muddada adeegga la siinayey Dawladda oo ka soo billaabata maalinta uu ka qaybgaluhu billaabay shaqada adeegga hawlgabka leh ee Dawladda.

ss) **Adeegga Dawladda:** waxaa loola jeedaa adeegga ama shaqada Dawladda Soomaaliya loo qabtay wixii ka horeeyey bishii Diseembar, 1990 iyo wixii ka dambeyey 1dii Jannaayo 2007.

shsh) **Shaqaale Dawladeed:** waxaa loola jeedaa qof si rasmi ah looga shaqaaleeyey hay'adaha Dawladda, lehna jago joogto ah.

dhdh) **Jago Joogta ah:** waxaa loola jeedaa jago adeeg rayid ah oo miisaaniyad loo

qoondeeyey, kuna jirta qaab dhismeedka hay'ad si sharci ahna loo ansixiyey.

**cc) Xisaabta keydka (Reserve Account):** waxaa loola jeedaa xisaabta banki ee uu asaasay Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka, oo keydka la dhigaa loogu talagalay in laga bixiyo daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha mutasyta si waafaqsan Sharcigan.

**gg) Xaas:** waxaa loola jeedaa qof lab ama dhedig ah, oo si sharci ah isku qabeen ka qaybgalaha geerida ka hor.

**ff) U hare:** waxaa loola jeedaa ilmaha, xaaska iyo waalidka ka qaybgalaha ee Sharcigan ku mutaysanaya daryeelid ama xaq siin.

**qq) Daryeel U hare:** waxaa loola jeedaa daryeelka ama xaqa Sharcigan lagu bixiyo marka uu ka qaybgale dhinto ee la siiyo dhaxaltooyadiisa.

## Qodobka 3aad
## Da'da Hawlgabka

**1)** Da'da hawlgabka shaqaalaha rayidka ee adeegga Dawladda waa 65 (Lixdan iyo Shan) sano, lab iyo dhedig.

**2)** Inta laga dhisayo Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda, qofka ka qeybgalaha ah shaqaale ayuu sii ahaanayaa, lamana gelinayo hawlgab.

## Qodobka 4aad
## Baaxadda Sharcigan

**1)** Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa qof kasta oo Dawladda Federaalka Soomaliyeed looga shaqaaleysiiyey adeeg hawlgab leh, uguna jira diiwaanka rasmiga ah ee shaqaalaha rayidka Dawladda marka uu Sharcigan dhaqangal noqdo.

**2)** Sharcigan laguma dabaqayo shaqaalaha sida:

b) Ciidamada qalabka sida

t) Shaqaalaha kumeelgaarka ah iyo kuwa ku shaqeeya heshiisyo muddeysan/cayiman.

j) Kuwa leh Xeer kale ee hawlgab.

x) Xubnaha ku yimaada siyaasad doorasho.

**3)** Iyadoo la raacayo qodobada Sharcigan, muddada mutaysiga adeeggii dambe waxay ka bilaabmaysaa 1da Jannaayo 2007.

**4)** Qaanta adeeggii hore ee shaqaalaha u soo shaqeeyey Dawladda ka hor Jannaayo 1991kii ee hadana dib ugu soo laabtay adeegga Dawladda 1dii Jannaayo 2007dii iyo ka



dibna, waxaa la siinayaa qaanta adeeggii hore oo ay bixinayso Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka.

5) Qiimeynta Halis hilaadinta qaanta adeeggii hore waxaa lagu darayaa qiimeynta sanduuqa hawlgabka.

## CUTUBKA LABAAD
## MUTAYSIGA, MUTAYSI LA'AANTA IYO XAALADDA KALA GUURKA EE HAWLGABKA

### Qodobka 5aad
### Mutaysiga Hawlgabka iyo Liiltirka

**1) U Hoggaansanaanta Qodobbada Sharcigan:**

b) Shaqaalaha rayidka Dawladda ee jago joogta ah oo halwgab leh ugu shaqeeya Dawladda muddo toban (10) sano iyo wax ka badan, marka uu gaaro da'da hawlgabka waxaa loo ballanqaadayaa oo la siinayaa "daryeel hawlgab" iyadoo hawlgabka uu Sharcigan ku helayo aysan ka badnaan karin 70% (boqolkiiba todobaatan) mushaarkiisa asaasiga ah xilliga shaqo ka saarista. Daryeelka hawlgabka waxaa loo xisaabin doonaa sida soo socota:

i) Abaalmarinta adeegga dambe: daryeelka hawlgabka wuxuu la mid yahay 1/800 (pension formula for monthly pension) aad ee mushaarkiisa aasaasiga ah ee bil kasta oo uu si buuxda u dhamesytiray adeegga dambe, taasoo u dhigganta hal iyo bar boqolkiiba (1.5%) mushaar sanadeedka uu helo shaqaalaha. Mushaar sanadeedka hawlgabka ee shaqsi walba waxaa lagu sameynayaa dib u qiimeyn iyadoo si celcelis ah loo kordhinayo mushaarka aasaasiga ah ee shaqaalaha laga soo billaabo sanadka uu kasbaday illaa sanadka hawlgabka ee shaqaalaha hawlgabaya.

ii) Abaalmarinta Adeeggii hore: daryeelka hawlgabka wuxuu la mid yahay 1/800 (pension formula for monthly pension) aad mushaarka aasaasiga ah ee bisha adeeggii hore ee ka horeeyey marka uu Sharcigani dhaqangalo, oo lagu dhuftay tirada bilaha adeeggii hore, oo u dhiganta 1.5% (hal iyo bar boqolkiiba) ee mushaarka la sheegay ee asaasiga ah ee sanad kasta oo adeeggii hore ah.

iii) Shaqaalaha rayidka ee laga rukhseeyo/laga saaro adeegga Dawladda wixii ka danbeeya marka uu Sharcigani dhaqangalo, hawlgabka adeeggii hore waa la cusbooneysiinayaa si loo tixgaliyo kororka celceliska mushaarka aasaasiga ah inta lagu guda jiro adeegga Dawladda oo dhan, laga billaabo sanadka la ansixiyo Sharcigan ilaa sanadka hawlgabka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

t) Shaqaalaha Dawladda ee aan mutaysan hawlgab sida ku xusan faqradda (1) xarafka (b) ee qodobkan, oo jago joogta ah ka hayey adeeg hawlgab leh ee Dawladda Federaalka Soomaaliya muddo ka yar 10 (toban) sano, waxaa u xaq u yeelanaya "Liiltir" loo xisaabinayo 1 (hal) bil mushaarka asaasiga ee mushaarkii ugu dambeeyey adeegga ee sanad kasta oo la dhameystiray adeegga.

j) Qofkii mutaystay daryeel hawlgab ee meelo badan ka imaanaya, sida kasabkiisa, iyo daryeel u hare ee xubin ka mid ah qoyskiisa; iyadoo la raacayo Sharcigan, qofka wuxuu helayaa oo kaliya hal daryeel hawlgab, isagoo xaq u leh inuu doorto meesha daryeelka ugu faa'iidada badan.

**2) Qaanta adeeggii hore iyo xaaladda kala guurka Sharcigan:**

b) Shaqaalaha rayidka ee u soo shaqeeyey Dawladda ka hor Jannaayo 1991kii ee hadana dib ugu soo laabtay adeegga Dawladda 1dii JaNnaayo 2007, iyo wixii ka dambeeyay, kaddibna gaaray da'da hawlgabka waxay mutaysanayaan oo ay xaq u yeelanayaan daryeel hawlgab oo ku salaysan adeeggii hore kaas oo lagu saleynayo sandka dhalashada sida lagu qoray shaxda lifaaqa sharcigan (Annex 1) oo tilmaameysa muddada adeeggii dambe ee uruurtay si waafaqsan qodobka 4aad, faqradihiisa (3) iyo (4) ee sharcigan.

t) Shaqaalaha rayidka ee ku soo biiray shaqada Dawladda 1dii Jannaayo 2007 iyo waxii ka dambeeyay lehna jaggo joogta ah hadana ku jira adeegga Dawladda dhammaystirayna 10 (toban) sano ama in ka badan oo adeeg hawlgab leh oo xiriir ah hadana gaaray da'da hawlgabka, waxay mutaysanayaa xaqna u yeelanayaan "daryeel hawlgab" iyadoo laga soo xisaabinayo taariikhda ay kusoo biireen adeegga Dawladda si waafaqsan Qodobka 5aad, faqradiisa (1) (b) ee Sharcigan, oo ku saleysnaanaysa wadarta uruurtay ee adeeggii dambe.

j) Shaqaalaha rayidka ee kusoo biiray shaqada Dawladda 1dii Jannaayo 2007, wixii ka dambeeyay lehna jago joogto ah hadana ku jira adeegga Dawladda balse aysan u uruurin muddo 10 (toban) sano oo adeeg hawlgab leh oo xiriir ah, marka uu gaaro da'da hawlgabka wuxuu muteysanayaa, xaqna u yeelanayaa in la siiyo "Liiltir" ah 1(hal) bil mushaarka asaasiga ee sanadka kasta ee uu dhamaystiray adeegga Dawladda ee dhammaan tirada sanadaha adeegga oo laga soo xisaabanayo taariikhda uu ku soo biiray shaqada Dawladda si waafaqsan Qodobka 5aad faqradiisa (1)(t) ee Sharcigan.

x) Shaqaalaha rayidka ee kusoo biiray shaqada Dawladda adeegga dambe laga soo bilaabo 1dii Jannaayo 2007 illaa xilliga ama taariikhda laga ansixinayo Sharcigan, waxay lahaanayaan adeegga dambe ee inta u dhaxeysa sanadaha 2007 – illaa sanadka la ansixiyo, waxaana loo tixraacayaa mushaarka aasaasiga ah ee ugu dambeeya iyo hannaanka xisaabinta hawlgabka sida lagu caddeeyey Qodobka 5aad, faqradiisa (1) (b)(i) ee Sharcigan.



## Qodobka 6aad
## Hawlgabka Naafannimo

1) **U qalmidda hawlgab:** Qofku wuxuu xaq u yeelanayaa daryeel hawlgab keliya haddii uu ku jiro adeegga hawlgabka lehlaga billaabo taariikhda uu dhaqangalo Sharcigan.

2) **Naafanimo:**

b) Qofka waxaa loo aqoonsan karaa ama loo tixgalin karaa inuu yahay naafo joogta ah ama uusanwaxba qabsan karin marka uu ka weynyahay 18 (sideed iyo toban) sano, balse uu ka yaryahay da'da hawlgabka uuna qabo naafanimo keenta inuu shaqada ka fariisto sida lagu qeexay Sharcigan

t) Guddi caafimaad oo aqoon u leh ayaa qiimeynaya codsadeyaasha hawlgabka naafanimo si ay u caddeeyaan in ay buuxiyeen shuruudaha caafimaad iyo kuwa mihnadeed ee Sharcigani uu dajiyey. Gudigga caafimaad waxa uu go'aaminayaa haddii naafanimadu ay codsadaha ka dhigayso mid aanan shaqo kasab leh qabsan karin waqtiga codsiga iyo mustaqbalkaba.

j) Codsaduhu waxaa uu arji ku dalbanayaa hawlgab naafanimo, isagoo u gudbinaya Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka muddo 90 (sagaashan) maalmood gudahood kaddib taariikhda ay naafanimadu haleeshay.

3) **Qiimeynta naafanimada**

b) Shahaadada qiimeynta naafanimada oo ay soo saaraan guddi caafimaad oo aqoon u leh, waa in ay ku caddahay:

t) Baaris caafimaad oo lagu aqoonsanayo dhibka naafanimo ee codsadaha haya iyo waqtiga naafanimadu billaabatay, baarista waa in si gaar ah loogu tilmaamo oo ay caddeysaa saameynta ay ku leedahay shaqada oo ay ku jirto in si gaar ah tilmaan looga bixiyo meelaha codsaduhu ka curyaamay ee sababta u tahay in uusan waxba qabsan karin.

j) Qiimeyn mihnadeed oo ku aadan waxqabadka nolol maalmeedka codsadaha iyo hawlaha la xiriira shaqada, taasoo ay ku jirto raadraac shaqadii u codsaduhu ka shaqeyn jiray haddiiba ay jirto.

x) Marka duruufaha naafanimo oo dhan la tixgaliyo, waa in la go'aamiyaa haddii codsadaha si uun loo shaqo gelin karo iyo haddii kale.

kh) Go'aan ka gaarsita naafanimo buuxda muddo 1 (hal) sano ka hor ama ka badan, muddadaas oo codsaduhu uusan caafimaad ahaan iyo mihnad ahaanba awoodin inuu qabto shaqo kasab leh.

d) Saadaalinta joogtonimada naafannimada.



r) Codsadaha hawlgabka naafanimada wuxuu xaq u leeyahay in uu caafimaadka iyo xeel dheerihiisa mihnadeed caddeymo uga keeno guddiga caafimaad, hase yeeshee, warbixintaas meesha kama saarayso go'aanka gudigga caafimaad oo leh awoodda xaqiijinta.

s) Dadka deggan, ku xareysan ama ay gacan siiyaan hay'adaha caawiya naafada oo ay ku jiraan kuwa dhimirka la', kuwa xanuunsan, kuwa hoyga, waxbarashada aan haysan iyo kuwa xabsiyadaku jira iyo hay'adaha kale ee miisaaniyad Dawladdu ku taageerto ma mutaysanayaan hawlgab naafanimo sida uu qabo Sharcigan.

sh) Dadka awooda inay shaqeystaan oo ay ku jiraan kuwa iskood u shaqeysta, ma mutaysanayaan hawlgab naafanimo. Qof walba oo iskiisa u shaqeysta waxay caddeyn u tahay in uusan naafo aheyn, bixinta hawlgab naafanimo waxay ku egtahay marka ugu horreysa oo uu qofka shaqo helo iskiisba ha u shaqeystee.

dh) Dadka ku qaata daryeel hawlgab si waafaqsan Sharcigan ama shuruuc kale, ma muteysanayaan hawlgab naafannimo. Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxay ka soo hubinayaan qorsheyaasha hawlgab ee kale in codsaduhu ka qaato dareyeel hawlgab.

**4) Baaris caafimaad si looga go'aan gaaro hawlgab naafanimo:**

b) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxa ay xaq u leedahay inay ka dalbato codsade kasta inuu hortago guddi caafimaad si uu u maro baaris caafimaad waqtiga iyo goobta guddigu u cayimo, sidoo kale waxaa lagu dabbaqayaa dadka hawlgabka naafanimo horay u qaadan jiray oo ay tahay in naafanimadooda dib u eegis lagu sameeyo si waafaqsan Sharcigan.

t) Codsaduhu haddii uusan marin baaris caafimaad, waxay keenaysaa in laga joojiyo inuu sii qaato hawlgabka naafanimada marka laga reebo sababo macquul ah oo Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka go'aansatay.

**5) Qaddarka iyo muddada uu soconayo hawlgabka naafanimada:**

b) Ka qeybgalaha shaqada ku naafooba wuxuu mutaysanayaa "hawlgab naafinimo" waxaa loo tixgalinayaa inuu gaaray da'da hawlgabka taas oo u dhiganta hawlgabkii uu heli lahaa haddii ka qeybgalaha uu si joogta ah uga sii shaqeyn lahaa adeeg hawlgab leh, siina qaadan lahaa heerka mushaarkiisa oo kale, uuna bilaabi lahaa helidda daryeel hawlgab marka uu gaaro da'da hawlgabka iyadoo aysana jirin wax looga dhimmayo hawlgab soo hormaray darteed.

t) Daryeelka Hawlgabka naafanimada waa mid la bixinayo inta qofka naafada ahi nool yahay, haddii ka qeybgaluhu aan u ka bogsan naafannimada.



**6) Waajibin wargelin:**

b) Qof kasta oo soo codsaday hawlgab naafanimo, hay'adda sanduuqa hawlgabku waxay si qoraal ah ugu wargelinaysaa natiijada codsigiisa muddo 60 (Lixdan) maalmood gudahood ah, muddada waxaa la kordhin karaa 30 (Soddon) maalmood haddii Guddiga Caafimaad ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku uu u baahdo in xaqiijin caafimaad oo dheeriya la sameeyo.

t) Qofka qaata daryeelka hawlgabka naafanimada, waa inuu Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka si degdeg ah u ogeysiiyaa isbaddel kasta wixii duruufo ah oo saameyn kara muteysiga daryeelka hawlgabka naafanimada.

j) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxay shaqaalaheeda rukhsad ama awoodeed u siin kartaa in ay si habeysan ama aan habeysnayn u hubiyaan una baaraan ciddii qaadata daryeel hawlgab naafanimo si ay u xaqiijiyaan xogta lagu muujiyey codsiga iyo sii jirista muteysiga daryeelka hawlgab naafanimo, Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka xaq looguma lahaanayo in ay sii bixiso ogeysiis ku aaddan xilliga iyo goobta lagu sameynayo hubintaas, balse waa inay ahaataa xiliyada munaasabka ah.

x) Shaqaalaha Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ee u idman xaqiijinta iyo hubinta, waa inay caddeyn rukhsad awoodeed u haystaan oo ay ku hubiyaan dukumiintiga, haddii laga codsadana ay tusiyaan aqoonsigooda, mar walbana waa in ay ilaaliyaan seeraha awooddooda shaqo.

kh) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxay hirgelinaysaa habraacyo si joogto ah loogula socdo dadka qaadanaya daryeelka hawlgabka naafanimada si loo xaqiijiyo sii jirista naafanimada iyo suurtagalnimada, jiritaanka shaqaaleyn ama iskiis u shaqeysta.

c) Dadka qaata daryeelka hawlgabka naafanimada, waa in ay maraan baaris caafimaad marka ay Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka u cayinto, ku guul dareysiga iskaashi codsi qoraal oo lala yeesho Hay'adda Sunduuqa Hawlgabka la wadaago ka qeybgalaha daryeelka hawlgabka naafanimada si loo baaro sii jiritaanka naafanimada waxay keeneysaa in la joojiyo daryeelka hawlgabka naafanimada, joojintaasi waxay soconaysaa inta hubinta laga dhameystirayo, si kastaba ha ahaatee, haddii hawlgabaha naafada ahi ku sugnaado xaaladdii muteysiga daryeelka hawlgabka naafanimo, waxaa la siinayaa wixii daryeel hawlgab naafanimo ee ka baaqday muddada baarista socotay.

## Qodobka 7aad
## Hawlgabka xilliga caadiga ah iyo midka soo hormaray

**1) Shaqo ka fariisashada xilliga hawlgabka:** Shaqo ka fariisashada xliliga da'da hawlgabka waa mid waajib ah, iyadoo shaqaalaha rayidka loo oggolaan karo inay ka

fariistaan shaqada Dawladda ka hor inta aysan gaarin da'da hawlgabka ee lagu xusay Sharcigan ayna heli karaan daryeel hawlgab oo la soo hormariyey si waafaqsan Sharcigan.

**2) Hawlgab soo hormaray:**

b) Haddii ka qeyb-galaha uu ka fariisto shaqada isaga oo aanan gaarin da'da hawlgabka, qaddarka daryeelka hawlgabka uu helayo waxaa laga dhimayaa 0.5% (boqolkiiba hal barkiis) bil kasta oo ka horeysa da'da hawlgabka, qiimaha isku dheelitirka waxaa dib u eegaya oo sameynaya Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka, marka ay lama huraan noqoto iyadoo lagu saleynayo qiimeynta halis-odorase.

t) Da'da hawlgabka soo hormaray waa inta u dhaxeysa 60 illaa 64 (lixdan ilaa lixdan iyo afar).

**3) Isirrada ama arrimaha qiimeynta halis-odorase hawlgabka soo hormaray:**

b) Markasta oo qiimeyn halis-odorase la sameeyo, Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waa inay xaqiijisaa in halis-odorasuhu dib u qiimeyaa isirrada ama arrimaha dhimmi kara "daryeelka hawlgabka" oo haddii ay laga maarmaan noqoto ka talabixin kara in isbaddallo la sameeyo si loo dhawro halis-odorase u dhiganta daryeelka hawlgabka la soo hormariyey iyadoo loo xisaabinayo si waafaqsan Sharcigan.

t) Haddii halis-odorasuhu ka talabixiyo in isbadello lagu sameeyo isirrada ama arrimaha wax ka dhimmi kara si loo dhawro halis-odorase u dhiganta daryeelka, Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxaa waajib ku ah inay ku wargaliso Wasiirka muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah, oo ka billaabanaysa marka lasoo saaro qiimeynta halis-odorase, Wasiirka waxaa waajib ku ah inuu ku wargeliyo Baarlamaanka muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa marka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ay ogeysiiso Wasiirka talooyinka halis-odorasaha, si la isugu dheeli tiro isirrada ama arrimaha dhimmaya daryeelka Hawlgabka si loo dhawro halis-odorase u dhiganta.

## Qodobka 8aad
## Daryeel U hare

**1) U harahayaasha muteystay:** U hareyaasha muteystay daryeel waa:

b) Lamaane: inta ay ka guursato ama uu ka guursado.

t) Caruurta: wiil inta uu ka gaarayo da'da 18 (sideed iyo toban) sano, gabar inta ay ka guursaneyso haddii uu ilmaha naafo yahay waa u soconayaa daryeelka.

j) Waalid: hooyo iyo aabbe haddii ay yihiin ku tiirsanayaal.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**2) Xaq u yeelashada daryeel u hare:**

b) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxaay daryeel u hare siinaysaa u hareyaasha muteystay oo ay ka tageen hawlgabayaasha iyo ka qeybgalayaasha geeriyooday, kuwaas oo ahaa shaqaale rayid oo u diiwaangashan Dawladda xilliga ama taariikhda la ansixiyo Sharcigan.

j) U hareyaasha mutaystay ee hawlgabe/abaaldhurte geeriyooday waxaa ay mutaysanayaan helidda daryeel u hare oo u dhigma dhammaan ama qeyb daryeelka hawlgabkii uu qaadan jiray hawlgabuhu inta aanu geeriyoon, haddii daryeelka hawlgabka la kordhiyo sicir barar dartiis si waafaqsan Sharcigan, daryeelka u harayaasha sidoo kale waxaa lagu darayaa xadigga korarka hawlgabka.

x) U hareyaasha mutaystay ee ka qeybgale geeriyooday kaas oo da'diisa la egtahay ama ka weyntahay da'da hawlgabka xilliga dhimashada welina ku jiray adeeg hawlgab leh xilliga dhimashada, waxay mutaysanayaan "daryeel u hare" oo u dhigma daryeelka hawlgabka uu qaadan lahaa ka qeybgalaha geeriyooday haddiiba u qaadan lahaa daryeel hawlgab taariikhda dhimashada.

kh) Haddii ay geeri ku timaado ka qeybgale sabab la xiriirta dhaawac ama jirro ay shaqadu keentay isagoo ka yar da'da hawlgabka kuna jiray adeeg hawlgab leh xilliga geerida, u hareyaasha waxay mutaysanayaan daryeel u hare oo la eg intii uu heli lahaa ka qeybgalaha geeriyooday, haddiiba uu shaqo hawlgab leh ku sii jiri lahaa inta uu da'da hawlgabka ka gaarayo, uuna isla mushaarkiisa qaadan lahaa kuna billaabi lahaa hawlgabkiisa xilliga hawlgabka.

d) Haddii geerida ka qeybgale ku timid sababo dabiici ah oo aanan la xiriirin shaqo gudasho, u hareyaasha ka qeybgalaha geeriyooday oo maalinta uu geeriyooday da'diisu ka yareyd da'da hawlgabka isla markaasna ku jiray adeeg hawlgab leh, waxa ay xaq u leeyihiin daryeel u hare oo ku saleysan xaddigga hawlgab ee uu heli lahaa ka qeybgalaha geeriyooday haddii qofkaas uu adeegga joojin lahaa isagoo isla mushaarkii uu qaadanayey uuna billaabi lahaa qaadashada hawlgabka maalinta uu geeriyooday

r) U hareyaasha mutaystay ee shaqaale hore ee Dawladeed oo aan ku jirin adeeg hawlgab leh oo maalinka uu geeriyooday xaq u lahaa hawlgab la dib dhigay, waxay xaq u leeyihiin daryeel u hare oo ku salaysan xaddigga hawlgab ee uu heli lahaa ka qeybgalaha geeriyooday haddii qofkaas uu qaadashada hawlgabka ku bilaabi lahaa da'da hawlgabka.

s) Daryeel u hare waxaa la siinayaa oo kaliya kuwa ku mutaystay sida Sharcigani qeexay, ka qeybgalaha aan ka tegin u hare mutaystay, qof kale uma dardaarmi karo inuu qaato daryeel u hare.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

sh) Wadarta daryeelka la siinayo u harayaasha ka qeybgalaha geeriyooday marna kama badnaan karto boqolkiiba 70% (boqolkiiba toddobaatan) oo uu hawlgabuhu qaadan jiray ka hor inta aanu geeriyoon, ama hawlgabka uu shaqaale hawlgabe ahi uu mutaysan lahaa sida uu qabo Sharcigan.

**3) Daryeel hawlgab ee qoysas ay ka maqan yihiin dad lagu tirinayo in ay dhinteen:**

b) Marka ka qeybgale ama hawlgabe maqan laga waayo wax xog ah muddo 3 (saddex) sano ah, Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxaa ay u qaadanaysaa in ka qeybgalahaasi geeriyooday, waxayna Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka siinaysaa daryeelka hawlgab u hareyaasha mutaystay si waafaqsan Sharcigan.

j) Bixinta daryeelka u hare waxay billaabaneysaa bisha ku xigta bisha la waayey ka qeybgalaha maqan, ilaa dib looga helayo ka qeybgalihii maqnaa.

x) Haddii la xaqiijiyo in ka qeybgalihii maqnaa la helay oo uu yimaado, waxaa la joojinayaa daryeelka u harayaasha, kaddib waxa la dheelli tirayaa mutaysiga hawlgabka ee da'da hawlgabka, iyadoo la tixgelinayo qaddarka daryeelka u hare ee la bixiyey.

**4) Daryeelka hawlgabka u hareyaasha ee hawlgabe geeriyoday ama shaqaale hawlgab leh:**

b) U harayaasha mutaystay waxay xaq u leeyihiin daryeel u hare oo ku salaysan adeeg hawlgab leh ee ka qaybgale ama hawlgabe geeriyoodey. Xaqani waxaa uu ku kooban yahay xubnaha qoyska ee noolaa marka uu geeriyoonayey iyo ilmaha aan weli dhalan haddii ay dhashaan sagaal (9) bilood gudahood geerida hawlgabaha ama ka qeybgalaha ka dib.

t) Lamaane (lab iyo dheddig) ee ah u haraha hawlgabe ama ka qeybgale geeriyooday waxaa uu xaq u leeyahay daryeel hawlgab haddii guurka uu ahaa mid si sharciyan u jiray ka hor xilliga geerida ka qeybgalaha ama hawlgabaha. lamaane (lab iyo dheddig) ee ah u haraha geeriyooday, wuxuu waayayaa daryeel u hare haddii uu guur kale sameeyo. Bisha guurka kale dhacay ayaa noqonaynsa bisha ugu danbaysa ee la bixinayo daryeel u hare.

j) Ilmo hawlgabe ama ka qaybgale waxa uu xaq u leeyahay daryeel u hare, marka uu siddeed iyo toban (18) sano ka yar yahay, haddii uu wiil yahay, haddii ay gabar tahayna inta ay guursanayso.

x) Ilmaha da'diisu ka weyn tahay siddeed iyo toban (18) sano oo qabay naafannimo maalinta uu hawlgabuhu ama ka qeybgaluhu geeriyooday, wuxuu mutaysanayaa daryeel u hare ilaa inta uu naafanimadaas kasoo bogsoonayo. Guddigga caafimaadka ee ku shaqada leh ayaa si Sharcigan waafaqsan u xaqiijinaya in

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

naafanimadu ka hor istaagtay shaqo kasab leh.

kh) Ilmaha naafanimadu ku timaaddo geerida hawlgabaha ama ka qeybgalaha ka dib ma helayo daryeel u hare haddii uu siddeed iyo toban sano ka waynaa maalinta geerida.

d) Bisha uu ilmuhu gaaro siddeed iyo toban (18) sano ama uu ka soo kabto naafannimada ayaa noqon doonta bisha ugu dambaysa ee la siinayo daryeel u hare ilmahaas.

r) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxay ilmaha siinaysaa daryeel u hare, ka dib marka lagu xaqiijiyo da'da ilmaha shahaadada dhalashada. Diiwaangelinta da'da ilmaha loo diiwaangeliyo daryeel u hare ayaa ah kama dambays sharci ah, mar danbana cidi kuma samayn karto dib u eegis sababtu waxay doontaba ha ahaatee.

s) Waalid kasta waxa uu xaq u leeyahay daryeel u hare, marka uu geeriyooday ka qeybgaluhu.

**5) Aqoonsiga u harayaal dheeri ah:**

b) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxaa ay qoraal ahaan ku wargelinaysaa muddo soddon (30) Maalmood gudahood ah natiijada araajida qof kasta oo soo codsada daryeel u hare. Hase yeeshee, ogaysiiskaas oo jira ayaa u harayaasha kale ay ku soo codsan karaan daryeel u hare ilaa muddo sanad ah oo ka billaabmaysa maalinta uu dhintay ka qeybgabe ama ka qeybgale.

t) Haddii ay dhacdo in Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku ansixiso codsi horseedi kara in la dhimmo ama la baabi'iyo ogolaansho daryeel u hare oo Sanduuqu horay u siiyay u harayaal kale, Hay'ada Sanduuqa Hawlgabka waxay dib u xisaabinaysaa oo ay hadba sidii loogu baahdo u dhimmi doontaa daryeelka u hare ee la siinayo u harayaasha. Wixii dheeri ah ee la bixiyay waa la soo celinayaa si waafaqsan Sharcigan.

**6) Qaddarka daryeelka u hare:**

b) Haddii u haraha mutaystey uu yahay hal qof kaliya (xaas, ilmo ama waalid) daryeelka uu helayo u harahu waxaa uu noqonayaa 50% (boqolkiiba konton) wixii hawlgabaha geeriyooday uu heli jiray.

u) Haddii u harayaasha mutaystay (xaas, ilmo ama waalid) yihiin laba (2) qofood ama ka badan, waxaa ay helayaan wixii uu qaadan jirey hawlgabaha geeriyooday oo dhammeystiran, waxaana loogu qaybinayaa si siman.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**7) Dhimmasho ama waayid muteysiga qaatayaasha daryeel u hare:**

Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waxay joojinaysaa bixinta daryeel u hare kasta bisha uu geeriyoodo ama marka u hare uu waayo muteysigii daryeelka si waafaqsan Sharcigan. Marka u hare uu waayo muteysigii daryeelka u hare, qaddarka haray waxaa lagu sameynayaa dheelitir, iyadoo si siman loogu qaybinayo u harayaasha kale ee muteystay si waafaqsan faqrada 6aad ee qodobkan.

## Qodobka 9aad
## Muteysi La'aanta Daryeel Hawlgab Ama Liiltir Xukun Dartiis

1) Hawlgab iyo liiltir lagu abaal marin maayo (lama siinayo) shaqaale dawladeed oo shaqada looga saaray xukun maxkamadeed oo kama dambays ah, iyadoo lagu soo eedeeyey dambi ciqaabeed la xiriira ku xadgudub iyo ka faa'deysi awood xafiis si sharci darro ah sida: xatooyo xoolo dadweyne, lunsi, tuuganimo, khiyaano, musuqmaasuq iyo wax isdabamarin, iyo dambi kasta oo keena in laga joojiyo inuu qabto xil xafiis Dawladeed.

2) Shaqaale dawladeed ee lagu xukumay dembiyada lagu xusay Qodobka 9aad faqradiisa 1aad ee sare lagu xusay, waxaa la siinayaa lacagtii looga gooyay Hawlgab ama liiltir.

## Qodobka 10aad
## Iscasilid

**Shaqaalaha Dawladda ee shaqada iskood isaga casila:**

1) Lama siinayo daryeel hawlgab haddii uusan si xiriir ah uga shaqeyn adeeg hawlgab leh muddo 10 (toban) sano ama ka badan, uusanna gaarin da'ada hawlgabka.

2) Waxaa la siinayaa liiltir loo xisaabinayo 1 (hal) bil mushaarka aasaasiga ah sannad kasta oo uu si joogta ah uga shaqeeyey adeeg hawlgab leh muddo ka yar 10 (toban) sano, marka uu ka baxayo ama ka fariisnayo shaqada ama adeegga Dawladda. Waxaana lagu salaynayaa qiimaha liiltirka la siinayo mushaarka ugu dambeeya ee uu qaatay shaqaaluhu.

3) Waxaa la siinayaa qaddarka liiltirka oo dhammeystiran haddii shaqaaluhu uu gaaro da' aan ka yareyn 60 (lixdan) sano marka ugu danbeysa adeegga hawlgabka leh.

4) Shaqaalaha iska casila shaqada Dawladda ka hor da'da hawlgabka ahna mid muteysatay liiltir, wuxuu heli karaa xaqa liiltirka haddii uu iska casilo adeegga hawlkaba leh ka hor inta uusan gaarin da'da lixdan (60) jirka, iyadoo la raacayo shuruudahan hoose:

   b) Qaddarka liitirka waa la dhimayaa iyadoo lagu saleynayo da'da qofka shaqaalaha ah xiliga

   t) Uu iska casilayo adeegga hawlgabka leh sida ku cad shaxdan hoose:



j) Hadii qofka shaqaalaha ahi iska casilayo adeegga hawlgabka leh da' iyadoo lagu saleynayo sida ku xusan Qodobka 10aad, faqradiisa 2aad, wuxuu qofku helayaa qaddarka boqolayda (%) liiltirkii uu heli lahaa oo ah sida soo socota:

i) Kayar 40 jir 70%

ii) U dhaxeysa 40 illaa 49 jir 80%

iii) U dhaxeysa 50 illaa 59 jir 90%

x) Qofkii iska casila shaqada ee qaata liiltirka ee haddana kusoo laabta adeegga hawlgabkaleh, wuxuu heli doonaa keydka sanadaha adeegga hawlgabka lahaa ee loo balan qaaday haddii uu si buuxda usoo celiyo qaddarkii horey loogu siiyey liiltir ahaan muddo lix bilood gudahood ah marka uu dib ugu soo laabto adeegga hawlgabka leh.

## CUTUBKA SEDAXAAD
## HAY'ADDA SANDUUQA HAWLGABKA, DHIGAALKA IYO MAAREYNTA SANDUUQA

### Qodobka 11aad
### Sanduuqa Hawlgabka

1) Sanduuqa laga bixiyo daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka Dawladda ayaa waxaa lagu magacaabaa "Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka".

2) Sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka waxaa maamulaya "Agaasinka Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda" Agaasinkaas oo ah hay'ad Dawladeed oo madax bannaan, lehna Agaasime Guud iyo Shaqaale u gaar ah, taas oo hoos tagaysa "Guddigga Kor joogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda". Hase yeeshee, siyaasad ahaan waxaa mas'uul ka ah Wasiirka ka masuulka ah Wasaaradda Shaqada, kuna matalaya Goleyaashada Dawladda. Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka waxay u xilsaaran tahay uruurinta dhigaalka, maareynta hantida sanduuqa, maamulidda iyo bixinta daryeelka hawlgabka iyo liiltirka si waafaqsan Sharcigan.

3) Agaasinka Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka waxay yeelanaysaa sifo sharci ah taas oo ka dhigaysa in:

b) ay wax dacweyn karto lana dacweyn karo;

t) geli karto heshiisyo ay ku hormarinayso fulinta hawlaha loo idmaday si waafaqsan Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

j) soo iibsan karto, la soo wareegi karto, haysan karto ama sii iibin karto hanti si waafaqsan Xeerka iibka iyo qandaraasyada Qaranka.

x) gelinta caymis ka dhan ah khasaare kasta oo ku imaan kara waxay ayadu mas'uulka ka tahay.

kh) soo amaahan karto illaa xad go'an oo lacag ah oo ay dawaladdu ogolaatay, si waafaqsan Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda.

d) gudoomi karto deeq kasta oo agab ah ama lacag ah si waawafsan Sharcigan iyo xeernidamiyeyaasha ka farcami doona.

r) shaqaaleysiin karto shaqaalaha loogu baahdo gudashada waajibaadka hay'adda si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

4) Sanduuqa hawlgabka waxa loo maamulayaa si waafaqsan Qodobka 13aad ee Sharcigan.

5) Wasaaradda Maaliyadda ee Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ah bixinta wixii gaabis ah haddii si uun ay u dhacdo in lacagta caddaanka ah ee sanduuqa hawlgabka u taal xisaabta bankiga dhexe ay dabooli weyso qaddarka lacageed ee sanduuqa laga rabo in uu ku bixiyo daryeelka iyo liiltirka billaha soo aaddan. Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waa in ay ku wargeliso waqti habboon hay'adaha ay khuseyso, haddii nuqsaantaasi ay soo ifbaxdo ama la odoroso.

## Qodobka 12aad
## Qaddarka Dhigaalka Hawlgabka

1) Laga bilaabo taariikhda maalinta 1aad ee bisha ku xigta bisha uu dhaqangalo Sharcigan, shaqaale Dawladeed ee kasta oo ka shaqeeya adeeg hawlgab leh wuxuu bixinayaa boqolkiiba shan (5%) mushaarkiisa aasaasiga ah si uu uga qeybgalo daryeelka sanduuqa hawlgabka ee Sharcigan lagu ballan qaaday. Dhigaaaalkaas waxaa bil kasta laga jarayaa mushaarka qofka shaqaalaha ah, waxaana lagu shubayaa Xisaabta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka uga furan Bankiga Dhexe, sida uu amro madaxa hay'adda Agaasimaha Guud ee u xilsaaran maamulka sanduuqa hawlgabka.

2) Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay bixinaysaa xaddi qaaraan lacageed oo u dhigma boqolkiiba shan (5%) mushaarka aasaasiga ah ee qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha rayidka dawladda oo ka shaqeeyo adeeg hawlgab leh, si loogu biiriyo daryeelka sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka sida sharcigan lagu ballan qaaday. Lacagta Dawladda waxaa laga bixinayaa madaxa ama madax xigeenka qoondada miisaaniyad sanadeedka Dawladda ee Sanduuqa Hawlgabka. Qoondada lacagta miisaaniyadda Dawladda ugu talagashay daryeelka Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka looma wareejin karo, loomana adeegsan karo kharash miisaanyadeed kale ama ujeedooyin kale intaba.

## Qodobka 13aad
## Maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liil-tirka

1) Shaqo ahaan, sanduuqa hawlgabka waxaa uu noqonayaa"Hay'ad Madax Bannaan" oo u madax bannaan hawl maalmeedkeeda iyo go'aamadeeda khuseeya arrimaha maamulka hawlgabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawadda, taas oo hoos imaanaysa "Guddigga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda" hase yeeshee, siyaasad ahaan waxaa mas'uul ka ah Wasiirka ka mas'uulka ah Wasaaradda Shaqada, kuna matalaya Goleyaashada Dawladda, qaab dhismeedka Hay'addan waxaa lagu faahfaahin doonaa Xeerhoosaad la soo saari doono.

2) **Guddiga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda:** Guddigga Korjoogteynta waxa uu ka kooban yahay (5) Shan xubnood oo kala ah:

   b) Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada – Guddoomiyaha.

   t) Wasiirka Wasaaraada Maaliyadda - Guddoomiye ku-xigeen.

   j) Guddoomiyaha Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda – xubin, hase yeeshee waa qofka Seddexaad Shirguddomiya haddii labada wasiir ay shirka ka maqan yiihiin.

   x) Guddoomiyaha Ururka Shaqaalaha Rayidka Dawladda – Xubin.

   kh) Xoghayaha Ururka Shaqaalaha Rayidka.

   d) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waa xoghayaha Guddiga Korjoogte.

   b) Guddiga Horumarinta Addeega Bulshada Baarlamanka JFS ayaa korjoogteynayaan

   c) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka.

3) **Waajibaadka iyo Awoodaha Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka:** Guddigga Korjoogteynta waxaa ay korjoogteeyaan oo ay la soconayaan dhammaan arrimaha Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyada oo mas'uuliyadaha iyo awoodaha Guddiga Korjoogteynta ay ka mid yihiin:

   b) Korjoogtaynta Hay'adda Hawlgabka iyo Liiltirka lagu aaminay maamulka Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka, iyo guud ahaan hantida sanduuqa.

   t) Ansixinta qorshe hawleedka 5 (shan) sano ah oo lagu oddorosayo daryeelka Sunduuqa Hawlgabka Dawladda oo uu soo diyaariyo Agaasimaha Guud ee

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

maamulka Sanduuqa Hawlgabka isagoo la kaashanaya dhammaan hay'adaha ay khuseyso ee Dawladda.

j) Ansixinta miisaaniyad sanadeedka ku talagalka ah ee loo qoondeynayo Hay'adda iyo daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka ka hor inta aan loo gudbin Goleyaasha Dawladda (Golaha Wasiirrada iyo Baarlamaanka).

x) Korjoogteynta iyo hubinta ku ururinta dhigaalka xisaabta (Account) sanduuqa hawlgabka ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

kh) Magacaabidda Guddiga Joogtada Rafcaanka ee sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha Dawladda.

d) Ansixinta habraacyo sugan oo si waqtiyeysan loogusiiyo daryeel hawlgab iyo liiltir ka faa'iideystayaasha muteystay.

r) Guddiga Korjoogteynta waxaa uu diyaarinayaa ama uu amrayaa in la diyaariyo si uu ugu gudbiyo Golaha Wasiirada iyo Baarlamankaba xisaab celinta la baaray ama la hubiyey iyo dhammaan arrimaha xisaabaadka sanduuqa hawlgabka ee xiliyada kala duwan sida waqti ka waqtigii iyo markasta oo la loo baahdo.

s) Guddiga Korjoogteynta waxaa uu amrayaa in la diyaariyo in qiimeyn halis-hilaadin lagu sameeyo sanduuqa hawlgabka ugu yaraan seddexdii (3) sano ee kasta, iyadoo warbixintana ay noqonayso mid ay shaqaalaha iyo dadweynahaba heli karaan.

Sh) Hubiyaan in dawladdu ku kabto sanduuqa dhaqaale dheeraad ah marka sanduuqa hawlgabka nuqsaani ku timaaddo.

Dh) Guud ahaan wixii uu Guddigu u arko in ay lagama maarmaan u tahay dedejinta, socodsiinta, hanashada iyo ka mira dhalinta hawlaha Sanduuqa iyo ilaalinta xuquuqda ka qeybgalayaasha iyo Dawladda.

c) Ansixinta qaabdhismeedka Hay'adda Saduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Dawladda.

g) Sameynta qeybta hanti-dhawr gudaha ah.

f) Qorista iyo qiimeynta shaqaalaha Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka kuwaas oo noqonaya shaqaale rayid joogta ah, hannaanka shaqo qoristoodana waxaa loo marayaa habraaca shaqo qorista shaqaalaha rayidka dawladda, taasoo ah tartan u furan dhammaan muwadiniinta Soomaliyeed.

q) Sameynta Xeerhoosaadyada iyo habraacyada kale ee lagama maarmaanka u ah shaqooyinka hay'adda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

k) La xisaabtanka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda".

**4) Waajibaadka Maaliyadeed ee Guddiga Korjoogteynta: Guddiga Korjoogteynta waxaa waajib ka saaran yahay:**

b) Ku dhaqmidda si ay ku jirto daacadnimo iyo danta ugu wanaagsan ee Sanduuqa Hawlgabka si loogu maareeyo arrimaha maaliyadeed ee sanduuqa hawlgabka si hufan.

t) Hubiyaan ururinta dakhliga loogu talagalay sanduuqa hawlgabka si loo bixiyo xuquuqda hawlgabayaasha si waafaqsan sharcigan.

j) Xil iska saaridda waajibaadka ugu sarreeya ee ka saaran korjoogteynta, hubinta iyo ilaalinta hantida iyo diiwaannada sanduuqa hawlgabka.

x) Mas'uul ka yihiin adeegsiga iyo illaalinta nidaam wax ku ool ah, hufan oo lagu maareeyo nidaamka maaliyadeed ee sanduuqa hawlgabka iyo xakameynta khataraha oo ay ku jiraan nidaamka xisaabaadka iyo hantida sanduuqa hawlgabka.

kh) In ay ka hortagaan, joojiyaan haddii ay jiraan ku takrifal kharashaad aan caadi ahayn oo aan miro dhal u lahayn hawlaha hay'adda sanduuqa hawlgabka kuwaas oo aanan waafaqsaneyn siyaasadaha hawlgelinta ee sanduuqa hawlgabka.

d) Ansixinta iyo soo jeedinta dib u eegis miisaaniyad sanadeedka sanduuqa hawlgabka haddii loo baahdo si maamulka hay'adda sanduuqa hawlgabka ugu gudbiso Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha kale oo ay khuseyso.

r) Hubiyaan wax soo iibsiga iyo wax iibinta Agaasinka iyo Maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka si waafaqsan Xeerka Iibka Qaranka si loo xaqiijiyo ku dhaqanka daahfurnaan, isla xisaabtanaka, tartan furan iyo caddaalad, iyada oo aysan hay'ddu marna isticmaali karin lacagta dhigaalka ah oo loogu tala galay hawlgabka, (10%), sida ku xusan qodobka 12aad faqraddiisa 2aad ee sharcigan.

s) Xubin ka mid ah Guddiga Korjoogteynta in aysan ku dhaqmi karin hab ka baxsan waajibaadyada iyo mas'uuliyadaha Guddiga Korjoogteynta lagu siiyey sharcigan, sida adeegsiga awood uusan siin sharcigan, bixinta macluumaadka sirta ah ee xubnaha Gudigga Korjoogteynta ay ku helaan mas'uuliyadda ka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

saaran Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka taas oo si aan habbooneyn loogu faa'iidaynayo dhinac kale oo masaalix ka leh Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka.

**5) Ka fogaanshaha danaha isdiidan ee Xubnaha Guddiga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka:**

b) Xubnaha Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka waa in ay caddeeyaan wixii dano isdiidan ah ee ka hor imaanaya hawsha ama shaqada loo xilsaaray si waafaqsan sharuucda iyo siyaasadaha ku aaddan dhaqanka saraakiisha sare ee dawladdu magacawdo.

t) Xubnaha Guddiga Korjoogteynta waa in ay shaaciyaan wixii dano isdiidan ah ka hor imaanaya go'aanadooda. Guddiga Korjoogteynta waa in uu yeeshaa siyaasad lagu maareeyo danaha isdiidan ee jiri kara marka uu gudigu gudanayo waajibaadyadiisa si waafaqsan sharcigan.

j) Xubnaha Guddiga Korjoogteynta waxaa ka reeban hadiyad ama deyn oo ka timaada maamulaha hantida sanduuqa, ilaaliyaha hantida sanduuqa ama adeeg bixiye la macaamila Hay'adda Hawlgabka Sanduuqa, ama dhinac kale oo xiriir shaqo kala dhaxeeyo dhammaan maamuleyaasha hay'adda iyo hantida sanduuqa hawlgabka. Mamnuuciddani waxay saameyneysaa sidoo kale, xaaska, walaalaha, waalidka iyo carruurta xubinta Guddiga Korjoogteynta. Haddii xubin ka tirsan Guddiga Korjoogteynta uu aqbalo, gudoomo arrimaha kor lagu xusay, xubin kaas waxaa looga baahanaanayaa inuu si degdeg ah isu casilo, haddii uu san keenin wax lagu qanci karo ee uu isku difaacayo.

x) Xubin ka mid ah Guddiga Korjoogteynta kama qaban karo wax xil shaqo ah sida jagooyinka: Maamulaha hantida sanduuqa, ilaaliyaha hantida sanduuqa, muddo hal sano ah ka dib marka ay dhamaato muddada xil haynta xubinka Guddiga Korjoogteynta.

**6) Magacaabista Agaasinka Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka:**

b) Iyadoo la tixraacayo Dastuurka JFS qodobadiisa ku saabsan magacaabista xilalka saraakiisha sare ee dawladda iyo xeernidaamiyeyaasha kale ee maamulka shaqaalaha rayidka dawladda, Wasiirka Wasaaradda Shaqada ayaa Golaha Wasiirrada u soo jeedinaya Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda, ka dib marka uu Goluhu oggolaado,waxaa si rasmi ah u magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka dibna waxaa lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

t) Shuruudaha iyo xaaladaha Magacaabista Agaasimaha Guud waxay ku imaanaysaa si wafaaqasan Xeernidaamiyaha 6aad ee Shaqo Qorista Shaqaalaha Rayidka Dawladda, gaar ahaan Qodobada 32aad, 33aad iyo 34aadee Xeernidaamiyeyaasha Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

j) Agaasimaha Guud ee Xafiiska Sanduuqa Hawlgabka wuxuu si toos ah ugu warbixiyaa Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka.

7) **Xil ka qaadista, Shaqo kajoojinta ama Iscasilidda Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka:** Agaasimaha Guud ee Xafiiska Sanduuqa Hawlgabku wuxuu ku waayi karaa xilka xafiiska haddii:

b) Gudigga Korjoogteynta Hay'adda ay soo jeediyaan xil ka qaadis, Wasiirka u xilsaaran Wasaaradda Shaqada uu ku qanco soojeedinta Guddiga Korjoogteynta, iyadoo sabab looga dhigayo anshax xumo, ku xadgudub awoodeed, xatooyo xoola dadweyne ama ay caddaato inuusan laheyn karti, aqoon iyo awood uu si xilkasnimo leh ugu guto waajibaadkiisa shaqo ee xafiiskiisa.

t) Wasiirka Wasaaradda Shaqada wuxuu shaqada ka joojin karaa Agaasimaha Guud ee Sanduuqa Hawlgabka isagoo latashanaya Gudigga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo LiiltirkaShaqaalaha Rayidka Dawladda, haddii uu wasiirku ku arko agaasimaha arrimaha ku xusan isla faqraddaan 7aad, xarafka (a) ee qodobkan.

j) Haddii uu go'aansado Agaasimaha Guud in uu si iskiis ah isaga casilo xilka, waa in uu muddo seddex bilood ka hor ah u soo gudbiyaa Gudigga Korjoogteynta qoraalka rasmi ah oo uu ku dalbanayo in uu xilka ka tagayo.

8) **Waajibaadka shaqo iyo Awoodaha Agaasinka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka:** Agaasimaha Guud ee Sanduuqa Hawlgabka wuxuu leeyahay awoodaha iyo waajibaadkan si waafaqsan sharcigan, si guudna shaqooyinkiisa iyo awoodihiisa waxaa kamid ah kuwaan hoos lagu qeexay:

b) Ugu adeego isagoo ka wakiil ah maamulka iyo amaanada hantida Sanduuqa.

t) Abuuridda ama ka furidda Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Xisaab banki oo ay gaar u leedahay Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka, taas oo lagu bixin doono Dhigaalka iyo waliba deeqaha haddii ay bixiso Dawladda ama deeq bixiyeyaal kaleba.

j) Xakameynta, maamulidda dhigaalka Sanduuqa Hawlgabka, hantida Sanduuqa oo si khaas ah oo kaliya uga faa'iideysanayaan ka qeybgalayaasha iyo u hareyaasha Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka.

x) Diyaarinta miisaaniyadda sanadeedka Hay'adda Sanduuqa ee si ay u ansixiyaan Guddiga Korjoogtaynta Hay'adda Hawlgabka iyo Liiltirka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

kh) Uruurintinta iyo xaqiijinta Dhigaalka sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka ee ay bixinayso dawladda iyo ka qaygalayaasha.

d) Diyaarinta iyo haynta hantida sanduuqa.

r) Dabbaqidda maalgashiga hantida Sanduuqa Hawlgabka ee Xisaabta keydka si waafaqsan sharcigan.

s) Haynta diiwaanada macluumaadka ka qeybgalayaasha, hawlgabeyaasha iyo u hareyaasha oo ay ku jirto balse aanan ku koobneyn xogta shakhsiyadeed ee ka qeybgalayaasha, tiradooda, ciwaanadooda, xogta adeegga hawlgabka leh, xogta daryeelka hawlgabka, xubnaha qoyska noqonkara u hareyaal iyo dhammaan macluumaadka kale oo looga baahnaanayo in lagu xisaabo bixinta daryeelka si waafaqsan sharcigan.

sh) Sameynta qiimeynta halis-hilaadin xililyeysan ee Sanduuqa hawlgabka si soo jeedinno ku saleysan qiimeynta halis-hilaadinta loogu gudbiyo Baarlamaanka. Sameynta daraasada qiimeynta waa in lagu fuliyaa iyadoo laga shidaal qaadanayo nolol cimriyeedka (life expectancy) tirada hawlgabka dadka Soomaaliyeed. Haddii xogta noocan ahi aanan la heleynin, shaxda nolol cimrayeedka dal leh xog dhammeystiran oo ah mid la mid ah astaamaha dadweynaha sida: dakhliga, xadigga dhimmashada iyo dhammaan isirrada ama arrimaha kale ee ay tahay in la tixgeliyo.

dh) Geli karo heshiisyo uu ku iibsanayo qalab iyo agab xafiiseedyada lagama maarmaanka u ah hawlaha shaqo ee sanduuqa hawlgabka si wafaqsan sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

c) In uu heshiiyo la galo Halis-odreseyeyaal hanti, xisaabiyeyaal, hantidhowreyaal, adeeg bixiyeyaal kale haddii loo baahdo, kuwaas oo ay ansixinayaan Guddigga Korjoogteynta.

g) Agaasimaha Sanduuqa wuxuu awood u leeyahay in uu soo jeediyo qaabdhismeedka iyo shaqaalaha kaaliyeyaasha ah ee maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka, kuwaas oo ka mid ah shaqaalaha rayidka ayna ansixiyaan Gudigga Korjoogteynta.

f) Qandaraas kula geli karaa, wax ka mid ah shaqooyinka Sanduuqa Hawlgabka, qof ama shirkad leh khibrad ku aadan shaqada lagu siinayo khandaraas hoosaadka, haddii ay maalgelinayso daraf ka kale oo dibadda ah.

q) Go'aaminta waqti ka waqti, haddii qof uu muteystay ama uusan muteysan daryeel faa'iido leh ama mid aan faa'iido lahayn ka helayo Sanduuqa Hawlgabka.

k) Ka bixinta Sanduuqa Hawlgabka abaalmarinada daryeelka si waafaqsan

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Sharcigan.

l) Bilaabidda, qaadida ama difaacidda wax kasta oo dacwado ah oo laxiriira Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ama go'aaminta wixii xuquuq kasta ah ee ka qeybgalayaasha iyo kuwa kale ee sharciga dhexdiisa xaq lagu siiyey, marka laga reebo dacwadaha Maxkamadaha hortooda yaalla.

m) Dabbaqidda iyo hirgelinta habraacyaya iyo Xeer hoosaadyada Hay'adda oo ay ansixiyaan Gudigga Korjoogteynta

n) Sameynta iyo ku dhaqanka habraacyo u gaar ah shaqooyinka ama maamulka gudaha ee hay'adda Sanduuqa Hawlgabka marka ay ansixiyaan Guddiga Kor joogtaynta.

w) Gudashada si guud ahaaneed dhammaan ficillada ama waxyaabaha laga maarmaanka noqon kara ama faa'iido iyo wanaag ugu jiri karto haynta iyo ilaalinta Sanduuqa Hawlgabka iyo xuquuqda ka qeybgalaha iyo dawladdaba.

**9) La Xisaabtanka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka:**

b) Guddigga Korjoogteynta marka uu gudanayo waajibaadkiisa shaqo, waxaa la xisaabtami kara Golaha Wasiirada, Baarlamaanka, Hanti Dhowraha Guud, ka qaybgalyaasha, u hareyaasha sanduuq.

t) Marka uu shaqooyinkiisa gudanayo, Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka, waxaa la xisaabtami kara Guddiga Korjoogteynta, Hantidhawrka Guud ee Qaranka, Golaha Wasiirrada, Baarlamaanka, ka qaybgalayaasha, hawlgabayaasha iyo u hareyaasha Sanduuqa Hawlgabka.

j) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ayaa leh mas'uuliyadda maamulka guud iyo maamulka hawl maalmeedka hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka, waxayna hay'addu xifdinaysaa, ilaalinaysaa, xasuus-reebeysaa dhammaan xogaha, macluumaadka, buugaagta, diiwaanada iyo xisaabaadka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka.

**10) Maalgelinta Hantida Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka:**

b) Haddii ay dhacdo ama marka Sanduuqa Hawlgabka ay ku jirto kayd lacageed oo dheeraad ah, loona baahdo in maalgelin lagu sameeyo, Guddiga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waa in uu Dawladda u soo jeediyaan talo si loo diyaariyo Siyaasad maalgelin iyo xeer u gaar ah maalgelinta hantida Sanduuqa Hawlgabka Shaqaalaha Rayidka Dawladda kuwaas oo laga ansixinayo Golaha Wasiirada iyo Baarlamaanka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

t) Hantida Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ee dheeraadka ku ah xisaabta keydka ah, Bankiga dhexe waa in si taxadar leh loo maalgeliyaa, iyadoo la raacayo mabaadi'da mas'uuliyadda, maamul wanaagga iyo islaxisaabtanka hufan si ay uga faa'iidaystaan oo keliya ka qeybgalayaasha Sunduuqa Hawlgabka iyo u hareyaasha muteystay, iyada oo la raacayo shuruudaha sharcigan.

j) Guddiga Korjoogtaynta Hay'adda Sanduuqa Halwgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda, waa in ay sameeyaan siyaasadda maalgashiga taas oo marka ay ansixiyaan Goleyaasha Dawladda loo adeegsan karo maalgashiga hantida Sanduuqa Hawlgabka iyadoo lagu salaynaya talo bixin ku dhisan aqoon mihnadeed, waafaqaysna mabaadi'da ku xusan Sharcigan soona bandhigaysa.

i) In si foojigan looga fiirsado noocyada ganacsi ee u qalma in la maalgaliyo iyo heerarka khatarta la aqbali karo ee hantida hawlgabka laga yaabo in lagu maalgelinkaro ama aan la maalgelin karin.

ii) Guddiga Korjoogtaynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka waa in ay go'aan masiiri ah ka qaataan arrimaha la xiriira maalgelinta hantida hawlgabka iyaga oo loo raacayo siyaasadda iyo Xeerka Maalgashiga Hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Dawladda.

iii) Habraaca iyo hannaanka go'aannada waa in ay ku salaysnaadaan Siyaasadda Maalgashiga Hawlgabka iyo Liiltirka, Xeerkan, Xeernidaamiyeyaasha iyo habraacyada kale ee Hawlgabka iyo Liiltirka.

iv) Waa in uu jiraa habraac lagu aqoonsado, lagula socon karo, laguna maareyn karo dhammaan khataraha ka imaan kara maalgelinta maalgashiga hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka.

v) Habka lagula soconayo u hogaansanaanta Maamulayaasha Sanduuqa Hawlgabka ee Siyaasadda maalgashiga.

vi) Iyo xeerhoosaadyadii iyo nidaamyadii kale ee ay u arkaan Guddigga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka in ay laga maarmaan u yihiin la socodka arrimaha malgashiga Sanduuqa Hawlgabka.

x) Iyado oo uu la tashanayo Gudigga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha rayidka Dawladda, Wasiirka ka mas'uulka ah Wasaaradda Shaqada ayaa Golaha Wasiirrada horgeynaya Siyaasadda Maalgashiga hantida hawlgabka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda si ay u ansixiyaan.

kh) Guddiga Korjoogtaynta Hay'adda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dalwadda ayaa si joogta ah warbixin uga siinaya Goleyaasha Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka iyo dadweynaha xaddiga maalgalinta hantida hawlgabka iyo faa'iidooyinka ama khasaarooyinka laga dhaxlay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Hantida dheeraadka ah ee Xisaabta Keydka Sanduuqa Hawlgabka waxa lagu maalgelin karo waxaa ka mid ah sida:

i) Qoraalada ballanqaadka ah ee ay soo saarto dawladda Faderaalka ee Soomaaliya kuwaas oo dammaanad qaadaya isla markaana leh xadiga soo celinta maalgashiga la aqbali karo.

ii) Dhigashada ama ku keydsi banki.

iii) Hantida kale ee maaliyadeed ee lagu kala iibsado suuqyada raasumaalka ee dhisan oo lagu qiimeyn karo ujeedooyinka xisaab soo celinta maalgashiga.

r) Saamiyada ganacsi ee damaandaha gudaha leh ee la maalgashan karo waxaa ka mid ah:

i) Xisaabaadka iyo keydka ama dhigaalka bankiyada ee shirkadaha shatiga ka haysta Bankiga Dhexe, kuwaas oo aan khatar ugu jirin tallaabo ka qaadis ku wajahan hakin ama kala laabasho shatiyadooda ganacsi.

ii) In maalgelintu waafaqsanaantaa damaanadda ay dawladdu bixiso iyo xadiga damaanadda ee la ogolyahayba.

s) Saamiyada caalamiga ah oo lagu soo saaro xeerar caalamiyan loo aqoonsan yahay lehna bankiyo, suuqyada raasumaal maaliyadeed ee sharciyeysan kuwaas oo ay ka mid noqon karaan:

i) Keydka ama dhigaalka shirkada haysta qiimaynta sumcada darajada maalgashiga ugu sarraysa ee ay qiimeeyeen ugu yaraan laba ka mid ah shirkadaha qiimaynta caalamiga ah ee ugu sumcadda badan.

ii) Saamiyada ganacsi ee dammaanadda leh ay soo saartay dawladda ilaa xadka damaanadda la ogolyahay, saamiyada detnta ah ee leh hanti u baahan lacag bixin go'an taas oo bixiyaha ay tahay inuu leeyahay qiimeyn la mid ah sida tan faqrada sare lagu xusay.

iii) Saamiyada ganacsi ee damınaanadda leh kana diiwaangashan suuqyada raasamaalka leh ee sharciyeysan kuwaas oo saamiyadooda lagu iibiyo si furan ama suuqyada la aqoonsanyahay ee saami kala iibsiga shardina ay u tahay inay hoos tagaan hay'daha sharci ahaan xeeriya suuqyada saamiyada.

iv) Maalgelin ay isla oggol yihiin dhinacyada maalgelinaya shardina ay u tahay oggolaanshaha iyo ansixinta hay'ad sharci ahaan xeerisa maalgashiga dhinacyada.

sh) Hantida Sanduuqa Hawlgabka waxaa ka reebanaan kara inaan lagu maalgelin arrimahan soo socoda sida:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

i) Saamiyada dammaanadaha leh balse aan ku jirin liiska suuqa saamiyada lagu kala iibsado amaba aanan si furan loo kala iibsan.
ii) Hantida aan la sii iibin karin amba si kale hadii la yiraahdo aanu sharcigu oggoleyn.
iii) Hantida ma guurtada ah.
iv) Hantida (agab ahaaneed) ee aan ku jirin liiska suuqyada saamiyada sharciyeysan kuwaas oo aan qiimeyntooda la hubin, oo ay ku jirto tusaale ahaan, laakiin aan ku xaddidnayn, waxyaalaha qadiimiga ah, farshaxanka, qadaadiicda iyo gaadiidka ama baabuurta.

v) Hanti kasta ama saami ganacsi oo damaanad leh oo uu bixinayo, iibinayo xubin ka mid ah Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha rayidka, Maareeyaha Maaliyadda Sanduuqa Hawlgabka iyo, Ilaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka ama shirkado ganacis oo xiriirka la leh ama qaraabadoodaba, iyo hanti kasta oo kale oo uu bankiga dhexe u aqoonsaday in aan la maalgashan karin.

dh) Hantida Sanduuqa Hawlgabka lagama soo iibsan karo ama lagama iibin karo xubin ka mid ah Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka, Maareeyaha Maaliyadda Sanduuqa Hawlgabka iyo Ilaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka ama shirkado ganacis oo xiriirka la leh ama qaraabadoodaba.

**11) Magacaabista iyo Waajibaadka Ilaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka (Pension Fund Custodian):**

b) Haddii wax maalgashi ah lagu sameynayo hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha rayidka Dawladda oo aan ka ahayn Siyaasadda Maalgashiga Dawladda FederaalkaSoomaaliya ay qaadatay, si waafaqsan sida lagu xusay faqradda (10)(d)(i), ee Qodobkan,ama ku keydsiga/dhigasho bankiyada Soomaaliya gudaheeda ah,sida lagu xusay faqradda (10)(d)(ii) ee Qodobkan,Guddiga Korjoogteynta Hantida Sanduuqa Hawlgabka wuxuu sameeyaa, dhaqangaliyaana siyaasadda maalgashiga sidoo kalena uu raadiyo talo bixinada maal-gelineed oo ku saleysan mihnad- yaqaanimo. Marka ay timaado maalgelinta Sanduuqa Hawlgabka, Guddiga Korjoogteynta waxaa uu awood u leeyahay in uu magacaabo Ilaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka, iyadoo loo marayo habka shaqo qorista oo tartan daahfuran ah, isla markaana laga qaadan karo gudaha shaqaalaha rayidka dawladda ama laga keeni karo bannaanka

t) Waajibaadka Illaaliyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka waxaa ka mid ah:
i) Haynta iyo ilaalinta hantida Sanduuqa Hawlgabka sida; dheefta daryeelka hawlgabayaasha, U hareyaasha, liiltirka Shaqaalaha iyo dhammaan hantida uu maagaliyo Sanduuqa Hawlgabka Shaqaalaha Rayidka Dawladda

ii) Gudoomidda, Ilaalinta iyo la socdo Hantida Sanduuqa Hawlgabka ee la maalgelinayo iyo inuu salka u dhigo dhammaan hawlaha dhaqdhaqaaqa la

xiriira ganacsiga iyo maamulka maalgashiga Sanduuqa Hawlgabka oo ay ku jiraan uruurinta faa'iidooyinka laga helay saami qeybsiga hantida uu maal-geliyo Sanduuqa Hawlgabka.

iii) Waa inuu si joogtaa ula socdaa dhammaan dhaqdhaqaaqa xisaabaadka ganacsiga, maalgashiga iyo faa'iidada saamiyada iyo wax kasta oo la xiriira wax kala iibsiga maalgashiga hantida sanduuqa hawlgabka

iv) Warbixin joogta ah ka siiyo Guddiga Korjoogtaynta iyo Agaasimaha Guud isagoo la socodsiinayo dhammaan arrimaha la xiriira hantida sanduuqa hawlgabka ee uu wakiilka uga yahay la socodkeeda iyo ilaalinteeda.

v) In uu sameeyo falanqayn xisaabeed ku saabsan maalgashiga iyo faa'iidada laga filayo inay kasoo laabato maalgashiga Hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo ilaalinteeda, sidoo kalena, in uu warbixin 3 (seddex) billoodle ah ama marka loo baahdo ka siiyaa Agaasimaha Guud iyo Guddiga Korjoogtaynta dhammaan xogaha iyo macluumaadka la xiriira maalgashiga iyo ilaalinta hantida sanduuqa hawlgabka.

vi) Fulinta go'aannada, qorsheyaasha iyo hawlaha ay meel-mariyaan ama ansxiyaan Guddiga Korjoogtaynta Sanduuqa Hawlgabka ee khuseeya maalgashiga hantida sanduuqa hawlgabka shaqaalaha Dawladda.

j) Ilaaliyaha sanduuqa hawlgabka waa in si joogta ah u ilaaliyaa dhammaan hantida sanduuqa hawlgabka, isagoo fulinaya go'annaanada Guddiga Korjoogtaynta Sanduuqa Hawlgabka. Ilaaliyaha sanduuqa hawlgabka, waxaa ka reeban in uu si shakhsi ah, dangaar ah uga faa'iidaysto, u isticmaalo hantida hawlgabka ee uu mas'uulka ka yahay isagoo ku raadinaya dano dhaqaale ama wax kastaoo saameyn ku yeelan kara go'aan qaadashada ilaaliyaha sanduuqa.

## 12) Magacaabista iyo Waajibaadka Agaasimaha Maaliyadda Sanduuqa Hawlgabka:

b) Haddii wax maalgashi ah lagu sameynayo hantida Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha rayidka Dawladda oo aan ka ahayn Siyaasadda Maalgashiga Dawladda Federaalka Soomaaliya ay qaadatay si waafaqsan sida lagu xusay faqradda(10)(d)(i) ee qodobkan ama ku keydsiga/dhigasho bankiyada Soomaaliya gudaheeda ah sida lagu xusay faqradda (10)(d)(ii) ee Qodobkan, Guddiga Korjoogteynta Hantida Sanduuqa Hawlgabka waa inuu sameeyaa dhaqan-galiyaana siyaasadda maalgashiga, sidoo kalena uu raadiyo talo bixinada maal-gelineed oo ku saleysan mihnad yaqaanimo. Marka ay timaado maalgelinta Sanduuqa Hawlgabka, Guddiga Korjoogteynta waxaa uu awood u leeyahay inuu magacaabo Maareeye ama Maareyeyaasha Maaliyadeed ee Hantida Sanduuqa Hawlgabka iyadoo loo marayo habka shaqo qorista oo tartan daah furan ah kuwaas oo laga qaadan karo gudaha shaqaalaha rayidka Dawladda amaba laga keeni karo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

banaanka.

t) Waajibaadka Maareeyaha Hantida Sanduuqa Hawlgabka waxaa ka mid ah:
   i) dabaqida ama adeegsiga, maareynta iyo la socodka dhammaan ama qeyb ahaan hantida sanduuqa sida lagu oggolaaday siyaasadda maalgelinta ee sanduuqa.

   ii) inuu maalgeliyo Hantida Sanduuqa Hawlgabka si waafaqsan siyaasadda maalgashiga ama qodobbada Xeerka Maalgelinta Sanduuqa Hawlgabka haddii la dhaqangeliyo.

   iii) in uu warbixin joogta ah siiyo Guddiga Korjoogtaynta iyo Agaasimaha Guud ee Sanduuqa Hawlgabka Shaqaalaha Rayidka Dawladda macluumaadyada ku saabsan istiraatijiyadda maalgashiga, odoraska laga filayo faa'iido soo celinta maalgelinta iyo halbeegyada kale ee tilmaameyaasha u ah horumarka iyo waxqabadka hawlaha maalgalinta.

   iv) ka baaraandagidda dhammaan arrima maalgashiga, iyadoo lala kaashanayo lana marsiinayo Ilaaliyaha Sunduuqa Hawlgabka.

   v) in uu qabto hawl kasta oo kale uu loogu xilsaaray hagayaal kale oo ayuu soo saarto Sanduuqa Hawlgabka.

j) Maareeyaha Sanduuqa waa in loo magacaabaa si waafaqsan heshiis waana inuu ilaaliyaa raasamaal maalgashiga ee Sanduuqa Hawlgabka, bixiyana damaanad qaad ku filan iyo caymis ka dhan ah khatarta hawlgalineed ee ka dhalan karta arrimaha maalgashiga, iyadoo la raacayo sida ay go'aamiyaan Gudigga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka & Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

x) Maamulaha Sanduuqa Hawlgabka waxaa looga baahan yahay inuu si xirfadaysan u odoroso, una doorto si uu u kordhiyo nooca ugu faa'iido soo celinta sarreeya maalgashiga Sanduuqa Hawlgabka, si waafaqsan Qodobbada Sharcigan, Siyaasadda maalgashiga ee Hantida Sanduuqa iyo Xeernidaamiyeyaasha Saduuqada Hawlgabka Shaqaalaha Dawladda.

## CUTUBKA AFARAAD
## QODOBBO QUBANE AH

### Qodobka 14aad
### Araajida Daryeelka Hawlgabka

1) Go'aanka gaarista daryeelka:

   b) marka ka qeybgale ama u hare uu ka codsado daryeel maamulka Sanduuqa Hawlgabka, maamulka Sanduuqa Hawlgabku waa in uu si qoraal ahaan ku ogeysiiyaa natiijada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

codsade kasta muddo 14 (toban iyo afar) maalmo shaqo ah gudahood, laga billaabo maalinta qabashada arjiga.

t) haddii maamulka Sanduuqu uu arjiga u diido dukumiinti ka maqan dartiis, maamulka Sanduuqa wuxuu codsadaha iyo hay'adda ay khuseyso qoraal ku wargelinayaa 14 (toban iyo afar) maalmo shaqo ah gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta arjiga la qabtay. codsaduhu sanduuqa ayuu xogwaraysan karaa inta aan muddadaas la dhaafin.

j) Hay'adda Sanduuqa Hawlgabku waxay soo saaraysaa shuruudaha araajida iyo habraacyadooda ugu dambeyn muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah, laga billaabo dhaqangalka Sharcigan, Golaha Wasiirraduna soo saaro Xeernidaamiyeyaasha Sharcigan.

2) Go'aaminta da'da:

b) qof kasta oo loo qoro shaqada Dawladda, inta uusan billaabin shaqada, waa in uu keenaa caddayn qoraal ah oo uu ku caddaynayo taariikhda dhalashada, isagoo keenaya shahaado dhalasho ama dokumeenti kale oo la aqoonsan yahay oo xaqiijinaya taariikhdiisa dhalashada.

t) haddii la caddeynwaayo taariikhda dhalasho ee shaqaale Dawladeed, maamulka Sanduuqa Hawlgabku wuxuu aqbalayaa shahaadada qiimaynta da'da ee ay soo saareen Guddi Dhakhaatiir ah oo aqoon u leh.

3) Racfaan qaadashada:

b) Dadka ka cabanaya go'aannada maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka, waxay racfaan u qaadan karaan Guddi Racfaan oo joogto ah oo ay magacaabaan Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka.

t) Racfaan kasta waa in go'aan looga gaaro muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah laga billaabo qabashada arjiga racfaanka.

j) Go'aannada Guddiga Joogtada ah ee Racfaanka kamadambeys ayey ka noqonayaan dhanka Sanduuqa, waxaase racfaan looga qaadan karaa maxkamad awoodda u leh arrinkaas.

## Qodobka 15aad
## Ka qeybgale la waayey

1) Iyadoo aan loo eegeyn waxkasta oo xeer kale ah ee arrintan lid ku ah, haddii la xaqiijiyo in Ka qeybgale la waayo muddo 3 (saddex) sano ah, isla markaasna dadkii ay ahayd sida caadiga ah in haddii uu noolyahay ay war ka hayaan aanay muddadaas war ka helin, waxaa loo aqoonsanayaa inuu dhintay, waloow taas la burin karo, waxaana loo raacayaa daryeelka qodobbada Sharcigan.

## Qodobka 16aad
## Waayitaanka iyo Hakinta Daryeelka Hawlgabka

1) Haddii shaqaale Dawladeed oo Sharcigan loogu oggolaaday daryeel hawlgab, ay Maxkamad awood u leh xabsi kamadambeys ah ku xukunto, iyadoo cuskaneysa dambiyada lagu xusay qodobka 9aad faqradda (1) ee Sharcigan, geysashada dambiyadaas dardeed isagoo kujira shaqada Dawladda, wuxuu waayayaa daryeelka hawlgabka.

2) Haddii shaqaale Dawladeed oo hawlgab loogu oggolaaday si waafaqsan Sharcigan, lagu xukumo dembi kama dambays ah oo ka dhan ah qarannimada Dawladda Soomaaliya, iyadoo loo cuskaday Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed oo ciqaabtiisu tahay dil, xabsi daa'in, ama xabsi 10 (toban) sano ah iyo wixii ka badan, wuxuu isla markaaba waayi doona xaddiga lacageed ee ku xusan qodobka 12aad faqraddiisa 2aad ee sharcigan.

3) Haddii shaqaale Dawladeed oo loogu oggolaaday daryeel hawlgab si waafaqsan Xeekan, ay maxkamad awood u leh xabsi ugu xukunto dambi aan ahayn kuwa ku xusan faqradda (2) ee Qodobkan, haddii xabsigaasi uu keenayo in shaqaalahaasi uu si kumeelgaar ah muddo ka maqnaado shaqada Dawladda sida uu qabo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, sanduuqa hawlgabku wuxuu si kumeelgaar ah uga joojinayaa daryeelka hawlgabka shaqaalahaas rayidka ah inta uu ku jiro xabsiga ama ay dhammaanayso muddadii loo cayimay.

## Qodobka 17aad
## Diiwaangelinta iyo Bixinta Dhigaalka Hawlgabka

1) Dhigaalka hawlgabka: Si waafaqsan Sharcigan, shaqaale kasta oo rayid ah waxa waajib ah in laga jaro mushaarkiisa dhigaal hawlgab bil kasta, laguna shubo Xisaabta Sanduuqa Hawlgabka ee Bankiga Dhexe, sidoo kale, Dawladda waxaa waajibku ah in ay ku shubto Xisaabta Sanduuqa Hawlgabka ee Bankiga Dhexe dhigaal hawlgab uu dhigma bil kasta inta shaqaalaha laga jaray dhigaal kaas oo ay maamulayso Hay'adda Sanduuqa Halwgabka.

2) Bixinta daryeelka hawlgabka: Golaha Wasiirrada wuxuu soo saarayaa xeernidaamiyeyaal iyo habraacyo lagu maamulo bixinta daryeelka Hawlgabka iyo liiltirka muddo 90 (sagaashan) maalmood gudohooda ah, laga billaabo dhaqangalka Sharcigan, isagoo qeexaya:

   b) Nidaam iyo qaabab ay Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka ay dhigaalka Dawladda iyo kan Ka qeybgalayaasha bil kasta ugu gudbinayso Xisaabta Sanduuqa Hawlgabka ee Bankiga Dhexe Soomaaliya.

   t) Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda waxaa ay Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka la wadaagayaan dhammaan xogta iyo macluumaadka khuseeya

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

hawlgabeyaasha. Qaabka macluumaad wadaaggu wuxuu noqon karaa mid warqad ama danab ah (electronic).

j) Biixinta ugu horeysa ee daryeel hawlgab ama liiltir sida Sharcigani qabo waa inaysan kaddib marin muddo lix bilood ah oo ka bilaabanaysa taariikha uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan.

3) Xog keydinta iyo xusuus dhowrka sanduuqa hawlgabka:

b) Galalka gaarka ah ee hawlgablayaasha waxaa la gelinayaa xog sugan oo la xiriirta dhigaal lagu shubayo xisaabta sanduuqa iyadoo loo kala soocayo ghigaalka ka qeybgalaha laga jaray iyo kan Dawladdu bixisay. Sanduuqa hawlgab ku wuxuu ku tiirsanaanayaa xogta iyo macluumaadka ay bixiyaan hay'adaha Dawladda, gaar ahaan Guddiga Dhigaalka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda.

t) Wasaaradda Maaliyadda iyo dhammaan hay'adaha kale ee Dawladda waxa laga rabaa inay raacaan Xeernidaamiyeyaasha Maamulka Sanduuqa iyo habraacayada la socda si maamulka loo hagaajiyo.

4) Korjoogteynta iyo baarista Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka: Guddiga Korjoogteynta Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka wuxuu u idman yahay, mas'uulna ka yahay in uu baaro, qiimeeyo in maamulka Hay'adaha Sanduuqa Hawlgabka ay u hirgelinayaan bixinta dhigaalka iyo daryeelka si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 18aad
## Oggolaanshaha Hawlgabka iyo Liiltirka

1) Dhammaan tallaabooyinka la xiriira arrimaha hawlgabka iyo liiltirka ee Sharcigan lagu xusay, waxaa ogolaanaya madaxda hay'adaha kala duwan ee awoodda u leh si waafaqsan Sharcigan.

2) Sanduuqa hawlgabku wuxuu billaabayaa bixinta daryeelka hawlgabka muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa marka uu Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa Hawlgabka ansixiyo qoondada daryeelka hawlgabka ugu jirta miisaaniyad sannadeedka Dawladda ee la ansixyey.

3) Lacagta daryeelka hawlgabka iyo liiltirkaba waxaa kaliya oo lagu bixin karaa xisaabaha bankiyada (bank accounts) iyo xawilaadaha danabeysan, marnaba lama oggolo bixinta lacag caddaan ah.

4) Taariikhda dhaqangalka hawlgabka waxay noqonaysaa marka uu ka qeybgaluhu soo buuxiyo shuruudaha Sharcigan lagu xusay, daryeelka hawlgabkii baaqday waxaa dib loo bixinayaa marka uu ka qeybgalahu muteysto.

## Qodobka 19aad
## Wareejin ama Magacaabid Daryeel Hawlgab iyo Liiltir

1) Looma wareejin karo, loomana magacaabi karo daryeel hawlgab ama liiltir cid kale oo aan Sharcigan gudihiisa loogu oggolaan.

2) Daryeelka hawlgab kaas ama liiltirkaas lama geyn karo Maxkamadaha si loogu qabsado ama loogu gudo dayn ama wax kasta oo sheegasho ah oo ay Dawladda ama dad gaar ahi ku leeyihiin muteysataha.

## Qodobka 20aad
## Tilmaamaha Sicir Bararka

1) Hawlgab ama daryeel U hare kasta oo Sharcigan loogu oggolaaday shaqaale Dawladeed waa in sannad kasta lala kordhiyo kororka maciishadda hadba sida ay tahay dib u eegista Bankiga Dhexe ee sannadlaha ah, haddii ay suurtagal u tahay Dawladda dhaqaale ahaan.

2) Kororkaas waxay ku xirnaan doontaa in Baarlamaanku ku ansixiyo qoondada miisaaniyad sannadeedka Sanduuqa Hawlgabka.

3) Kororkaas waxa la jaangoynayaa ugu dambayn bisha Juun ee sannad kasta, iyadoo lagu saleynayo kororka maciishadda ee sannadkii ka horreeyey, waxaana la dhaqangelinayaa ugu dambayn bisha Jannaayo ee sannadka xiga.

# CUTUBKA SHANAAD
# QODOBBO GUNAANAD AH

## Qodobka 21aad
## Soo saarista Xeernidaamiyeyaal iyo Awaamiir

1) Wasiirka Wasaaradda Shaqada wuxuu soo saarayaa Xeernidamiyeyaal lagu dhaqangelinayo Xeerka Hawlgabka iyo Liiltirka

2) Haddii ay lagama maarmaan noqoto, Maamulka Hay'adda Sanduuqa Hawlgabka wuxuu soo saarayaa tallaabooyin ama ammarro ku habboon oo la xariira hirgelinta Xeernidaamiyeyaasha Sharcigan.

## Qodobka 22aad
## Baabi'in

Waxa la baabi'iyey sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 23aad
## Dhaqangalka

Sharcigani wuxuu dhaqangalayaa markuu ansixiyo Baarlamaanka JFS, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

**Lifaaq 1aad: Keydka sanadaha adeegii hore oo lagu saleynayo sanadka dhalashada.**

**F.G:** Shaxdan hoose waxay tixraacaysaa Qodobka 5aad(2)(b) waxaana si buuxda loogu faahfaahin doonaa xeer-nidaamiyeyaasha sharcigan marka la dhaqan-geliyo.

| **Sanadka dhalashada (Year of Birth)** | **Tirada sanadaha loo xisaabayo adeegii hore (Years of Past Service Credit)** |
|---|---|
| 1956 ama ka hor or Earlier | 15 |
| 1957 | 14 |
| 1958 | 13 |
| 1959 | 12 |
| 1960 | 11 |
| 1961 | 10 |
| 1962 | 9 |
| 1963 | 8 |
| 1964 | 7 |
| 1965 | 6 |
| 1966 | 5 |
| 1967 | 4 |
| 1968 | 3 |
| 1969 | 2 |
| 1970 | 1 |
| 1971 | 0 |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 MAR 2024
BY: SHACAB SAXIIX

**SHARCI LR. 21** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**

**SHARCIGA KU BIIRISTA URUR GOBOLEEDKA DHAQAALAHA BARIGA AFRIKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0492/B11/24**, ku taariikheysan **10/02/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Heshiiska Ku Biirista Urur Goboleedka Dhaqaalaha Bariga Afrika''.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Ku Biirista Urur Goboleedka Dhaqaalaha Bariga Afrika.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-31-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Salad
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**






# HESHIISKA KU BIIRISTA

# EE

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# AY UGA MID NOQONAYSO

# HESHISKA DHISMAHA BULSHADA BARIGA AFRIKA

**BULSHADA BARIGA AFRIKA IYO JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA:**

**WAXAY KU MIDOOBEEN** rabitaankooda ah inay ka midho-dhalinta ujeedooyinka Heshiiska Aasaaska Bulshada Bariga Afrika ("Heshiiska");

**WAXAA LAGU GO'AAMIYAY** iyadoo la eegayo ahmiyadda heshiiska si la xoojiyo xiriirka dhaqaale, bulsho, dhaqan, siyaasadeed, tignoolajiyada iyo kuwa kale ee horumarinta, dheellitirka iyo horumarka waara ee Jamhuuriyadda Midowgga ee Tanzania, Jamhuuriyadda Kenya, Jamhuuriyadda Uganda, Jamhuuriyadda Rwanda, Jamhuuriyadda Burundi, Jamhuuriyadda Koonfuurta Suudaan, Jamhuuriyadda Dimuqraaddiga ah ee Congo iyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyada oo loo marayo samaynta Midowga Kastamka Bariga Afrika iyo Suuqa Guud oo ah marxalad kale oo muhiim ah oo loo marayo , ka dibna Midowga Lacagta. iyo ugu dambayntii Siyaasad mideysan;

**ANAGOO TIXGELINAYNA** in qodobka 3aad ee heshiiska uu aqoonsan yahay in dalal aan ahayn Jamhuuriyadda Midowday ee Tanzania, Jamhuuriyadda Kenya, Jamhuuriyadda Uganda, Jamhuuriyadda Ruwaanda, Jamhuuriyadda Burundi, Jamhuuriyadda Koonfuurta Suudaan iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Kongo in la siiyo xubinnimada Bulshada Bariga Afrika Shir Madaxeedka Madaxda EAC;

**IYADOO LA XUSUUSTO IN** Shirkii 23-aad ee Caadiga ahaa ee Madaxda Waddamada Bariga Afrika ee qabsoomay 24-kii Noofambar 2023 lagu go'aamiyay in Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay xubin buuxda ka noqoto Bulshada Bariga Afrika, waxaana loo magacaabay Guddoomiyaha Shir Madaxeedka in uu soo gabagabeeyo Heshiiskii Ku biirista Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**IYADOO LA AQOONSANYAHAY** in Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay xubin ka noqoto Bulshada Bariga Afrika ay lagamamaarmaan u tahay dhamaystirka heshiiska ka mid noqoshada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heshiiska Aasaaska Bulshada Bariga Afrika;

**WAXAY GO'AANSADEEN** inay ku dhisaan heshiis guud shuruudaha ku biirista iyo in la gaaro tan, waxay u qoondeeyeen inay noqdaan kuwa awood buuxda leh in ay Saxiixaan:

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA KOONFUR SUUDAAN SALVA KIIR MAYARDIT, AHNA GUDDOOMIYAHA SHIRKA BULSHADA BARIGA AFRIKA EE MADAXDA GOBOLEEDKA IYO MADAXWEYNE XASAN SHEEKH MAXAMUUD MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA iyagoo u adeegsaday awoodoodii oo dhan si wanaagsan iyo qaab saxan;

**WAXAY KU HESHIIYEEN SIDA SOO SOCOTA:**

## QODOBKA 1AAD
## FASIRAADDA

Heshiiskan, haddi si kale loo tilmaamin macnaha guud uu leeyahay waa -

**"Ku biiris"** waxaa loola jeedaa talaabada uu waddanku ku noqonayo qayb ka mid ah ururu horeba uga dhaqan gashay Waddamada Xubnaha ka ah;

**"Wada-hawlgalayaasha"** waxaa loola jeedaa dhammaan sharciyada, siyaasadaha, hab-maamuuska, heshiisyada, mashaariicda, barnaamijyada, mawqifyada lagu heshiiyey iyo ficillada Bulshada Bariga Afrika ee taariikhda la saxiixo heshiiskan;

**"Bulshada"** waxay leedahay micnaha loo qoondeeyay sida ku cad qodobka 1aad ee heshiiska aasaaska bulshada Bariga Afrika;

**"Dawladaha Qeybta ka ah"** waxa ay leeyihiin macnaha lagu sheegay qodobka 1-aad ee Heshiiska Dhismaha Bulshada Bariga Afrika;

**"Awood buuxda"** waxa loola jeedaa qof si buuxda loogu oggolaaday inuu matalo dawladdiisa ama hay'adaha dawladda dhexdooda;

**"Heshiiska"** waxa loola jeedaa Heshiiskii Aasaaska Bulshada Bariga Afrika ee la ansixiyay 30kii Noofambar 1999 kaas oo dhaqan galay 7dii Luulyo, 2000;

**"Heshiiskan"** waxaa loola jeedaa heshiiska ka mid noqoshada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Heshiiska Dhismaha Bulshada Bariga Afrika.

## QODOBKA 2AAD
## KU BIIRIS

1. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay halkan ku aqbashay in ku biirto heshiiska aasaaska bulshada Bariga Afrika, dhammaan hab-maamuuska heshiiska, heshiisyada saddex geesoodka ah iyo is-afgaradka la socdo heshiiska.

2. Shuruudaha ka mid noqoshada heshiiska, heerarka wada shaqaynta, ka mid noqoshada wada-hawlgalayaasha bulshada Bariga Afrika waxay ku cad yihiin heshiiskan iyo lifaaqa heshiiskan oo noqon doona qayb muhiim ah oo ka mid ah heshiiskan.

3. Qodobbada khuseeya xuquuqda iyo waajibaadka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo awoodaha iyo awoodaha Hay'adaha Bulshada Bariga Afrika ee ku xusan heshiiska ayaa lagu dabaqayaa heshiiskan.

4. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in muddo laba iyo toban bilood gudahood ah laga bilaabo taariikhda la saxiixo heshiiskan ay ku sugto dhaqan-gelinta iyo dhaqan-gelinta sharci ee lagama maarmaanka u ah dhaqan-gelinta heshiiska, gaar ahaan:
(a) in la siiyo bulshada awoodda sharci iyo shakhsiyadda looga baahan yahay gudashada shaqadeeda; iyo
(b) In ay u hoggaansamaan shuruucda, xeerarka iyo awaamiirta Bulshada iyo hay'addeeda awoodda sharciga ee gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## QODOBKA 3AAD
## ISKAASHIGA DHANKA SHARCIGA IYO SIYAASADDA

Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya waa in ay aqbashaa oo fulisaa wada-hawlgalayaasha la xiriira wada-shaqeynta dawladaha iskaashiga xagga sharciga iyo arrimaha siyaasadda laga bilaabo taariikhda ku biiritaanka iyo gaar ahaan waxaa lagu dhaqmi doonaa qodobada heshiiska ee la xiriira;

(a) Ujeeddooyinka Bulshada ee ku xusan qodobka 5aad ee heshiiska;

(b) Mabaadi'da aasaasiga ah ee Bulshada sida ku cad qodobka 6aad ee heshiiska; iyo

(c) Mabaadi'da hawlgelinta ee Bulshada sida uu dhigayo qodobka 7aad ee heshiiska.

## QODOBKA 4AAD
## ISKAASHIGA GANACSIGA, MAALIYADDA, MAALGASHIGA, ARRIMAHA LACAGTA IYO MAALIYADDA

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay aqbashaa oo fulisaa wada-hawlgalayaasha laxidhiidha iskaashiga dawladaha ee ganacsiga, maaliyadda, maalgashiga, lacagta iyo arrimaha maaliyadda laga bilaabo taariikhda dhigaalka nuqulka ansixinta heshiiskan, iyada oo ku xidhan Nidaamyo gaar ah oo lagu qeexay Lifaaqa Heshiiskan, oo ay ku jiraan isla ganacsiga ka dhaxeeya Jamhuuriyadda Midowday ee Tansaaniya, Jamhuuriyadda Kenya, Jamhuuriyadda Uganda, Jamhuuriyadda Ruwaanda, Jamhuuriyadda Burundi, Jamhuuriyadda Koonfurta Suudaan iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Congo oo ku salaysan is-dhaafsi laba dhinac ah.

## QODOBKA 5AAD
## ISKAASHIGA KAABAYAASHA DHAQAALAHA IYO ADEEGYADA

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay aqbashaa oo ay fulisaa wada-hawlgalayaasha laxiriirta iskaashiga kaabeyaasha dhaqaalaha iyo adeegyada ee Dowladaha Iskaashiga wadaaga ah laga bilaabo taariikhda ku biirista, iyadoo la raacayo qabanqaabada gaarka ah ee ku xusan lifaaqa heshiiskan.

## QODOBKA 6AAD
## ISKAASHI DHINACA WAXSOOSAARKA

Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya waa in ay aqbashaa oo ay fulisaa wada-hawlgalayaasha la xiriirta iskaashiga dawladaha ee dhinacyada wax soo saarka laga bilaabo taariikhda ku biirista, iyada oo la raacayo qabanqaabada gaarka ah sida ku cad lifaaqa heshiiskan.

## QODOBKA 7AAD
## ISKAASHIGA DHINACA BULSHADA

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay aqbashaa oo fulisaa wada-hawlgalayaasha la xiriira iskaashiga wadashaqaynta dawladaha ee qaybaha bulshada laga bilaabo taariikhda ku biirista, iyada oo la raacayo qabanqaabada gaarka ah sida ku cad lifaaqa heshiiskan.

## QODOBKA 8AAD
## KA-QAYBGALKA XUBNAHA, HAY'ADAHA, MASHAARIICDA IYO BARNAAMIJYADA

Iyadoo la raacayo waajibaadka iyo shuruudaha khuseeya Dawladaha xubnaha ah ee Bulshada Bariga Afrika, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

ayaa laga bilaabo taariikhda dhigaalka nuqulka ansixinta heshiiskan, waxay xaq u yeelan doontaa inay ka qaybgasho:

(1) Xubnaha iyo Hay'adaha Bulshada ee lagu dhisay qodobka 9aad ee heshiiska;

(2) Mashaariicda iyo barnaamijyada Bulshada Bariga Afrika sida lagu sheegay Istaraatiijiyadda Horumarinta Bulshada Bariga Afrika ee 6aad (2021/22 - 2025/26) iyo gaar ahaan mashaariicda iyo barnaamijyada la xidhiidha:

(a) Iskaashiga xagga ka qaadista xanibaadaha Ganacsiga iyo Horumarintooda;

(b) Iskaashiga Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha;

(c) Wada-shaqeynta Halbeegga, Xaqiijinta Tayada, Cabirka shaybaarada iyo Tijaabada loo marayo

(d) Iskaashiga Lacagta iyo Maaliyadda;

(e) Iskaashiga kaabayaasha iyo adeegyada;

(f) Iskaashiga Horumarinta Kheyraadka Aadanaha, Sayniska iyo Teknolojiyada;

(g) Iskaashi qaadashada tallaabooyinka lagu gaadhayo Dhaqdhaqaaqa Xorta ah ee Dadka, Shaqada, Adeegyada iyo Xaqa Aasaasiga ah iyo Deganaanshaha;

(h) Iskaashiga Beeraha iyo Sugnaanta Cuntada;

(i) Iskaashiga Deegaanka iyo Maareynta Khayraadka Dabiiciga ah;

(j) Iskaashiga Dalxiiska iyo Duurjoogta;

(k) Iskaashiga Caafimaadka, Hawlaha Bulshada iyo Dhaqanka iyo Horumarinta Dadka;

(l) Iskaashiga Arrimaha Siyaasadda;

(m) Iskaashiga dhinaca Sharciga iyo Garsoorka; iyo

(n) Iskaashiga ka-qaybgalka iyo horumarinta hay'adaha gaarka ah iyo bulshada rayidka ah.

## QODOBKA 9AAD
## WAAJIBAADKA DHAQAALE

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in laga bilaabo taariikhda la xareeyo nuqulka ansixinta heshiiskan ay waajib ku noqon doonto bixinta maaliyadeed iyo miisaaniyadda ee shuruudaha ah si la mid ah xubnaha kale si waafaqsan heshiiska.

## QODOBKA 10AAD
## ANSIXINTA IYO KAYDINTA

1. Heshiiskan waxa ansixinaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan shuruudaheeda dastuuriga ah.

2. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay Nuqul ansaxsan ee heshiiskan u gayn doontaa Xoghayaha Guud ee Bulshada Bariga Afrika muddo lix (6) bilood gudahood ah oo ka bilaabmaysa maalinta la saxeexo heshiiskan.

## QODOBKA 11-AAD
## DHAQAN GALKA

Heshiiskani waxa uu dhaqan galayaa maalinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay dhigto nuqul u dhamaystiran ansixinta Xafiiska Xoghayaha Guud ee Bulshada Bariga Afrika.

## QODOBKA 12AAD

## DIIWAANGELINTA

Xoghayaha Guud waa in uu heshiiskan ka diiwaan geliyo Midowga Afrika, Qaramada Midoobay iyo ururada kale ee Golaha Wasiirada ee Bulshada Bariga Afrika ay go'aamin karaan.

**Waxaa lagu Saxiixay ENTEBBE ee Jamhuuriyadda Uganda maanta oo ah 15-ka Diseembar sanadka laba kun iyo saddex iyo labaatanaad.**

# LIFAAQA

# WADA-HAWLGALAYAASHA

wada-hawlgalayaasha ee Bulshada Bariga Afrika waa in ay ku jiraan dhammaan sharciyada, siyaasadaha, hab-maamuuska, heshiisyada, mashaariicda, barnaamijyada, mawqifyada lagu heshiiyey iyo ficilada Bulshada Bariga Afrika marka la eego taariikhda saxeexa heshiiskan oo ay ku jiraan kuwan soo socda:

## 1.0 TREATY FOR THE ESTABLISHMENT OF THE EAST AFRICAN COMMUNITY

### 1.1. Acts of the East African Community

(i) The East African Community Appropriation Act, 2002
(ii) The Community Emblems Act, 2003
(iii) The Acts of the East African Community Act, 2003
(iv) The Laws of the Community (Interpretation) Act, 2003
(v) The East African Community Appropriation Act, 2003
(vi) The East African Legislative Assembly (Powers and Privileges) Act, 2003
(vii) The East African Community Customs Management Act, 2004
(viii) The East African Community Appropriation Act, 2004
(ix) The East African Community Immunities and Privileges Act, 2004
(x) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2005
(xi) The East African Community Appropriation Act, 2005
(xii) The East African Community Standardization, Quality Assurance, Metrology and Testing Act, 2006
(xiii) The East African Community Competition Act, 2006 as amended.
(xiv) The East African Community Appropriation Act, 2006
(xv) The East African Community Appropriation Act, 2007
(xvi) The Summit (Delegation of Powers and Functions) Act, 2007
(xvii) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2007
(xviii) The Lake Victoria Transport Act, 2008
(xix) The East African Community Customs Management (Amendment) Act, 2007
(xx) The East African Community Joint Trade Negotiations Act, 2008
(xxi) The East African Community Customs Management (Amendment) Act, 2008
(xxii) The East African Community Budget Act, 2008
(xxiii) The East African Community Appropriation Act, 2008

(xxiv) The East African Community (Supplementary) Appropriation Act, 2008
(xxv) The Inter-University Council for East Africa Act, 2008
(xxvi) The Acts of the East African Community (Amendment) Act, 2009
(xxvii) The East African Community Appropriation Act, 2009
(xxviii) The East African Community Customs Management (Amendment) Act, 2009
(xxix) The Community Emblems (Amendment) Act, 2008
(xxx) The Administration of the East African Legislative Assembly Act, 2012
(xxxi) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2010
(xxxii) The East African Community Appropriation Act, 2010
(xxxiii) The East African Community Competition (Amendment) Act, 2010
(xxxiv) The East African Legislative Assembly Elections Act, 2012
(xxxv) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2011
(xxxvi) The East African Community Appropriation Act, 2011
(xxxvii) The East African Parliamentary Institute Act, 2011
(xxxviii) The East African Community Customs Management (Amendment) Act, 2011
(xxxix) The East African Civil Aviation Safety and Security Oversight Agency Act, 2009
(xl) The Community Emblems (Amendment) Act, 2012
(xli) The East African Community Customs Management (Amendment) Act, 2012
(xlii) The East African Community HIV & AIDS Prevention and Management Act, 2012
(xliii) The East African Community Conflict Management Act, 2012
(xliv) The East African Community Appropriation Act, 2012
(xlv) The East African Community One Stop Border Post Act, 2013
(xlvi) The East African Community Vehicle Load Control Act, 2013
(xlvii) The East African Community Customs Management (Amendment) (No. 2) Act 2013
(xlviii) The East African Community Supplementary Appropriation (No. 2) Act, 2012
(xlix) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2013
(l) The East African Community Appropriation Act, 2013
(li) The East African Community Supplementary Appropriation Act, (No. 2) 2014
(lii) The East African Community Appropriation Act, 2014
(liii) The East African Community Civic Education for Integration Act, 2019
(liv) The East African Community Elimination of Non-Tariff Barriers Act, 2017
(lv) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2015
(lvi) The East African Community Appropriation Act, 2015

(lvii) The East African Community Customs Management (Amendment) Act, 2015
(lviii) The East African Community Customs Management (Amendment) Act, 2016
(lix) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2016
(lx) The East African Community Appropriation Act, 2016
(lxi) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2017
(lxii) The East African Community Appropriation Act, 2017
(lxiii) The East African Community Supplementary Appropriation Act, 2018
(lxiv) The East African Community Oaths Act, 2019
(lxv) The East African Community Monetary Institute Act, 2019
(lxvi) The Lake Victoria Basin Commission Act, 2021
(lxvii) The East African Community Appropriation Act, 2021
(lxviii) the East African Community Supplementary Appropriation Act, 2021
(lxix) the East African Community Supplementary Appropriation (No. 2) Act, 2021
(lxx) the East African Competition Authority (Amendment) Act
(lxxi) the East African Community Appropriation Act, 2022
(lxxii) the East African Community Supplementary Appropriation Act, 2022
(lxxiii) the East African Community Supplementary Appropriation (No. 2) Act, 2022

## 1.2. EAC Protocols and Other Tripartite Instruments

(i) Agreement for the Avoidance of Double Taxation and the Prevention of Fiscal Evasion with respect to Taxes on Income
(ii) Protocol on Decision-Making by the Council
(iii) Protocol on Combating Drug Trafficking in the East African Region
(iv) Protocol on Standardization, Quality Assurance, Metrology and Testing
(v) Tripartite Agreement on Road Transport
(vi) Tripartite Free Trade Area Agreement
(vii) Tripartite Agreement on Inland Waterway Transport
(viii) Protocol on the Establishment of the Inter-University Council for East Africa
(ix) East African Community Search and Rescue Agreement
(x) Protocol for the Sustainable Development of Lake Victoria Basin
(xi) Protocol on the Establishment of the East African Community Customs Union
(xii) Protocol on Environment and Natural Resources
(xiii) Protocol on the Establishment of the East African Science and Technology Commission

(xiv) Protocol on the Establishment of the East African Civil Aviation Safety and Security Oversight Agency
(xv) Protocol on the Establishment of the East African Kiswahili Commission
(xvi) Protocol on the Establishment of the East African Health Research Commission
(xvii) Protocol on the Establishment the East African Community Common Market
(xviii) Protocol on the Establishment the East African Community Monetary Union
(xix) Protocol on Cooperation in ICT Networks
(xx) Protocol on Cooperation in Defence Affairs
(xxi) Protocol on Peace and Security
(xxii) Protocol on Foreign Policy Coordination.
(xxiii) Protocol on Cooperation in Meteorological Services
(xxiv) Protocol to Operationalize Extended Jurisdiction of the East African Court of Justice
(xxv) Protocol on Sanitary and Phyto sanitary Measures
(xxvi) Protocol on Privileges and Immunities of the East African Community.

**1.3. Memoranda of Understanding:**

(i) Memorandum of Understanding on Enhancement of Civil Aviation Safety
(ii) Memorandum of Understanding on Co-operation in Defence;
(iii) Memorandum of Understanding of Foreign Policy Co-ordination; and
(iv) Memorandum of Understanding on Cooperation between EAC and the East African Communications Organization.

**2.0 SIXTH (6TH) EAST AFRICAN COMMUNITY DEVELOPMENT STRATEGY (2021/22 – 2025/26)**

**3.0 AGRICULTURE AND RURAL DEVELOPMENT POLICY**

(i) EAC Agricultural and Rural Development Policy
(ii) EAC Agricultural and Rural Development Strategy 2005-2030
(iii) EAC Strategy on Control and Prevention of Transboundary Animal Diseases
(iv) EAC Food and Nutrition Security Policy and Strategy

(v) EAC Food and Nutrition Security Action Plan
(vi) EAC Climate Change Policy,
(vii) EAC Climate Change Strategy
(viii) EAC Climate Change Master Plan 2011-2031
(ix) EAC Summit Declaration on Food Security and Climate Change;
(x) All Instruments/ Strategic Documents Covering EAC Energy Sector.

**4.0 TOURISM AND WILDLIFE AND NATURAL RESOURCES**

(i) EAC Tourism Marketing Strategy 2021 -2025
(ii) EAC Wildlife Conservation and Management Policy
(iii) EAC Strategy to Combat Poaching, Illegal Trade and Trafficking of Wildlife and Wildlife Products
(iv) EAC Protocol on Tourism and Wildlife Management
(v) EAC Protocol on Natural Resources Management

**5.0 EAST AFRICAN INDUSTRIAL DEVELOPMENT STRATEGY**

(i) EAC Leather and Leather Products Strategy and Implementation Roadmap 2020-2030
(ii) EAC Fruits and Vegetables Value Chain Strategy and Action Plan 2021- 2031
(iii) EAC Cotton Textiles, Apparels Strategy and Implementation Roadmap 2020 - 2030

**6.0 JOINT EXPORT AND INVESTMENT PROMOTION STRATEGY**

**7.0 EDUCATION**

(i) Report on the Harmonization of the EA Education Systems and Training Curricula.
(ii) The EAC Pre-Primary Education Strategic Plan.
(iii) The EAC Primary Education Strategic Plan.
(iv) The EAC Secondary Education Strategic Plan.
(v) The EAC Teacher Education Strategic Plan.
(vi) The EAC Technical and Vocational Education and Training (TVET) Strategic Plan.
(vii) The EAC Non-Formal, Adult and Continuing Education Strategic Plan;
(viii) The EAC Special Needs Education Strategic Plan.
(ix) The EAC Pre-Primary Education Harmonization Structures and Frameworks.
(x) The EAC Primary Education Harmonization Structures and Frameworks.
(xi) The EAC Secondary Education Harmonization Structures and Frameworks.

(xii) The EAC Primary Teacher Education Harmonization Structures and Frameworks.
(xiii) The EAC Secondary Teacher Education Harmonization Structures and Frameworks.
(xiv) EAC ICT Integration in Education (E-Learning) Strategic Plan 2015-2020.
(xv) Criteria for identifying prospective Centres of Excellence.
(xvi) Education Sector response to HIV and AIDS Strategic Plan.
(xvii) Education Sector response to HIV and AIDS Implementation Plan.
(xviii) Education Sector response to HIV and AIDS Resource Mobilization Strategy.

## 8.0 GENDER AND SOCIAL DEVELOPMENT

(i) 2nd EAC Strategic Plan on Gender, Youth, Children, Persons with Disabilities, Social Protection and Community Development (2012-2017) as an operational plan for the EAC Gender and Community Development framework, 2006 and the 5th Development Strategy – 3rd Strategic Plan under development
(ii) EAC Policy on Persons with Disabilities, 2012
(iii) The Consultative Dialogue Framework for Private Sector and Civil Society participation in the EAC integration process, 2012
(iv) EAC Social Development Policy Framework, 2013
(v) EAC Framework for Gender and Social Development Outcome Indicators for EAC Development Strategy (2011-2016) – to be updated in line with the 6th Development Strategy
(vi) EAC Youth Policy, 2013
(vii) EAC Youth Peace and Security Strategy and Implementation Plan
(viii) EAC Youth Peace and Security Platform
(ix) EAC Child Policy, 2016
(x) Minimum Standards for Comprehensive for Children and Young People in the EAC
(xi) Framework for Strengthening Child Protection Systems and Community Mechanisms in the EAC
(xii) EAC Gender Policy, 2018
(xiii) Simplified Guide for Micro and Small-Scale Women Cross Border Traders and Service Providers within the East African Community & Training Manual
(xiv) Gender Mainstreaming Tools
(xv) Guidelines and Checklists for Gender Mainstreaming in EAC Organs and Institutions

(xvi) Gender Mainstreaming Strategy for EAC Organs and Institutions, 2013.
(xvii) Gender Mainstreaming Handbook
(xviii) Participatory Gender Audit Report for EAC Organs and Institutions, 2013 and 2018.
(xix) EAC Gender and Community Development Framework.
(xx) Bujumbura Declaration on Child Rights and Wellbeing in the East African Community.
(xxi) East African Community Youth Policy.
(xxii) EAC Social Development Policy Framework.
(xxiii) EAC Policy on Persons with Disabilities.
(xxiv) Consultative Dialogue Framework for the Private Sector, Civil Society and Other Interest Groups in the EAC Integration Process

## 9.0 HEALTH SYSTEMS, POLICY & RESEARCH

(i) EAC Regional Health Sector Strategic Plan
(ii) EAC Regional Integrated Population & Environment (PHE) Project.
(iii) East African Community Regional Centres of Excellence (CoE) for Skills and Tertiary Education in Higher Medical and Health Sciences Education; and for Health, Vaccines and Immunization Logistics.

### A. Medicines & Food Safety

a) EAC Regional Pharmaceutical Policy & Strategic Plan
b) EAC Regional Food Safety and Quality Policy
c) EAC Regional Pharmaceutical Manufacturing Plan of Action
d) EAC Harmonized Regulatory Framework for Medicines Regulatory Authorities

### B. Disease Prevention & Control

a) EAC Regional Sexual and Reproductive Health and Rights Strategy
b) EAC Open Health Initiative to Improve Reproductive, Maternal, New-born and Child Health

### C. HIV/AIDS AND Sexually Transmitted Infections (STI's)

a) East African Public Health Laboratory Networking Project (EAPHLNP)
b) East African Integrated Disease Surveillance Network (EAIDSNet)
c) EAC Regional HIV and AIDS Strategic Plan of Action

## 10.0 IMMIGRATION:

The Regional Strategic Framework for e-Immigration 2014/2015 – 2019/2020.

**11.0 INFRASTRUCTURE:**

(i) **10 Years Priority Infrastructure Investment Strategy (Adopted by the Heads of State at their Retreat);**

(ii) **Intermodal Transport Strategy;**

(iii) **Strategic Cooperation Framework Agreement for the EAC Corridors**

(iv) **EAC Transport Strategy and Regional Road Sector Development Program;**

(v) **EAC Transport Facilitation Strategy – 7 Volumes;**

(vi) **EAC Vehicle Load Control Act, 2013;**

(vii) **EAC One-Stop-Border-Post Act, 2013;**

(viii) **Strategic Cooperation Agreement between the EAC, the Northern Corridor Transit Transport Authority (NC-TTCA); the Central Corridor Transit Transport Facilitation Agency (CCTTFA), and the Lamu Port South Sudan Ethiopia (LAPSSET) Corridor Authority.**

**12.0 PRIVATE SECTOR DEVELOPMENT STRATEGY**

**13.0 REPORT OF THE NEGOTIATIONS BETWEEN THE EAST AFRICAN COMMUNITY (EAC) AND THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA (FRS) ON THE ADMISSION OF FRS INTO EAC AND ALL ITS ANEXTURES AS AGREED UPON ON 30TH AUGUST, 2023 IN NAIROBI, KENYA.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:

**SHARCI LR. 22** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**
**SHARCIGA ILAALINTA iyo MAAREYNTA DEEGAANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0494/B11/24**, ku taariikheysan **10/02/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindise Sharciyeedka Ilaalinta iyo Maareeynta Deegaanka''.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Ilaalinta iyo Maareeynta Deegaanka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-32-2024
TAARIIKH: 21-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA AQALKA SARE

# SHARCIGA ILAALINTA IYO MAAREYNTA DEEGAANKA

Muqdisho,
26 Agosto, 2023

## Cutubka 1aad

## Qodobo Guud

### Qodobka 1aad

### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Maareynta Deegaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 2aad

### Qeexidda Ereyada

Si loo fahmo macnaha guud ee sharcigan, Ereyada soo socda waxa ay yeelanayaan macnaha (fasiraadda) ku hor qoran.

1. **Tayada Hawada** waxa loola jeedaa hawadu sida ay tahay marka la cabbiro wasakhda ku jirta sida uu Sharcigani dhigayo.
2. **Baaris** waxaa loola jeedaa baarista curiye ama walxaha si loo ogaado waxa ay ka samaysanyihiin (koobanyihiin) iyo tayadooda, isla markaana la hubiyo saamaynta ay ku yeelan karaan qayb ka mid ah deegaanka. Waxa kale oo ka mid ah baadhista waxyaabaha hawada lagu sii daayo, diiwaangalinta dhawaqa/codka ama gariirka si loo ogaado heerka codka ama gariirku uu gaarsiisan yahay iyo saamaynta uu ku yeelan karo deegaanka.
3. **Deegaan biyood**: waxa loola jeedaa deegaan biyoodka ay ka mid yihiin baddaha, webiyadda, harooyinka, biyaha dhulka hoostiisa, iwm.
4. **Wasakheynta Hawada**: waxaa loola jeedaa badelidda tooska ah ama mid dadban ee lagu sameeyo qaabka dabiiciga ah ee hawada iyadoo lagu sii daynayo qiiq (qaac), gaas, shucaac, ur ama wasakh kale.
5. **Dhuxul**: waxaa loola jeedaa dhirta la shido is la markaana loo adeegsado tamar wax lagu karsado.
6. **Kiimiko:** waxaa loola jeedaa nooc kasta oo walxaha kiimikooyinka ah, kuwaas oo la warshadeeyay ama si dabiiciya loo sameeyay, waxaana ka mid ah kiimikooyinka warshadaha, sunta cayayaanka, bacriminta iyo daawooyinka.
7. **Dastuur:** waxa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
8. **Maxkamad:** waxa loola jeedaa maxkamadaha ku xusan qodobka 86aad ee Sharcigan.
9. **Farsameynta Qashinka:** waxa loola jeedaa ururinta, qaadidda, kaydinta, farsamaynta iyo in qashinka la geeyo goobta loogu tallo galay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

10. **Hannaan Deegaameedka Dabiiciga ah** (Ecosystem) waxaa loola jeedaa is-dhexgalka/xiriirka noolaha dhexdooda iyo sidoo kale deegaanka ma noolaha ah ee ku gadaaman.
11. **Noolaha Dabargo'aya (endangered species):** waxa loola jeeda noole kasta oo sii darbargo'aya kaas oo gabi ahaan ama qayb ka mid ah ay meesha ka baxayso (aan dib loo arkayn).
12. **Deegaan:** waxa loola jeedaa dhamaan waxyaabaha inagu xeeran sida dhulka, biyaha, hawada dhulka ku xeeran, cimilada, codka, urta, dhadhanka, xaaladaha abuurista ee xayawaanka iyo dhirta, deegaanka dabiiciga ah iyo ka dadku ay sameeyeen.
13. **Hubinta/Dhawrista Deegaanka:** (Environmental Audit) waxa loola jeedaa in si nidaamsan oo dhexdhexaad ah loo qiimeeyo sida ay haya'ddaha maareynta deegaanku u gudanayaan hawlaha ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.
14. **Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada:** waxaa loola jeedaa in si nidaamsan loo baaro sidii loo ogaan lahaa saamayn ama raad reeb barnaamij, hawl ama mashruuc uu ku yeelanayo karo deegaanka iyo bulshada.
15. **Maareynta Deegaanka:** (Environmental Management) waxaa ka mid ah ilaalinta iyo daryeelka iyadoo si joogtaysan (sustainable) loo isticmaalayo qaybaha deegaanka.
16. **Kormeeridda Deegaanka:** (Environmental Monitoring) waxa loola jeedaa in si joogta ah ama wakhtiyo kala duwan loo kormeero deegaanka si loo ogaado saameynta soo gaadhay ama soo gaadhi karta deegaanka wakhtiga dhaw iyo wakhtiga fog labadaba.
17. **Macluumaadka Deegaanka**: waxaa loola jeedaa macluumaadka ku saabsan deegaanka ee Sharcigani uu dhigayo ama xeerarka kale ee ku saabsan ilaalinta deegaanka.
18. **Sarkaal Deegaan:** waxa loola jeedaa sarkaalka la magacaabo sida uu dhigayo qodobka 20aad ee Sharcigan.
19. **Ilaha biyaha macaan:** waxaa ka mid ah harooyinka, webiyada, ceelasha biyaha, dooxyada, dhulka qoyan iyo ilaha kale ee biyaha macaan;
20. **Dowlad** waxa loola jeedaa Dowladda Federaalka Soomaaliya ama Maamul Goboleedyada.
21. **Saameyn ba'an":** waxa loola jeedaa saameynta wasakhda hawada, jabaqda, gariirka, shucaaca, wasakhaynta biyaha, carrada iwm.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

22. **Qashinka halista ah:** waxa loola jeeda qashinka adkaha, dareeraha, gaas (hawo), kiimikooyinka, qashinka nukliyeerka iyo qashin kasta oo khatar ku ah caafimaadka dadka ama waxyeelayn kara deegaanka;
23. **Saameyn:** waxaa loola jeedaa saameynta ka dhalan karta isticmaalka, horumarinta deegaanka oo waxaa ka mid ah saameyn wanaagsan ama mid waxyeelo leh, saameyn ku meel gaadh ah ama mid wakhti dheer taagnaanaysa, saameyn hore, mid hada taagan iyo mid mustaqbalka dhici karta.
24. **Khabiir madax banaan:** waxa loola jeedaa qof ka madax banaan ama aan xidhiidh la lahayn qofka raba in uu mashruuc fuliyo. Khabiirku waa qof aqoon u leh hawsha loo igmaday, soona bandhigi kara fikir cilmiyaysan oo ku saabsan saameynta uu mashruuc ku yeelan karo deegaanka;
25. **Dhisme Warshadeed (installations):** waxaa loola jeedaa dhisma warshadeed kasta **mid yar iyo mid weyn**
26. **Wasaaradda ama Wasaaraddaha ay Khuseyso** waxa loola jeedaa
    b) Heer Federaal waa wasaaradaha kala duwan ee Federaalka
    t) Heer Maamul Goboleed waa wasaaradaha deegaanka,
27. **Ruqsad/Shati** waxaa loola jeedaa ruqsad (ogolaansho) la bixiyay iyadoo la raacayo Sharcigan ama xeer kale oo dalka ka jira;
28. **Deegaan Baddeed:** waxa loola jeedaa deegaanka badda kaas oo ka kooban noolaha iyo ma noolaha ku jira badda;
29. **Wasaarad** waa Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada ee JFS **iyo Wasaaradaha Deegeenka DXDF.**
30. **Kheyraadka Dabiiciga ah:** waxaa ka mid ah kheyraadka hawada, dhulka, biyaha, xayawaanka, dhirta oo ay ku jiraan tayadooda iyo bilicdoodu.
31. **Jabaq/dhawaq:** waxa loola jeedaa jabaq (sawaxan) kasta oo la dhibsanayo kaas oo keeni kara saameyn caafimaad ama deegaan;
32. **Sunta Cayayaanka:** waa kiimikooyinka loo isticmaalo in lagu dilo (laayo) cayayaanka dhirta, beeraha **iyo noolaha.**
33. **Qof:** waxa loola jeeda qof dabiici ah (natural person) ama shirkad (juridical person);
34. **Ugaarsiga Sharci Darrada ah:** waxaa loola jeedaa ugaarsiga duur joogta ee aan ogolaansho loo haysan kaas oo ka hor imanaya shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah, waxaana **ka mid ah** ficilada ugaarsiga qabashada, dabin u dhigidda ama dilka xayawaanka duurjoogta ah.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

35. **Qaadista Masuuliyadda Waxyeelleynta Deegaanka**: waxa loola jeedaa bixinta kharashka lagu nadiifinayo deegaanka la wasakheeyay, bixinta magadhaw la siinayo dadka ay dhibaatadu ka soo gaadhay wasakhaynta, bixinta khasaaraha ama kharashaadka kale ee la xiriira wasakhaynta la sameeyay. Waxaas oo kharash ah waxaa bixinaya qofka lagu helo in uu wasakheeyay deegaanka sida uu Sharcigani dhigayo.
36. **Wasakhayn** (Pollution) waxa loola jeedaa badelidda tooska ah ama sida dadban loogu sameeyo qaabka, muuqaalka, kiimikooyinka, abuurka iyo dabeecadaha deegaanka iyadoo lagu sii daynayo/lagu shubayo wasakh waxyeellayn karta caafimaadka dadweynaha, xayawaanka, shimbiraha, duurjoogta, kalluunka, noolaha biyaha iyadoo lagu xadgudbay shuruudaha ogolaansho/ruqsad ee Sharcigan.
37. **Goobaha Dadweynaha:** waxaa loola jeedaa xaafadaha la degan yahay, suuqyada, **goobaha waxbarashada, Goobaha Caafimaadka,** goobaha kale oo ay dadku isugu yimaadaan **iwm.**
38. **Goobaha la ilaaliyay (protected areas)** waa goob juqraafi ahaan cayiman ama la qeexay, sharci ahaanna loo aqoonsaday in la sameeyo taas oo ujeedadu tahay daryeelka iyo ilaalinta noolaha iyo guud ahaan deegaanka.
39. **Mabda'a Taxaddarka** (Precautionary Principle) waa mabda' ku saabsan haddii ay jirto halis ku soo fool leh deegaanka, ha ahaato mid daran ama aan wax laga qaban karin, ama haddii la la'yahay cadayn saynis ama cilmi ku saabsan halistaas, cudurdaar uma noqon karto in dib loo dhigo qaadidda tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu baajinayo tayo dhaca/burburka deegaanka.
40. **Dhisme** (Premises) waxaa ka mid ah dhismayaasha, dhulka, hanti kasta oo la kala dhaxli karo, mashiinnada, warshadaha oo ay ku jiraan baabuurta loo isticmaalo ganacsiga dhismaha ka socda.
41. **Mashruuc** waxaa ka mid ah hawl qabad kasta, fikir ganacsi, barnaamij ama siyaasad la xidhiidha mashaariic saameyn ku yeelan kara deegaanka.
42. **Warbixinta Mashruuca**:waxa loola jeedaa warbixin kooban oo tibaaxaysa saamaynta ay deegaanka ku yeelan karaan mashaariic horumarineed.
43. **Ilaalinta Deegaanka** waxa loola jeedaa in la dhawro qaab dhismeedka dabiiciga ah ee deegaanka is la markaana kheyraadka si haboon loo isticmaalo si loo ilaaliyo danaha jiilka maanta jooga iyo kuwa mustaqbalka;
44. **Shucaac** waxa loola jeedaa shucaac kasta oo halis ku ah caafimaadka dadka iyo deegaanka;

45. **Gobol** waxa loola jeeda Gobolada Soomaaliya sida uu qorayo Dastuurka Dalka;
46. **Wasaaradaha Waaxyaha** (Sectoral Ministries) waa Wasaaradaha kala duwan ee dowladda Federaalka Soomaaliya.
47. **Heer ama Halbeeg** (Standard) waxa loola jeedaa xadka wasakh ee biyaha ama hawada lagu sii dayn karo sida uu Sharcigani ama xeerar kale ay dhigayaan.
48. **Walax** waxa loola jeedaa kiimikooyinka, qashinka, neef, daawo, iwm.
49. **Horumarka Joogteysan** waxa loola jeedaa in si isku dheelli tiran looga faa'idaysto khayraadka deegaanka horumarna ay u gaadhaan jiilka hadda jooga si ay baahidooda u daboolaan ha yeeshee aanay waxyeello gaadhsiin jiilalka mustaqbalka sidii ay iyaguna baahidooda u dabooli lahaayeen.
50. **Qashin** waxaa ka mid ah nooc kasta oo **haraa** ah sida **mid** dareere ah, **mid** adag, **mid** neefta ah , ama shucaaca kuwaas oo lagu sii daayo ama lagu shubo deegaanka waxyeello ama isbadel ku keeni kara deegaanka.
51. **Duurjoog** waxaa loola jeedaa nooc kasta oo xayawaan **ah** kaas oo laf dhabar leh ama aan laf-dhabar la hayn, xayawaanka duurka ku nool, kuwa lagu hayo goobaha xayawaanka lagu dhaqaaleeyo (tusaale: beer xayawaan), xayawaanka waddamada iskaga goosha, muunad duurjoog ama qayb ka mid ah jirka duurjoogta sida ugxaanta, dhogorta, baalasha iwm, **balse,** waxaan ku jirin xoolaha la dhaqdo, xayawaanka la carbiyo sida bisadaha.
52. **Xayawaanka Halista ku Sugan** (threatened species) waa noocyada xayawaanka ay suurta galka tahay in mustaqbalka gabi ahaan ama qayb ka mid ah ay darbargo'aan.
53. **Farsamayn** waxa loola jeedaa farsamaynta qashinka (adkaha iyo dareeraha);

## Qodobka 3aad

## Hirgalin/Dabaqid

Sharcigani wuxuu ka shaqaynayaa dhamaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Cutubka 2aad

## Mabaadi'da Guud iyo Ujeeddooyinka Sharciga

### Qodobka 4aad

### Mabaadi'da Sharciga

Mabaadi'da Sharcigani waxa ay la mid yihiin mabaadi'da Siyaasadda Qaran ee Maareynta Deegaanka.

### Qodobka 5aad

### Xaqa Deegaan Nadiif ah

1. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu ku noolaado deegaan nadiif ah, amaan ah oo caafimaad qaba.

### Qodobka 6aad

### Maareynta Qashinka

1. Qashinka waa in la yareeyo, oo intii suurtagal ah dib loo warshadeeyo (farsameeyo).
2. Waa in la raacaa nidaamka (3 R – Reduce, Re-use, Recycle): Yaree, Dib-u-isticmaal, Dib-u-farsamee.
3. Qashinka waa in loo maareeyaa si aan deegaanka wax u dhimayn.

### Qodobka 7aad

### Qaadista Masuuliyadda Waxyeelleynta Deegaanka

1. Qofkii deegaanka wasakheeya ayaa bixinaya dhaqaalaha lagu hagaajinayo.
2. Ciddii deegaanka wasakhaysa ayaa masuul ka ah in ay bixiso magdhaw la siinayo cidda ay dhibaato ka soo gaartay.

### Qodobka 8aad

### Qiimaynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo bulshadu waa nidaam loo baaroo sidii loo ogaan lahaa, saameyn ama raad reebka barnaamij, hawl ama mashruuc uu ku yeelan karo deegaanka.
2. Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo bulshada waa in la sameeyaa iyadoo la raacayo Cutubka 11aad ee Sharcigan.

### Qodobka 9aad

### Horumarka Waara

1. Horumarka waara waa in si isku dheelli tiran looga faa'idaysto kheyraadka deegaanka, horumarna ay u gaaraan jiilka (generation) hadda jooga si ay

baahidooda u daboolaan, ha yeeshee aanay waxyeello gaarsiin jiilalka mustaqbalka sidii ay iyaguna baahidooda u dabooli lahaayeen.

2. Ka faa'idaysiga kheyraadka Soomaaliya, waa in uu noqdaa mid waafaqsan mabda'a Horumarka Waara.

## Qodobka 10aad

## Mabda'a Taxadar ka

Haddii ay jirto halis ku soo fool leh deegaanka, ha ahaato mid daran ama aan wax laga qaban karin, maqnaashaha caddayn saynis ama cilmi ku saabsan halistaas, cudurdaar uma noqon karto in dib loo dhigo qaadidda tallaabooyin wax ku ool ah, oo lagu baajinayo ama lagaga hortagaayo burburka deegaanka.

## Qodobka 11aad

## Ujeedooyinka Sharcigan

Ujeedooyinka Sharcigani waa:

1. In la horumariyo, lagana shaqeeyo sidii dadka Soomaaliyeed u heli lahaayeen deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba.
2. In laga hortago, la xakameeyo, lala socdo, waxna laga qabto, wasakhaynta iyo burburka deegaanka;
3. In kor loo qaado fahanka deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah ee muhiimada ugu fadhiya Qaranka Soomaaliyeed;
4. In wasakhaynta saamaynta daran, laga ilaaliyo dadka, biyaha, carrada, xayawaanka, dhirta, hawada iyo noolaha kala duwan;
5. In la qaado tallaabooyinka ku haboon ee lagu maareynayo kheyraadka dabiiciga ah iyo sidii loo soo noolayn lahaa (loo hagaajin lahaa) deegaanka la waxyeeleeyay;
6. In la dhiiri galiyo nidaamka horumarka waara;
7. In la yareeyo qashinka, isla markaana la horumariyo in si haboon loo maareeyo qashinka;
8. In la qeexo qaab-dhismeedka Dowladda ee maareynta deegaanka ee heer Federaal iyo Dowlad Goboleed;
9. In la xoojiyo sidii Soomaaliya ay caalamka iyo waddamada kale ugala shaqayn lahayd arrimaha deegaanka.
10. **In si taxadder leh loo qiimeeyo waxyeellada ka soo gaari karta deegaanka soo saarista shidaalka iyo macdanta."**



## Cutubka 3aad
## Qaab-dhismeedka Maamulka Deegaanka
## Qodobka 12aad
## Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada

1. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa ah hay'ada Qaran ee masuulka ka ah ilaalinta deegaanka Dalka iyo wax ka qabashada isbaddelka cimilada.
2. Masuuliyadaha Wasaaradda waxaa ka mid ah:

b) Hogaaminta, kor u qaadidda wada shaqaynta iyo maamul wanaaga ee ilaalinta, daryeelka iyo ka faa'idaysiga kheyraadka deegaanka;

t) Dejinta siyaasaddaha, istiraatajiyadda, xeerarka iyo halbeegyada deegaanka, isla markaana hubinta sidii loo heli lahaa qaab lagu horumariyo bulshada iyo dhaqaalaha oo aan waxyeello u gaysanayn dadka iyo deegaanka;

j) Hogaaminta iyo hubinta sidii loo dhaqan gelin lahaa siyaasaddaha, Xeeladaha (strategy), xeerarka lagu ilaalinayo deegaanka.

x) Qiimeynta iyo korjoogteynta arrimaha deegaanka ee heer Federaal iyo heer Maamul Goboleed.

kh) Wasaaraddu iyadoo la tashaneysa Wasaaradaha deegaanka ee Dowlad Goboleedyada, waxa ay diyaarinaysaa dib u eegista iyo cusboonaysiinta Siyaasaddaha, Xeeladaha strategies), iyo Xeerarka deegaanka.

d) Dejinta nidaamka Qiimeynta, Saameynta Deegaanka iyo Bulshada ee dhamaan mashaariicda iyo barnaamijyada saameyn ku yeelan kara deegaankaasi, tixgelin loo siiyo arrimaha deegaanka iyo bulshada oo ay uga mid noqdaan qorshayaasha, siyaasaddaha iyo barnaamijyada lagu horumarinayo tayada nolosha dadka;

r) Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa hay'adaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo Dowlad Gobolleed, waxa ay fulinaysaa daraasado ku saabsan xaalufinta dhirta iyo dabargo'a duurjoogta iyo sidii wax looga qaban lahaa iyadoo la diyaarinayo tallaabooyin wax lagaga qabanayo;

s) Fulinta daraasadaha iyo faafinta cilmi baarista ku saabsan xaaladda deegaanka ee Dalka.

sh) Matalaada, la talinta Dowladda iyo fulinta baaqyada, habmaamuuska (protocols) iyo heshiisyadda ku saabsan deegaanka ee heer gobol iyo heer caalami;

dh) Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa Hay'ada ay khuseyso ee heer Federaal iyo Dowlad Goboleedyada, waxa ay abuuraysaa nidaamka xog-uruurinta, maareynta iyo isticmaalka xogaha ku saabsan deegaanka iyo isbaddelka cimilada;

c) Dhiirigelinta ka qeybgal wax ku ool ah oo ay bulshadu kaga qayb gasho ilaalinta deegaanka, iyadoo la adeegsanayo wacyigelin ballaaran iyo waxbarasho;

g) Abaabulka iyo la socodka ilaha dhaqaale ee lagu maareynayo deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah.

f) Fulinta dhamaan arrimaha khuseeya deegaanka iyo isbaddelka cimilada ee Dalka.

q) Diiwaangelinta dhamaan hay'adaha aan dowliga ahayn ee ka shaqeeya arrimaha deegaanka iyo isbaddelka cimilada.

k) Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa xeer-nidaamiyeyaal fududeynaya fulinta sharcigan.

## Qodobka 13aad

## Dhaqaalaha Deegaanka

1. Sharcigani waxa uu abuurayaa sanduuq dhaqaale oo lagu daryeelo Deegaanka (Environmental Trust Fund).
2. Ilaha dhaqaalaha sanduuqu waxa ay ka koobnaan doonaan:
   (b) Miisaaniyadda ama dhaqaalaha ay Dowladda Federaalku u qoondayso deegaanka;
   (t) Taageerada dhaqaale ee ka timaada hay'adaha caalamiga ah, deeq-bixiyayaasha iwm.
   (j) Khidmadaha la qaado sida ku xusan Sharcigan ama xeer-nidaamiyeyaasha ka arcama Xeerkan;
   (x) Ganaaxyada laga qaado jebinta qodobada Xeerkan iyo shuruucda hoos timaada;
   (kh) Deeqaha iyo qaaraanka meelo kale kasoo xerooda.
3. Wasaaradda ayaa mas'uul ka ah maamulka Sanduuqa.
4. Dhaqaalaha deegaanka waa in loo isticmaalaa fulinta waajibaadka Wasaaradda.
5. Dhaqaalaha deegaanka waa in loo maareeyaa si waafaqsan Nidaamka Maareynta Maaliyadda Dowladda (Public Financial Management).
6. Wasaaraddu waa in ay keydisaa xisaab xidh dhameystiran (sax ah) oo ku aadan maareynta sanduuqa.
7. Xafiiska Hanti-dhawrka Guud ayaa sanadkii mar hubinaya xisaabaadka sanduuqa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 14aad

## Guddiga Qaran ee Deegaanka

1. Si ay u fududaato hirgelinta sharcigan, waa in la aasaasaa Guddiga Qaran ee Deegaanka, kaas oo ka kooban:

   b) Gudoomiye (Wasiirka Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada, JFS);

   t) Xubno ka socda wasaaradaha/hay'adaha ay khuseyso ee Dowladda Federaalka;

   j) Xubno (min hal xubin) oo ka socda Wasaaradaha Deegaanka ee Maamul Goboleedyada;

   x) Xubin ka socota ururada aan dowliga ahayn ee ku hawllan deegaanka;

   kh) Xubin ka socota ururka shaqaalaha;

   d) xubin ka socota Rugta Ganacsiga Soomaaliya;

   r) Qareen ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

   s) Xubno ka **kala** socda **Guddiyada** Khayraadka iyo bay'ada **labada Aqal ee** Baarlamaanka JFS.

   sh) xubno kale haddii loo baahdo.

## Qodobka15aad

## Waajibaadka Guddiga Qaran ee Deegaanka

1. Guddigu wuxuu:

   b) Talooyin ka bixinayaa himilooyinka Qaranka, ujeeddooyinka, siyaasadaha iyo shuruucda ilaalinta deegaanka;

   t) Guddigu isagoo fiirinaya warbixinta ay u soo gudbiso Wasaaraddu, waxa uu samaynayaa qiimeyn isagoo soo jeedinaya tallooyinka ku habboon sidii loo hirgelin lahaa siyaasaddaha iyo shuruucda deegaanka ee Soomaaliya;

2. Shirarka caadiga ah ee Guddigu waa lixdii biloodba mar, laakiin Guddigu wuxuu qaban karaa shirar aan caadi ahayn marka loo baahdo.

## Qodobka 16aad

## Wasaaraddaha Waaxyaha (Sectoral Ministries)

1. Shuruucda maareynta deegaanka ee heer Qaran ayaa ka sarreeya kuwa ku kooban waax (sector);
2. Wasaaraddu waxa ay yeelaneysaa sarkaal xiriiriya oo mas'uul ka ah iskuxirka wasaaraddaha waaxyaha iyo hubinta ku dhaqanka sharcigan iyo xeerarka kale ee deegaanka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
ADALKA SARE

## Qodobka 17aad

### Wasaaraddaha Deegaanka ee Maamul Goboleedyada

1. Maamul Goboleed kastaa waxa uu yeelanayaa Wasaarad ama Hay'ad Deegaan taas oo u qaabilsanaan doonta arrimaha deegaanka ee dowlad Goboleedka iyo dhaqan gelinta Siyaasadda iyo Xeerarka Qaran ee Maareynta Deegaanka ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed;
2. Wasaaradda deegaanka ee Maamul Gobolleedku waxa ay masuul ka noqonaysaa isku dubbaridka (xiriirinta), diyaarinta, dhaqan gelinta, dib u eegista Siyaasaddaha, Xeeladaha (strategies) iyo Xeerarka Dowlad Goboleedka ee ilaalinta deegaanka;
3. Wasaaradda Deegaanka ee Maamul Goboleedku waa in ay hubisaa dhaqan gelinta halbeegyada deegaanka ee dowladda Federaalka;
4. Siyaasadaha iyo xeerarka deegaanka ee Dowlad Goboleedyadu waa in ay waafaqaan kuwa heer Federaal;
5. Faqradda 4aad ee qodobkan isagoo sidiisa ah, Dowlad Goboleedyadu waa in ayna soo saarin heerar deegaan (environmental standards) oo ka khafiifsan (less stringent) kuwa Federaalka;
6. Haddii ay is khilaafaan shuruucda deegaanka ee heer Federaal iyo kuwa Dowlad Goboleedyadu, waxaa la raacayaa kuwa heer Federaal;
7. Wasaaraddaha deegaanka ee Maamul Gobolleedyadu iyo **Wasaaradda Deegaanka ee XFS waa in ay mar walba ka wada tashadaan sidii la isku waafajin lahaa xeerarka deegaanka ee labada heer.**

## Cutubka 4aad
## Hubinta Dhawrista Deegaanka iyo Kormeerka
### Qodobka 18aad
### Dabagalka Dhawrista Deegaanka (Environmental Audit)

1. Wasaaradda ayaa masuul ka ah in ay hubiso wax kasta oo saameyn ku yeelan kara deegaanka.
2. Milkiilaha dhismaha ama masuuliyiinta mashaariic fulinaya waa in ay kaydiyaan diiwaan sax ah, iyagoo warbixin sannadle ah u gudbinaya Wasaaradda si ay ula socodsiiyaan sida ay isku waafaqsanyihiin mashruuca iyo daraasadda lagu qiimeeyay, saamaynta deegaanka uu ku yeelanayo sida ku xusan qodobada Cutubka 11aad ee Sharcigan.
3. Milkiilaha dhismaha ama masuuliyiinta mashaariicda fulinaya waa in ay qaadaan tallaabo kasta oo lagu yaraynayo waxyeellaynta deegaanka.

### Qodobka 19aad
### Kormeeridda Deegaanka (Environmental Monitoring)

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaraddaha ay khuseyso waa in ay kormeertaa:-

   **B**. Deegaanka si ay u qiimeyso is baddelada ku iman kara deegaanka iyo saameyntooda.

   **T**. Hawlaha warshaddaha, mashaariicda ama hawlaha kale si ay u ogaato samaynta dhaw iyo tan fog labadaba.
2. Sarkaalka deegaanka ee ku xusan qodobka 20aad ee Sharcigan, waxa uu awood u leeyahay in uu galo dhul ama dhisme kasta si uu kormeer ugu sameeyo hawlaha halkaas ka socda.

### Qodobka 20aad
### Saraakiisha Deegaanka

1. Wasaaraddu waxay qoraal ahaan ku magacaabi kartaa qofka ay u aragto in uu aqoon u leeyahay in uu noqdo Sarkaal Deegaan. Sarkaal Deegaan waxa noqon kara shaqaalaha Wasaaradda, Booliska, kormeerayaasha caafimaadka bulshada iyo qofkii kale ee aqoon u leh arrimaha deegaanka.
2. Agaasimaha Guud iyo dhamaan saraakiisha Wasaaradda iyo Wasaasaradaha Deegaanka ee Maamul Goboleedyada ee heysta jagooyin waqti buuxa ah (full-time employees) waxa ay yihiin saraakiil deegaan.

## Qodobka 21aad

## Awooddaha Sarkaalka Deegaan

1. Iyadoo la tixgelinayo faqradda 2aad & 3aad ee qodobkan, sarkaalka deegaanku.
   b) Waxa uu gali karaa dhul ama dhismayaasha aan la deganayn ama aan la degganeyn wakhtiga loo baahdo;
      i. Waxa uu gali ama kori karaa, doon, markab, diyaarad, baabuur ama gaadiid nooc kale ah, **iyada oo ujeeddadu tahay**
      ii. Kormeeridda ficil laga shaki qabo in uu saameyn ku yeelan karo deegaanka;
      iii. Baaridda fal dambiyeed deegaan ama ku xad gudub shuruucda ilaalinta deegaanka;
      iv. Dhaqan gelinta Sharcigan iyo shuruucda kale ee ilaalinta deegaanka.
2. Sarkaalka deegaanku waxa uu adeegsan karaa oo kaliya awooddaha ku xusan faqradda 1aad (b) ee qodobkan, si loo baaro fal dambiyeed deegaan oo laga shaki qabo in la gaystaa, taas oo la aaminsan yahay ama ay macquul tahay haddii dhulka ama dhismaha la galo in la heli doono caddayn.
3. Awooddaha ku xusan faqradda 1aad (b) lama adeegsan karo ilaa milkiilaha ama qofka deggan/masuulka ka ah la siiyo ogeysiis wakhti macquul ah ama waa in gelintaanka dhulka/dhismaha loo haysto waaran maxkamadeed.
4. Helitaanka waaranka maxkamadeed waxaa lagu dabaqi doonaa qodobada Hab-raaca Xeerka Habka Ciqaabta ee Soomaaliya;
5. Si uu u fuliyo awoodaha ku xusan qodobkan, Sarkaalka deegaanku waxa uu:
   b. Sameyn karaa baaritaanada loo baahan yahay si uu ula socdo saameynta falka ama ficilka la sameeyay;
   t. Qaadi karaa muunado (samples) si loo tijaabiyo (baaro);
   j. Qaadi karaa sawirro ama cabbiraado;
   x. Waxa uu waydiin karaa magaca, shaqadiisa iyo halka uu degan yahay qof kasta oo u muuqda ama looga shakiyo in uu ku lug leeyahay falka la baarayo;
   kh. Waxa kale oo uu waydiin karaa dokumentiyo iyo caddaymo kale sida ruqsadda meheradda iwm;
   d. Waxa uu qofka looga shakiyay falka ka dalban karaa la shaqayn iyo gacan siin si uu hawshiisa u guto; iyo
   r. Waxa uu la wareegi karaa (soo qaadi karaa) shay kasta oo looga shakiyay in loo adeegsaday ama uu qayb ka ahaa fal dambiyeedka deegaan ee la baarayo.
6. Qof kasta oo -

b. Carqaladeeya ama horjoogsada Sarkaalka Deegaanka ee ku guda jira gudashada waajibaadkiisa sida ku xusan Sharcigan;
t. Kiciya ama abaabula dad kale si ay u horjoogsadaan ama u carqaladeeyaan shaqada Sarkaalka Deegaanka;
j. Iska dhiga in uu yahay Sarkaal Deegaan (been abuur);
d. U hoggaansami waaya codsiyada Sarkaalka Deegaanka ee ku xusan faqradda (5) (x), (kh) **iyo** (d); **ama**
x. U sheega ama u dhiiba Sarkaalka deegaan warbixin ama dokumenti been ah –
Qofkaasi waxa uu galay fal dambiyeed.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Cutubka 5aad

## Macluumaadka Deegaanka

### Qodobka 22aad

### Waajibaadka bixinta Macluumaadka

1. Dhammaan milkiileyaasha ama hawlwadeennada warshadaha iyo ganacsiga kale ee wasakheyn kara deegaanka waa in ay ogeysiiyaan Wasaaradda soddon (30) maalmood gudahooda markuu dhaqan galo Sharcigan.
2. Milkiileyaasha ama hawlwadeennadu waa in ay Wasaaradda u gudbiyaan warbixin ku saabsan waxyaabaha wasakhda ah ee ay ku sii daayaan deegaanka;
3. Wasaaradda ay khuseyso waa in ay qaadaa tallaabooyinka ku habboon si waafaqsan Sharcigan.

### Qodobka 23aad

### Macluumaadka Deegaanka iyo Talo Bixin

1. Wasaaraddu waa in ay dadweynaha uga warbixisaa arrimaha la xiriira ilaalinta deegaanka iyo heerka wasakheynta deegaanka, gaar ahaan:

b) Waa in ay daabacdaa daraasadaha ku saabsan wasakheynta deegaanka iyo guulaha tallaabooyinka la qaaday;

t) Haddii ay danta guud ku jirta, waxaa la daabici karaa:
   i. Natiijooyinka Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada
   ii. Natiijooyinka kormeerka warshadaha

2. Danta guud iyo ilaalinta sirta ganacsiga waa in mar kasta lagu dadaalaa.
3. Wasaaraddu waa in ay talo bixin siisaa hay'adaha dowladda, ganacsatada gaarka ah iyo dadweynaha. Waa in ay dadweynaha kula taliysaa ku dhaqanka wanaagsan ee ku aadan deegaanka iyo tallaabooyinka lagu yareynayo wasakheynta deegaanka.
4. Macluumaadka ku saabsan deegaanka waa in uu noqdaa mid lagau heli karo qaab online ah.

### Qodobka 24aad

### Warbixinta Deegaanka

Wasaaraddu waxa ay qiimaynaysaa xaaladda deegaanka Soomaaliya sanadkiiba mar. Waxa ay warbixinta u gudbinaysaa Golaha Xukuumadda iyo **Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka JFS.**

## Qodobka 25aad

## Xoriyadda Xogta iyo Macluumaadka Deegaanka

Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu helo macluumaadka deegaanka ee ay Dowladdu hayso;

## Cutubka 6aad

## Wasakheynta Deegaanka

## Qodobka 26aad

## Mabaadi'da

1. Wasakhowga hawada, jabaqda (shanqarta), gariirka iyo shucaaca waa in lagu xaddidaa goobahooda (at their sources).
2. Waa in si taxadar leh loo qaadaa tallaabooyin lagu yareynayo wasakhowga deegaanka **iyada oo la adeegsanayo** ~~ah~~ tiknoolajiyad~~a~~ **cusub.**
3. waa in tallaabooyin adag laga qaadaa sidii loo joojin lahaa wasakhda halista ah.

## Qodobka 27aad

## Heerka ama Cabbirka Tayada Hawada

1. Wasaaraddu, iyadoo la kaashanaysa wasaraadaha ay khusayso waa in ay soo saartaa:
   a) Heerka tayo ee hawada guud
   b) Heerka tayada hawada goobaha la degan yahay
   c) Tayada hawada goobaha shaqo
   d) Heerka sii daynta qiiqa
   e) Tayada shidaalka gawaadhida/baabuurta
   f) Shuruudaha iyo tilmaamaha lagu xakamaynayo wasakhaynta hawada
2. Qof kasta oo siidaaya walxo wasakhaynaya hawada, kuna xadgudba heerarka Sharcigani dhigayo ama xeer ka sii farcamay waxa lagu qaadayaa dambi oo waxaa lagu xukumi xadhig aan ka badnayn laba sano ama ganaax u dhigma oo ay maxakamadda awoodda u leh go'aan ku gaarto ama labadaba.
3. Qofka lagu helo dambi sida ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan waxaa kale oo lagu xukumayaa in uu:
   **B.** Bixiyo kharashka lagu sifeynayo hawada oo uu ku jiro kharashka ka baxay ciddda masuulka ka ah si ay dib ugu hagaajiso deegaanka la waxyeeleeyay.



T. Magdhaw ay maxkamadu go'aaminayso oo la siinayo cidii kale ee ay waxyeelo ka soo gaartay.

4. Si loo yareeyo wasakhowga hawada is la markaana loo dabaqo heerarka hawada ee la dajiyay, Hay'adaha awoodda u leh waxa kale oo ay qaadi karaan tallaabooyin lagaga dalbanayo dib u habayn (re-design) ku aadan warshadaha ama rakibidda teknoolajiyad cusub.

## Qodobka 28aad

## Ruqsadda Qaaca ama Qiiqa (Emission)

1. Marka uu Sharcigan dhaqan galo, milkiilaha ama masuulka meherad ganacsi, warshad ama goob kale oo sii daynaysa qiiq wasakhayn kara hawada, waa in uu qaataa ruqsadda oggolaashaha siideynta qiiqa ama qaaca.
2. Goobaha ganacsi iyo warshadaha sii jiray ka hor dhaqan galka Sharcigan, waa in ay laba iyo toban bilood gudohood ku codsadaan ruqsadda marka ay soo buuxiyaan shuruudaha sharcigan laga bilaabo maalinta uu Sharcigani dhaqan galo.
3. Wasaaraddu waa in ay samaysaa diiwaanka ruqsadaha qaaca, diiwaankaas oo ay hubin karaan cid kasta oo danaynaysa ka dib marka la bixiyo khidmadda ay Wasaaraddu qeexday.
4. Codsiga ruqsadda, khidmadda la bixinayo iyo qaabka loo qorayo waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.

## Qodobka 29aad

## Qiiqa noocyda Matoorrada

1. Milkiilaha ama masuulka gaari, tareen, markab, diyaarad, noocyada gaadiid, warshadaha, matoorrada yar yar iyo waaweyn:-

   **B.**waa in ay buuxiyaan habraacyada tayada sjarcigan tilmaamayo iyo xeerarka ka farcami doono.

   T. lama soo dejin kara mashiinno iyo qalab kale oo sii daaya qiiq waxayeelleynay tayada iyo heerka hawada sharcigani qeexay, **iyada oo la raacayo halbeegyada ay Wasaaradda Gaadiidka XFS dejiso.**

## Qodobka 30aad

## Khidmadda Deegaanka

1. Iyadoo la ilaalinayo caafimaadka dadka Soomaaliyeed, Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Waasaarada Maaliyadda ee Federaalka iyo khuburo aqoon durugsan u leh cimillada iyo deegaanka;

b) Waxaa ay soo jeedin kartaa in cashuuraha lagu qaado dhoofinta ama soo-saarka badeecadaha qaarkood dib loogu celiyo deegaannada waxyeelladu soo gaartay.

t) Waxa kaloo Wasaaraddu ay soo jeedin kartaa mamnuucidda soo dejinta ama soo-saarka alaabooyinka waxyeellada u leh deegaanka.

2. Cashuurta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa loo raacayaa Nidaamka Maamulka Maaliyadda Dowladda (Public Financial Management);
3. Cashuurta waxaa qaadaya Wasaarada Maaliyadda ee Federaalka.

## Qodobka 31aad

## Wasakhowga Biyaha

1. Sharcigani marka uu dhaqan galo, qof kasta oo ku kaca waxyaabahan sharcigan mamnuucay ama xeerarka kale ee ilaalinta deegaanka ee ku shuba ama ku rida qashin deegaan biyoodka dabiiciga ah waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabi karaa sida ku xusan qodobka 84aad ee sharcigan.
2. Qofka lagu helo fal dambiyeedka ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waxa kale oo lagu soo rogi karaa:

b) Kharashka ku baxaya nadiifinta deegaanka waxyeeladu soo gaartay. Kharashka waxa loo adeegsanayaa dib u soo celinta deegaanka iyadoo laga nadiifinayo wasakhda lagu shubay;

t) Bixinta magdhaw la siinayo cid kasta oo dhib ka soo gaartay wasakhda. Ciddii uu dhib soo gaaray waa in ay dacwad u gudbisaa maxkamadda isla markaana magdhawga waxaa go'aan ka gaaraya maxkamadda awooda u leh.

3. Iyadoo qodobada kor ku xusan aan waxba laga badelayn, Hay'adaha awoodda u leh waa in ay:

b) Dejiyaa nidaam lagu maamulayo waxyaabaha wasakhda ah ee biyaha la raacin karo (lagu shubi karo);

t) Ilaalinta tayada biyaha;

## Qodobka 32aad

## Heerarka Tayada Biyaha

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso waa in ay soo saartaa heerka tayada:

b. Biyaha la cabo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

t. Biyaha loo isticmaalo beeraha
j. Biyaha warshadaha
x. Biyaha kalluunka iyo duurjoogta

kh. Iyo isticmaalka noocyada kale ee biyaha

### Qodobka 33aad

### Warbixinta Warshadda

Dhamaan milkiilayaasha ama masuuliyiinta fulinaya mashaariicda waraabka dhulka, nidaamka bullaacadaha, warshadaha wax soo saara ama hawlaha kale ee ay ka dhalan karaan dareere wasakh ah oo lagu sii deynayo deegaan, waa in ay sagaashan **(90)** maalmood ka hor warbixin tifaftiran ugu soo gudbiyaan Wasaaradda, waana in ay warbixintana ku caddahay cadadka , tayada iyo waxyeelada ay u geysan karto degaanka.

### Qodobka 34aad

### Wasakhda Dareeraha

Wasakhda dareeraha iyo nidaamka maamulka bullaacadaha waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye gaar ah.

### Qodobka 35aad

### Heerka Dhawaqa/Codka (Standards of Noise)

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khusayso iyo xeeldheerayasha aqoonta u leh waa in ay:-
   b. Soo saartaa heerka dhawaqa iyo guuxa ee wasakhaynaya (dhibaateynaya) deegaanka si loo ilaaliyo caafimaadka dadweynaha iyo deegaanka.
   t. Dejisaa nidaamka iyo shuruudaha lagu qiyaasayo dhawaqa iyo guuxa.
   j. Ku amartaa guurista ama yareenta warshadaha jabaqda (shanqarta) badan samaynaya ee ku yaal goobaha la degan yahay, **Goobaha Waxbarashada, Goobaha Caafimaadka,** goobaha kaluumeysiga , goobaha Xanaanada Xoolaha, IWM.

### Qodobka 36aad

### Dhawaqa/Codka Ka badan Heerka la ogolyahay

Qofkii sameeya dhawaq ka sarreeya heerka la xaddiday ee ku qeexan xeer-nidaamiyaha jabaqda (shanqarta) **waxaa lagu oogayaa** fal dambiyeed.

## Qodobka 37aad

## Heerarka Urta aan Habooneyn

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khusayso waa iney samaysaa:

   b. Nimaadka lagu cabirayo heerka ugu yar ee lagu xakameynayo wasaqeynta deeganka ee urta aan habooneyn.

   t. Qaabka ama tallaabooyinka lagu joojin karo urta aan habooneyn ee ay sababaan bani'aadamku ama si dabiiciyan u timaadda.

## Cutubka 7aad

## Xakamaynta Walxaha Khatarta ah

## Qodobka 38aad

## Maareynta Walxaha Halista ah

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waxa ay soo saareysaa nidaamka xakameynta soo saarista ama soo dejinta walxaha halista ah si wafaqsan Halbeegyada Calamiga ah.
2. Wasaaraddu waa in ay **kor u qaaddaa aqoonta iyo xirfadda** saraakiisha kastamada ee heer Federaal iyo **heer** Dowlad Gobolleed ee Sharcigani tilmaamayo;
3. Walxaha halista ah waxa ka mid ah:
   sida sunta cayayaanka, walxaha cuntada wakhtigeeda dheereeya, bacriminta, kolooriinta iyo birta culus (chlorine and heavy metals) iyo Kiimikooyinka kale;
4. Iyagoo aan waxba laga badelayn qodobada kor ku xusan, xeer-nidaamiye ayaa qeexi doona:
   b. Noocyada walxaha iyo kiimikooyinka halista ah ee la xakameynaya waxaa qeexaya xeernidamiye gaar ah;
   t. Qorshaha maareynta walxaha halista ah;
   j. Hirgelinta heerarka caalamiga ah iyo habraacyada la xiriira maareynta walxaha halista ah;
   x. Waajibaadka in la sameeyo diiwaan walxaha halista ah, iyo macluumaadkooda;

   kh. Xakameynta soo dejinta iyo dhoofinta, oo ay ku jiraan dabagalka maraakiibta iyo howlaha kale ee kontaroolka xuduudaha sida lambarrada kastamyada (custom codes) iyo tallaabooyinka aqoonsiga (identification measures);

d. Ruqsad siinta iyo nidaamyada ururinta, qaadista iyo burburinta qashinka/**haraaga** walxaha halista **ah**;

r. Shuruudaha la xiriira maareynta wanaagsan ee ku aadan walxaha halista ah iyo howlgalka goobaha lagu burburiyo qashinka halista ah;

s. Shuruudaha bixinta qalabka badbaadada (safety equipment),nidaamka (procedures), iyo tababarka shaqaalaha ka shaqeeya walxaha halista ah;

Sh.Qodobo gaar ah oo la xiriira maareynta qashinka shucaaca, oo ay ku jiraan xakameynta ama mamnuucidda soo dejinta qalabka iyo alaabada abuuri kara ama noqon kara qashinka shucaaca (radiation).

## Qodobka 39aad

## Ruqsadda/Shaatiga Walxaha Halista ah

1. Lama soo dejin karo, dhoofin karo, lamana isticmaali karo badeecadaha (aaladaha) ay ku jiraan walxaha ama kiimikooyinka halista ah **ogolaansho/ruqsad/shati la'aan.**
2. Waxlaha ay ku jiraan kiimikooyinka halista lama soo saari karo (warshadeyn karo), keydin karo, lamana iibin karo, **iyada oo aan oggolaasho loo heysan.**
3. Xeer-nidaamiye ka soo baxa Wasaaradda ayaa qeexi doona nidaamka bixinta shaatiga ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.

## Qodobka 40aad

## Shucaaca (Radiation)

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa hay'adaha ay khuseyso, waa in ay:
   b. dejiso halbeegyada/heerka shucaaca ee la ogol yahay;
   t. Samaysaa shuruudaha iyo habka lagu cabirayo shucaaca.

## Qodobka 41aad

## Mamnuucidda Ku Sii daynta (shubidda) deegaanka Kiimikooyinka, Shidaalka, iyo Walxaha Halista

1. Waa mamnuuc in lagu sii daayo (shubo) kiimikooyinka, walxaha halista ah, **shidaalka** ama waxkasta oo saliidi ku qasantahay,sida ku cad Sharcigan.
2. Qofka ku shuba ama sii daaya kiimikooyin, walxaha kale ee halista ah, saliidda ama wax saliidi ku jirto waxaa lagu oogayaa fal dambiyeed.
3. Qofka lagu helo in uu galay dambi/xadgudub sida ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, waxa ciqaabaha kale loo dheeraysiinayaa oo lagu xukumi in uu:
   B. Bixiyo kharashka lagu sifeynayo deegaanka ama biyaha lagu shubay.

T. Magdhaw la siinayo dadka kale ee ay dhibaato ka soo gaartay

4. Milkiilaha ama masuulka goob wax soo saar ama meel wax lagu kaydiyo/lagu qaado ee ee ay ka daataan walxo **halis ku ah deegaanka,** si aan waafaqsanayn Sharcigan waa in uu:-
   B. Si deg deg ah u wargaliyo Wasaaradda.
   T. Si degdeg ah u bilaabo nadiifinta
   J. U hoggaasamo amarrada Wasaaradda
5. Wasaaraddu waxaay dacwad ku soo oogeysa milkiilayaasha goobaha wax soo saar ka, goob wax lagu kaydiyo/lagu qaado kuwaas oo ku xadgudba waajibaadka ku xusan faqradda 4aad ee qodobkan.
6. Maxkamaddu marka ay qaadayso dacwad waa in ay tixgalisaa in uu qofku ku dhaqmay tallaabooyinka ku xusan faqradda 4aad qodobkan.

## Qodobka 42aad

## Deegaanka iyo Hawlgallada Batroolka

1. Cid kasta oo ku hawlan sahminta, baarista, soo saaridda, warshadeynta iyo hawlaha kale ee la xiriira batroolka waa in uu ilaaliyaa deegaanka si waafaqsan xeerkan, shuruucda kale ee Dalka iyo **xeerarka** caalamiga ah ee ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.
2. Haddii shidaal ama wasakh lagu sii daayo ama lagu daadiyo biyaha Soomaaliya, wasakhdaas oo ka imanaysa meelo kala duwan oo ay ka mid yihiin markab, doon, hawlgallada sahminta, soo saaridda ama ka faa'iideysiga kheyraadka dabiiciga ah ee badda gudaheeda, (Dhiiqowga, Duxidda) dikhowga deegaanka ee arrimahaas ka dhasha waxaa masuul ka ah milkiilaha ama madaxa goobta ay wasakhdu ka timid.
3. Haddii dikhowga ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan aanu sabab u ahayn dayac bani'aadam (force majeure), Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha ay khuseyso waxa ay:

   (b) qiimeynaysaa baaxadda waxyeelada ama dikhowga;

   (t) dejinaysaa tallaabooyinka loo baahan yahay in la qaado si loo yareeyo waxyeelada:

4. Iyadoo la tixgelinayo qiimeynta ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan, qofka masuulka ka ah goobta ay ka timid dikhowga waxaa lagu xukumi karaa in uu bixiyo magdhow & kharashka nadiifinta deegaanka la waxyeeleeyay.



5. Qofka ku xadgudba qodobkan waxa uu galay fal-dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax ama xadhig ama labadaba, iyadoo maxkamadu eegaysa xaddiga dhibaatada ama waxyeelada.
6. Waxa kale oo maxkamada awooda u leh ay ku xukumi kartaa in qofka fal-dambiyeedka lagu helay uu:
    b. Bixiyo magdhaw la siinayo cid kasta oo uu dhib ka soo gaaray
    t. Nadiifiyo oo dib u soo nooleeyo deegaanka wasakhoobay ama dhibku gaaray.

## Qodobka 43aad

## Ilaalinta iyo ka hortaga wasaqeynta Deegaanka

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha iyo hay'adaha ay khuseyso, waa in ay dejisaa isla markaana hirgelisaa qorshaha deg-dega ah ee wasaqeynta deegaanka oo ay ka mid yihiin:

    b) batroolka ku daata badda ama beriga;

    t) Daadashada walxaha halista ah;

    j) Shilalka warshadaha;

    d) Hawlaha kale ee horseedi kara masiibo caafimaad ama waxyeelo deegaanka.

2. Qorshooyinka wasaqeynta deegaanka ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waa in loo qeybiyaa dhamaan hay'adaha Dowladda ee heer Federaal iyo heer Maamul Goboleed.

## Qodobka 44aad

## Maareynta Walxaha Daciifiya Lakabka Hawada sare ee ku jira qabta waxyabaha kicya Heer kulka (Ozone)

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waxay samaynaysaa cilmi baaris iyo daraasado kuwaas oo tilmaamaya horumarka dhanka sayniska ee ku aadan walxaha iyo ficilada waxyeelleeya (daciifiya) lakabka ozone-ka (stratospheric ozone layer), caafimaadka aadanaha iyo deegaanka;
2. Iyadoo la raacayo faqradda 1aad ee qodobkan,Wasaaraddu waxa ay soo saaraysaa nidaam/tilmaamo(guidelines) isla markaana waxa ay qaadi doonta barnaamijyo la xiriira;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

B) Ciribtirka walxaha, teknoolojiyadda iyo qalabka (aaladaha) waxyeellaynaya lakabka ozone ka, oo ay ku jiraan maaddooyinka/walxaha gacanta ka geysta kululaanshaha adduunka;

T) Joojinta, yareynta ficilada horseedi kara daciifidda lakabka Ozone ka; iyo

J) Yareynta (hoos u dhigidda) halisaha caafimaad iyo saamaynta deegaan ee ka dhalan kara burburinta (waxyeelleynta/daciifidda) Ozone ka.

3. Xeer-nidaamiye ka soo baxa Wasaaradda ayaa qeexi doona arrimaha la xiriira Ozone ka.

## Qodobka 45aad
## Tijaabooyinka

1. Qof kasta oo doonaya in uu sameeyo tijaabooyin, tijaabooyinkaas oo deegaanka ku sii dayn kara unugyada noolaha ah ama walxaha loo adeegsado tijaabooyinka, wuxuu u baahan yahay oggolaansho (shati).
2. Wasaaradda ayaa bixinaysa shatiga ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, iyadoo lala tashanayo Wasaaradda Caafimaadka ee JFS.

## Cutubka 8aad
## Ilaalinta Dhulka
## Qodobka 46aad
## Ilaalinta Dhulka

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxa ay soo saaraysaa tilmaamo iyo amaro ku aadan ilaalinta deegaanka iyo isticmaalka dhulka oo ay ka mid yihiin:

   b) dayactirka dhulka xaalufay iyadoo la adeegsanayo tikniyoolajiyad ku habboon iyo dib-u dhirayn;

   t) xoojinta nidaamyada maareynta dhulka iyo kheyraadka dabiiciga iyadoo la tixgelinayo habka isticmaalka dhulka ee soo jireenka ah; iyo

   j) tallaabooyinka kale ee Wasaaraddu u aragto in ay lagama maarmaan yihiin.

2. Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waxa ay la soconaysaa hirgelinta qorshaha isticmaalka dhulka.

## Qodobka 47aad
## Ilaalinta Keymaha

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxa ay soo saaraysaa tilmaamo qeexaya



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
GOLAHA GARE

tallaabooyin ku saabsan ilaalinta, maareynta iyo isticmaalka joogteysan ee keymaha Soomaaliya;

2. Marka la dejinayo tilmaamaha ku xusan farqada 1aad ee qodobkan waa in la tixgeliyaa:
   b) Goobaha keymaha ah ee la ilaaliyo, oo ay ku jiraan keymaha dhulka keydka ah, seerooyinka iyo jardiinooyinka Qaranka;
   t) duurjoogta ku nool dhulka keymaha;
   j) isticmaalka iyo maareynta kaymaha;
   x) adeegsiga dhaqameedka kaymaha iyo noocyada dhirta muhiimadda gaarka ah u leh bulshada deegaanka; iyo
   kh) ilaalinta noolaha kala-duwan.

## Qoobka 48aad

## Xaalufinta Dhirta

1. Sharcigani waxa uu mamnuucayaa shididda, soo dejinta iyo dhoofinta dhuxusha;
2. Marka laga reebo geedaha ama dhirta qalaad sida geedka garan waaga (invasive plants), Sharcigani waxa uu mamnuucayaa jaridda (goynta) kheyraadka dhirta ee la doonayo in loo badelo dhuxul;
3. Si loo dhimo isticmaalka gudaha ee dhuxusha iyo xaabada isla markaana loo helo tamar lagaga maarmo, wasaarada waa in ay:
   b. Dhiiri gelisaa dadka ku howlan bixinta adeega tamarta aan dhuxusha ahayn;
4. wasaaradu waa in ay ku dadaashaa sidii loo heli lahaa ilo tamareed oo kala duwan isla markaana maalgelin ku samaysaa tamarta Dalka. Sidoo kale waa in wasaarada dhiirigelisaa shirkadaha gaarka ah, sidii ay u bixin lahaayeen adeeg tamareed oo jaban sida tamarta dabeysha, qoraxda, gaaska iyo biogas.
5. **Qofkii ku kaca faldemiyeedka ku xusan faqradda 1aad & 2aad waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yareen 2 (labo) sano kana badneyn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo u dhigma waxyeellada uu u geystay deegaanka.**
6. **Dowladda Soomaaliya waxay la waragaysaa wax kasta oo loo adeegsaday gelidda faldembiyeedyada ama ka qeybqaatay daabbulaadda ama dhoofinta waxyaabaha sharcigan dhexdiisa lagu mamnuucay.**

## Qodobka 49aad

## Ilaalinta Dhulka Qoyan

1. Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa Wasaaraddaha ay khuseyso, waxa ay qeexaysaa tallaabooyinka lagu ilaalinayo dhulka qoyan;
2. Wasaaraddu waxa ay goobo cayiman u aqoonsan kartaa dhul qoyan oo deegaan ahaan nugul, goobahaas oo lagu soo rogi karo xadidaad dhanka horumarka ah ama ficilada kale ee waxyeelayn kara;
3. Marka laga reebo ogolaansho qoraal ah oo ka soo baxayWasaaradda, iyadoo la tashanaysa hay'adaha ay khuseyso, qofna ma sameyn karo:
   b) Sheegashada dhul qoyan ama qalajinta dhulka qoyan;
   t) Ficilo carqaladeyn kara dhulka qoyan ficiladaas oo saameyn ku yeelan kara xayawaanka iyo dhirta ku nool dhulka qoyan;
   j) ku abuurid xayawaan ama dhir;
4. Waa in la sameeyaa Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada, ka hor inta aan la fulin howlaha laga yaabo inay saameyn ku yeeshaan dhulka qoyan;
5. Qof kasta oo jabiya qodobkan iyo xeer-nidaamiye ku salaysan qodobkan wuxuu muteysanayaa Xabsi aan ka badneeyn laba sano/ganaax u dhigma ama labadaba.
6. Wasaaraddu waxaay soo saari kartaa xeer-nidaamiye ku saabsan ilaalinta dhulka qoyan.

## Qodobka 50aad

## Ilaalinta Webiyada

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Wasaaraddaha ay khuseyso, waxa ay qeexaysaa tallaabooyinka lagu ilaalinayo webiyada;
2. Iyadoo la raacayo farqada 1aad ee qodobkan, ogolaansho la'aan qofna ma samayn karo arrimaha socda:
   b. taagid, dib u dhis, dhigid ama ku shubid, bedelid, dheereyn, ama ka saarid webiga gudahiisa ama hareerahiisa;
   t. qodis, daloolin, ama wax ka bedelid salka webiga;
   j. ku beeris wabiga gudahiisa ama hareerahiisa dhir, Xayawaan ama ku shubid walax kasto oo saameyn ku yeelan kara deegaanka;
   x. leexiya ama xirid marinka webiga; ama
3. Qofka ku xadgudba qodobka 50aad ee sharcigan waxa uu galay fal-dambiyeed waxaana lagu xukumayaa xabsi aan ka badnayn saddex sano/ganaax u dhigmo ama labaduba. Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa xeer-nidaamiye ku saabsan ilaalinta webiyada.

## Qodobka 51aad

## Ilaalinta Buuraha

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso ee heer federaal iyo heer Dowlad Gobolleed, waxa ay soo saari doontaa tilmaamo iyo tallaabooyin lagu ilaalinayo buuraha;
2. Iyadoo la raacayo faqradda 1aad ee qodobkan, Wasaaraddu waxa ay qeexi doontaa buuraha halista ugu jira nabaad-guurka deegaanka iyo masiibooyinka dabiiciga ah;
3. Buuruhu waxay halis ugu jiraan nabaad-guurka deegaanka ama masiibooyinka dabiiciga ah:
   b) Marka ay u nugul yihiin nabaad-guurka carrada ama ay ka muuqato calaamado nabaad-guur;
   t) haddii ay buurtu dildilaac yeelato;
   j) haddii ay jiraan calaamado muujinaya in ay adagtahay in dhir ama doog ka soo baxo buurta;
   x) marka dhirta laga jarayo ay ka badan tahay dhirta ka soo baxaysa ama lagu beerayo buurta; ama

   kh) haddii isticmaalka dhulka ee buurtu horseedi karto burbur deegaan.

3. Wasaaraddu, iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha ay khusayso ee heer federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxaay qaadaysaa tallaabooyinka dib u soo celinta iyo dhiraynta dhulka buuraleyda ah.
4. Iyadoo aan waxba laga badalayn Cutubka 11aad ee Xeerkan, hawgallada ku aadan baarista, qodista iyo guud ahaan ka faa'idaysiga kheyraadka macdantu waa in ay ilaaliyaan deegaan dabiiciga ah, yareeyaan ama xakameeyaan qashinka, si deg deg ah ay wax uga qabtaan haddii dikhow deegaan dhaco.
5. Iyadoo aan waxba laga badalayn qodobkan iyo qodobada kale ee xeerkan, intii suuragal ah, qof kasta oo ku hawlan ka faa'idaysiga macdanta waxaa waajib ku ah dayactirka iyo soo celinta dhulka macdanta laga qoday ama la saahmiyay iyadoo dhulkaas lagu soo celinayo xaaladdii uu ku sugnaa ka hor intii aan macdanta laga qodin ama la sahmin.

## Qodobka 52aad

## Maareynta Dhul-daaqsiimeedka

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waa in ay soo saartaa tilmaamaha iyo tallaabooyinka lagu maareynayo ka faa'iideysiga dhul-daaqsiimeedka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2. Wasaaraddu marka ay soo saarayso tilmaamaha iyo tallaabooyinka hoose farqada (1), waxa ay tixgelinaysaa

(b) xadiga daaqa iyo xoolaha daaqi kara (carrying capacity of the land);

(t) baahida loo qabo in la ilaaliyo nafaqada carrada iyo biyaha;

(j) halista xaalufinta degaanka ee soo wajahi karta dhul-daaqsiimeedka;

(x) qodobada kale ee ay Wasaaraddu u aragto in la tixgeliyo.

## Qodobka 53aad

## Ilaalinta Goobaha Taariikhiga ah

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Wasaaradda ay khusayso ee heer federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxa ay:
   b) Diiwaan gelinaysaa, aqoonsanaysaa goobaha dabiiciga ah, kuwaas oo muhiimad Qaran ugu fadhiya dadka Soomaaliyeed dhaqaale ahaan, dhaqan ahaan iyo deegaan ahaanba;
   t) Haynaysaa diiwaanka goobaha iyo walxaha dabiiciga ah ee ku xusan faqradda (b) ee qodobkan, iyadoo la raacayo nidaam la qeexay; iyo
   j) Soo saaraysaa tilmaamo iyo tallaabooyin lagu maareynayo laguna ilaalinayo walxaha dhaqanka iyo goobaha la diiwaan galiyay si waafaqsan qodobkan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
GOLAHA SARE

## Cutubka 9aad
## Isbedelka Cimilada
## Qodobka 54aad
## Barnaamijyada wax lagaga Qabanayo Isabdelka Cimilada

1. Iyadoo lala kaashanayo Wasaaradaha ay khuseyso, isla markaana laga qayb galinayo bulshada, Wasaaraddu waxa ay dejinaysaa isla markaana ay hirgelinaysaa xeeladaha iyo barnaamijyada :-

   b) kor loogu qaadayo heerka aqoonta dadka Soomaaliyeed ee ku saabsan saameynta isbedelka cimilada iyo waxyaabaha keena;

   t) wax ka qabashada saameynta isbedelka cimiladu ay ku leedahay ilaha biyaha, xeebaha, dhulka, sugnaanta cuntada, noolaha kala duwan, kalluumeysiga, dhaqaalaha, kaabayaasha bulshada iyo u nuglaanta masiibooyinka dabiiciga ah;

   j) hirgalinta barnaamijyada iyo mashaariicda lagu ilaalinayo ilaha biyaha, xeebaha, dhirta, dhulka, noolaha kala duwan, kalluumeysiga iyo kaabayaasha bulshada, iyo inay gacan ka geystaan fayo-qabka caafimaadka iyo hab-nololeedka dadka Soomaaliyeed; iyo

   x) ka qayb qaadashada shirarka iyo fagaarayaasha caalamiga ah iyo kuwa gudaha iyada oo ujeeddadu tahay in la helo kaalmo wax ku ool ah oo wax looga qabanayo saameynta isbedelka cimilada.

2. Wasaaraddu waa in ay dejisaa tallaabooyinka ku aadan **u diyaar garowga** isbaddelka cimilada iyo yareynta qaaca hawada lagu sii daayo.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 55
## Kala-Guurka Cadaalad ku-Dhisan (just Transition)

1. Soomaaliya waxa ay u bahantahay cadaalad ku dhisan si ay ugu gudubto hormar iyo dhaqaale waara oo si cadaalad ah u helo, gaar ahaan kuwa sida tooska ah u saameyey isbaddelka cimilada.
2. Wasaaradd,deegaanka iyo isbadalka cimilida waxa ay diyaarineysaa ayna fulineysa siyaasada Kala-Guurka cadaalad ku-dhisan si sare logu qaado fursadaha bulsho iyo dhaqaale ee isbadalka cimilada keenaan, iyadoo la yareenayo, si taxadar lehna loo maareenayo caqabad ama khatar kasta.
3. Mabaadi'da Caalamiga ah ee Kala-Guurka Ku-dhisan waa in lagu xaqiijiyaa wada-hadal bulsho oo wax ku ool ah oo dhexmara dhammaan qeybaha bulshada uu sameeyey isbadalka cimilada sida ganacsatada, muruqmaalka/shaqaalaha/xoogsatada iyo Dowladda Federaalka/ Dowlad Goboleedyada, iyadoo la ixtiraamayo mabadi'da asaasiga ah ee shaqada iyo xuquuqda shaqalaha.

## Qodobka 56aad
## Shaybaarka Deegaanka

1. Wasaaraddu waa in ay:
   b) Sameeysaa shaybaar deegaan;
   t) Qeexdaa shaybaarka deegan ee la aqoonsan yahay si ay u baaraan muunadaha (samples) la xiriira arrimaha deegaanka.
2. Wasaaraddu waa in ay qeexdaa, iyadoo ku soo saareysa faafinnada rasmiga ah ee Dowladda:
   b) Hawlaha ay qaabanayaan shaybaarka deegaanku;
   t) Nidaamka shaqo ee ku aadan muunadaha hawada, biyaha, carrada iyo walxaha kale ee la baarayo, qaabka loo qorayo warbixinta shaybaarka iyo khidmadda baaritaanka;
   j) Wixii kale ee loo baahan yahay si loo fududeeyo hawlaha shaybaarka.
3. Iyadoo la tashaneeysa wasaaradaha ay khuseyso, wasaaraddu waxa ay qeexaysaa nidaamka muunadda loo qaadayo si loo baaro.

## Cutubka 11aad

## Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

## Qodobka 57aad

## Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qofka raba in uu fuliyo mashruuc waxaa ku waajib ah in uu sameeyo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada, ka hor inta aan la bilaabin mashruuca, xiitaa haddii qofku haysto ruqsad ama ogolaansho uu ku fuliyo mashruuca.
2. Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada waxa ay khuseysaa mashaariicda deegaanka waxyeeleyn kara. Mashaariicdaas waxaa ka mid ah:
   B. Warshadaha Shidaalka soo saara iyo kuwa sifeeya ee berriga iyo badda
   T. Alluminiyam,
   J. Layrka (Nalka) iyo **Anteenooyinka Isgaarsiinta.**
   X. Warshadaha saameyntoodu ay gobolo kala duwan iskaga gudbi karto.
3. Isagoo faqrada 2aad ee qodobkan aan waxba laga badelayn, Wasaaraddu waxa ay xeer-nidaamiye ku soo saaraysaa liisto mashaariicda iyo warshadaha loo baahan yahay in ay sameeyaan Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
4. Wasaaraddu waxa ay wax ka badal iyo dib u eegis wakhti leh ku sameynaysaa liiska markii loo baahdo.

## Qodobka 58aad

## Dabagalka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qofka raba in uu fuliyo mashruuc, kaasoo ah mashaariicda ku xusan Lifaaqa 1aad ee ku lifaaqan Sharcigan, waxaa ku waajib ah in uu sameeyo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada isla markaa uu bixiyo kharashka ku baxaya qiimayntaas (daraasadda);
2. Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada waa in la sameeyaa ka hor inta aan mashruuca la fulin;
3. Lama bixin karo ruqsad, taas oo ogolaanaysa in la fuliyo mashruuc iyadoo aan la sameyn Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada .
4. Wasaaraddu waa in ay la socotaa hawlaha (mashaariicda) iyo ficilada deegaanka saameyn ku yeelan kara: dhulka, hawada iyo biyaha Soomaaliya.

## Qodobka 59aad

### Hab-raaca Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Xeer-nidaamiye ayaa qeexi doona qaabka loo samaynayo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
2. Iyadoo faqrada 1aad ee qodobkan aan waxba laga badelayn, Xeer-nidaamiyuhu waa in uu qeexaa:
   b) Nooca mashaariicda loo baahan yahay in ay sameeyaan Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada ;
   t) Nidaamka Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida warbixinta loo qorayo (format), tijaabinada saynis (baaris) iyo arrimaha kale ee la xiriira hubinta qiimeynta;
   j) Foomamka loo baahan yahay in la buuxiyo iyo khidmadda (fee) la qaadayo ee Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida codsiga, warbixinta, qiimeynta, natiijada iyo ansixinta;
   x) Awooddaha hay'adaha ku shaqada leh Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada iyo dhaqan gelinteeda;
   Kh) Ansixinta (bixinta ogolaansho) iyo shuruudaha ku xiran;
   d) Dhaqangelinta shuruudaha ku xiran mashaariicda ogolaanshaha la siiyay;
   r) Xadgudubyada shuruudaha Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada iyo ciqaabtooda.

## Qodobka 60aad

### Warbixinta Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Iyadoo la raacayo qodobka 58aad ee Sharcigan, waa in milkiilaha mashruuc uu sameeyaa Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada .
2. Warbixinta la diyaariyay ee ku saabsan Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada waa in loo gudbiyaa Wasaaradda;
3. Warbixinta ku xusan faqradda 2aad ee qodobkaan waa in ay ku jiraan dhamaan macluumaadka ku saabsan mashruuca, si waafaqsan xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada iyo arrimaha bulshada. Waa in warbixinta loo diyaariyaa qaabka (format & guidelines) la ogolyahay.
   Macluumaadka waxaa ka mid ah:
   b) Xaalada hadda ee goobta **ku sugan tahay** (existing condition)



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

t) mashruuca, tallaabooyinka lagu ilaalinayo deegaanka iyo haddii masiibo dhacdo sida loo yareynayo khasaaraha ka dhalan kara;

j) Saameynta deegaan ee mustaqbalka la filan karo.

4. Warbixinta ku xusan qodobkan waa in uu diyaariyaa khabiir madax banaan.
5. Wasaaraddu waxa ay codsan kartaa macluumaad ama caddaymo dheeraad ah. Wasaaraddu waxa ay u xilsaari kartaa khabiir wasaaradda ka socda. Ka hor inta wasaaraddu sidaas yeelin, waa in uu fursad siiyaa cidda mashruuca leh si fikirkooda loo maqlo.

## Qodobka 61aad

## Guddiga Qiimaynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Wasaaraddu waa in ay samaysaa Guddi farsamo oo lagu magacaabo Guddiga Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
2. Guddiga farsamo waxa uu ka talo bixinayaa qoraallada ama warbixinta laga sameeyo qiimaynta deegaanka. Agaasimaha guud ayaa qeexi doona qaabka iyo nimaadka shaqo ee gudiga.
3. Xubnaha Guddigu waxay noqonayaan:
    b) Xubnaha farsamo ee Wasaaradda
    t) Xubin ka socota wasaaradaha ay khuseyso
    j) Xubnaha kale ee ay Wasaaradda u aragto in ay Guddiga qayb ka noqdaan

## Qodobka 62aad

## Ruqsad ama Shati

1. Marka ay ku qanacdo warbixinta Qiimeynta Saameynta Deeganka iyo Bulshada, Wasaaraddu waxay bixinaysaa ogolaanshaha fulinta mashruuca isla markaana waxa kale oo ay raacin kartaa shuruudaha loo baahan yahay in la tixgaliyo si loo ilaaliyo deegaanka, kheyraadkana si waara looga faa'idaysto.
2. Haddii Wasaaraddu ku qanci waydo warbixinta Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada , mashruuca lama fulin karo, wax ruqsad ahna lama bixinayo.
3. Wasaaraddu waxay burin kartaa ama dib ula noqon kartaa ogolaansho ay bixisay, haddii lagu xadgudbo shuruudaha la socday ruqsadda sida ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.

4. Haddii ruqsad la buriyo, la tirtiro ama lala noqdo, sida ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan, haystaha ruqsaddu ma sii wadi karo mashruuca ilaa inta uu ruqsad cusub ka helayo.
5. Qofka ku qanci waaya go'aanka Wasaaradda, waxa uu racfaan u qaadan karaa maxkamadda ku xusan qodobka 86aad ee xeerkan.

### Qodobka 63aad

### Mudnaan gaar ah oo la xiriirta Ruqsadda

1. Wasaaradda looma qabsan karo haddii ay dhibaato ka dhalato mashruuc si sax ah loo qiimeeyay oo ruqsadna la siiyay.
2. Difaac ma noqon karto haysashada ruqsadda qiimaynta saamaynta deegaanka, haddii ficil madani ah lagu soo oogo hirgaliyaha mashruuca oo ku saabsaan sida mashruuca loo maareeyay ama loo fuliyay.

### Qodobka 64aad

### Xaqa helidda Xogta

1. Haddii aanu jirin dan guud ama mid gaar ah oo warbixinta qiimeynta sir ka dhigaya, qof kastaa wuu heli karaa warbixinta iyo natiijooyinka Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
2. Sirta ganacsiga (trade and business secrecy) waa in mar kasta la ilaaliyaa.

## Cutubka 12aad

## Hagaajinta iyo Dib u soo Celinta Deegaanka

### Qodobka 65aad

### Waajibaadka dib u hagaajinta Deegaanka

1. Dowladaha xubinta ka ah Federaalka waa inay hubiyaan in goobaha wasakhaysan la hagaajiyo, gaar ahaan haddii goobahaasi horseedi karaan waxyeelo ama khatar caafimaad.
2. Wasaaraddu waa in ay diiwaan gelisaa goobaha wasakhaysan isla markaana diiwaankaasi uu noqdaa mid dadweynuhu heli karaan.
3. Wasaaraddu waxay sameyn kartaa baaritaan, kormeer iyo dib u hagaajin ku aadan goobaha wasakheysan ama waxa ay u xilsaari kartaa cid kale in ay samayso, haddii:
    b. Halis degdeg ah ay jirto;
    t. Qofka goobta wasakheeyay aanu awoodin in uu nadiifiyo; ama
    j. Qofka goobta wasakheeyay uu wax ka qaban waayo.

## Qodobka 66aad

## Masuuliyadda Kharashka

1. Qofka masuulka ka ah wasakheynta ayaa bixinaya kharashka hagaajinta ama nadiifinta.
2. Haddii ay laba qof iyo in ka badan ay masuul ka yihiin **waskheynta,** bixinta kharashku waxa ay ku xiran tahay xaddiga wasakheynta qof kasta uu gaystay.
3. Dowladda aya bixinaysa qaybta kharashka qofka la waayo;
4. Wasaaradda ayaa soo saaraysa sida loo qaybinayo bixinta kharashka dadka dhibka gaystay;
5. Wasaaraddu waxa ay qofka dhibka gaystay ka dalban kartaa in uu keeno damaanad, taas oo laga hayn doono inta uu bixinayo kharashka baarintaanka, kormeerka iyo hagaajinta goobta la wasakheeyay.

## Qodobka 67aad

## Amarka dib u soo celinta Deegaanka

1. Iyadoo la tixgelinayo qodobada Sharcigan, Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa amarka dib u soo celinta deegaanka;
2. Amarka dib u soo celinta deegaanka ee ku xusan faqradda 1aad ee Sharcigan:
    b. **Waxa** uu ku amri karaa qofkii deegaan waxyeeleeya in uu deegaanka ku soo celiyo sidii uu ahaa ka hor intii aanay waxyeeladu soo gaarin;
    t. Waxa uu amarku ka hor istaagi karaa qof, in uu qaado tallaabooyin waxyeelaynaya deegaanka;
    j. Waxa uu amarku ku aadanaan karaa qof in uu bixiyo magdhaw la siinayo dadka ay waxyeello ka soo gaartay ficilada uu qof ku kacay ee uu deegaanka wax ugu dhimay;
    x. Waxa uu amarku qofka ku soo rogi karaa ganaax lacageed.
3. Amarka dib u soo celinta deegaanka waxa ku qornaan kara shuruudaha iyo waajibaadyada kale ee dib loogu soo celinayo deegaanka, si loo gaaro arrimaha ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan;
4. Iyadoo aan waxba laga badelayn faqradda 2aad ee qodobkan, amarka dib u soo celinta deegaanku, waxuu qofka uu ku socdo ku amri karaa:
    b. Qaadidda tallaabooyinka lagaga hortagaayo ama lagu joojinaayo wasakheynta deegaanka;
    t. In dhulka lagu soo celiyo sidii uu ahaa isla markaana la nadiifiyo carrada, dhir dib loogu beero, lana soo celiyo qaab dhismeedkii



dhulka, astaamihii taariikhiga ee uu dhulku lahaa, taas oo ay ku jirto xeebaha iyo agagaarka badda;

j. Joojinta tallaabo kasta oo waxyeelayn karta deegaanka;

x. Ka saaridda (bixinta) shay dhulka la galiyay ama lagu aasay;

kh. Ka hortagga dhawicidda dhulka, dhirta, xayawaanka iyo biyaha (qaybaha kala duwan ee biyaha dhulka Soomaaliya);

d. Ka bixinta qashin lagu aasay dhulka ama goob kale (sida badda, webiyada) isla markaana burburinta qashinkaasi si waafaqsan qodobbada Sharcigan;

r. Bixinta magdhawga amarku qeexayo.

5. Soo saaridda amarka dib u soo celinta deegaanka waxaa hagaya:

b. Mabaadi'da wanaagsan ee maareynta deegaanka iyo qodobbada Sharcigan; iyo

t. In qofka uu amarku ku socdo loo sharaxo wixii dhacay, lana ogeysiiyo xaqa uu u leeyahay rafcaan in uu ka qaato go'aanka isagoo **cabasho** u gudbinaya maxkamadda awooda u leh.

## Qodobka 68aad

## Wargelinta Taxadar ka (Precautionary Notice)

1. Haddii sarkaal deegaan uu ka shakiyo in hawl meel ka socota (ama ficil kale) ay saamayn ku yeelan karto deegaanka, sarkaalka deegaanka waxa uu milkiilaha ama qofka hawsha masuulka ka ah siinayaa, ogeysiis lagaga dalbanayo in uu sameeyo arrimaha ku xusan faqrada 2aaad ee qodobkan.
2. Ogeysiiska ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan waxa uu amri karaa in la sameeyo waxyaabahan:

b. In macluumaad ku saabsan hawsha ama ficilka meesha ka socda loo gudbiya Wasaaradda, taas oo lagu caddaynayo in hawshu aanay deegaanka saamayn ku lahayn;

t. In la qaado tallaabooyin kale oo lagu yaraynayo saamaynta ficilkaasi ku yeelan karo deegaanka;

j. In wax ka badel ama hagaajin lagu sameeyo hawsha meesha ka socota. Wax ka badelkaas ama hagaajintaas waa in ay ku qancaan hayadaha awooda u leh dalab kasta oo lagu yaraynayo ama dhimayo saamaynta deegaanka.

3. Qof kasta oo loo gudbiyo ogeysiiska ku xusan qodobkan, waa in uu ka soo baxaa dalabka ogeysiiska ku xusan isla markaana uu kaga soo jawaabaa

wakhtiga loo qabtay. Jawaabta waa in ay ku qancaan hay'adaha awoodda u leh oo ay isla qaataan in hawsha meesha ka socota aanay saamayn ku lahayn deegaanka;

4. Qofka ogeysiis loo gudbiyo sida ku xusan qodobkan ee:
   b. Ka soo bixi waaya dalabka ogeysiiska; ama
   t. Qancin waaya hayada awoodda u leh, in hawshu meesha ka socota aanay saamayn ku lahayn deegaanka –

   Waxa uu galay fal dambiyeed oo waxa lagu xukumayaa –

   b. Ganaax lacageed oo u dhigma dhibka uu geystay deegaanka.
   t. Haddii uu deegaanka dhib weyni soo gaaray, ganaax lacageed oo u dhigma dhibka uu deeganka geystay ama xarig aan ka 6 bilood ama labadaba.

## Qodobka 69aad

## Wargelinta Hawl Joojin

1. **Wargelinta** ku xusan qodobkan waxa la bixin karaa marka loo baahdo, ~~oo~~ **kumana** xirna qodobka 68aad ee Sharcigan;
2. Haddii Wasaaraddu ay dareento in hawl ama ficil meel ka socda uu halis degdeg ah ku yeelan karo deegaanka, waxa ay soo saaraysaa **Wargelinta** ku xusan qodobkan.
3. **Wargelinta** qodobkan–
   b. Waxa loo diri karaa qofka ay Wasaaraddu aaminsantahay in uu hawsha ama ficilka wado ama masuulka ka ah;
   t. **Wargelinta** waa in lagu qeexaa ficilka ama hawsha iyo dhibaatada ay deegaanka gaarsiinayso; iyo
   j. **Wargelinta** waxaa lagu dalban karaa in ficilka ama hawsha la joojiyo ilaa inta hay'addu ku qancayso in halis deegaan aanay jirin;
4. **Wargelinta** ku xusan qodobkan, waxa la soo saari karaa xiitaa haddii ruqsad ama ogolaansho loo haysto in la sameeyo ficilka ama hawsha.
5. Wasaaradda ruqsadda bixisay masuul kama noqonayso wixii khasaare ah ee ka dhashay joojinta hawsha.
6. Qof kasta oo –
   b) Ka soo bixi waaya qodobbada **Wargelinta** (dalabka **Wargelinta**);
   t) Isagoo ogeysiiska la soo gaarsiiyay, hadana qofka kale u ogolaada in hawsha uu sii wado isagoo ku xad gudbaya qodobbada **Wargelinta;**



j) Si ula kac ah u jabiya (ugu xadgudba) qodobbada **Wargelinta**

Waxa uu qofkaasi galay fal dambiyeed, waxaana lagu xukumayaa ganaax dhan ama xarig aan ka badanayn 3 bilood.

7. Maxkamaddu waxa kale oo ay qofka ku soo rogi kartaa ciqaab dheeri ah taas oo noqon karta:
   b) In uu qofku hagaajiyo deegaanka uu dhibka soo gaaray;
   t) Bixiyo lacag (kharashka) Dowladdu ku hagaajinayso deegaanka dhibku soo gaaray; ama uu magdhaw siiyo cid kasta uu dhib kasoo gaaray ficilkiisa.

## Cutubka 13aad
## Maareynta Qashinka
## Qodobka 70aad
## Maareynta Qashinka

1. Maamul Goboleed kasta isagaa masuul ka ah maareynta qashinka **deegaannada** uu maamulo;
2. Qashinka ka soo baxa Maamul Goboleed, maaha in uu wasakheeyo deegaanka Maamul Gobolleed kale.
3. Maamul Goboleedyadu waa in ay iska kaashadaan **maareynta** wasakheynta xuduudaha iskaga gudba;
4. Maamuul Gobolleedyadu waa in wixii khilaaf ah ee ku saabsan wasakheyn/qashin xuduuda ka gudbay, si nabad ah u xaliyaan;
5. Haddii ay xal ka gaari kari waayaan, waxaa dhexdhexaadinaysa Wasaaradda iyadoo:
   b. Cayimaysa meesha qashinku ka yimid (source);
   t. In tallaabooyin lagu joojinayo uu qaado Maamulka uu qashinku ka yimid;
   j. Magdhaw la siiyo Maamulka dhibku soo gaaray;
   x. Tallaabooyin kale oo lagu xalinayo khilaafka.
6. Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa xeer-nidaamiye ku aadan maareynta qashinka.

## Qodobka 71aad
## Qashinka/Haraaga la Dhigo Goobaha aan loogu tala galin

1. Iyadoo aan waxba laga badelayn qodobka 70aad, waa mamnuuc in qashin lagu tuuro wadooyinka, xeebaha, webiyada, ilaha biyaha iyo dhamaan goobaha aan loogu talo galin in qashinka lagu tuuro ama **lagu** rido.

2. Qashinka waxa lagu tuuri karaa ama **lagu** ridi karaa meelaha gaarka loogu diyaariyay in qashinka lagu rido;
3. Dowladaha hoose ama cida ay u igmadaan ayaa mas'uul ka ah goobaha qashinka lagu ridaayo iyo dayactirkooda, waana in dadweynuhu helaan goobo qashinka loogu tala galay oo aan ka fogayn.
4. Qofkii ku xadgudba qodobkan waxa uu galay fal-dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax aan ka yareyn xadgudubka uu geystay ama xabsi aan ka badnayn 15 maalmood ama labadaba.

## Qodobka 72aad

## Mamnuucid bacaha

Iyadoo la tixgelinayo dhibaatada ay soo gaarsiiyaan deegaanka, Sharcigani waxa uu mamnuucayaa bacda fudud **iyo dhamaan kuwa ay isku bahda yihiin** (light weight single use plastic).

## Cutubka 14aad
## Noolaha Kala Duwan
## Qodobka 73aad
## Ilaalinta Noolaha Kala Duwan

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waa in ay dejisaa isla markaana dhaqan galisaa Siyaasaddo iyo Barnaamijyo lagu ilaalinaayo noolaha kala duwan ee Soomaaliya, gaar ahaan:
   b. Xakameynta iyo ciribtirka geedaha shisheeye (invasive species);
   t. Ilaalinta iyo daryeelka noolaha kala duwan (species);
   j. Ilaalinta iyo xakameynta duurjoogta Dalka iyo kuwa shisheeye ee la keeno waddanka ama ka sii gudbaya Soomaaliya;
   x. Xakameynta ka ganacsiga duurjoogta Dalka iyo kuwa shisheeye

   Kh. Ilaalinta iyo ka hortagga in ay dilaacaan cudurada xayawaanka laga qaado.

   d. Aqoonsiga iyo isticmaalka aqoonta dhaqan ee dadka Soomaaliyeed, aqoonta casriga ah kuwaas oo lagu maareynayo noolaha kala duwan ee Dalka;
   r. Samaynta seerooyin (goobo gaar u ah noolaha kala duwan), iyo hirgelinta tallaabooyinka lagu dhawrayo noolaha kala duwan ee Soomaaliya;
   s. Horumarinta teknoolojiyaddaha la xiriira noolaha kala duwan ee Soomaaliya;

   Sh. Hirgelinta nidaam lagu kor meerayo (lagula soconayo) arrimaha la xiriira ama saameyn ku leh noolaha kala duwan ee Soomaaliya.

   Dh. Wasaaraddu waa in ay qaadaa tallaabooyinka kale ee ay u aragto in ay lagama maarmaan u yihiin ilaalinta iyo daryeelka noolaha kala duwan.
2. Wasaaraddu waa in ay qaadaa tallaabooyin lagu ilaalinayo noolaha halista ugu jira in ay dabargo'aan iyo dhamaan xayawaanka halista ku sugan.
3. Wasaaraddu waxay soo saareysaa Xeer-Nidaamiye, si loo hirgeliyo arrimaha ku xusan qodobkan.

## Qodobka 74aad
## Ilaalinta Duurjoogta iyo Shimbiraha

1. Xayawaanka duurjoogta, shimbiraha iyo gaar ahaan, noocyada aan badnayn ee halista ugu jira in ay dabargo'aan iyo deegaannada ay ku nool

yihiin waa in la ilaaliyaa iyadoo la raacayo xeer-nidaamiyeyaasha iyo amarada kale ee ay soo saarto Wasaaradda, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso;

2. Si loo fuliyo faqrada 1aad ee qodobkan, waa in daraasad lagu sameeyaa noolaha kala duwan ee Dalka iyadoo la diiwaan gelinayo xayawaanka Dalka, xaaladda uu ku sugan yahay, noocyada xayawaanka, kuwa halista ugu jira in ay dabargo'aan iwm. Sidoo kale waa in la diiwaan geliyaa hoyga noolaha kala duwan.
3. Tallaabooyinka iyo amarada ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa ka mid noqonaya goobaha la ilaaliyay ee duurjoogtu ku nooshahay iyo seerayaasha, iyadoo la qeexayo:
    b) Magaca iyo soohdimaha goobaha la ilaaliyay.
    t) Seerayaasha Qaranka (National parks);
    x) Goobaha kale ee ay cayinto Wasaaradda, iyadoo la tashanaysa wasaaraddaha ay khuseyso.
4. Waxaa la mamnuucay ugaarsiga sharci darrada ah, dhoofinta iyo ka ganacsiga duurjoogta iyo dhamaan duurjoogta shuruucda caalamku ay mamnuuceen ka ganacsigooda, sida heshiiska Caalamiga ah ee Mamnuucaya ka Ganacsiga noocyada noolaha, dhirta iyo duurjoogta dabargo'a halista ugu jirta.
5. Cid kasta oo ku kacda xadgudub ka dhan ah qodobkan, wuxuu galay fal-dambiyeed, waxaana lagu xukumay ciqaab u dhaxeysa lix bilood ilaa lix sano ama ganaax lacageed. Ciqaabta iyo ganaaxa waxaa loo eegayaa halista fal-dambiyeedka iyo cida falka gaysatay.
6. Iyadoo aan waxba laga badelayn faqrada 5aad ee qodobkan, qofka fal-dambiyeedka galay, waxa kale oo lagu xukumi karaa:
    b. In lala wareego duurjoogta iyo qalabka loo adeegsaday ugaarsiga sida hubka iyo gaadiid la isticmaalay;
    t. In lala wareego dhammaan wixii manaafacaad ah ee laga helay ka ganacsiga duurjoogta;
    j. In lagala noqdo shaati ama ruqsad ganacsi, ama ruqsad kale oo la siiyay qofka fal-dambiyeedka galay.
    x. Bixinta kharashka dib ugu celinta duurjoogta dalkii ay ka yimaadeen, haddii la dammaanad qaado in la celinayo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
ADALKA KARE

## CUTUBKA 15aad
## Ilaalinta Deegaanka Badda iyo Xeebaha
### Qodobka 75aad
### Ilaalinta Deegaanka Badda

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashaneysa Wasaaradaha ay khuseyso, waxa ay soo saaraysaa xeer-nidaamiye ku habboon oo lagu ilaalinayo, yareynayo ama xakameynayo wasakheynta deegaanka badda iyadoo laga ilaalinayo:
    b) Wasakhda ka timaada beriga oo ay ku jiraan wasakhda lagu shubo ama la raaciyo webiyada iyo dhuumaha;
    t) Maraakiibta iyo matoorada kale ee laga isticmaalo xeebaaha;
    j) Qalabka ama aaladaha loo isticmaalo sahminta ama ka faa'iideysiga kheyraadka dabiiciga ah ee badda gunteeda; iyo ilaha kale ee wasakheyn kara deegaanka badda.

### Qodobka 76aad
### Ilaalinta Xeebaha

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khusayso ee heer Federaal iyo heer Maamul Goboleed, waa iney sameeysaa daraasad ku saabsan xeebaha iyo qorshaha Qaran ee maareynta xeebaha.
2. Warbixinta daraasadda ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan waxay ka koobnaan kartaa:
    b) tirakoob dhamaystiran oo ku aadan dhismooyinka, jidadka, dekeddaha, qashin qubka iyo goobaha kale ee ku yaal xeebaha;
    t) xaaladda geedaha (mangroves) iyo marsooyinka laga helo xeebaha;
    j) tirakoob dhamaystiran oo ku saabsan goobaha qiimaha leh ee dhanka dalxiiska (madadaalada) iyo dhaqanka;
    x) tirakoob ku saabsan goobaha xeebaha muhiimadda gaarka ah u leh cilmi-baarista la xiriirta kalluumeysiga, nabaad-guurka iyo arrimaha kale ee la midka ah;

    kh) Qiyaasta xadiga ciidda badda iyo walxaha kale ee laga qaado ama saaro badda;

    d) qiyaasta saameynta nabaad-guurka xeebaha; iyo
    r) qiyaas ku saabsan wasakhowga badda, ilaha ay ka yimaadaan iyo burburka deegaanka xeebaha;
    s) qiyaas ilaha biyaha macaan ee laga heli karo xeebaha; iyo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
ADALKA SARE

sh) wixii xog iyo macluumaad kale ah ee la xiriira xeebaha.

3. Ogolaansho la'aan qofna xeebaha Dalka kama samayn karo:
   b) taagid, dhisid, dhigid ama ku shubid, bedelid, dheereyn badda ama hareeraheeda;
   t) qodis, daloolin, ama wax ka bedelid salka badda ama xeebta;
   j) ku beeris dhir badda gudaheeda ama hareeraheeda;
   x) ku shubid ama ku ridid xayawaan ama noole kale badda gudaheeda ama xeebta;
   kh) ku shubidda walax kasta oo saamayn ku yeelan kara deegaanka badda; iyo
   d) ficilada kale ee wasakheyn kara xeebaha.
4. Qof kasta oo ku xadgudba qodobbadan wuxuu galay fal dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax ama xabsi ama labadaba. Maxkamadda ayaa xadideysa ganaaxa ama mudada xabsi iyada oo eegeysa waxyeelada dhacday.

## Cutubka 16aad
## Xadgudubyada Deegaanka
### Qodobka 77aad
### U hogaansanaan La'aanta Shuruudaha Ilaalinta Deegaanka

Qof kasta oo ku guul dareysta inuu u hoggaansamo shuruudaha ku xusan ruqsadda ama oggolaansho sharci wuxuu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabi doonaa ganaax lacageed ama xabsi muddo ah oo aan ka badnayn 6 bilood, **haddii aan ciqaab ka beddelan lagu xusin sharcigan dhexdiisa.**

### Qodobka 78aad
### Bixinta macluumaad been abuur ah

Qof kasta oo si ula kac ah u bixiya ama u baahiya macluumaad been abuur **ah** oo ku saabsan codsiyada uu qeexayo Sharcigan ama Xeer-nidaamiye wuxuu galayaa fal dambiyeed waxaana lagu **ciqaabayaa hab waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.**

## Qodobka 79aad

## Fulinta Mashruuc aan Ogolaansho haysan

1. Ciddii fulisa mashruuc aan ogolaansho haysan sida ku xusan Sharcigan waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabi doonaa ganaax lacageed ama xabsi muddo aan ka badnayn 2 sano.
2. Ka sakow ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, maxkamaddu waxay ku soo rogi kartaa qofka fal dambiyeedka galay in uu bixiyo kharashka dib u soo celinta goobta oo mashruuca ka sameeyay (ama samayn rabay).

## Qodobka 80aad

## Xadgudubyada Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qof kasta oo:

b. **Ku** xadgudba qodobka Cutubka 11aad ee Sharcigan ee keeni waaya warbixinta mashruuc;

t. Sameyn waaya Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida ku xusan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyeyaasha la soo saaro;

j. Ka been abuura warbixinta Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada ,

Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabi doonaa ganaax lacageed oo u dhiganta falka uu ku kacay ama xabsi mudo aan ka badnayn 3 sano.

## Qodobka 81aad

## Xadgudubyada Kormeerka

1. Iyadoo aan waxba laga badelayn qodobka 20 aad ee Sharcigan, qof kasta oo:

b. Carqaladaya ama hor istaaga Sarkaal Deegaan oo gudanaya waajibaadkiisa ku xusan Sharcigan ama Xeer-nidaamiye;

t. Diida codsi ka yimid Sarkaal deegaan oo waafaqsan Sharcigan

j. U diida Sarkaal deegaan in uu galo dhisme, dhul, doon, gaari/baabuur iwm

x. Iska dhiga (isku eekaysiisa) Sarkaal deegaan;

Kh. U diida Sarkaal deegaan in uu eego dokumentiyo uu dalbaday;

d. Diida in uu sheego magaciisa iyo goobta uu degan yahay ama sheegta magac been ah iyo goob aan sax ahayn;

r. Marin habaabiya ama macluumaad khaldan u sheega Sarkaal deegaan;

s. Diida, dayaca, ka soo bixi waaya in uu sameeyo amar hagaajin ah oo loo soo jeediyay; Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax lacageed ama xabsi mudo aan ka badnayn 3 bilood.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
ADALKA SARE

## Qodobka 82aad

## Xadgudubyada Heerarka Deegaanka

1. Qof kasta oo:

b. Ku xadgudba heer deegaan oo uu dhigayo Sharcigan ama Xeer-nidaamiye soo baxay;

t. Ku xadgudba qodobbada Sharcigan;

j. Ku takrifala kheyraadka dabiiciga ah ama si **wanaagsan** u isticmaalin isla markaana jabiya qodobbada Sharcigan, Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax lacageed ama xabsi aan ka badnayn 1 sano.

## Qodobka 83aad

## Xadgudubyada Qashinka Halista ah, Kiimikooyinka iyo Walxaha Shucaaca

1. Qof kasta oo:

b. U maareyn waaya qashinka halista ah, sida uu dhigayo Sharcigan ama Xeer-nidaamiye;

t. Soo dejisa qashin halis ah, taas oo aan waafaqsaneyn Sharcigan;

j. Si ula kac ah magac khalad ah ugu qorta qashinka iyo walxaha halista ah;

x. U maareyn wayda kiimikooyinka iyo walxaha shucaaca sida uu dhigayo Sharcigan;

Kh. Ku kacda ama ka qayb qaadata kootarabaanin sharci darro ah (illegal trafficking) oo ku saabsan qashinka halista ah, kiimikooyinka, sunta iyo walxaha kale ee halista ah;

d. U burburisa kiimikooyin si aan waafaqsaneyn Sharcigan;

r. Bixin wayda ama been ka sheegta macluumaadka ku saabsan qashinka halista ah, kiimikooyinka, walxaha shucaaca iwm,

Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax lacageed ama xabsi muddo aan ka badnayn 3 sano.

## Qodobka 84aad

## Xadgudubyada Wasakheynta

1. Qof kasta oo:

b. Ku sii daaya ama ku shuba wasakh (qashin) deegaan biyood si aan waafaqsaneyn Sharcigan ama Xeer-nidaamiye;

t. Wasakheeya deegaanka

j. Ku sii daaya ama ku shuba deegaanka wasakh;

Ku sii daaya ama ku shuba deegaanka wasakh; Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabayaa si waafasan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.xukumayaa ganaax lacageed ama xabsi muddo aan ka badnayn 3 bilood.

2. Ka sokow xukunka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, qofka fal dambiyeedka geystay waxa kale oo lagu soo rogi karaa:

b. In uu bixiyo kharashka lagu nadiifinayo deegaanka uu waxyeelada gaarsiiyay;

t. In uu nadiifiyo deegaanka uu waxyeelada gaarsiiyay

3. Iyadoo aan waxba laga badelayn faqradada 1 & 2 ee qodobkan, bi'iyaha (polluter) waxa kale oo lagu xukumi karaa in uu bixiyo magdhaw la siinayo ciddii ay dhibaato ka soo gaartay wasakheynta uu geystay. Qiyaasta magdhawgu waxa uu ku xiran yahay khasaaraha ka dhashay falka.

## Qodobka 85aad

## Cabasho

Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanada Wasaaraddu soo saarto, sida uu dhigayo xeerkan ama xeerarka ka sii farcama, waxa uu **cabasho** u qaadan karaa maxkamadda.

## Qodobka 86aad

## Ciqaab Guud

Qof kasta oo ku xadgudba qodobbada Sharcigan ama xeer-nidaame ka sii farcama oo aanay jirin ciqaab goonni ah ama aanay cuslayn ciqaabta uu Sharcigani dhigayo, waxaa loo raacayaa ciqaabta xarig & ganaax ee ku xusan Xeerka madaniga iyo ka ciqaabta guud.

## Qodobka 87aad

## Maxkamadda Awooda u Leh Arrimaha Degaanka

1. Iyadoo la raacayo Xeerka Nidaamka Garsoorka, maxkamadda awooda u leh xukunka arrimaha degaanka ee Sharcigani dhigayo waa kuwa ku xusan Dastuurka iyo Sharciga Nidaamka Garsoorka 1974 (ama sharciga cusub ee lagu badelo) sida Maxkamada Degmada, Maxkamadda Gobolka, Maxkamadda Rafcaanka iyo Maxkamada sare.
2. Heerarka kala duwan ee maxkamadaha ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waa in ay yeeshaan qayb (Environmental Bench or Desk) u qaabilsan dacwadaha deegaanka;

3. Maxkamadaha waa in lagu tababaraa arrimaha la xiriira shuruucda deegaanka;

## Cutubka 17aad
## Dhaqangelinta Sharciga
### Qodobka 88aad
### Awoodda Dhaqan gelin ee Heer Federaal

1. Dhaqangelinta Sharcigan waxaa masuul ka ah Wasaaradda Deegaanka & Isbaddelka Cimilada;
2. Wasaaraddu waxay fulinaysaa awooddaha gaarka ah ee uu siinayo Sharcigani.

### Qodobka 89aad
### Awoodda Dhaqangelin ee Heer Maamul Gobolleed

1. Maamul Goboleedyadu waa in ay Sharcigan sidiisa u dabaqaan.
2. Maamul Goboleedyadu iyagoo raacaya qodobbada Sharcigan, waa in ay soo saaraan Sharciga Maareynta Deegaanka ee Heer Maamul Goboleed.
3. Xeerarka Maareynta Deegaanka ee Maamul Goboleedyada ee haatan jira waa in dib u eegis lagu sameeyaa si loo waafajiyo Sharcigan iyo Siyaasadda Qaran ee Maareynta Deegaanka.
4. Maamul Goboleedyadu waxa ay fulinayaan awoodaha uu Sharcigani siinayo.
5. Dowladdaha hoose ayaa door muhiim ah ku leh fulinta Sharciga sida maareynta qashinka.

### Qodobka 90aad
### Kormeeris

Wasaaradda ayaa kormeeraysa isla markaana la soconaysa dhaqangelinta Sharcigan iyo Siyaasadda Qaran ee Maareynta Deegaanka.

### Qodobka 91aad
### Hay'adaha kale ee qaybta ku leh Fulinta iyo Dhaqangelinta Sharcigan

1. In si wax ku ool ah loo dhaqan geliyo Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyayaasha la soo saaro waxa loo baahan yahay:

b. In dhamaan qaybaha kala duwan ee Dowladdu ay ka qayb qaataan fulinta Sharcigan iyo xeerarka ilaalinta deegaanka iyagoo

   i. Raacaya go'aanada Wasaaradda
   ii. Codsiyada Wasaaradda



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Cutubka 18aad
## Qodobo Gaar ah
## Qodobka 92aad
### Iskaashiga Ganacsiga Gaarka ah

1. Wasaaraddu waa in ay iskaashi dhaw la yeelataa ganacsatada;
2. Ganacsatada waxaa lala gali karaa heshiisyo ama is afgarad ku saabsan heerarka deegaanka iyo wakhtiga loo baahan yahay in la gaaro heerarkaas;

## Qodobka 93aad
### Baaritaanka ku saabsan Wasakheynta Deegaanka

1. Wasaaraddu waa in ay sameeysaa baaritaano lagu ogaanayo wasakheynta deegaanka isla markaana hubiyaan tallaabooyinka la qaaday ee wax lagaga qabanayo;
2. Baaritaanada ay sameeyaan Wasaaradaha deegaanka ee Maamul Goboleedyadu waa in ay u soo gudbiyaan Wasaaradda Deegaanka iyo isbeddellada cimilada.

## Qodobka 94aad
### Baaritaano Joogta ah

Wasaaraddu waxa ay soo jeedin kartaa in la sameeyo baaritaano joogto ah oo ku aadan warshadaha, sida kuwa shidaalka, goobaha qashinka lagu burburiyo iyo mashiinada dhismaha.

## Qodobka 95aad
### Macluumaadka iyo Sirta Xogta

1. Masuuliyiinta, khubarada iyo saraakiisha kale ee dhaqan gelinaysa Sharcigan, waxaa waajib ku ah in ay xafidaan sirta ama xogta ay hayaan;
2. Macluumaadka sirta ah ee masuuliyiintu helaan si waafaqsan Sharcigan, la lama wadaagi karo waddamada shisheeye. Waxa lala wadaagi karaa oo kaliya haddii uu jiro heshiis caalami ah ama Xeer heer Federaal ah oo ogol.
3. Wasaaradda ayaa masuul ka ah maamulka iyo hab-raaca ku saabsan faqradda 2aad ee qodobkan.

## Qodobka 96aad
### Qaadista Khidmadaha

1. Bixinta ruqsaddaha iyo adeegyada gaarka ah waxa laga qaadayaa lacag (fii);
2. Xadiga lacagta iyo foomka waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.

## Qodobka 97aad

## Tababarka iyo Daraasaadka

1. Wasaaraddu waxay horumarinaysaa aqoonta iyo xirfaddaha shaqaalaha u xilsaaran in ay dhaqan geliyaan Sharcigan;
2. Waxay taageeri karaan cilmi baaris ama daraasado;
3. Si loo yareeyo wasakheynta deegaanka, waxa ay dhiiri gelinayaan horumarinta makiinadaha iyo warshadaha casriga ah;
4. Wasaaradda ayaa sameynaysa qiimeyn guud oo ku saabsan waxtarka tababarada iyo daraasadaha la sameeyay hal mar sanadkii.

## Qodobka 98aad

## Iskaashiga Caalamiga ah ee Ilaalinta Deegaanka

1. Wasaaradda ayaa:

b. ka qayb galeysa ururada caalamiga ah iyo barnaamijyadda caalamiga ah iyo kuwa Gobolka ee ilaalinta deegaanka;

t. dhaqangelinaysa heshiisyadda caalamiga ah ee ku saabsan ilaalinta deegaanka;

j. Si loo kobciyo awoodda Dalka ee ku aadan deegaanka, Wasaaraddu waxay wada shaqayn dhaw la yeelanaysaa machadyada caalamiga ah ee aqoonta u leh arrimaha deegaanka;

x. dejinaysa nidaamka looga qayb galayo heshiisyada iyo kulamada caalamiga ah. Waa in ay Soomaaliya matalaan dad aqoon u leh arrimaha deegaanka;

kh. hogaaminaysa la shaqeynta ururada Gobolka isla markaana hubinaya in Soomaaliya ay qayb ka noqoto kulamada kana war hayso wixii ka soo baxa;

d. hageysa raadinta isla markaana diyaarinaya nidaamka loo marayo sidii loo heli lahaa kaalmo ku aadan dhaqan gelinta heshiisyada caalamiga ah iyo barnaamijyadooda;

## Qodobka 99aad

## Heshiisyada Caalamiga ah

1. Soomaaliya waxay qayb ka tahay heshiisyada caalamiga ah ee ku xusan Lifaaqa 2aad ee ku lifaaqan Sharcigan;
2. Shuruucda deegaanka ee Dalka waa in ay waafaqaan heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay.

## Qodobka 100aad

## Xeer-nidaamiye

Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxay diyaarineysaa xeer-nidaamiye ku saabsan arrimaha xeerkani ogolyahay in xeer-nidaamiye loo sameeyo si loo dhaqan geliyo qodobbada xeerkan.

## Qodobka 101aad

## Xeerarka Hore ee Deegaanka

**Sharcigan wixii laga waayo waxaa loola noqonayaa Xeerka Ugaarsiga iyo Ilaalinta Keymaha ee Xeer Lr. 15 soona baxay 25 Jannaayo 1969.**

## Qodobka 102aad

## Dhaqangalka Sharciga

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa, kadib marka ay ansixiyaan labada gole ee sharci-dejinta, madaxwaynuhuna saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah.

## Liifaaqa 1aad

### Nooca Mashaariicda loo baahan yahay in la sameeyo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

Mashruuc kasta oo saameyn ku yeelan kara nawaaxigiisa, dhulka iyo guud ahaan deegaanka waa in la sameeyaa Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida uu dhigayo Sharcigani ama xeer ka sii farcamay. Mashaariicdaas waxaa ka mid ah (laakiin kuma koobna oo kaliya):

1. Soo saaridda shidaalka
2. Warshadaha nukliyaarka
3. Horumarinta Magaalooyinka
4. Dhismaha wadooyinka iyo marinada kale ee gaadiidka
5. Biyo xireen
6. Macdan qodista
7. Warshadaha wax soo saara
8. Kaabayaasha layrka (nalka)
9. Goobaha qashin qubka (qashinka lagu burburiyo)
10. Mashruuc kasta oo xeer kale ama xeer-nidaamiye uu qeexayo

## Lifaaqa 2aad

## Liiska Heshiisyada Caalamiga ah

Muddadii ka horreysay 1991, Soomaaliya waxay qeyb ka ahayd dhowr heshiis oo caalami ah oo ku saabsan ilaalinta deegaanka. Waxaa intaa dheer, sannadihii u danbeeyay Soomaaliya waxay saxeexday heshiisyo badan oo la xiriira deegaanka. Iyadoo la aqoonsan yahay in mushkiladaha deegaanku ay xuduudaha iskaga gudbaan, dalku wuxuu saxeexay ama ansaxiyay heshiisyo muhiim ah oo dhinacyo badan taabanaya oo ku saabsan arrimaha deegaanka. Liistada soo socota waa heshiisyada ay Soomaaliya saxiixday ama ay ansixisay:

1. Heshiiska Caalamiga ah ee Mamnuucaya ka Ganacsiga Noocyada Noolaha Dhirta iyo Duurjoogta Dabargoa ku dhaw ama halista ku sugan (CITES);
2. Heeshiiska Ilaalinta Xayawaanka (duurjoogta) Xuduudaha iskaga Goosha;
3. Heshiis Goboleedka Ilaalinta Badda Cas iyo Deegaanka Gacanka Cadmeed;
4. Heshiis Goboleedka iyo Iskaashiga lagula Tacaalayo ama looga Hortagayo Wasakhaynta Shidaalka (batroolka) iyo Walxaha halista ah;
5. Heshiiska Qaramada Midoobay Sharciga Badda;
6. Heshiiska Qaramada Midoobay ee la Dagaalka Nabaad-guurka (Xaalufka) (UNCCD);
7. Heshiiska Qaramada Midoobay ee Isbedelka Cimilada (UNFCCC);
8. Heshiiska Kyota;
9. Heshiiska Noolaha Kala Duwan;
10. Heshiiska Sugnaanta (ilaalinta) Noolaha (Protocol on Bio-Security) (Protocol-ka Cartagena);
11. Heshiisyada Basel, Stockholm iyo Rotterdam;
12. Heshiiska Bariga Afrika Seerayaasha, Ilaalinta Dhirta (flora) iyo Xayawaanka (fauna);
13. Heshiiska Bariga Afrika ee ka hortagga wasakhda badda ee xaaladaha degdegga ah;
14. Heshiiska Ilaalinta, Maareynta iyo Horumarinta Deegaanka Badda iyo Xeebaha Bariga Afrika (Heshiiska Nairobi).
15. Heshiiska Xakamaynta Waxyaabaha Daciifiya lakabka Ozone ka (Montreal Protocol)
16. Heshiiska Ilaalinta Lakabka Ozone ka (Heshiiska Vienna);

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
07 APR 2024
BY: SAACAD SAXHX

**SHARCI LR. 24** **TAARIIKH: 31 MAARSO 2024**

**WAX-KA BEDDELKA CUTUBYADA 1AAD, 2AAD,3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 133aad, 134aad iyo 136aad (1) ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad (F) ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddonka Labada Aqal ee Baarlamaanka J.F.S ee summaddeedu tahay **BFS/B11/10/03/24**, ku taariikheysan **30/03/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Nuqulka Rasmiga ah ee Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad,2aad,3aad iyo 4aad ee Dastuurka.

**MARKUU ARKAY:** Qaraarka lambarkiisu yahay **GSH/31/16** ee ku taariikheysan **Agoosto 17, 2016** oo Baarlamaankii 9aad dib ugu dhigay dhameeystirka Dastuurka Baarlamaanka 10aad.

**MARKUU ARKAY:** Xeer Madaxweyne ee ku taariikheysan 24/12/2020, kaasoo dib loogu dhigay dhameeystirka Dastuurka Baarlamaankii 11aad.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu meelmariyey Nuqulka Rasmiga ah ee Wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/050/2024
TAARIIKH SAXIIX: 8/4/2024
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee XFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR KU SAABSAN

# ANSIXINTA NUQUL KAMA DAMBAYSTA EE WAX-KABEDDELKA CUTUBYADA 1AAD, 2AAD, 3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA

**Muqdisho:** Maarso 30, 2024

# BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**Markuu Arkay:** Qodobbada 63(a) iyo 71(1)(a) ee Dastuurka KMG;

**Markuu Arkay:** Qodobbada 133aad, 134aad iyo 136(1) ee Dastuurka Ku-meel-gaar ah;

**Markuu Tixraacay:** Warqadda ku taariikhsan 15/7/2024, ujeedkeeduna ahaa "Soo gudbin heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka" oo ay si wadajir ah ugu saxiixan yihiin Gudoomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddoomiyaha Aqalka Sare;

**Markuu Arkay:** Warqadda summadeedu tahay XWR/0277/06/2023 ee 18/6/2024, ujeedkeedunaha ahaa "Soo gudbin heshiisyada Golaha Wadatashiga Qaranka" oo ka soo baxday xafiiska R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu Tixraacay:** Warqadda summadeedu tahay GMDHD/GG/131/24 ee 8/2/2024, ujeedkeeduna ahaa "Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada laad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta al socota" oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;

**Markuu Arkay:** Warqadda tirsigeedu yahay GLD/BFS/02/2024 ee 10/2/2024 ujeedkeeduna yahay "Soo Gudbin Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka" oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka;

**Markuu Xaqiijiyey:** In ay soo idlaatay doodda mudanayaasha labada aqal ay fiirooyinkooda iyo talooyinkooda kaga dhibteen dhammaan cutubyada 1aad ilaa 4aad;

**Markuu Hubiyay:** In soojeedimaha loo soo gudbiyay laba aqal ee Baarlamaaka Federaalka Soomaaliya lagu soo dhafay soojeedimaha iyo talooyinka xafiisyada iyo hay'adaha ku xusan Qodobka 3(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG;

**Markuu Arkay:** Warqadda summadeedu tahay GMDHD/GG/132/24 ee 26/3/2024, ujeedkeeduna ahaa "Soo Gudbin Nuqul Kama Dambaysta ah e Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3ad iyo 4aad e Dastuurka." oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;

**Markuu Arkay:** Warqadda tirsigeedu yahay GLD/BFS/96/03/2024 ee 27/3/2024 ujeedkeeduna yahay "Soo Gudbin Nuqul Kama Dambaysta ah ee Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3ad iyo 4aad ee Dastuurka" oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka;

**Markuu Arkay:** Qodobka 5(7) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG;

**Markuu Arkay:** Qodobbada 108aad iyo 109aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Qodobka 60(6) ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare ee BFS;

## WUXUU XEERIYEY QODOBBADAN:

### Qodobka 1aad:

1) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ku kulansan Kalfadhiga 4aad kulankiisa 31aad oo ay goobgooj yihiin laba boqol konton iyo afar (254) xildhibaannada labada Aqal ee BFS oo codeenaya, wuxuu ansixiyey Nuqul Kama Dambaysta ah ee Wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka marka laga reebo qodobbada hoos ku xusan kuwaas oo sii ahaan doona sidii ay ugu qornaayeen Asalka Dastuurka KMG ah:

    1) Qodobka 13(1) ee soojeedinta guddiyada oo xeerinaya "Xaqa Nolosha";
    2) Qodobka 16aad ee soojeedinta guddiyada oo xeerinaya "Xorriyadda Diinta iyo Caqiidada" oo asalka dastuurka ahayd Qodobka 17aad; iyo
    3) Qodobka 28(2) ee soojeedinta guddiyada oo xeerinaya "Da'da Carruurta", oo asalka dastuurka ahayd qodobka 29(8).

2) Si waafaqsan Qodobka 5(5) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa cod aqlabiyad (50%+1) tirada xildhibaannada goobjoog ah ku ansixiyey cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee dastuurka, codeyntuna waxay u dhacday sida soo socota:

| Coddeynta Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare | | | |
|---|---|---|---|
| Cutubka | Oggol | Diiday | Ka aamustay |
| 1aad | 254 | 0 | 0 |
| 2aad | 254 | 0 | 0 |
| 3aad | 254 | 0 | 0 |
| 4aad | 254 | 0 | 0 |

3) Si waafaqsan Qodobka 5(6) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG ah xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa cod aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka ku ansixiyey cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee dastuurka, codeyntuna waxay u dhacday sida soo socota:

| Coddeynta Aqalka Sare | | | |
|---|---|---|---|
| Cutubyada | Oggol | Diiday | Ka aamustay |
| 1aad – 4aad | 42 | 0 | 0 |

| Coddeynta Golaha Shacabka | | | |
|---|---|---|---|
| Cutubyada | Oggol | Diiday | Ka aamustay |
| 1aad – 4aad | 212 | 0 | 0 |

**Qodobka 2aad:**

Si waafaqsan Qodobka 6(1) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG ah nuqulka kama dambaysta ee wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee dastuurka, waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si uu ugu meelmariyo xeer Madaxweyne.

**Qodobka 3aad:**

Qaraarkani wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobka 6aad ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG ah, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madobe"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Sen. Cali Shacbaan Ibrahim
K/simaha Guddoomiyaha ahna
Guddoomiye Ku-xigeenka
ee Aqalka Sare

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka
Hirgelinta Dastuurka

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور

Federal Republic of Somalia
The Constitution Review and Implementation Oversight
Committee (OC)

**Tix: GLD/BFS/96/03/2024** **Taariikh: 27/03/2024**

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS
Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS
Og: Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

Ujeeddo: Soo Gudbin Nuqulka Kama Dambaysta ah ee Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee BFS wuxuu si waafaqsan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, Qodobka 108aad iyo 109aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Qodobka 81aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare iyo Qodobka 5(7) ee Qaraarka Ansixinta Habraaca Wax-kabeddelka Dastuurka halkan idinku soo gudbinayaa nuqulka kama dambeysta ah ee soojeedimaha wax-kabeddelka cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka ee usoo diyaariye Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, uuna aqbalay Guddiga La-socodka ee dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ee BFS.

Mudane Guddoomiye, Guddiga wuxuu xaqiijiyey in Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ay soojeedimahan kama dambaysta ah ee cutubyada 1aad ilaa 4aad ku soo dhafeen natiijada latashiyadii kala duwanaa iyo talooyinka xildhibaannada labada aqal ee BFS intii lagu gudajiray ka doodistą cutubyadan oo ka koobnaa 16 kulan oo si wadajir ah ay u yeesheen xidhibaannada labada aqal ee BFS.

Haddaba, Guddigu wuxuu si xushmad iyo qaddarin leh u codsanayaa in nuqulka kama dambaysta ah ee soojeedimaha loo gudbiyo xildhibaannada labada aqal ee BFS si ay waajibaadkooda uga gutaan si waafaqsan qodobka 136(1) ee Dastuurka iyo qodobka 5(7) ee Qaraarka ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf "Xuseen Iido"
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka
Dib-u-eegista Dastuurka.

Address: Km-0 | Degmada Shibis – Banaadir | Muqdisho, Soomaaliya.
Email: info@dastuurka-bfs.s, oc@parliament.gov.so | website: www.dastuurka-bfs.so

GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

***Summad:*** GMDHD/GG/132/3/24 ***Taariikh:*** Maarso 26, 2024

***Ku:*** Guddoomiyaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka.

***Og:*** Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BFS.

***Og:*** Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS.

***Og:*** Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee XFS

***Ujeeddo:*** Soo Gudbin Nuqul Kama Dambaysta ah ee Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka.

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Madaxabannan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka "GMDHD":

**Markuu Arkay:** Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG.

**Markuu Arkay:** Qodobka 5(1): ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG.

**Markuu Tixgaliyey:** Soojeedimihii iyo talooyinka xildhibaannada labada aqal ay ka dhiibteen intii ay socotay ka doodista wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee dastuurka.

**Markuu Lafaguray:** Maxdarqoraalka kulamada 12aad, 13aad, 14aad, 15aad, 17aad, 18aad, 19aad, 20aad, 22aad, 23aad, 24aad, 25aad, 26aad, 27aad, 28aad iyo 29aad.

**Markuu Tixgaliyey:** Natiijooyinka latashiyadii qaybaha kala duwan ee bulshada soomaaliyeed ee loo qabtay hab kala duwan.

**Markuu Tixgeliyey:** Soojeedimaha iyo talooyinka guddoonka, xildhibaannadii dawlad goboleedyada, maamulka SSC-Khaatumo iyo maamulka Gobolka Banaadir ee ka soo qaybgalay Shirkii Latashiga Dastuurka ee qabsoomay 27kii –29kii Febraayo 2024.

**Markuu Helay:** Natiijooyinka ka soo baxay aragti dhiibashada barnaamijka danabaysan ee latashiga dadweynaha dib-u-eegista dastuurka oo socday 17 kii – 21kii Maarso, 2024.

**Markuu Arkay:** Jawaab celinta iyo talooyinka hay'adaha ku xusan Qodobka 3(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Wuxuu, halkan kuugu soo gudbinayaa nuqulka kama dambaysta ah ee soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka oo Guddigu diyaariyey kadib markii uu kusoo daray natiijada latashiyadii la sameeyey iyo soojeedimihii iyo talooyinkii xildhibaannada labada aqal ee marxaladdii labaad, si loo dhamaystiro tallaabooyinka muhiimka u ah marxaladda seddexaad.

*Wa Billaahi Tawfiiq.*

26/2024

**Avv. Burhaan Aadan Cumar**
**Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.**

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Guddiga Dib u Eegista iyo La-socodka**
**Hirgelinta Dastuurka**

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور

**Federal Republic of Somalia**
**The Constitution Review and Implementation**
**Oversight Committee (OC)**

Ref: GLD/BFS/...../02/2024

TAR: 10, Febraayo 2024

**Ku:** **Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS**
**Ku:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS**
**Og:** **Wasiirka Wasaaradda Caddaalaadda iyo Arr. Dastuurka, XFS**
**Og:** **Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka**

**Ujeeddo:** **Soo Gudbin Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka.**

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee BJFS wuxuu si waafaqsan Qodobka 133(10) ee Dastuurka KMG, Qodobka 108aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Qodobka 81aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare iyo Qodobka 1(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka halkan idinku soo gudbinayaa Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG iyo Warbixinta la socota.

Soojeedimaha cutubyadan waxaa soo diyaariyey Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka waxaana ansixiyey Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka si waafaqsan Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, iyo Qodobka 3(1)(2) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Mudane Guddoomiye, Guddigu inta uu ku guda jiray diyaarinta soojeedimahan, waxay hay'adaha u xilsaaran dib-ueegista dastuurka latashi la sameeyeen culumada soomaaliyeed, si guddiga uu u dhageysto talooyinkooda iyo fiirooyiinka ku aaddan wax-kabeddelka cutubyadan.

Ugu dambayn, Mudane Guddomiye, guddiga wuxuu diyaar u yahay inuu dhagaysto tallooyiinka iyo fikradaha xildhibaannada labada Aqal ee BFS ee ku aaddan wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah, si waafaqsan Qodobka [illegible] ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Iga guddoon salaan iyo qadarin

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf 'Xuseen Iidow'
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka
Dib-u-eegista Dastuurka BFS

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GUDIGA DIB U EEGIDDA IYO LA SOCODKA HIRGALINTA DASTUURKA

**Lifaaqyo:**
1. Soojeedimaha Wax-Kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka KMG ah
2. Warbixin Faahfaahineysa Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah.

GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Summad:** GMDHD/GG/131/24 **Taariikh:** Febraayo 8, 2024

Ku: Guddoomiyaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka BFS

Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BFS

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS

Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arr. Dastuurka

Ujeeddo: Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta la socota

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Madaxabannan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka "GMDHD", waxaa sharaf u ah in si waafaqsan Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobka 3(1) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta wax-kabeddelka Dastuurka, uu halkaan kuugu soo gudbiyo soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta la socota.

GMDHD oo tixraacaya warqadaha ku kala taariikhsan 26/7/2023 iyo 25/12/2024 oo dhammaantood aad ku soojeediseen taallooyin iyo in la sameeyo cilmibaarisyo dheeraad ah iyo latashi culimmada soomaaliyeed, iyo kulamadii dhowrka ahaa ay wada yeesheen labada guddi, wuxuu cutubyada 1aad ilaa 4aad ku soo dhafay fiirooyinka Guddiga Lasocodka iyo talooyinka culimmada Soomaaliyeed, sidoo kale wuxuu soo diyaariyey daraasad iyo cilmibaarisyo ku abbaaran cutubyadan sida aad ka arki doontaan warbixinta guud ee la socota soojeedimaha.

Ugu dambeyn, GMDHD waxaa u sharaf ah in soojedimaha wax-kabeddelka dastuurka cutubyadiisa 1aad ilaa 4aad iyo warbixinta la socota loo gudbiyo labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.

Avv. Burhaan Aadan Cumar
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee
Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
INDEPENDENT CONSTITUTIONAL REVIEW AND IMPLEMENTATION COMMISSION

**Lifaaqyo:**

(1) Soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah; iyo
(2) Warbixin faahfaahineysa soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Guddiga Dib u Eegista iyo La-socodka
Hirgelinta Dastuurka

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Constitution Review and Implementation Oversight Committee (OC)

**TR:26/LUULYO2023**

**Ku:** Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-U-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
**Og:** Guddoomiyaha Golaha Shacabka (BFS)
**Og:** Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare (BFS)

**Ujeeddo: Tilmaansiinta Diyaarinta Cutubka 1, 2, 3 iyo 4aad si waafaqsan Cutubka 15aad Qod. 133aad Far.5aad iyo 6aad ee Dastuurka KMG Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Guddiga Dib U Eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka;**

**Markuu arkay** Cutubka 15aad Qodobadiisa 133aad faqridiisa 5aad iyo 6aad, Qod. 134aad faqridiisa 7aad;

**Markuu arkay** warqadda Guddoonka labada Aqal ee BFS, kuna taariikheysaneyd 15ka Luulyo 2023 ee ay kusoo gudbiyeen heshiisyadii siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka; una kuur galay nuxurka heshiisyada lasoo gudbiyay;

**Markuu Guddigu ka dooday** hanaanka hishiisyada siyaasadeed loogu bedeli lahaa siiqo Dastuur, qaarna loo cadeyn lahaa in lagu qeexo shuruuc gaar ah;

**Markuu garwaaqsaday** in Guddiga Dib u Eegista iyo la-socodka Hirgelinta Dastuurka BFS uu awood u leeyahay inuu jaheeyo soo diyaarinta wax ka bedelka Dastuurka iyadoo la raacayo tilmaamaha ku xusan Cutubka 15aad;

Wuxuu idiin soo gudbinayaa:

1. In aad dib u eegis kusoo sameysaan Cutubyada 1aad, 2aad,3aad iyo 4aad iyadoo lagu saleynayo heshiisyadii siyaasadeed ee Golaha wadatashiga Qaran soo gudbiyeen.
2. Kuna saleysaan dib u eegistiinna soo jeedimihii Barlamaanka 9aad iyo 10aad iyo warbixinnadii la socday.

Guddiga Dib u Eegista iyo la-socodka Hirgelinta Dastuurka wuxuu si kooban u tilmaamayaa arimaha soo socda:

1. In guud ahaan **Cutubka 1aad** in lagu sameeyo dib u eegis farsamo oo ay ku jirto eray bixin, toosin iyo habeyn.
2. In **Qodobka 8aad** laga sameeyo daraasad, lagana soo diyaariyo mabaa'di guud si looga soo saaro sharci gaar ah.
3. In **Qodobka 9aad** laga soo diyaariyo xulashooyin (options) la horgeyn karo BFS
4. In **Cutubka 2aad** lagu sameeyo dib u eegis farsamo iyo mid nuxur iyadoo fiiro gaar ah la siinayo **Qodobada 13aad, 15aad iyo 29aad**.
5. In **Cutubka 3aad** laga soo diyaariyo mabaa'di guud oo ku saabsan lahaanshaha, maamulka iyo wadaaga dakhliga khayraadka dabiiciga ah si waafaqsan Heshiiska Madasha Wadatashiga Qaran ku gaareen Magaalada Baydhabo 27dii April 2018, waxaa sidoo kale muhiim ah in daraasad iyo mabaa'di guud laga soo diyaariyo ilaalinta dhulka iyo deegaanka maadaama ay yihiin aas aaska nolosha iyo xuquuqda aadanaha.

6. In **Cutubka 4aad** loo soo diyaariyo si waafaqsan heshiiska doorashooyinka ee Madasha Wadatashiga Qaran kaasoo tilmaamaya muddo xileedka Dowladdaha heer Federaal iyo heer Goboleed, doorasho qof iyo cod ah oo ku saleysan laba xisbi siysaasadeed, hal deegaan doorasho iyo matalaad isku dheeli-tiran (single constituency, proportion representation, with closed list), maamulkeedana uu leeyahay Guddiga Madaxa banaan ee Doorashooyinka iyo Xudduudaha.

   Inta lagu jiro wax ka bedelka Cutubka 4aad, waxaa lagama maarmaan ah in fiiro gaar ah loo yeesho **Cutubka 10aad** Qodobadiisa kala ah **111E iyo 111G,** sidoo kalana lala akhrinayo sharciga lagu dhisay Guddiyada Madaxbanaan ee Doorashooyinka iyo Guddiga Xudduudaha Iyo Federaalka, Sharciga Doorashooyinka iyo Sharciga Axsaabta

Ugu danbeyn, waxaa si xushmad leh looga codsanayaa Guddiga Madaxa banaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dstuurka in ay soo diyaariyaan wax ka bedelka cutubyada kor ku xusan sida ugu dhakhsiyaha badan iyadoo la tixgalinayo dib u dhaca ku yimid Dib u eegista Dastuurka iyo caqabadaha jira guud ahaan.

Mahadsanidiin

**Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf**
**Gudoomiyaha Guddiga Dib u Eegista la-socodka iyo Hirgalinta Dastuurka**

Address: Km-0 | Degmada Shibis – Banaadir | Muqdisho, Soomaaliya.
Email: info@dastuurka-bfs.so | website: www.dastuurka-bfs.so

# BAARLAMAANKA JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Taariikh: Luulyo 15, 2023

Ku: Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka

Og: Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka

Og: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

Og: Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**UJEEDDO:** SOO GUDBIN HESHIISYADA SIYAASADEED EE GOLAHA WADATASHIGA QARANKA

## GUDDOONKA LABADA AQAL EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKAY ARKEEN:** Cutubka 15aad Qodobbadiisa 132aad, 133aad, 134aad, 136aad iyo 137aad ee Dastuurka KMG.

**MARKAY ARKEEN:** Qodobbada 55, 61(1), 69 iyo 71 ee Dastuurka KMG

**MARKAY ARKEEN:** Qodobbada 108aad iyo 109aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Qodobbada 45aad iyo 46aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare.

**MARKAY DHAGEYSTEEN:** Talo-soojeedinta La-taliyeyaasha Guddoonka Labada Aqal ee dhanka Sharciga iyo arrimaha Dastuurka.

**MARKAY KA BAARAANDEGEEN:** Heshiisyada Siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka, isla markaana uu Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha u soo gudbiyey Guddoonka Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**MARKAY KA DOODEEN:** Hannaanka heshiis siyaasadeedyadaasi loogu beddeli lahaa qodobbo Dastuuri ah, sidoo kale habraaca loo marayo iyo cidda awoodda u leh arrimahaas, ilaa uu ka noqonayo qeyb ka mid ah Dastuurka.

**WAXAY GAROWSADEEN:** In dhammaan Heshiisyadaasi loogu gudbiyo **Guddiga La-scodka Dib-u-eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka** ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si ay uga gutaan waajibaadka uga abbaaran heshiisyada ay gaareen Golaha Wadatashiga Qaranka.

Haddaba, Guddoomiye, waxaan halkan kugu soo lifaaqnay dhamaan Heshiis Siyaasadeedyada ay gaareen Golaha Wadatashiga Qaranka, si aad uga baarandegtaan, uguna badashaan luuqad qanuun oo dastuuri ah, isla markaana aad u soo gudbisaan fadhiyada Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si ay iyaguna waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan.

Naga guddooma salaan iyo xushmad.

Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tixraac:XRW/02332/06/2023** **Tariikh: 18/06/2023**

**Ku: Gudoonka Golaha Shacabka**
**Og: Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka XJFS**
**Og: Guddiga dib u eegista Dastuurka Qaranka (ICRIC)**
**Og: Gudoonka Golaha Aqalka Sare**
**Og: Madaxwaynaha JFS**

XRW - BIXIT
18 JUN 2023
OPM - EXIT

**Ujeeddo: <u>Soo gudbinta heshiisyada Golaha Wada tashiga Qaranka</u>**

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Qodobka 99aad xarfaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG. |
| Markuu arkay: | Qodobka 100aad xarfaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG. |
| Markuu arkay: | War murtiyeedyada iyo Heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka ay gaareen lixdii kalfadhi ee qabsoontay Octoobar 2022 – Maajo 2023 |
| Markuu arkay: | Baahida waye ee loo qabo dardargalinta dhamaystirka Dastuurka Ku meel gaarka ah ee JFS. |
| Markuu arkay: | Mas'uuliyadda Dowladda ka saaran hir-gelinta heshiisyada Golaha Wada tashiga Qaranka ee ah in heshiiska loo gudbiyo Laanta sharci dajinta Dalka |

Wuxuu go'aamiyay qodbadan soo socda;

**Qodobka 1aad**

In aan guddoonka Golaha Shacabka JFS, aan si rasmi ah ugu soo wareejinno nuqullada saxda ah ee heshiisyadii ay gaareen Golaha Wada tashiga Qaranka (GWQ), Heshiisyadaas oo lagu gorfeeyay lix kal fadhi oo ku qabsoontay muddo hal sano ku dhaw ayaa lagu lafa guray, loogana heshiiyay qodobadan soo socda;

1. Hannaanka Doorashooyinka Dalka
2. Hannaanka Federaalaynta Awoodaha laamaha Dowladda
3. Hannaanka Garsoorka iyo cadaaladda Dalka
4. Qaab dhismeedka Hay'adaha Amniga
5. Iyo Hannaanka Federaalaynta Maaliyadda Dalka

Waxaa Guddoonka xasuusinayaa in ay Dowladda Soomaaliya horay heshiis uga gaartay Arrimaha Wadaaga Khayraadka Dalka, hadaba maadaama ay qodobadani ahaayeen kuwa ugu waawayn ee Dastuurku u xannibnaa, waxaan rajaynaynaa in Guddoonka iyo Golayaasha Baarlamaanku ay ka gudan doonaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

Wabillahi towfiiq

**Mudane Xamsa Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA

# NUQULKA RASMIGA AH

## EE WAX-KABEDDELKA CUTUBYADA 1AAD ILAA 4AAD EE DASTUURKA

MAARSO 31, 2024

## Cutubka Koowaad:
## Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

### Qodobka 1aad:
### Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

1) Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, muslim sunni shaafici ah, lehna gobannimo ku saleysan caddaalad bulsho iyo sarraynta sharciga.

2) Soomaaliya waa Jamhuuriyad dimoqraadi ah, oo ku dhisan matalaadda dadweynaha loo dhan yahay, kuna salaysan nidaam siyaasadeedka xisbiyada badan ee tixgelinaya kala duwanaanta afkaarta si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3) Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, awoodda gobonnimada dalka waxaa iska leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, asagoo awooddaas u isticmaalaya si toos ah ama si dadban, u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay, si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4) Waxaa reebban in qof ama qayb ka mid ah shacabka Jamhuuriyadda ay sheegato ama la wareegto xaqa lahaanshaha gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama isticmaalkeeda si u gaar ah.

5) Gobannimada, madaxbannaanida, midnimada qaranka, xuduudaha badeed iyo dhuleed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma xadgudbaan.

### Qodobka 2aad:
### Diinta

1) Islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3) Waxaa reebban caayidda diinta Islaamka, nacaybkeeda iyo wax kasta oo wax u dhimaya xushmada arrimaha diinta Islaamka. Qofkasta oo ku xadgudba diinta Islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4) Lama soo saari karo xeer aan waafaqsanayn Shareecada Islaamka iyo maqaasiiddeeda.

### Qodobka 3aad:
### Mabaadii'da Aasaasiga ah

1) Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka Kariimka iyo Sunnada Nebi Muxammad (NNKH), wuxuuna ilaaliyaa Shareecada Islaam[illegible] maqaasiddeeda.

2) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Muslim ah oo ka mid ah ummadaha adduunka gaar ahaan Carabta iyo Afrikaanka.

3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan tahay mabaadi'da asaasiga ah ee awood qaybsiga nidaamka federaalka.

4) Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ilaalinayaa xuquuqda aadanaha, talinta sharciga, xurmaynta xeerarka caalamiga ah oo aan ka horimaaneyn shareecada islaamka iyo Dastuurka, xoojinaya dawlad loo dhanyahay, kala soocidda awoodaha xeer dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbannaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan, daahfurnaan, hufnaan, kana jawaabaya danaha dadweynaha.

5) Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay'adaha dawladda iyo guddiyada madaxabannaan ee heer federaal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose si wax-ku-ool ah, lana sugo jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo.

6) Awood dawladeedka heer kasta waxaa loo adeegsan karaa oo keliya si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

7) Dhulka, badda, hawada, webiyada, jasiiradaha iyo kheyraadka dabiiciga ah waa hanti qaran oo ay shacabka soomaaliyeed wada leeyihiin, waxaana mas'uul ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 4aad:**
**Sarreynta Dastuurka**

1) Shareecada Islaamka ka sokow, Dastuurka Jamhuuriyaddu waa xeerka ugu sarreeya ee dalka, isaga ayayna u hoggaansameysaa xukuumadda heer kasta oo dawladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuuna hagayaa curinta iyo go'aannada siyaasadeed ee qaybaha dawladda oo dhan.

2) Cid kastaba, dhammaan hay'adaha dawladda, ururrada, xisbiyada siyaasadeed iyo bulsho waxaa waajib ku ah in ay u hoggaansamaan ku dhaqanka iyo ilaalinta Dastuurka.

3) Xeer, go'aan, ama tallaabo maamuleed kasta oo ka soo baxa heerarka hay'adaha dawladda, kana soo horjeeda Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana burin kara maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 5aad:**
**Afafka Rasmiga ah**

1) Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Af-soomaali (Maay iyo Maxaatiri), af Carabiguna waa afka labaad.

2) Dawladda Federaalka Soomaaliya waa in ay daryeeshaa, ilaalisaa islamarkaana horumarisaa Af Soomaaliga iyo suugaantiisa.

**Qodobka 6aad:**
**Calanka iyo Astaanta Qaranka**

1) Calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta (A) ee Jadwalka koowaad, waa laydi buluug furan ah oo ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shan gees ah, madaxyo simanna leh.

2) Astaanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta (B) ee jadwalka koowaad, waxay ka kooban tahay gaashaan buluug ah, oo leh xiddaayad dahabi ah, dhexdana ku leh xiddig shan gees ah oo dheeh qalin ah leh, gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo Carbeed oo xardhan, lehna shan madax oo dahabi ah oo labada geesaha ku yaalla ay kala qaaran yihiin, hareerahana waxaa ka haya laba shabeel oo isu tusmaysan, kuna kala taagan labo waran oo isku weydaarsan caaradda hoose ee gashaanka, ayna weheliyaan laba caleen-cawbaar, mayrax cadna ay ku qoofalan tahay.

3) Heesta Qaranka Soomaaliya waa "Qolobaa Calankeedu waa cayn", sida lagu muujiyey qaybta (C) ee jadwalka koowaad, ayada ayayna Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadaba u isticmaalayaan munaasabadaha rasmiga ah.

4) Billad sharafta calanka iyo heesta qaranka ee Jamhuuriyadda iyo maammuuska ay mudanyihiin dadka mutaysta waxaa xeer gaar ah ku soo saaraya Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

5) Dawlad goboleedyadu waxay yeelan karaan calan iyo astaan u gaar ah, balse ma yeelan karaan hees astaameed iyaga u gaar ah.

**Qodobka 7aad:**
**Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

1) Gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay koobeysaa geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil, oo ay ku jiraan berriga, badaha, webiyada, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda sare iyo geyi qaaradeedka iyo dhul iyo biyo goboleed kasta oo ku soo biira Jamhuuriyadda Soomaaliya, oo uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo.

2) Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed lama kala goyn karo, lagumana xadgudbi karo.

3) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa xuduudihii ku astaansanaa Dastuurka 1960 ee Soomaaliya.

4) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:
   a) Waqooyi: Gacanka Cadmeed;
   b) Waqooyi Galbeed: Jabuuti;
   c) Galbeed: Itoobiyia;
   d) Koonfur Galbeed: Kenya;
   e) Bari: Badweynta Hindiya.

**Qodobka 8aad:**
**Shacabka iyo Jinsiyadda**

1) Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waa mid, lamana kala qaybin karo, wuxuuna ka kooban yahay dhammaan muwaaddiniinta.

2) Jinsiyadda Soomaaliyeed waa mid qur ah, xeer gaar ah oo uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo kaliya ayaa xaddidaya sida lagu helayo, lagu laalayo ama lagu waayayo.

3) Qof leh jinsiyadda Soomaaliyeed wuxuu qaadan karaa jinsiyad dal kale, lagamana qaadi karo jinsiyadda soomaaliyeed, lagumana qasbi karo in uu ka tago jinsiyadiisa kale.

4) Diidmada, laalista iyo ka-qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed.

**Qodobka 9aad:**
**Magaalamadaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

1) Magaalomadaxda Jamhuuriyadda Federaaalka Soomaaliya waa Muqdisho.

2) Maqaamka Magaalomadaxdu leedahay iyo matalaaddeeda waxaa lagu xeerinayaa cutubka 5aad ee Dastuurka.

## Cutubka Labaad:
## Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaaddinka

### Madaxa Koowaad:
### Mabaadii'da Guud ee Xuquuqda Aadanaha

### Qodobka 10aad:
### Karaamada Aadanaha

1) Karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa ku mannaystay qof kasta oo bani'aadan ah, xuquuqda aadanuhuna deeqdaas ayay ka dhalataa.

2) Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan.

3) Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin ku xadgudbidda karaamada Aadanaha.

4) Qofna lama addoonsan karo, xoogna looguma shaqeysan karo, lagamana ganacsan karo, shaqana laguma qasbi karo ujeeddo kasta ha laga lahaadee.

### Qodobka 11aad:
### Sinnaanta

1) Qof kasta iyadoo aan loo eegin lab ama dheddig, diin, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, xirfad, dhalasho, isir, da' iyo afguri toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba way u siman yihiin xeerka hortiisa, si waafaqsan Shareecada Islaamka.

2) Waxaa reebban in qofna lagu sameeyo, si toos ah ama dadban, takoor ku salaysan da', midab, qabiil, isir, dhaqan, afguri, lab iyo dheddig, dhalasho, naafannimo, diin, afkaar siyaasadeed, xirfad, hanti ama sababo kale.

3) Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada dawladda sida xeerarka, hab siyaasadeed iyo hab maamuleed ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu geystey takoorid ama ku sugan xaalad dib-udhacsan.

4) Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab faldembiyeedka uu galay, haddii aanu Dastuurku si kale u dhigin.

### Qodobka 12aad:
### Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah

1) Hay'adaha Dawladda heer Federaal iyo heer Dawlad gobleedba, xisbiyada siyaasadeed, urur kasta oo gaar loo leeyahay iyo qof kastaba waa in ay u wada hoggaansamaan markasta xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyaadka lagu aqoonsaday cutubkan.

2) Dawladdu waa in ay mar walba ilaalisaa, damaanad qaaddaana hirgelinta iyo ku dhaqanka xuquuqda aasaasiga ah iyo xurriyaadkaba.

## Madaxa Labaad:
## Xuquuqda, Xorriyaadka Aasaasiga Ah Ee Qofka Iyo Xaddidaadooda

### Qodobka 13aad:
### Xaqa Nolosha

1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay nolol.

2) Noloshu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa siiyey banii'aadamka oo idil, sidaas daraadeed waa xaq dabiici ah oo qofna laga qaadi karin, haddii aysan jirin asbaabo xeerku tilmaamayo in xaqaasi lagu waayi karo, taas oo ku imaan karta xukun maxkamadeed oo kama dambays ah.

3) Soo rididda ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii ayna keenin xaalad caafimaad, oo aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada oo uu sugay dhakhtar hufan oo awood u leh.

### Qodobka 14aad:
### Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabadgelyada qofnimadiisa.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay amniga qof ahaantiisa iyo hantidiisa; qofna looma geysan karo qaab kasta oo jirdil ah ama fal bini'aadannimada ka baxsan; waxaana reebban xarig aan sharciga waafaqsaneyn iyo wax kasta oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay kan lagula kaco haweenka iyo carruurta.

3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay badqabka jirkiisa, waana laguma xad gudbaan. Qofna laguma samayn karo tijaabo dhakhtareed ama mid cilmibaariseed oggolaasho la'aantiisa, haddii qofku sharciyan awood u lahayn inuu wax oggolaado waa in la helaa oggolaashaha xigtadiisa ugu dhow, oo ku salaysan talo uu bixiyey xeeldheere caafimaad.

4) Gudniinka gabdhaha waa caado naxariisdarro ah iyo xaqiraad u dhiganta jirdil, waana uu reebban yahay.

### Qodobka 15aad:
### Xorriyadda Ka-mid-noqoshada

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro urur ama koox kale, xaqaas waxaa ka mid ah inuu sameeyo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed, wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi karo inuu cid kale ku biiro.

**Qodobka 16aad:**
**Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada**

1) Qof kastaa wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa.

2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 17aad:**
**Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta**

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu yeesho ra'yigiisa, kuna soo bandhigo hadal, qoraal, saxaafad, farshaxan ama sidii kale oo uu doono, haddii aysan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u soo bandhigo aqoontiisa ama hal-abuurkiisa.

**Qodobka 18aad:**
**Xurmada Hoyga**

Qofna hoygiisa, qalabkiisa, goobaha iyo waxyaabaha kale ee isaga u gaarka ah lama baari karo, lama dhegeysan karo lamana basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la'aantiis.

**Qodobka 19aad:**
**Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka**

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qayb galo kulamo ama bannaanbax, cabasho, taageero oo lagu muujinayo si xasillooni ah, iyadoo aan oggolaansho loo baahnayn.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho qoraal ah u gudbin karo hay'adaha dawladda.

**Qodobka 20aad:**
**Xorriyadda Isusocodka iyo Degitaanka**

1) Qof kasta oo dalka sifo sharci ku jooga wuxuu xaq u leeyahay in uu dego meesha uu rabo, kuna dhex socon karo dalka gudihiisa, si xor ahna uga bixi karo dalka goortii uu doono.

2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay soo-gelidda, ka bixidda iyo joogitaanka waddanka.

3) Muwaaddin kasta wuxuu kale uu xaq u leeyahay inuu helo baasaboor Soomaali ah, dukumentiga aqoonsiga qaranka, dukumeenti diiwaangelineed iyo aqoonsi kasta oo ay dawladdu u soo saarto muwaaddiniinta.

## Qodobka 21aad:
## Xaqa Ka Qaybgalka Siyaasadda

1) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qeybqaato arrimaha siyaasadeed ee dalka, uuna sameysan karo, kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed, loona dooran karo xil kasta, oo xisbiga gudihiisa ah, si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto, lana doorto.

## Qodobka 22aad:
## Xorriyadda Xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda

Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u doorto xirfadda, shaqada ama mihnadda uu rabo.

## Qodobka 23aad:
## Xiriirka Shaqada

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan caddaalad.

2) Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu sameeyo, kuna biiro urrur shaqaale, kana qaybgalo hawlaha urrurkaas.

3) Shaqaaluhu xaq ayay u leeyihiin shaqo joojin.

4) Urur shaqaale kasta ama loo shaqeeye kasta waxay xaq u leeyihiin in ay wada geli karaan gorgortan wadareed oo ku saabsan arrimaha shaqada.

5) Qof kasta oo shaqaale ah, gaar ahaan haweenka waxay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo xadgudub, faquuqid iyo takoorid goobaha shaqada. Xeer kasta oo shaqaaleed iyo hab dhaqan kasta waa in uu xeeriyaa sinnaanta xuquuqda shaqaalaha ee lab iyo dheddigba.

6) Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin in ay goobaha shaqada ku helaan sinnaan buuxda, waana in loo fududeeyaa qaab kasta oo u suurtaggelinaya shaqadooda.

## Qodobka 24aad:
## Deegaan Nadiif ah

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo Deegaan aan waxyeello u lahayn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyaalaha halista ah.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad dhaaf ah, oo degaanka iyo kheyraadka dabiiciga ahba waxyeello u geysan kara.

## Qodobka 25aad:
## Hantida Gaarka Loo Leeyahay

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu hanti gaar ah yeesho, ku dhaqmo, ka faa'ideysto, kuna naalloodo, iskana gado ama hibeeyo markuu doono.

2) Dawladdu waxay hanti gaar loo leeyahay la wareegi kartaa marka ay jirto dan guud. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loola wareegay wuxuu dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddaalad ah, lagalana heshiiyey ama maxkamadi go'aamisay.

## Qodobka 26aad:
## Xuquuqda Bulshada

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo biyo nadiif ah uu cabo.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo daryeel caafimaad, iyadoo qofna laga reebi karin helitaanka adeegyada caafimaadka deg-deg ah sabab kasta ha jirtee.

3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay daryeel bulsho oo dhammaystiran.

4) Hay'adaha dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in si dhab ah ugu sugaan dadweynaha dhammaantood taabbaggelinta xuquuqdaas, iyagoo si gaar ah mudnaan u siinaya haweenka, carruurta, waayeelka, dadka naafada ah iyo beelaha laga tiro badan yahay ama la takooro.

## Qodobka 27aad:
## Daryeelka Qoyska

1) Guurku waa aasaaska qoyska oo ah saldhigga bulshada, ilaalintiisuna waa waajib sharci ah oo saaran dawladda.

2) Qof kasta oo qaangaar ah wuxuu xaq u leeyahay in uu guursado uuna yeesho qoys ku yimid rabitaankiisa iyo rabitaankeeda, si waafaqsan shareecada Islaamka iyo xeerarka Jamhuuriyadda.

3) Daryeelka hooyada iyo dhallaanka waa waajib qaran oo saaran dawladda.

4) Ubadku wuxuu waalidkiis xaq ugu leeyahay xannaano ay ka mid tahay waxbarasho iyo barbaarin toosan. Haddiise xannaanadaas uu ka waayo qoyskiisa ama xigtadiisa, ama uu yahay ubad dayacan, Dawladda ayaa kafaala qaadaysa xuquuqdaas.

5) Waalidka aan iskiis isugu filnayn wuxuu ubadkiisa qaangaarka ah xaq ugu leeyahay in uu ka helo daryeel, waalidiinta aan daryeel ka helin ubadkooda qaangaarka ama xigtadooda, waxaa daryeelkoodu kafaala qaadaya dawladda.

6) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya arrimaha qoyska.

## Qodobka 28aad:
## Xuquuqda Carruurta

1) Ubadku markuu dhasho wuxuu xaq u leeyahay in loo bixiyo magac suubban iyo in si rasmi ah loo diiwaangeliyo.

2) Ubad kasta wuxuu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo dhaqan-xumo, dayacaad, xadgudub ama liiditaan.

3) Carruurta looma diri karo inay qabtaan hawl, ama adeegyo aan ku habboonayn da'dooda, ama halis gelin kara caafimaadkooda ama koritaankooda.

4) Carruurta waxaa la xiri karaa oo keliya muddo gaaban markii la waayo xal kale, lagumana xiri karo dadka waaweyn dhexdooda, marka laga reebo xigtada ugu dhow, waana in lagu hayaa xaalado ku habboon. Xigtada ugu dhow carruurta waa in sida ugu dhaqsaha badan oo suurtogal ah loo wargeliyaa xiritaankooda.

5) Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay helaan kaalmo qareennimo oo ay dawladdu bixineyso kharashkeeda.

6) Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo askarayn loona adeegsan dagaallada hubaysan.

7) Danta carruurta ayaa mar walba mudnaan leh, markay joogto arrin kasta oo maslaxaddooda khusaysa.

8) Ereyga "carruur/ubad" ee qodobkan ku xusan waxaa looga jeedaa qof da'diisu ka yar tahay 18-jir.

## Qodobka 29aad:
## Waxbarashada

1) Waxbarashadu waa xaq aasaasi ah oo ay leeyihiin dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho lacag la'aan ah oo gaarsiisan ilaa heer dugsi sare.

3) Waxbarashada aasaasiga ah ee qur'aanka kariimka ah iyo dugsiyada hoose-dhexe waa khasab.

4) Heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda ee u xilsaaran waxbarashada, waxaa waajib ku ah horumarinta, fidinta iyo baahinta waxbarashada guud ee dadweynaha.

5) Heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda ee u xilsaaran waxbarashada waa in ay horumariyaan tacliinta sare, machadyada farsamo, tiknoolijiyada, cilmi barista, hal-abuurka, cayaaraha, hiddaha iyo dhaqanka.

6) Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa u xilsaaran dejinta manhaj waxbarasho mideysan ee Qaranka. Hay'adaha Dawladda ee heer kasta ayaa u xilsaaran in ay ka hirgeliyaan manhajkaas dhammaan dugsiyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

7) Barashada tacliinta diinta Islaamka waa ku khasab ardeyda dhigata dugsiyada dawladda iyo dugsiyada gaarka ah ay leeyihiin dadka muslim ka ah.

8) Dawladdu waa in ay qaaddaa tallaabooyin muhiim u ah dhalinyarada si ay u helaan waxbrasho tayo leh, xirfad iyo horumar wax-ku-ool ah, iyada oo la carbinayo laguna beerayo jeceylka dadka, dalka iyo diintaba, islamarkaasna waa in dawladdu dhalinyarada ka ilaalisaa dhaqannada xun xun ee lidka ku ah mustaqbalka dalka.

9) Dawladdu waxay xaqiijinaysaa bixinta iyo helitaanka hay'adaha iyo agabka lagama maarmaanka ah si loo horumariyo awoodda dhalinyarada iyo hal-abuurkooda, sidoo kale, dawladdu waxay qaadaysaa tallaabooyinka lagu horumarinayo qaybaha kala duwan ee ciyaaraha.

**Qodobka 30aad:**
**Dhaqanka iyo Afka**

1) Hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan waa in ay horumariyaan afka, hiddaha iyo dhaqanka suubban ee shacabka Soomaaliyeed, iyagoo ku dadaalaya in ay bulshada dhexdeeda ka ciribtiraan caadooyinka xun ee haraaga ah iyo kuwa dhawaan soobaxa ah ee saamayn xun ku yeelan kara diinta, midnimada iyo caafimaadka bulshada.

2) Hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waa in ay uruuriyaan, ilaaliyaan, kaydiyaan dhaxalkii sooyaalka ahaa ee ummadda sida goobaha taariikhiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyaga oo islamarkaasna horumarinaya aqoonta, kartida, teknoloojiyada iyo farsamada hay'adahaas u suurtagalin karta gudashada waajibaadkan.

3) Hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waa in ay horumariyaan, dhawraanna dhaqan hoosaadyada iyo afguriyada dhammaan dadka Soomaaliyeed.

4) Xukuumadda Federaalku waa inay abuurto hay'ad si gaar ah u hormarisa, una kobcisa: hiddaha, dhaqanka, afka iyo sooyaalka Soomaaliyeed.

**Qodobka 31aad:**
**Xaqa Helidda Xogta**

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xogta ay hayaan hay'adaha Dawladda heer kasta, marka laga reebo xogta taabanaysa amniga qaranka iyo xogta lagu ilaalinayo xuquuqda dad kale, ama xeerku reebayo.

2) Qof iyo hay'ad midna laguma khasbi karo inuu bixiyo xog haddii aysan maxkamad amrin ama xeererka Jamhuuriyadda.

3) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa lagu hirgelinayaa xaqa helidda xogta.

**Qodobka 32aad:**
**Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga**

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in la ilaaliyo xogtiisa qof ahaaneed, taas oo loo isticmaali karo oo keliya ujeeddadii loo uruuriyey.

2) Xogta ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waxaa lagu bixin karaa oo keliya oggolaashaha shakhsiga xogta leh ama sabab kale oo xeer tilmaamayo.

3) Qofka wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xogtiisa gaarka ah ee la uruuriyey iyo sidoo kale in la saxo xogtiisa.

4) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya uruurinta, isticmaalka iyo gudbinta xogta shakhsiga ah.

**Qodobka 33aad:**
**Go'aanno Maamul oo Caddaalad ah**

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aamada maamuleed ee ka soo baxa maamullada heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda ay ahaadaan kuwo ku dhisan sharci, maangal ah oo sababaysan, go'aan-kagaaristoodana loo maray hannaan caddaalad ku dhisan.

2) Qofka kasta oo ku qanci waaya go'aannada maamuleed ee ka soo baxa hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan, wuxuuna xaq u leeyahay inuu horgeyo maxakamadda awoodda u leh.

**Qodobka 34aad:**
**Xaqa Dacwadda Iyo Isdifaaca**

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garsoor madaxbannaan, caddaalad ku dhisan, aan eex lahayn; laguna qaado maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo muddada xeerku jideeyey.

3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahey inuu iska difaaco dacwad kasta oo lagu soo oogo heer iyo darajo kasta oo ay taagan tahay.

4) Dawladdu waxay siinaysaa difaac sharci oo lacag la'aan ah dadka aan awoodin bixinta qarashka dacwadda maxkamadda iyo dadka raadinaya, oo u doodaya arrin la xiriirta danta guud.

**Qodobka 35aad:**
**Xuquuqda Eedaysanaha**

1) Eedaysanuhu wuxuu la mid yahay qof aan dembi gelin ilaa maxkamad awood u leh ay si kama-dambays ah ugu xukunto dembiga loo haysto.

2) Qof kasta oo la soo qabto ama lagu soo xiro tuhun faldembiyeed wuxuu xaq u leeyahay in lagu wargeliyo dembiga lagu tuhunsan yahay, looguna sheegaa af uu garanayo, wuxuuna isla markaasba xaq u leeyahay in uu ka aamuso hadal lagu eedeyn karo.

3) Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in xaaladdiisa la gaarsiiyo qoyskiisa ama eheladiisa iyo qareenkiisa.

4) Qofna laguma qasbi karo dembi-qirasho, xukunkiisana saldhig loogama dhigi karo qiraal lagu qasbay.

5) Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco maxkamad awood u leh horteeda, lana yimaado caddeymaha eed-iska-rogidda ah uu isku difaacayo.

6) Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in 48 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamad awood u leh.

7) Eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu goobjoog ka ahaado marka dacwaddiisa la qaadayo.

8) Qof kasta oo la soo xiro wuxuu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen difaaca, haddii uusan awood u lahaynna ay dawladdu u qabato.

9) Eedeysanuhu waxuu xaq u leeyahay tarjumaan haddii uusan fahmayn afka maxkamaddu adeegsanayso.

10) Eedeysanuhu oo maxkamad lagu soo taagey tuhun faldembi ciqaabeed wuxuu xaq u leeyahay garsoor caaddil ah.

11) Qofna laguma soo oogi karo mar labaad dembi si kama dambeys ah horey loogu soo xukumay ama looga sii daayay si sharciga waafaqsan.

12) Mas'uuliyadda ciqaabtu waa shakhsi, sidaa darteed, qofna looma ciqaabi karo faldembiyeed uu galay qof kale.

13) Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu qofku ku kacaayay uusan sharcigu dembi u aqoonsaneyn, haddii uusan ahayn dembi lid ku ah bani'aadannimada.

14) Eedeysanuhu waxuu xaq u leeyahay in uu racfaan u qaato maxkamad ka sarreysa tan xukunka gaartay hadduusan ku qancin xukunka Maxkamadda.

15) Eedeysanaha laguma hayn karo goob aan sharcigu bannayn, waana in loo oggolaado waqti ku filan booqashada eheladiisa, dhakhtarkiisa iyo qareenkiisa.

**Qodobka 36aad:**
**Isucelinta Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha**

1) Isucelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaa lagu oggolaan karaa oo keliya si waafaqsan xeerka, iyo in uu jiro heshiis isucelin ah, oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhinac ka tahay ama heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliya celinta eedaysanaha ama dembiilaha.

2) Muwaaddinka Soomaaliya looma gacangelin karo dal shisheeye.

3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay hormarinaysaa iskaashiga garsoor ee caalamiga ah.

4) Baarlamaanka Federaalka ah ayaa soo saaraya xeer ku saabsan isu-celinta eedaysanayaasha iyo dambiilayaasha iyo iskaalmaysiga sharciyeed ee arrimaha dembiyada.

**Qodobka 37aad:**
**Qaxootiga iyo Magangelyada**

1) Qof kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo gala magangalyo-doon ama loo aqoonsado qaxooti wuxuu xaq u leeyahay in aan dib loo celin ama aan loo qaadin dal kale, haddii ay jirto cabsi muuqata oo ah in uu la kulmaayo ciqaab ama khatar lid ku ah.

2) Baarlamaanka Federaalka waa in uu soo saaraa xeer waafaqsan qaanuunka caalamiga ah; kaas oo nidaaminaya qaxootiga ama magangelyo-doonka.

## Qodobka 38aad:
## Xaddidaadda Xuquuqda

1) Xuquuqdan waxaa xaddidi karaa xeer, ama xaddidaad si gaar ah Dastuurka dhexdiisa ugu xusan, waase haddii xaddidaaddaasi ay tahay mid si cad u maangal ah ama kuwo la aqbali karo waafaqsanna qiyamka lagu qeexay Dastuurka, islamarkaasna xaddidaaddaasi aysan si gaar ah u bartilmaameedsanayn shakhsiyaad ama kooxo gaar ah.

2) Xadiddaadu waxay imaan kartaa oo keliya marka ay jirto baahi culus oo lagu xaqiijinayo: dhawritaanka xuquuqda cid kale, amniga guud, difaaca dalka, caafimaadka guud iyo anshaxa wanaagsan, iyadoo la tixgelinayo isu dheellitirnaanta xaddidaada iyo asbaabta keentay.

3) Hay'adaha garsoorka ayaa dammaanad qaadaya in aan lagu xadgudbin xuquuqda iyo xorriyaadka, lana dhawro qiyamka saldhiga u ah Dastuurka.

## Qodobka 39aad:
## Dib-uxaqsooridda La Xiriirta Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha

1) Qof kasta waxuu xaq u leeyahay magdhow haddii lagu xadgudbo xuquuqdiisa aasaasiga ah, waxaana go'aan ka gaaraya dacwaddiisa maxkamad awood u leh.

2) Qof ama urrur wuu u dacwoon karaan maxkamad awood u leh, si ay u difaacaan xuquuqda asaasiga ah ee dadka kale leeyihiin oo aan awoodin in ay iskood isu difaacaan.

3) Ma laha waqti xaddidan furidda oogiddda gal dacwadeedka la xiriira gabood-falada xuquuqda aadanaha, dembiyada dagaalka iyo dembiyadda lidka ku ah binii'aadannimada oo ay xeeriyeen xeerarka Jamhuuriyadda ama heshiisyada caalamiga ah, oo ay Soomaaliya qayb ka tahay.

4) Dacwadaha ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan waxaa qaadi kara maxkamad awood u leh, gabood-faladaasna lama siin karo gabbaad nooc kasta oo uu yahay, lamana cafin karo haddii uusan Dastuurku si kale u dhigin.

5) Dawladdu waxay qaadaysa tallaabooyin caddaaladeed, garsooreed, maamuleed, tacliimeed iyo tallabo kastoo kale, oo ay uga hortageyso, ku ciqaabmarineyso ama ugu dib-garnaqayso si ay u saxdo cid kasta oo dhibaato geesatay maqaam kastoo ay leeyihiiin.

6) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya dib-uxaqsooridda xadgudubyada xuquuqda aasaasiga ah.

## Qodobka 40aad:
## Fasiraadda Xuquuqda Asaasiga ah

1) Marka la fasirayo xuquuqda ku xusan cutubkan waa in maxkamad awood u leh ay raadiso qeexidda ujeeddooyinka laga leeyahay xuquuqda asaasiga ah iyo qiyamka saldhigga u ah Dastuurkan.

2) Marka ay fasirayso xuquuqahani waxay maxkamaddu tixgelineysaa Shareecada Islaamka, qaanuunka dawliga ah, dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed iyo mabaadi'da iyo halbeegga fasiraadda xeerarka ee caalamiga ah, ilaa iyo inta fasiraaddaas aysan ka horimaaneyn Dastuurka iyo qiyamka saldhigga u ah.

3) Aqoonsiga xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Cutubkan kama hor-imaaan karaan xuquuqda kale ee Shareecada Islaamku aqoonsatay.

## Qodobka 41aad:
## Guddiga Xuquuqda Aadanaha

1) Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqda Aadanaha oo uu waajibkiisu yahay:
   a) Xoojinta, sare-uqaadidda, difaacidda, xushmeynta iyo xaqiijinta qiyamka xuquuqda aadanaha iyo xoriyadaha guud si waafaqsan: Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda;
   b) U kuurgelidda, baarista iyo diyaarinta warbixinno la xiriiro xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Dalka;
   c) Ka hortagga tacaddiyada iyo ku xad-gudubyada xuquuqda aadanaha iyo ku wargelintooda hay'adaha qaranka ee ay khusayso;
   d) Hubinta damaanadqaadka xuquuqda aasaasiga iyo dhowrista habdhaqanka xuquuqda aadanaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   e) Ka talobixinta habka ugu habboon ee lagu dhowri karo xuquuq aadanaha iyo xaqsoorka gaboodfalada, iyo kala talinta dawladda ee ka mid noqoshada iyo gelidda heshiisyada caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee aan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Dalka;
   f) Baarista iyo diiwaangelinta xadgudubyada xuquuqda aadanaha, kormeeridda xabsiyada iyo goobaha kale ee dadka lagu xiro iyo wacyi-gelinta bulshada ee xuquuqda aadanaha;
   g) Qabashada howl-kasta oo kale ee uu sharcigu u xilsaaro.

2) Guddigu wuxuu ka kooban yahay 9 xubnood oo uu soojeediyo Golaha Wasiirada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne.

3) Baarlamaanka Fedeeraalka Soomaaliya wuxuu soo saarayaa xeer qeexaya shuruudaha xubnaha iyo dhammaan arrimaha u muhiimka ah guddiga.

## Madaxa Saddexaad:
## Waajibaadka Muwaaddinka

### Qodobka 42aad:
### Waajibaadka Muwaaddinka

1) Sida Diinta Islaamku qabto, caddaaladda waxay ku jirtaa isu-dheellitirnaanta xuquuqda iyo waajibaadka.

2) Muwaaddin kasta ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah inuu u hoggaansamo arrimaha soo socda:
   a) Noqdo waddani daacad u ah horumarinta iyo wanaagga dalkiisa;
   b) Difaaco ilaaliyana diinta, dalka, dadka iyo karaamada aadanaha.
   c) Adkeeyaa midnimada qaranka, isaga oo kaashanaya muwaaddiniinta kale;
   d) Horumariyo mas'uuliyadda waalidnimo;
   e) Barto aasaasiyaadka diinta islaamka;
   f) Si buuxda u barto, u xurmeeyo, ku dhaqmo, una hoggaansamo, difaacaana Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka;
   g) Horumariyo mabda'a islaxisaabtanka iyo sarraynta sharciga;
   h) Bixiyo canshuurta si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   i) Ka qayb-qaato hawlaha waxtarka u leh muwaaddinka, qoyska, wanaagga guud iyo in uu kaqayb-qaato horumarinta qaranka iyo bulshada uu la nool yahay;
   j) Ka ilaaliyo degaanka wasakhda iyo waxyeellada aan loo baahnayn;
   k) Dhowro xuquuqda xayawanaadka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   l) Inuu codeeyo doorashooyinka.

3) Marka la fasirayo waajibaadka ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan laguma xaddidi karo xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan cutubkan.

## Cutubka Saddexaad:
## Dhulka, Hantida iyo Deegaanka

### Qodobka 43aad:
### Dhulka

1) Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Dhulku waa kheyraadka koowaad ee Soomaaliya iyo saldhigga nolosha dadka.

3) Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4) Dhulka waxaa lagu haysan karaa, loo adeegsanayaa, loona maamulayaa si caddaalad ah oo u agaasiman wax soosaarid uu dhulku xammili karo, waxna u dhimayn, kana soo horjeedin xeerarka dhaqangalka ka ah dalka iyo danta guud.

5) Xukuumadda Federaalku, iyadoo la tashaneysa dawalad goboleedyada iyo ciddii kale oo ay khuseyso, waxay dejineysaa siyaasadda dhulka qaran oo lagu hormarinayo maamulka dhulka si joogto ahna dib-u-eegis loogu sameeyo, si loo xaqiijiyo:
   a) Dhawrista deegaaneed ee u nugul waxyeellada saameeya isu dheellitirnaanta xiriirka deegaaneed iyo meelaha kale ay ku jirto dan guud;
   b) Ilaalinta goobaha taariikhiga ah, ayadoo loo aqoonsanayo in ay yihiin dhaxal taariikhi ah ;
   c) In loo siman yahay fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'ideysiga kheyraadkiisa;
   d) In si sugan loo damaanadqaado milkiyadda dhulka iyo diiwaangelinta;
   e) In si sugan loo xaqiijiyo in dhulka loo dheefsaday si waafaqsan mabaadi'da xeeriya isticmaalka dhulka iyadoo aan wax dhibaato loo geysan;
   f) In xal deg deg ah oo maangal ah laga gaaro khilaafaadka ku saabsan dhulka iyo milkiyadda;
   g) In la xaddido inta uu la ekaan karo dhulka qof ama shirkad ay milkiyad ahaan u yeelan karto;
   h) In la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ka-ganacsiga ee dhulka, si loo ilaaliyo xuquuqda milkiilayaasha dhulalka yar leh.

6) Dawlad Goboleedyada waxay dejinayaan siyaasad dhuleed oo heerkooda ah, oo aan ka hor imaanayn siyaasadda qaran ee Dhulka iyo xeerarka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.
7) Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu soo saarayaa xeer, haseyeeshe, ma jiri karto qayb ka mid ah dhulka, badda ama hawada dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo loo bixin karo fasax istacmaal joogto ah.

8) Dawladda Federaalka oo keliya ayaa u fasaxi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaalka ama heshiis kiro ah ee dhul, bad ama meel ka mid ah geyiga Jamhuuriyadda, muddo aan ka

badnayn midda xeer ku cayiman, waana haddii heshiiskaas ay dan guud ku jirto, islamarkaasna aan dhib ku aheyn madaxbannaanida Jamhuuriyadda, uuna ansixiyo Baarlaamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 44aad:**
**Kheyraadka Dabiiciga Ah**

1) Kheyraadka Dabiiciga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hanti qaran waxaana looga faa'ideysanayaa qaab waara, oo badda iyo dhulkuba xammili karaan, oo aan wax u dhimayn shacabkana waxtar u leh.

2) Waxaa xeer lagu dhisayaa hay'ado u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in khayraadka dabiiciga ah looga faa'ideysto si aan badda iyo berriga dhulka wax u dhimayn oo waxyeellana ka ilaalinaysa hantida dabiiciga ah, hay'adahaas oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobnayn:
   a) Hay'adda Macdanta;
   b) Hay'adda Biyaha; iyo
   c) Hay'adda Betroolka;
   d) Hay'adda Ugaarta iyo Duurjoogta.

3) Guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga waa in uu sugaa in dakhliga ka yimaada hantida dabiiciga ay si caddaalad ah u wadaagaan dawladda Federaalka, dawlad goboleedyada iyo dawladaha hoose ee Jamhuuriyadda.

**Qodobka 45aad:**
**Deegaanka**

1) Dhammaan heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda waxaa waajib ku ah ilaalinta, keydinta iyo dhowrista deegaanka, iyadoo laga hortagayo xaalufinta, wasakheynta, iyo waxyeello kasta oo kale.

2) Dhammaan dadka ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah ilaalinta, kobcinta deegaanka iyo ka-qaybgalka horumarinta, fulinta, maareynta, xannaanaynta iyo dhawrista kheyraadka dabiiciga ah iyo deegaankaba.

3) Dawladda Federaalka iyo Dawlad goboleedyadu waa in ay:
   a) Ilaaliyaan nidaamka ka faa'ideysiga dhulka, isticmaalka, maareynta, dhowrista deegaanka iyo hantida khayraadka dabiiciga ah, si aan wax u dhimayn;
   b) U hawlgalaan sidii dalka loo gaarsiin lahaa in uu noqdo degaan dhulkiisu doogeysan yahay oo dhirtuna ku hagoogan tahay;
   c) Shacabka ku wacyigeliyaan, kuna dhiirrigeliyaan ka qaybqaadashada maaraynta, ilaalinta iyo dhawraarinta deegaanka;
   d) Ilaaliyaan ugaarta, isir-hayeenka iyo noocyada nafleyda kala duwan;
   e) Dejiyaan nidaamyo qiimeeya ilaa heerka ay gaarsiisantahay saameeynta waxyeellada degaanka iyo u kuurgalka xaaladaha degaanka;

f) Ciribtiraan waxyaabaha degaanka halis ku ah;
g) Qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah dib-unoolaynta, dib-udhiraynta, kor-u-qaadidda, ilaalinta degaanka, ka hortagga wixii waxyeellayn kara khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanka Jamhuuriyadda.
h) Ka taxadaraan, kana hortagaan waxyeellada saamayn kara ama sababi kara isbeddelka cimilada.
i) Maamnuucaan xaalufinta dhirta iyo ka ganacsiga dhuxusha.

4) Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedka hadba ay saameeynta waxyeelada deegaanku gaartey waa in ay:
   a) Qaadaan tallaabooyin deg deg ah oo lagu dhaqangalinayo ka hortagga iyo nadiifinta wasakhda iyo haraaga sunta halista ah ee lagu shubay ama lagu duugay dhulka, badda, wabiyada. iyo harooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   b) Soojeediyaan xeer oo ay xeeriyaan tallaabooyin deg deg ah oo lagama maarmaanka u ah ka hortagga wasakh ku daadinta iyo ku xabaalidda dalka, taasoo ah xeer jebin xeerka Dalka iyo ku xadgudub gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo
   c) Qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in laga qaado magdhaw kuwa mas'uulka ka ah ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; ha joogeen Jamhuuriydda Federaalka Soomaaliya gudaheeda ama meel kale.

5) Baarlamaanka Federaalka Somaaliya ayaa soo saaraya xeer qeexaya mabaadi'da guud ee lagu daryeelo degaanka ee ku salaysan halbeegyo caalamiga ah ee lagu ilaalinayo, laguna dhowrayo deegaanka.

## Cutubka Afaraad:
## Matalaadda Shacabka

### Madaxa Koowaad:
### Mabaadii'da Guud ee Matalaadda Shacabka

### Qodobka 46aad:
### Awoodda Shacabka

1) Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dawladda ee heer kasta iyo wakiillada shacabka ee u xilsaaran maamulka dalka iyo adeegyada dadweynaha.

2) Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo dawladdeed waa in ay ahaataa mid furan oo loo dhan yahay, muwaaddin kastana fursad u siinaya in uu si madaxbannaan, oo aan takoor lahayn uga qaybqaato xukunka si toos ah ama si dadban, si fududna u fahmi karo xeerarkiisa iyo habraacyadiisa.

3) Nidaamka matalaaddu waa inuu ahaado mid ka hortegi kara qalalaase ka dhalan kara tartammada siyaasadeed iyo natiijooyinka doorashada.
4) Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ka ah xaqiijinta in Dawlad Goboleed kasta ay dhaqangeliso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

### Madaxa Labaad:
### Doorashooyinka

### Qodobka 47aad:
### Mabaadi'da Guud ee Doorashooyinka

Mabaadi'da guud ee nidaamka doorashooyinku waa in ay ahaadaan kuwo:
1) Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodi yahay, oo ka maran: takoor, eex, musuqmaasuq, cabsi gelin, hanjabaad, marin-habaabin iyo faragelin nooc kasta oo ay tahay;

2) Dammaanad qaada xuquuqda siyaasadeed ee muwaaddinka sida ku xusan qodobka 21aad ee Dastuurka;

3) Sugaya geeddisocodka doorashada, oo si sahlan loo fahmi karo xeerarkiisa, qaababkiisa iyo habraacyadiisaba, uuna fulinayo Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;

4) Dammaanad qaadaya in dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo ay leeyihiin xaqa dhiibashada codkooda si siman;

5) Sharci ku salaysan, geeddisocodkiisuna loo maareeyey, loona korjoogteeyey si madaxbannaan oo sugaya hab daahfuran oo isla xisaabtan leh;

6) Hubinaya in aan lagu xadgudubin midnimada Jumhuuriyada iyo bulshada Soomaaliya;
7) Xaqiijinaya ka qaybgalka haweenka ee goleyaasha xeerdejinta iyo xisbiyada siyaasadeed, iyadoo qoondada haweenka lagu nidaaminayo xeerarka uu soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;

8) Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada ay helaan matalaad caddaalad ah siiba dadka naafada ah;

9) Sugaya in bulshada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba beelaha laga tirada badan yahay; si loo gaaro caddaalad bulsho;

10) Dhiirigelinaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, islamarkaana tixgalinaya xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale ee Jamhuuriyadda; iyo

11) Ka hortagga hurinta colaadaha.

**Qodobka 48aad:**
**Nidaamka Doorashooyinka**

Hannaanka doorashoyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 49aad:**
**Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo**

1) Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa:
   a) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare;
   b) Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo magcaabaya xilkana ka qaadaya Ra'iisul Wasaaraha.
   c) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka.
   d) Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka; iyo
   e) Golaha Deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa ee Dawladaha hoose.

2) Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye;

3) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa cod qarsoodi ah, oo madaxbannaan ku dooranaya keliya muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye;

4) Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa, si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee buuxiyey shuruudaha codbixiye, meel kasta oo ay joogaan;

5) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka; waxaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye;

6) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Golaha Wakiillada ee Dawlad Goboleed kasta waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye;

7) Golayaasha deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa magaalada waxaa si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya muwaaddininta deggan degmooyinka ee buuxiyey shuruudaha codbixiye.

**Qodobka 50aad:**
**Muddada Xilhaynta**

1) Muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah oo sida tooska loo doooranayo ee ku xusan Qodobka 49aad, faqraddiisa 1aad waa shan sano.

2) Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo soo doortay waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan, marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka oo laga soo hormarinayo doorashooyinka hay'adaha kale ee dastuuriga ah, sida ku qeexan xeerka doorashooyinka.

**Qodobka 51aad:**
**Codbixiyaha**

1) Muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo, gaarayna da'da 18 sano waqtiga diiwaangelinta, wuxuu xaq u leeyahay in uu isdiwaangeliyo, si uu u codeeyo.

2) Codbixiyeyaasha diiwaangashan waxay, si siman, xaq ugu wada leeyihiin dhiibashada codkooda, waana in la ilaaliyo rabitaankooda iyo kalsoonidooda.

3) Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu masu'uul ka yahay diiwaangalinta isagoo diyaarinaya diiwaanka codbixiyeyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
4) Dadka aan xaqa u lahayn diiwaangelintu waa:
   a) Dadka aan dhimirkoodu dhammayn;
   b) Qof ay maxkamad awood u leh ay ku ridday xukun kama danbays ah oo la xiriira dembi doorasho shantii sano ee la soo dhaafay ama maxkamaaddaasi ay ka mamnuucdo xaqa codaynta, ama dembi uu galay awgeed xabsi uu ku jiro.

## Madaxa Saddexaad:
## Xisbiyada Siyaasadeed

### Qodobka 52aad:
### Dowrka Xisbiyada Siyaasadeed

1) Xisbiyada siyaasadeed waxay, si nabadgelyo iyo dimuqaraaddi ah, ugu tartamayaan hoggaanka siyaasadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Xisbiyada siyaasadeed, ha ahaadaan kuwa xukunka haya ama kuwa mucaaradka ah, waxay ka mid yihiin tiirarka nolosha siyaasadda iyo dimuqraadiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 53aad:
### Shuruudaha Xisbiyada Siyaasadeed

1) Xisbi Siyaasadeed kasta waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
   a) In uu ilaaliyaa, ku dhaqmaa, adkeyaa, horumariyaana midnimada Jamhuuriyadda;
   b) In uu u hoggaansamaa Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo talinta sharciga;
   c) In uu u taagan yahay xurmaynta, qaddarinta, horumarinta iyo difaaca xuquuqda aadanaha;
   d) In uu u hoggaansamaa mabaadii'da dimuqoraadiyadda iyo maamul wanaagga;
   e) In uu xaqiijiyaa matalaadda dadweynaha oo loo dhan yahay siiyaanna mudnaan gaar ah beelaha laga tirada badan yahay iyo dadka naafada ah ay ku leeyihiin xubinnimada iyo hoggaamintaba;
   f) In uu siiyo mudnaan gaar ah haweenka;
   g) In uu maraa habraaca diiwaangelinta xisbiyada iyo xurmaynta xeer dhaqanka xisbiyada siyaasadeed.

2) Waxaa reebban xisbi kasta oo:
   a) Qarsoodi ah, qaab ciidan ama ciidan u yaalle ah ama u abaabulan colaad si ujeeddooyinkiisu ku gaaro, ama u hubeysan in xukun ku qabsado, ama leh magac ama astaan qabiil;
   b) U ololeeya kala goynta dalka; iyo isku dirka bulshada.
   c) Adeegsada maaliyad ka timid ilo aan sharci ahayn, iyo
   d) Adeegsada hanti dawladeed ama la yimaada fal laaluush iyo musuqmaasuq, si uu u gaaro dano gaar ah.

### Qodobka 54aad:
### Tartanka Xisbiyada Siyaasadeed

1) Doorashooyinka golayaasha deegaanka waxaa ku tartamaya dhammaan ururrada siyaasadeed ee ka diiwaangashan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;

2) Saddex urur siyaasadeed ee buuxiyey shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada ee ku guulaysta doorashada golayaasha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyada qaran ee u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka, Aqalka Sare, xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuraasta golaha wakiillada, xilka hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku xigeenka ee dawlad goboleed kasta.

## Madaxa Afaraad:
## Maamulka Doorashooyinka

### Qodobka 55aad:
### Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha oo u xilsaaran maamulka doorashooyinka dalka oo dhan iyo maarayntoodaba heer kasta, si loo helo doorashooyin hufan, daahfuran oo xor iyo xalaal ah.

### Qodobka 56aad:
### Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waxaa xilkiisa iyo waajibaadkiisa ka mid ah:

a) in uu maamulo, la socdo, xaqiijiyo habsami u socodka, xalaalnimada iyo hufnaanta, doorashooyinka heerarka kala duwan ee dawladda iyo in uu ku dhawaaqo natiijada doorashooyinka.
b) in uu si joogta ah u diiwaangeliyo codbixiyeyaasha doorashooyinka oo dhan.
c) in uu diyaariyo, abaabulo, fududeeyo, qabto heerarka kala duwan doorashooyinka guud.
d) in uu si joogta ah u diiwaangeliyo xisbiyada siyaasadeed iyo murashaxiinta doorashooyinka guud ee heerarka kala duwan.
e) in uu soohdimeeyo degaan doorashooyinka, si xilliyeysanna u asteeyo xarumaha codbixinta;
f) in uu dejiyo hab dhaqanka doorashooyinka ee murrashaxiinta iyo xisbiyada siyaasadda;
g) in uu cayimo tirada iyo goobaha codbixinta ee dalka;
h) in uu diyaariyo, maamulana agabka doorashada iyo goobaha codbixinta;
i) in uu sameeyaa daraasad iyo khariidado la xiriira astaynta soohdimaha deegannada, asagoo kaashanaya khuburro.
j) in uu u soo jeediyo tallooyin Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sidii loo soohdimeeyo xuduudaha deegannada, asagoo tixgelinaya xogta: dadka, dhulka, xaaladda siyaasadeed iyo kan dhaqan, si uu baarlamaanku go'aan uga gaaro arrimaha xuduudaha;
k) in uu fuliyo hawl kasta ee kale, oo la xiriirta arrimaha doorashooyinka iyo soohdimaha, oo ku xusan Dastuurka ama xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 57aad:**
**Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha**

1) Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu ka kooban yahay 18 xubnood, oo uu soo jeediyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, oo la soo tashaday hay'adaha ay khuseyso, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne.

2) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga waxaa iska dhexdooranaya xubnaha guddiga.

**Qodobka 58aad:**
**Shuruudaha Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha**

1) Xubnaha Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha waxaa ka mid noqon kara qof kasta oo buuxiya shuruudahan soo socda:
   a) in uu yahay muwaaddin; da'diisuna ka yareyn 35 sano;
   b) in uu leeyahay anshax iyo sumcad wanaagsan;
   c) in uu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay; iyo
   d) in uu leeyahay ugu yaraan 10 sano waaya-aragnimo maamul ama sharci.

2) Xubinnimada Guddiga looma magacaabi karo dadka soo socda:
   a) Qof ka tirsan xisbi siyaasadeed;
   b) Qof ay maxkamad ku ridday xukun kama danbays ah oo ay ciqaabtiisu gaarsiisan tahay 5 sano;
   c) Qof kasta oo ka haya xil dawladeed hay'adaha dawladda ee heer federal iyo heer dawlad gobaleed xilliga magacaabista ama lixdii bilood ee ka horreysay; iyo
   d) Qof kasta oo uu ka mamnuuco xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 59aad:**
**Xil-waayidda Xubnaha Guddiga**

Xubnaha Guddigu waxay xilkooda ku waayi karaan oo keliya arrimaha soo socda midkood:
1) Geeri;
2) Istiqaalad qoraal ah oo uu u gudbiyey Guddiga lagana aqbalo;
3) Xil gudasho la'aan joogta ah sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyey dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay;
4) Xukun maxkamadeed oo kama danbays ah;
5) Aqbalaada xil kale oo dowladeed;
6) Muddada xil haynta oo dhammaataa; iyo
7) Arrin kasta oo kale lagu xuso dastuurka dhexdiisa ama xeerarka kale ee Jamhuuriyadda.

**Qodobka 60aad:**
**Muddada Xilhaynta Xubnaha Guddiga**

Muddada xilhaynta xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa lix sano oo hal mar ah oo aan dib u cusboonaysiin lahayn.



# SAXID DHANKA QORAALKA AH

SHARCIGA HAY’ADDA SIRDOONKA IYO NABAD-SUGIDDA QARANKA WAXA LAGA SAXAY KHALAD DHANKA QORAALKA AH

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.003** **TAARIIKH: 08-DA Maarso 2023**

**ShARCIGA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD-SUGIDDA QARANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/802/B11/23**, ku taariikheysan **28/02/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad-sugidda Qaranka**.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad-sugidda Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Waxaa uu dhaqangalayaa sharcigan isla markuu saxiixo Madaxweynaha J.F.S., waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-30-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S**

**Mudane Dr Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SEAL

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

BY:
SAACAD _____ SAXIIX _____

**XEER MADAXWEYNE LR. 150** **TAARIIKH: 18 OKTOOBAR 2023**

**XILKA QAADIS ERGAYGII GAARKA AHAA EE XASILINTA IYO ILAALINTA ARRIMAHA RAYIDKA & MAGACAABISTA ERGAYGA GAARKA AH EE XASILINTA IYO ILAALINTA ARRIMAHA RAYIDKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKA UU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

**MARKA UU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo magacaabista khabiir arrimaha Xasilinta Iyo Ilaalinta Arrimaha Rayidka.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu **Mudane Maxamed Cabdi Waare** ka qaaday xilkii Ergayga Gaarka Ah Ee Xasilinta Iyo Ilaalinta Arrimaha Rayidka.

**Qodobka 2aad**

waxa uu **Mudane Cumar Ibraahim Xaashi** u magacaabay in uu noqdo Ergayga Gaarka Ah Ee Xasilinta Iyo Ilaalinta Arrimaha Rayidka.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-04-2624
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowrka Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY: SAACAD SAXNX

**XEER MADAXWEYNE LR.151** **TAARIIKH: 24 Oktoobar 2023**

**WAREEJIN IYO DALLACSIIN SARKAAL**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960, kuna saabsan dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Codsiga Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay XTC/XDS/0097/23, kuna taariikhaysan 08/08/2023, kuna saabsan wareejin iyo dallacsiin Sarkaal.

**MARKUU ARKAY:** Ogolaanshaha Taliyaha Boliiska Soomaaliyeed warqadda summadeedu tahay XTCB/1/7/2023, kuna taariikheysan 06/08/2023, kuna saabsan Ogolaansho wareejin sarkaal.

**MARKUU GARWAAQSADAY:** Mudnaanta uu sarkaalkan mudan yahay in lasoo wareejiyo lana dallacsiiyo sarkaalkan.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay loo soo wareejiyay Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, loona dallacsiiyay darajada ku hor qoran isagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

| Lr. | Darajo | Magaca | Darajada uu u dallacay |
|---|---|---|---|
| 1 | G/le | Xuseen Maxamuud Xuseen | G/Dhexe |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 2aad**

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-05-2024
TAARIIKH: 01-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee [illegible]

**Madaxweynaha J.F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 : MAR 2024
BY:
SAACID SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR. 152** **Taariikh: 16 Nofeembar 2023**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/814/10/2023, ku taariikheysan 29/10/2023 , kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Ciise Maxamed Yuusuf.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Ciise Maxamed Yuusuf** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxa uu **Dr. Ciise Maxamed Yuusuf** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-06-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guled
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 MAY 2024
BY: SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.153** **TAARIIKH: 16 NOFEEMBER 2023**

**SOO WAREEJIN SARAAKIIL**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Taliyaha Booliska Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay XTCB/21/41/2023, kuna taariikhaysan 14/11/2023, ujeedaduna tahay U soo Wareejin Ciidanka Boliiska Federaalka ah.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Mudnaanta ay mudan yihiin saraakiishan in loosoo wareejiyo Ciidanka Boliiska Federaalka.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa saraakiisha magacyadoodu hoos ku xusan yihiin oo ka tirsanaa Ciidanka Boliiska Maamul Goboleedka Jubbaland loo soo wareejiyay Ciidanka Boliiska Federaalka.

| Lr. | Darajo | Magaca |
|---|---|---|
| 1. | G/Sare | Xuseen Cali Xaashi |
| 2. | G/Dhexe | C/risaaq Maxamed Cumar |
| 3. | G/le | Maxamed Cali Rashiid |

**Qodobka 2aad**

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxa aynxaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-07-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gelle
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 · MAY 2024
BY:
SAACAD SAXNX

**XEER MADAXWEYNE LR.154** **TAARIIKH: 16 Nofeembar 2023**

**SOO WAREEJIN SARKAAL**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeer Lr.003 ee soo baxay 08/03/2023, kuna saabsan dhismaha Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Taliyaha Booliska Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay XTCB/21/40/2023, kuna taariikhaysan 14/11/2023,ujeedaduna tahay Soo wareejin Sarkaal.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Mudnaanta uu sarkaalkan mudan yahay in loo soo wareejiyo Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay oo ka tirsanaa Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka loo soo wareejiyay Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

| Lr. | Darajo | Magaca |
|---|---|---|
| 1. | G/Sare | Mukhtaar Cali Maxamed |

**Qodobka 2aad**

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-08-2024
TAARIIKH: 08/05/2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Guuleed
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JF
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY: SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNAHA LR.155** **TAARIIKH:** 27 NOFEEMBAR, 2023

**MAGACAABISTA TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BADDA IYO DIFAACA XEEBAHA &XIL-KA-QAADIS KU-SIMIHII TALIYAHA CIIDANKA BADDA IYO DIFAACA XEEBAHA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad. Xarfaha 'a', b' iyo c Iyo faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad , Xarfaha ' b ' iyo ' c ' ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay XTC/XDS/0395/23, ee ku taariikheysan 18/11/2023 ee soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeeed, kuna saabsan soo jeedinta Magacaabidda Taliyaha Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha X.D.S.

**MARKUU GARWAAQSADAY:** In ay muhiim tahay in la magacaabo Taliye cusub oo Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha, xilkana laga qaado ku simihii hore ee Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa G/le Cabdiwaaxid Cali Afrax laga qaaday Ku-Simihii Taliyaha Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha.

**Qodobka 2aad**

Waxaa S/Guuto X/10964 Cabdi Warsame Cismaan Macallin loo magacaabay in uu noqdo Taliyaha Ciidanka Badda Iyo Difaaca Xeebaha.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah e J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAM-09-2024
TAARIIKH : 21-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud F.

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 . MAY 2024
BY:
SAACAD _____ SAXIIX _____

**XEER MADAXWEYNE LR. 156** **Taariikh: 27 Nofeembar 2023**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/520/07/2023, ku taariikheysan 20/07/2023 , kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee ay leedahay **Dr. Khadiija Osoble Ali.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Khadiija Osoble Ali** loo magacaabay inay noqoto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxa ay **Dr. Khadiija Osoble** Ali ka howl galaysaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-10-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issaqui Elo
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
BY:
SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR. 157** **TAARIIKH: 29 Nofeembar 2023**

**MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA EE ARRIMAHA DASTUURKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKA UU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacabayo xilkan.

**MARKUU ARKAY:** Baahida loo qabo magacaabista qabiir La-Taliye Sare Madaxweynaha ee Arrimaha Dastuurka.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa **Xuseen Sheekh Maxamuud** loo magacaabay in uu noqdo La-Taliye sare Madaxweynaha ee Arrimaha Dastuurka.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu burinayaa wixii xeer ah ee ka horreeyay, kana hor imaanaya.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-11-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Bulhan
Hantidhowrka Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAY 2024
BY: SAACAD SAXUX

**XEER MADAXWEYNE LR.158** **TAARIIKH: 29 NOFEEMBER 2023**

**QIIMEYN IYO KU QAADASHO DARAJO CIIDAN**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **XTC/XDS/0447/23,** ee ku taariikhysan **29/11/2023** ee soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, kuna saabsan codsi Qaadasho Saraakiil Injineero ah.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Mudnaanta ay leedahay in la qiimeeyo injineeradan, lana Siiyo derajo ciidan.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa injineeradan hoos ku xusan la siiyey mid waliba darajada ku hor qoran.

| Lr. | Magaca | Darajada |
|---|---|---|
| 1 | **Cabdicasiis Mukhtaar Sheekh Ciise** | **Dhamme** |
| 2 | **Cabdiqafaar Ibraahim Sheekh** | **Dhamme** |
| 3 | **Cabdiraxmaan Cabdullahi Xaaji Cali** | **Dhamme** |

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-12-2024
TAARIIKH: 01-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Omar
Hantidhowrka Guud Ee JFS

**Madaxwaynaha**
**J.F.S.**
**Mudane Dr Xasan Sheikh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 MAY 2024
BY:
SAACAD SAXNX

**XEER MADAXWEYNE LR.159** **TAARIIKH: 29 NOFEEMBER 2023**

**SOO WAREEJIN SARKAAL**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Taliyaha Booliska Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay XTCB/21/76/2023, kuna taariikhaysan 26/10/2023, ujeedaduna tahay Soo wareejin sarkaal.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Mudnaanta uu mudan yahay sarkaalkan.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay oo ka tirsanaa Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed loo soo wareejiyay Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

| Lr. | Darajo | Magaca |
|---|---|---|
| 1. | G/Dhexe | Axmed Xuseen Maxamed |

**Qodobka 2aad**

Sarkaalka kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-13-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

**Madaxweynaha J.F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY: SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR. 160

TAARIIKH: 29 Nofeembar 2023

**MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA EE ARRIMAHA DIB-U-HESHIISIINTA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKA UU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacabayo xilkan.

**MARKUU ARKAY:** Baahida loo qabo magacaabista qabiir La-Taliye Sare Madaxweynaha ee Arrimaha dib-u-heshiisiinta.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa **Dr. C/Raxmaan C/laahi Baadiyoow** loo magacaabay in uu noqdo La-Taliye sare Madaxweynaha ee Arrimaha Dib-u-Heshiisiinta.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu burinayaa wixii xeer ah ee ka horreeyay, kana hor imaanaya.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-14-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guuleed
Hantidhowrka Guud Ee J.F.S

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 : MAY 2024
BY:
SAACAD ____ SAXIIX ____

**XEER MADAXWEYNE LR. 161** **TAARIIKH: 10-KA DISEEMBAR 2024**

**MAGACAABIS GARSOOREYAAL MAXKAMADAHA GOBOLKA BANAADIR**

**MADAXWEYNAHA J. F. S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad Xarafkiisa (J) ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Qodobbada 87aad, 108aad iyo 139aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Nidaamka Garsoorka lambar 3, soona baxay 12 Juun 1962.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare warqadda sumadeedu tahay **MS/XG/94/2023,** kuna taariikheysan 10/12/2023, kuna saabsan Soo jeedin Magacaabis Garsooreyaal Maxkamadda Sare.

**MARKUU TIXGELIYEY:** In ay muhiim tahay in dib-u habeyn buuxda lagu sameeyo Garsoorka iyo guud ahaan hannaanka cadaaladda Dalka.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa xubnaha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin loo magacaabay garsooreyaal Maxkamadaha Gobolka Banaadir:

| Tirsi | Magaca | Xilka |
|---|---|---|
| 1. | Yaxye Maxamuud Axmed Nuur | Garsoore |
| 2. | Maxamuud Xuseen Axmed | Garsoore |
| 3. | Cabdullaahi Maxamuud Xuseen | Garsoore |
| 4. | Abuubakar Sh. Maxamuud Rooble | Garsoore |
| 5. | C/Casiis Maxamuud Sh. Mustafa | Garsoore |
| 6. | C/risaaq Cali Cismaan | Garsoore |
| 7. | Axmed Aadan Maxamed Cusmaan | Garsoore |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

| | | |
|---|---|---|
| 8. | Daahir Xasan Maxamed | Garsoore |
| 9. | C/raxmaan Daahir Sulub Dhowre | Garsoore |
| 10. | Maxamed Muuse Daahir | Garsoore |
| 11. | Xuseen C/laahi Cabdi Guuleed | Garsoore |
| 12. | Maxamed C/laahi Maxamed Tooxow | Garsoore |
| 13. | Maxamed Cumar Cabdi Nuur | Garsoore |
| 14. | C/Nuur C/laahi Maxamuud Maxamed | Garsoore |
| 15. | C/naasir Maxamed Afyare Maxamuud | Garsoore |
| 16. | Ibraahim Abuukar Gacal | Garsoore |
| 17. | Casayr Cabdulle Maxamuud Caddow | Garsoore |
| 18. | C/raxmaan C/laahi Cali | Garsoore |
| 19. | Liibaan Maxamed Xuseen | Garsoore |
| 20. | Khaliif C/laahi Muxumed | Garsoore |
| 21. | Xuseen Muuse Xasan | Garsoore |
| 22. | Fawsi Axmed Sh. Maxamuud | Garsoore |
| 23. | Isxaaq Cumar C/laahi | Garsoore |
| 24. | C/naafic Axmed C/laahi Maxamuud | Garsoore |
| 25. | Barre Ibraahim Axmed Aadan | Garsoore |
| 26. | Maxamed Macallin Cismaan Ibraahim | Garsoore |
| 27. | C/qaadir Maxamed C/raxmaan Muxumed | Garsoore |
| 28. | Xasan Cabdi Muxumed | Garsoore |
| 29. | C/laahi Maxamed Xaamud | Garsoore |
| 30. | C/xakiin Saleebaan C/laahi | Garsoore |

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-15-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Cotale
Hantidhowrka Guud F.H.J.F.S

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 · MAR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.162** **TAARIIKH: 10-KA DISEEMBAR 2023**

**MAGACAABIS WAKIILADDA XEER-ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA**

**MADAXWEYNAHA J. F. S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad Xarafkiisa (J) ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Qodobbada 87aad, 108aad iyo 139aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Nidaamka Garsoorka lambar 3, soona baxay 12 Juun 1962.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka warqadda sumadeedu tahay **XXIG/AG236/2023,** kuna taariikheysan 06/12/2023, kuna saabsan Soo jeedin magacaabis Wakiiladda Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

**MARKUU TIXGELIYEY:** In ay muhiim tahay in dib-u habeyn buuxda lagu sameeyo Xeer-Ilaalinta iyo guud ahaan hannaanka cadaaladda Dalka.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa xubnaha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin loo magacaabay Wakiiladda Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka kuwaas oo ka howl gali doono Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka:

| Tirsi | Magaca | Xilka |
|---|---|---|
| 1. | Maxamed Baashi Abshir | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 2. | Cabdixakiin Saleebaan Cabdilaahi | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 3. | Maxamed Cabdi Maxamuud Dhoore | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 4. | C/Rashiid C/Raxmaan Axmed | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 5. | Xafsa Axmed Siciid Xasan | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 6. | Xamdi Cabdulaahi Calasow | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 7. | Maxamed Cabdirisaaq Nuux Xasan | Wakiil Xeer-Ilaaliye |

| | | |
|---|---|---|
| 8. | Maxamuud Muuse Cawaale | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 9. | Axmed Maxamuud Maxamed Axmed | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 10. | Maxamed Cabdulle Maalin Waasuge | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 11. | C/Wahaab Ismaaciil Maxamed Cartan | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 12. | C/Risaaq Cabdulle Xasan | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 13. | Bukhaari Maxamuud Maxamed Ciise | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 14. | C/Fataax Faarax Cabdi Nuur | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 15. | C/Laahi C/Qaadir Khaddar | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 16. | Maxamuud Abuukar Cali Guure | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 17. | C/Salaan Maxamed Axmed | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 18. | Cali Cabdikariin Axmed Ciyow | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 19. | C/Laahi Xasan Axmed Cusmaan | Wakiil Xeer-Ilaaliye |
| 20. | Suleymaan C/Laahi Maxamed Xasan | Wakiil Xeer-Ilaaliye |

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-16-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD ____ SAXIIX ____

**XEER MADAXWEYNE LR.163** **TAARIIKH: 24-TA DISEEMBAR 2023**

**KU QAADASHO DERAJO CIIDAN**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharci Lr. 2 ee soo baxay 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay XTCB/21/46/2023 ee ku taariikheysan 26/12/2023, kana soo baxday Xafiiska Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, kuna saabsan Codsi qiimeeyn shahaado dhaqaatiir.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Mudnaanta ay leedahay in la qiimeeyo dhaqaatiirtan.

**Waxaa uu Madaxweyhuhu soo Saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa taqaatiirtan hoos ku xusan la siiyay mid walbo derajada ku hor qoran

| Lr. | Magaca | Lagu qaatay |
|---|---|---|
| 1. | Dr. Saciid C/qaadir Daahir | G/le |
| 2. | Dr. Maxamed Maxamuud Cumar | G/le |
| 3. | Dr C/qaadir Xuseen Maxamed | G/le |
| 4. | Dr. Axmed C/laahi Cumar | G/le |
| 5. | Dr. C/rashiid Xuseen Faarax | L/xle |
| 6. | Dr. C/laahi Nuurre Jimcaale | L/xle |
| 7. | Dr. C/qaadir Maxamed Jimcaale | L/xle |
| 8. | Dr. C/naasir Muuse Fiiqow | L/xle |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 2aad**

Waxaa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-17-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed [illegible] Qutub
Hantidhowraha Guud ee XFS

Madaxweynaha **J.F.S.**
Mudane Dr. Xasan Sheekh **Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.164** **TAARIIKH: 24-KA DISEEMBAR 2023**
**DALLACSIIN SARAAKIIL XIGEENNO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **XTCB/21/47/2023** Ee ku taariikheysan **16/12/2023,** kana soo baxday Xafiiska Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, kuna saabsan Codsi Qiimeyn Shahaado Dhakhaatiir.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Mudnaanta ay leedahay in la qiimeeyo Dhaqaatiirtan ah lana dalacsiiyo.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa saraakiil xigeennada hoos ku xusan loo dallacsiiyay mid waliba derajada ku hor qoran.

| Lr. | Derajada | Magaca | U Dallacay |
|---|---|---|---|
| 1. | K/S 6485 | Dr. Maxamed Xuseen Maxamed | L/Xle |
| 2. | K/S 7934 | Dr. Sharmarke C/Salaam Xasan | L/Xle |
| 3. | K/S 4645 | Dr. Fartun Abshir Cusman | L/Xle |
| 4. | K/S 8029 | Dr. Maxamed Cabdulaahi Faarax | L/Xle |
| 5. | K/S 6443 | Dr. Axmed Maxamed Maxamuud | L/Xle |
| 6. | K/S 6443 | Dr. Xasan Axmed Raage | L/Xle |
| 7. | L/A 1835 | Dr Nasro Xasan Maxamed | L/Xle |
| 8. | D/Le 6426 | Dr. Dayib Axmed Geelle | L/Xle |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 2aad**

Waxaa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN - 18 - 2024
TAARIIKH : 01 - 04 - 2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA
BIXID / SENT
2 MAY 2024
BY:
SAACAD _____ SAXIIX _____

**XEER MADAXWEYNE LR. 165** **Taariikh: 10-ka Diseembar 2023**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/902/12/2023, ku taariikheysan 03/12/2023 , kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Ibraahim Iidle Suleymaan.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Ibraahim Iidle Suleymaan** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxa uu **Dr. Ibraahim Iidle Suleymaan** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-19-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Qotaa
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD ____ SAXIIX ____

**XEER MADAXWEYNE LR.166** **TAARIIKH: 31 DISEEMBER2023**
**DALLACSIIN SARKAAL**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo sarkaalkan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan loo dallacsiiyay derajada ku hor qoran.

| Lr. | Darajo | Magaca | U Dallacay |
|---|---|---|---|
| 1. | G/Sare | Maxamed Macallin Cali | S/Guuto |

**Qodobka 2aad**

Waxaa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-20-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guteld
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Y: AD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.167** **TAARIIKH: 03-DA JANAAYO 2024**

**SOO WAREEJIN IYO QIIMEYN DARAJO ee CIIDANKA BOLIISKA FEDERAALKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **XTCB/21/51/2024** Ee ku taariikheysan **01/01/2024**, kana soo baxday Xafiiska Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, kuna saabsan Codsi u soo wareejin iyo qiimeyn darajo ee Ciidanka Boliiska Federaalka.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Mudnaanta ay leedahay in loo soo wareejiyo Boliiska Federaalka.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa saraakiisha magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo soo wareejiyay Boliiska Federaalka iyagoo leh mid kasta darajada ku hor qoran:

| Lr. | Magaca | Darajada | Laga soo wareejiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Yuusuf Warsame Cali | G/Dhexe | Boliis Puntland |
| 2. | Axmed Siciid Maxamed | G/Dhexe | Boliis S/Land |
| 3. | C/Xamiid Faarax Iidle | G/le | Boliis S/Land |
| 4. | Khaliif Maxamuud Cali | G/le | Boliis S/Land |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 2aad**

Waxaa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-21-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gulaid
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 . MAR 2024
BY:
SAACAD _____ SAXIIX _____

**XEER MADAXWEYNE LR.168** **TAARIIKH: 04-TA JANAAYO 2024**

**KU QAADASHO DERAJO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharci Lr. 49 ee soo baxay 1970, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay **T/G/C.A.S/T/G/477/2023**, kuna taariikheysan 24-ta Diseember 2023, ujeedaduna tahay Soo jeedin ku qaadasho darajo ciidan.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Mudnaanta uu mudan yahay mudanuhu in lagu qaato oo loo qiimeeyo derajo ciidan mudnaan gaar ah.

**Waxaa uu Madaxweyhuhu soo Saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa mudanaha hoos ku xusan magaciisa loo qiimeeyey derajada ciidan ee ku hor qoran isaga oo ka mid ah Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

| Lr. | Magaca | Derajada lagu qaatay |
|---|---|---|
| 1. | Ibraahim Yoonis Sheekh Ibraahim | Dhamme |

**Qodobka 2aad**

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggol yahay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxaa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-22-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
BAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gotale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 / MAR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.169** **TAARIIKH: 07-DA JANAAYO 2024**
**DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL-XIGEEN**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **XTCB/21/47/2023** ee ku taariikheysan **16/12/2023**, kana soo baxday Xafiiska Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed, kuna saabsan Soo Jeedin Dallacaad.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Mudnaanta ay leedahay in la qiimeeyo Dhaqaatiirtan ah lana dalacsiiyo.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa saraakiil xigeennada hoos ku xusan loo dallacsiiyay mid waliba derajada ku hor qoran.

| Lr. | Derajada | Magaca | U Dallacay |
|---|---|---|---|
| 1. | Dhamme | C/Casiis C/laahi Maxamuud | G/le |
| 2. | L/Xle | Axmed Xasan Maxamuud | Dhamme |
| 3. | L/Xle | Maxamed Axmed Cusmaan | Dhamme |
| 4. | L/Xle | C/Laahi Maxamed Colow | Dhamme |
| 5. | L/Xle | C/rashiid Cali Maxamed | Dhamme |
| 6. | X/le | C/Jabaar Maxamuud Maxamed | L/Xle |
| 7. | X/le | Ayaanle Maxamed C/laahi | L/Xle |
| 8. | X/le | C/raxmaan Xuseen Tuuryare | L/Xle |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 9. | X/le | Maxamed Xasan Yuusuf | L/Xle |
| 10. | X/le | Saciid C/laahi Faarax | L/Xle |
| 11. | K/S 5540 | C/laahi C/naasir Maxamed | L/Xle |
| 12. | K/S 5395 | Haashim C/xukun Ducaale | L/Xle |
| 13. | K/S 05 | Sagal C/nuur Axmed | L/Xle |
| 14. | K/S 4981 | Abshir Salaad Ciise | L/Xle |
| 15. | K/S 8641 | Xasan Ciise Axmed | L/Xle |
| 16. | K/S 8741 | C/fitaax Nuur Maxamed | L/Xle |
| 17. | D/le 7687 | Ikraan C/laahi Ciise | L/Xle |

**Qodobka 2aad**

Waxaa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-23-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFISKA MADAXWEYNAHA
جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR. 170** **TAARIIKH: 10 JANAAYO 2024**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/516/04/2023**, ku taariikheysan **30/04/2023**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. C/qaadir Maxamed Cosoble.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. C/qaadir Maxamed Cosoble** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxa uu **Dr. C/qaadir Maxamed Cosoble** ka howl galayaa Gobolka Benaadir gaar ahaan magaalada Muqdishu.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-24-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Cutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

XAFIISKA MADAXWEYNAHA
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD _____ SAXIIX _____

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.171** **TAARIIKH: 10 JANAAYO 2024**

**WAREEJIN SARKAAL**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeer Lr. 15 ee **06/04/1960**, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Xeer Lr.003 ee soo baxay **08/03/2023**, kuna saabsan dhismaha Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Codsiga Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay **XTC/XDS/0508/23**, kuna taariikhaysan **26/12/2023**, ujeedaduna tahay Oggolaansho Wareejin Sarkaal.

**MARKUU TIXGELIYAY:** AqbalaaddaAgaasimaha Guud ee HSNQ warqadda Summadeedu tahay **X/AG/HSNQ/DT/0001/24**, kuna taariikhaysan **01/01/2024**, ujeedaduna tahay Codsi Soo wareejin Sarkaal.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Mudnaanta uu mudan yahay in loo soo wareejiyo Hay'adda Sirdoonka & Nabad-Sugidda Qaranka.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalka Magaciisu hoos ku xusan yahay loo soo wareejiyay Hay'adda Sirdoonka & Nabad-Sugidda Qaranka.

| Lr. | Darajo | Magaca |
|---|---|---|
| 1. | G/le | **Axmed Cumar Maxamed Diini** |

**Qodobka 2aad**

Sarkaalka kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAIN-25-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Qotaa
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA J.F.S
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD ____ SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.172** **TAARIIKH: 16-KA JANAAYO 2024**

**SOO WAREEJIN IYO QIIMEYN DARAJO ee CIIDANKA BOLIISKA FEDERAALKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **DHSH/XM/116/23** Ee ku taariikheysan 12**/06/2023**, kana soo baxday Xafiiska Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeelle, kuna saabsan Codsi Qarameyn Sarkaal Boliis Hirshabeelle.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Mudnaanta ay leedahay in loo soo wareejiyo Boliiska Federaalka.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay loo soo wareejiyay Boliiska Federaalka isagoo leh darajada ku hor qoran:

| Lr. | Magaca | Darajada | Laga soo wareejiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Mekaahiil Ibraahim Xasan | Dhamme | Boliis Hirshabeelle |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 2aad**

Waxaa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-26-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 - MAR 2024
BY:
SAACAD ____ SAXIIX ____

**XEER MADAXWEYNE LR.173** **TAARIIKH: 17-KA JANAAYO 2024**

**MAGACAABIS GUDDIGA QARAN EE DIFAACA MADAX-BANNANIDA IYO MIDNIMADA DHULEED EE SOOMAALIYA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faraqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faraqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka'B' ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Baahida loo qabo in la xoojiyo awoodda Difaaca Madax-Bannanida iyo Midnimada Dhuleed Dalka.

**MARKUU GARWAAQSADAY:** In loo baahanyahay magacaabista Guddi Qaran oo u Difaaca Madax-Bannanida iyo Midnimada Dhuleed si shacabka Soomaliyeed iskugu tashado.

**Waxa uu Madexweynuhu soo saaray Xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan,waxa uu u magacaabay **Xubnaha Guddiga Qaran ee Difaaca Madax-Bannanida iyo Midnimada Dhuleed ee Soomaaliya oo ka kooban:**

1. C/raxman Sh. Yusuf Caynte | Wasiir Hore -Iskuduwe
2. Maxamed Cismaan Jawaari | Guddoomiye Hore Barlamaan -Xubin
3. Yusuf-Garaad Cumar | Wasiir Hore -Xubin
4. Dr. Maryan Qasim Axmed | Wasiir Hore -Xubin
5. C/karim Xasan Jamac | Wasiir Hore -Xubin
6. Cali Xaji Warsame | Wasiir Hore Puntland -Xubin
7. Ayub Ismaaciil Yusufu | Xildhibaan -Xubin
8. Jamac Maxamed Askar | Xildhibaan -Xubin
9. Ciid Max'ed Beddel | Danjire Hore -Xubin
10. Feysal Cabdi Roble | Khabiir Arimaha Geeska Afrika -Xubin

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-49-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed [illegible] Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

RUXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXNX

**XEER MADAXWEYNE LR. 174** **TAARIIKH: 05 Febraayo 2024**
**MAGACAABISTA LABADA KU-XIGEEN ee HANTI-DHOWRAHA GUUD J.F.S.**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 2aad ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharci Lr. 14 ee soo baxay 10/09/2023.

**MARKUU ARKAY:** Soo jeedinta Hanti-Dhowraha Guud ee J.F.S warqadda summadeedu tahay XHG/HG031/2024, ujeedaduna tahay Soo jeedin magacaabista labada ku xigeen ee Hanti-dhawrka J.F.S, kuna taariikheysan 17/01/2024.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Waayo-aragnimada ay leeyihiin mudanayaasha xilkan loo magacaabayo.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxa uu Madaxwaynaha J.F.S u magacaabay **labada Mudane** ee magacyadoodu hoos ku xusan yihiin inay noqdaan Ku xigeennada Hanti-dhowraha Guud ee J.F.S.

1. **Cabdijamaal Ismaaciil Maxamed**
2. **Mukhtaar Maxamed Abuukar**

**Qodobka 2aad**

Wixii Hawlo, Xuquuq iyo Maamuus ah waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Lr. 11 ee 05/12/2006 ee Shaqaalaha Rayidka.

**Qodobka 3aad**

Xeerkani waxa uu baabi'inayaa wixii xeer ah ee ka hor imanaya, kana horreeyay.

**Qodobka 4aad**

Waxa uu xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-48-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S.

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
RUUD / SENT
27 FEB 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR. 176**
**MAGACAABIS GARSOORE**

**TAARIIKH: 11 FEBRAAYO 2024**

**MADAXWEYNAHA J. F. S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad Xarafkiisa (J) ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Qodobbada 87aad, 108aad iyo 139aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Nidaamka Garsoorka lambar 3, soona baxay 12 Juun 1962.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare warqadda sumadeedu tahay **MS/XG/02/2024,** kuna taariikheysan 08/01/2024, kuna saabsan Soo jeedin Magacaabis Garsoore Maxkamadda Sare.

**MARKUU TIXGELIYEY:** In ay muhiim tahay in dib-u habeyn buuxda lagu sameeyo Garsoorka iyo guud ahaan hannaanka cadaaladda Dalka.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa Mudane Khadar Axmed Faarax Cabdulaahi loo magacaabay in uu noqdo Garsoore ka howl-gala Maxkamadaha Gobolka Banaadir.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-47-2024
TAARIIKH: 01-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Omale
Hantidhowraha Guud ee J.F.S

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
XAFIISKA MADAXWEYNAHA
21 SENY
27 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR. 177** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**

**MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ee ARRIMAHA SOMALILAND**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKA UU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

**MARKA UU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo magacaabista khabiir La-Taliye ee Madaxweyne ee Arrimaha Somaliland.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu **Mudane Faarax Giindhe Xuseen** u magacaabay in uu noqdo La-Taliye Arrimaha Soomaaliland ee Madaxweynaha J.F.S.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-46-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guhale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
21 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXNX

**XEER MADAXWEYNE LR. 178** **TAARIIKH: 19 FEBRAAYO 2024**

**WAREEJIN MASUULIYADDA MASJIDKA ISBAHAYSIGA ISLAAMKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKA UU ARKAY:** Warqadda summaddeedu tahay **WAAD/XW/B-1/124/2024** ee kasoo baxday Xafiiska Wasiirka Awqaafta iyo Arrimaha Diinta, ku taariikheysan 14/02/2024, ujjeedaddunạ tahay codsi soo wareejin masuuliyadda Masjidka Isbahaysiga Islaamka.

**MARKA UU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la hormariyo lana kormeero masaajidkan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa Masjidka Isbahaysiga Islaamka lagu wareejiyay Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Diinta.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-45-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA J.F.S.
BIXID / SENT
21 MAR 2024
BY: SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR. 179** **TAARIIKH: 19 FEBRAAYO 2024**

**MAGACAABID XUBIN KAMID NOQONAYSA XUBNAHA MAAMULKA BANGIGA DHEXE (NON-EXECUTIVE DIRECTORS)**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** **Sharci Lr. 130** ee soo baxay **22/04/2012,** kuna saabsan Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo Hey'adaha Maaliyadda Soomaaliya.

**MARKUU ARKAY:** Waraqadda sumadeedu tahay **XRW/246/01/2024,** ee soo baxday **18/01/2024,** kuna saabsan Soo Jeedin Magacaabid Xubin Maamulka Bangiga Dhexe ee Soomaaliya (**Non-Executive Directors**).

**MARKUU TIXGELIYAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leedahay marwadan.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa uu magacaabay xubinta magaceedu hoos ku xusan yahay oo kamid noqonaysa Xubnaha Guddiga Maamulka Bangiga (**Non-Executive Directors**):

1) Farxiyo Maxamed Yuusuf

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xeerkaan dhaqan gelaya marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-44-2024
TAARIIKH : 21-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Qutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
SAXIIX
SAACAD

**XEER MADAXWEYNE LR. 180** **TAARIIKH: 21 FEBRAAYO 2024**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1089/02/2024**, ku taariikheysan **10/02/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Aweys Cismaan Xaaji Axmed.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa Dr. **Aweys Cismaan Xaaji Axmed** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxa uu **Dr. Aweys Cismaan Xaaji Axmed** ka howl galayaa Gobolka Benaadir gaar ahaan magaalada Muqdishu.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-43-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
RECEIVED / SENT
21 FEB 2024
BY:
SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR. 181** **TAARIIKH: 21 FEBRAAYO 2024**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1072/02/2024**, ku taariikheysan **17/02/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Xasan Nuur Maxamuud.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Xasan Nuur Maxamuud** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxa uu **Dr. Xasan Nuur Maxamuud** ka howl galayaa Gobolka Benaadir gaar ahaan magaalada Muqdishu.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-47-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guudle
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFISKA MADAXWEYNAHA
BIXID / SENT
21 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR. 182** **TAARIIKH: 21 FEBRAAYO 2024**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1070/02/2024**, ku taariikheysan **17/02/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Axmed Maxamed Axmed.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Axmed Maxamed Axmed** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxa uu **Dr. Axmed Maxamed Axmed** ka howl galayaa Gobolka Benaadir gaar ahaan magaalada Muqdishu.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan-gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-41-2024
TAARIIKH : 01- 04- 2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guhad
Hantidhowraha Guud ee IFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**THE PRESIDENT'S DECREE NO.183** **DATE: 11 MARCH 2024**

**APPOINTMENT of PRESIDENTIAL ADVISOR for DEVELOPMENT PROGRAMS**

**THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA,**

**Having Seen:** Article 87th of the provisional constitution of the Federal Republic of Somalia.

**Having Seen:** Article 90th of the provisional constitution of the Federal Republic of Somalia.

**Having Seen:** The qualifications and experience the official possess for the post.

**Having Considered:** The need to appoint Presidential Advisor for Development Programs.

**DECREES THE FOLLOWING:**

**Article One**

Starting from today, the President has appointed **Mr. Mohamed Abdi Rage** as the **Presidential Advisor for Development Programs.**

**Article Two**

This decree shall come into force and be effective once the President of the Federal Republic of Somalia signs it and it will be published in the Official Bulletin of the Federal Republic of Somalia.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-40-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed
Hantidhowraha Guud

**Hassan Sheikh Mohamud (PhD)**
President of the Federal Republic of Somalia

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
DIIWAAN SENY
21 MAR 2024
SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.184** **TAARIIKH: 11 MAARSO 2024**

**WAREEJIN SARKAAL**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Xeer Lr.2 ee **23/12/1973**, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Xeer Lr.003 ee soo baxay **08/03/2023**, kuna saabsan dhismaha Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Codsiga Agaasimaha Guud ee HSNQ warqadda Summadeedu tahay **X/AG/HSNQ/DT/0258/23**, kuna taariikhaysan **12/12/2023**, ujeedaduna tahay Codsi Beddel sarkaal.

**MARKUU TIXGALIYEY:** Mudnaanta uu mudan yahay in loo soo wareejiyo Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalka Magaciisu hoos ku xusan yahay loo soo wareejiyay Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

| Lr. | Darajo | Magaca |
|---|---|---|
| 1. | S/Guuto | Salaad Maxamed Guuleed |

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-39-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Guuleed
Hantidhowrka Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXEX

**XEER MADAXWEYNE LR.185** **TAARIIKH: 19 MAARSO 2024**

**MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA & AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA HORUMARINTA IYO DIB-U-DHISKA SOOMAALIYA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Bangiga Horumarinta iyo Dib-U-Dhiska Soomaaliya (**Sharci Lr. 25**) ee soo baxay 24/06/2014, Qodobka 25aad Faqradiisa 1aad oo tilmaameysa hannaanka magacaabista Guddoomiyaha Bangiga Horumarinta iyo Dib-U-Dhiska Soomaaliya.

**MARKUU ARKAY:** Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.09.66.03.24** ee soo baxay **07/03/2024**, kuna saabsan magacaabista Guddoomiyaha Bangiga Horumarinta iyo Dib-U-Dhiska Soomaaliya oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**MARKUU ARKAY:** Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S ee warqadda summadeedu tahay **XRW/256/03/2024** ee soo baxday **07/03/2024**, kuna saabsan Go'aan Gole-Ansixinta Soo Jeedinta Magacaabid Guddoomiyaha Bangiga Horumarinta iyo Dib-U-Dhiska Soomaaliya.

**MARKUU ARKAY:** Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S ee warqadda summadeedu tahay **XRW/261/03/2024** ee soo baxday **19/03/2024**, kuna saabsan Go'aan Gole-Ansixinta Soo Jeedinta Magacaabid Agaasimaha Guud ee Bangiga Horumarinta iyo Dib-U-Dhiska Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**MARKUU TIXGELIYAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin Marwada iyo Mudanaha loo magacaabayo xilalkan.

**Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan,

1. waxaa **Marwo Hodan Aadan Cismaan** loo magacaabay in ay noqoto Guddoomiyaha Bangiga Horumarinta iyo Dib-U-Dhiska Soomaaliya.
2. Waxaa **Mudane Aadan Xuseen Rooble** loo magacaabay in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Bangiga Horumarinta iyo Dib-U-Dhiska Soomaaliya.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-38-2024
TAARIIKH : 21-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Guhad
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA-SO
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

**XEER MADAXWEYNE LR.186** **TAARIIKH: 19 MAARSO 2024**

**CAFIS MADAXWEYNE**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Soo jeedinta Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/AG0051/2024**, ku taariikheysan 13/03/2024, kuna saabsan soo Jeedin Cafis Madaxweyne.

**MARKUU ARKAY:** Soo jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka Xaaladda Xabsiyada iyo Maxaabiista Warqadda Ujeedadeedu ahayd Soo Gudbinta Liiska Maxaabiista soo buuxiyay Shuruudaha Cafiska, warqadda sumaddeedu tahay **XXIG/0061/2024**, ku taariikheysan 12/03/2024.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Xabsiyada Lr. 7 ee 30 Disembar 1972.

**MARKUU GARWAAQSADEY:** In maxaabiista cafiskan loo fidinaayo ay mudan yihiin in ay ka faa'ideystaan Cafis Madaxweyne si waafaqsan Sharciga.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan, waxaa loo fidiyay Cafis Madaxwayne Maxaabiista magacyadoodu hoos ku qoran yihiin kuwaas oo tiradoodu tahay **116 (Boqol iyo toban iyo lix) Maxbuus**, waxaana Xeer-Ilaalinta Guud ee Qaranka la farayaa in laga siidaayo Xabsiyada ay maxaabiistaasi ku xiran yihiin.

MHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

| | | | |
|---|---|---|---|
| 29. | Maxamed Cali Xuseen | Amino Cusmaan | 3 Sano |
| 30. | Najiib Cabdi Cismaan | Nuurto Salaad | 3 Sano |
| 31. | Cabdi Yoonis Maxamed | Fowsiyo Khaliif | 3 Sano |
| 32. | Maxamed C/qadir Maxamed | Sacdiyo Bedel | 3 Sano |
| 33. | Maxamed Cabdi Nuune | Sahro Cali | 3 Sano |
| 34. | Aadan Maadeey Maxamed | Shiino C/qadir | 3 Sano |
| 35. | C/lahi Cismaan Cali | Cadeey Maxamed | 3 Sano |
| 36. | C/shakuur Mustaf Cumar | Xalimo Cumar | 3 Sano |
| 37. | C/risaaq Adan Shooble | Raaxo Isaaq | 3 Sano |
| 38. | Maxamed C/nasir Maxamud | Xaliimo Cabdi | 3 Sano |
| 39. | Maxamed Muxudiin Cali | Ubax Dhiblawe | 3 Sano |
| 40. | Muqtaar Maxamed Yarow | Faay Yareey | 3 Sano |
| 41. | Maxamed Dahir Xasan | Raaxo C/lahi | 3 Sano |
| 42. | Axmed C/raxman Axmed | Safiyo Saciid | 3 Sano |
| 43. | Axmed Cabdi Nuur | Xaliimo Nuur | 3 Sano |
| 44. | Ibraahim Xuseen Cali | Madino Cali | 3 Sano |
| 45. | Mahad Axmed Cilmi | Shukri Xuseen | 3 Sano |
| 46. | Farxaan Xasan Cabdi | Farxiyo Cisman | 3 Sano |
| 47. | Abshir Cali Xasan | Sacdiyo Maxamud | 3 Sano |
| 48. | C/laahi Warsame Xaayow | Madiino Jaamac | 2 Sano |
| 49. | Shaakir Nuur Cali | Xabibo Cali | 2 Sano |
| 50. | Ibraahim Siyaad Nuur | Nuunaay Maxamed | 2 Sano |
| 51. | Axmed Barqash Xasan | Dahabo Cabdi | 2 Sano |
| 52. | Aweys Daahir Maxamuud | Faadumo Maxamud | 2 Sano & 4 bil |
| 53. | Saalax Jeele Cismaan | Xaawo Cismaan | 2 Sano |
| 54. | Dalmar Cali Maxamed | Xalwo Xirsi | 2 Sano |
| 55. | Yaxye Salaad Geele | Ubax Cali | 2 Sano |
| 56. | C/qaadir Cabdi Mire | Dhool Xuseen | 2 Sano |
| 57. | Shuceyb Isaaq Maxamed | Xaawo Nuur | 2 Sano |
| 58. | Ibraahim Yuusuf Macalin | Faadumo Mayow | 2 Sano |
| 59. | Qaalid Xuseen Maxamuud | Saynab Cabdi | 2 Sano |
| 60. | Muzamil Nuur Daa'uud | Nuuriyo Aweys | 2 Sano |
| 61. | C/naasir Maxamed Ibrahim | Amino Aweys | 2 Sano |
| 62. | Faarax Cali Maxamed | Sahro Jimcaler | 2 Sano |
| 63. | Maxamed Cabdi Barow | Sahro Muxumud | 2 Sano |
| 64. | Abukar Axmed C/laahi | Aamino Xasan | 2 Sano |
| 65. | Liibaan Muxudiin Cali | Caasho Shiikh | 2 Sano |
| 66. | C/salaan Maxamed Aadan | Mumino Aadan | 2 Sano |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkan dhaqan gelayaa marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**LIISKA MAXAABIISTA AY XUKUMEEN MAXKAMADAHA RAYIDKA AH EE KU XIRAN XABSIGA GUUD EE MUQDISHO (MPCC), BUUXIYAY SHURUUDAHA CAFISKA.**

| Tr. | Magaca Maxbuska | Magaca hooyada | Xukun |
|---|---|---|---|
| 1. | Saleebaan C/lahi Aweys | Fadumo Muuse | 6 Sano |
| 2. | C/casis Maxamed Xasan | Madiino Cismaan | 6 Sano & 6 bil |
| 3. | Aadam Maxamud Xaashi | Fadumo Nuur | 5 Sano |
| 4. | Mahad Muxudiin Maxamed | Nuurto Maxamuud | 5 Sano |
| 5. | Sadiiq C/salaan Maxamed | Xaliimo Cilmi | 4 Sano |
| 6. | Nuur Calasow Maxamed | Xaliimo Maxamuud | 4 Sano |
| 7. | Saadaq Cali Abuukar | Xaliimo Xasan | 4 Sano |
| 8. | Max'ed Deeq C/lahi Sh. Cali | Saruuro Guuleed | 4 Sano |
| 9. | C/raxmaan Axmed Sahal | Sahro Maxamed | 4 Sano |
| 10. | Cabdi C/laahi Cali | Falxado Maxamed | 4 Sano |
| 11. | Yaasir Mahdi Maxamed | Nasro Ibrahim | 3 Sano |
| 12. | Maxamed Xasan Abukar | Fadumo Muuse | 3 Sano |
| 13. | C/lahi C/qadir Abukar | Xaliimo Muqtaar | 3 Sano |
| 14. | Asad Cabeey Colow | Muno Maxamed | 3 Sano |
| 15. | Maxamud C/raxman Max'ed | Mulki Maxamed | 3 Sano |
| 16. | C/qani Axmed Cali | Shukri Ibrahim | 3 Sano |
| 17. | C/naasir Axmed Barre | Mumino Ceynte | 3 Sano |
| 18. | C/qadir Maxamed C/qadir | Maryan Cabdi | 3 Sano |
| 19. | Yaxye C/naasir Maxamed | Fadumo Barre | 3 Sano |
| 20. | Maxamed Warsame Cabdi | Shamso Cabdi | 3 Sano |
| 21. | Saalax Maxamed Yaasiin | Ruqiyo Muxumud | 3 Sano |
| 22. | Max'ed deeq Muse Max'ed | Xaliimo Cali | 3 Sano |
| 23. | C/qadir C/lahi Arwaax | Xaawo Axmed | 3 Sano |
| 24. | C/fitax Ibrahim Guuleed | Idil Maxamed | 3 Sano |
| 25. | Faarax Maxamuud Ciise | Madiino Xaaji | 3 Sano |
| 26. | Maxamed Xasan Cabdi | Khadiijo Shiikh | 3 Sano & 6 bil |
| 27. | Xuseen Maxamed Xasan | Maryan Macalin | 3 Sano & 6 bil |
| 28. | Nuur Cismaan Xasan | Salaado C/nuur | 3 Sano |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 67. | Yoonis Xasan Muuse | Cabdiyo Maxamed | 2 Sano |
| 68. | Maxamed Maxamud Cumar | Maryan Iidow | 2 Sano |
| 69. | Hanad Cartan Cali | Dhuuxo Cali | 1 Sano |
| 70. | Maxamed Ciise Maxamuud | Fowsiyo Maxamed | 1 Sano & 6 bil |
| 71. | Sharmake Muudeey Shiiq | Saynab Abuukar | 1 Sano |
| 72. | Abukar Maxamud Max'ed | Dahabo Jirif Maxamud | 3 Sano |
| 73. | C/salan Xasan Ibraahim | Xaawo Axmed | 3 Sano |
| 74. | Xasan Yuuuf Saalim | Caasho Cisman | 3 Sano |
| 75. | Maxamed C/lahi Saalax | Qadiijo Maxamed | 3 Sano & 6 bil |
| 76. | Axmed Maxamed Axmed | Faadumo Cabdi | 3 Sano |
| 77. | Cabdi Xasan Cali | Gubaad Salaad | 2 Sano |
| 78. | Maxamed Xasan Cabdule | Maryan Cismaan | 2 Sano |
| 79. | C/qaadir Nuur Cali | Caasho Cabdi | 2 Sano |

**DADKA U XIRAN CIQAABTA GANAAXA AH EE YAR EE BUUXIYAY SHURUUDAHA CAFISKA, XABSIGA GUUD EE MUQDISHO (MPCC)**

| Tr. | Magaca Maxbuska | Magaca Hooyada | Xukun | Hantida |
|---|---|---|---|---|
| 80. | Axmed Yacquub Axmed | Caasha Xasan | 4 Sano | G. 1 Milyan Sh.Som |
| 81. | C/laahi Cabdi Maxamuud | Cataro Xasan | 4 Sano & 6 bil | Mobil |
| 82. | C/risaq Bashiir Diiriye | Fahmo Aadan | 3 Sano | $70 & Mobil |

**LIISKA MAXAABIISTA AY XUKUMEEN MAXKAMADAHA RAYIDKA AH EE KU XIRAN XABSIGA DHEXE EE XAMAR, BUUXIYAY SHURUUDAHA CAFISKA.**

| XABSIGA DHEXE EE XAMAR | | | |
|---|---|---|---|
| **Tr.** | **Magaca Maxbuuska** | **Magaca Hoyada** | **Xukun** |
| 1. | Axmed Cabdi Maxamed | Raxmo Maxamed | 4 Sano |
| 2. | Cumar Cali Abuukar | Faadumo Nuur | 4 Sano |
| 3. | Jaamac Muxyadiin Maciow | Sacdiyo Suudi Xasan | 3 Sano |
| 4. | Cabdulle Xirsi Cali | Xaawo Maxamed Kulan | 3 Sano |
| 5. | maxamed Maxamuud Cali | Faadumo C/lle Axmed | 3 Sano |
| 6. | Usaama Baashi Axmed | Aamina Cali Maxamed | 3 Sano |
| 7. | Maxamed Cilmi Maxamuud | Xaliimo Sheekh Cabdi | 3 Sano |
| 8. | C/naasir Cali Muuse | Aamino C/lle Yuusuf | 2 Sano |
| 9. | Xuseen Maxamed Cali | Nuurto Aadan Cismaan | 2 Sano |
| 10. | C/qaadir Maxamed Cali | Faadumo Sugiwaa Ibraahim | 2 Sano |
| 11. | Sudaysi Daauud Maxamed | Laylo Maxamed Maaleele | 2 Sano |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

| | | | |
|---|---|---|---|
| 12. | Maxamed Abuukar Maxamed | Madiino Maxamed Xaaji | 2 Sano |
| 13. | Salmaan C/risaaq Maxamed | Skukri Cabdi Sulub | 2 Sano |
| 14. | Mascuud C/laahi Maxamed | Xaliimo C/lle Cismaan | 2 Sano |
| 15. | Cabdi Axmed Mursal | Xabiibo Cismaan Ibraahim | 2 Sano |
| 16. | Yaxye Cabdi Faarax | Safiya Maxamed Rooble | 2 Sano |
| 17. | C/haali Cabdi Muise (Gees-Dur) | Safiya Xuseen Dhaayow | 2 Sano |
| 18. | Cabdala Cumar Aadan Cali | Jiiia Cumar Xaaji | 2 Sano |
| 19. | Cabaas Sharif Cureyr | Culumo M.Ibreahin | 1 Sano |
| 20. | Maxamed Call Maramed | Sahra Axited Max'ud | 1 Sano |
| 21. | Maxamed Cumar Maxamed | Cadar Aadan Cabdi | 1 Sano |
| 22. | Saadaam Xuseen Cilmi. | Maryan Cismaan Xasan | 1 Sano |
| 23. | Zakeriye C/raxmaan Maxamed | Xaawa Axmed Afrax | 1 Sano |
| 24. | Mahad Yuusuf Cali | Xaawa Macalin Adan | 1 Sano |
| 25. | Maxamed C/laahi Xasan (Diimow) | Maryan Call Xuseen | 1 Sano |
| 26. | c/qani Axmed C/laahil | Nadiifa Xasan Call | 8 Bilood |
| 27. | Faadumo Cali Muxidiin | Xakiimo Maxamed Nuur | 2 Sano |
| 28. | Axmed Docaale Maxamed | Xaliima Maxamed Cabdi | 3 Sano |
| 29. | Xasan Maxamed Macow | Madiina Dhagey Yalaxae | 1 Sano |
| 30. | Cadnaan Shaacir Maadow | Maano Cali Cadow | 1 Sano |
| 31. | Cabdala muqtaar cali | Nuuro Cali Maxamud | 1 sano |

**DADKA U XIRAN CIQAABTA GANAAXA AH EE YAR EE BUUXIYAY SHURUUDAHA CAFISKA, XABSIGA DHEXE EE MUQDISHO.**

| Tr. | Magaca Maxbuuska | Magaca Hooyada | Xukun |
|---|---|---|---|
| 32. | C/kariin Cumar Maxamed | Laylo Max ed Xuseen | 6 Bilood & $150 |
| 33. | Nuur Maxamed C/laahi | Qamar Cabdi Xuseen | 1 Sano & $70 |
| 34. | Jamaal Mahad C/qaadir | Maryan Cabdi Xasan | 1 Sano & $70 |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-37-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guhaie
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY: SAXIIX

**THE PRESIDENT'S DECREE NO.187** **DATE: 23 MARCH 2024**

**APPOINTMENT OF SOMALI REPRESENTATIVE TO THE ORGANIZATION OF THE ISLAMIC CO-OPERATION**

**THE PRESIDENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA,**

**Having Seen:** Article 87th of the Provisional Constitution of the Federal Republic of Somalia.

**Having Seen:** Article 90th of the Provisional Constitution of the Federal Republic of Somalia.

**Having Seen:** The qualifications and experience the official possess for the post.

**Having Considered:** The need to appoint a Somali Representative to the Organization of the Islamic Co-operation.

**DECREES THE FOLLOWING:**

**Article One**

Starting from today, the President has appointed **Ambassador Abdulkadir Moallin Noor** as the **Somali Representative to the Organization of the Islamic Co-operation.**

**Article Two**

This decree shall come into force and be effective once the President of the Federal Republic of Somalia signs it and it will be published in the Official Bulletin of the Federal Republic of Somalia.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-36-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Qutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Hassan Sheikh Mohamud (PhD)**
President of the Federal Republic of Somalia

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
01 APR 2024
SAACAD SAXNX

**XEER MADAXWEYNE LR.188** **TAARIIKH: 27-DA MAARSO 2024**
**DALLACSIIN SARKAAL XIGEEN**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Sharciga Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **XTC/XDS/0723/24/2024** ee ku taariikheysan **24/03/2024**, kana soo baxday Xafiiska Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, kuna saabsan Soo jeedin Dallacsiin Sarkaal Xigeen.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Mudnaanta ay mudan tahay in la dallacsiiyo sarkaal xigeenkan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa sarkaal xigeenka magaceedu hoos ku xusan loo dallacsiiyay derajada ku hor qoran.

| Lr. | Darajo | Magaca | U Dallacay |
|---|---|---|---|
| 1. | S/le | **Asli Maxamuud Xasan Xalane** | **Dhamme** |

**Qodobka 2aad**

Waxaa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/0573/2024
TAARIIKH: 01/4/2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
07 APR 2024
SAACAD

**XEER MADAXWEYNE LR. 189** **TAARIIKH: 31 MAARSO 2024**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/1096/02/2024, ku taariikheysan 24/02/2024 , kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdullaahi Sheekh Cali Salaad.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdullaahi Sheekh Cali Salaad** loo magacaabay in uu noqdo Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxa **Dr. Cabdullaahi Sheekh Cali Salaad** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/52/2024
TAARIIKH: 01/04/2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
RECEIVED / SENT
BY:

**XEER MADAXWEYNE LR. 190** **TAARIIKH: 31 MAARSO 2024**

**MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH ee ARRIMAHA CAAFIMAADKA IYO NAFAQADA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo magacaabista khabiirkan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu **Xil. Dr. Cabdirashid Maxamed Nuur Jilley** u magacaabay in uu noqdo Ergayga Gaarka ah ee Arrimaha Caafimaadka iyo Nafaqada.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/051/2024
TAARIIKH SAXIIX: 31/4/2024
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowrka Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J.F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 152** **Taariikh: 16/03/2024**

**XEER: QARAARKA DHAMMEYSTIRKA DHAQANGALINTA SHARCIGA SHAQADA WASAARADDA ARRIMAHA DIBADDA.**

18 MAR 2024

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda (**Sharci Lr.112/2013**) ee soo baxay 05/09/2013;

**Markuu arkay:** Warqadda Summaddeedu tahay MFA/FRS/SM/3817/2024 kuna saabsancodsi soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Dibedda & Iskaashiga Caalamiga ah ee ku aadan dhammeystirka dhaqangalinta Sharciga kor ku xusan;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.10.67.03.24** ee **14/03/2024**, kuna saabsan **Qaraarka Dhammeystirka Dhaqangalinta Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibadda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Baahida loo qabo in Dalku ka faa'iideysto aqoonta iyo xirfadda diblomaasiyiinta Soomaaliyeed;

**Waxa uu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad**
**Jaangoynta Tirada Diblomaasiyiinta**

1. Tirada diblomaasiyiinta ka hawlgalaya safaaradaha, ergooyinka diblomaasiyadeed, iyo qunsuliyadaha guud waxa ay noqoneysa sida ku cad ***Shaxda 1aad*** ee ku lifaaqan Qaraarkan iyada oo la raacayo halbeegga soo socda:

    a) Safaaradaha ama ergooyinka ku asteysan "**A**" waxaa ka hawlgalaya seddex ilaa shan diblomaasi oo uu ku jiro danjiraha;

    b) Safaaradaha ama ergooyinka ku asteysan "**B**" waxaa ka hawlgalaya labo ilaa afar diblomaasi oo uu ku jiro danjiraha;

    c) Safaaradaha ama ergooyinka ku asteysan "**C**" waxaa ka hawlgalaya labo ilaa seddex diblomaasi oo uu ku jiro danjiraha.

2. Marka la dhimaayo tirada xubnaha hadda ka hawlgala safaaradaha, ergooyinka, iyo qunsuliyadaha guud waxaa la tixgalinayaa danta shaqada iyo muddada uu diblomaasigu uu shaqeynayay iyada oo xaaladda ciddii dhaaftay muddada uu Sharcigu jideeyay la waafajinayo Sharciga.

**Qodobka 2aad**
**Muddo-dhaafka Shaqada Dibedda**

1. Diblomaasi kasta oo ka shaqeynayay hal dal muddo ka badan afar sano, waa in xaaladdiisa la waafajiyaa Qodobka 39aad faqraddiisa (b) ee Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

2. Diblomaasi kasta oo ka shaqeynayay dibedda muddo ka badan siddeed sano oo xiriir ah waa in xaaladdiisa la waafajiyaa Qodobka 39aad faqraddiisa (c) ee Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

**Qodobka 3aad**
**Dhimidda Tirada Safaaradaha**

1. Muddo lix bilood gudaheeda ah, waxaa la xirayaa safaaradaha soo socda:

   a) Safaaradda Burundi
   b) Safaaradda Senegal;
   c) Safaaradda Canada.

2. Diblomaasiyiinta iyo shaqaalaha ka hawlgala safaaradaha la xirayo, waxaa la farayaa in ay gutaan waajibaadka kaga aadan Qaraarkan, Dalkana dib ugu soo noqdaan, waxaana xaaladdooda loo maareynayaa si waafaqsan Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

**Qodobka 4aad**
**Hannaanka Fulinta Shaqada Dibedda**

1. Wasaaradda Arrimaha Dibedda, waxaa la farayaa in ay u dhaqangaliso hannaanka jaranjarada kala sarreynta iyo wadashaqeynta xubnaha safaaradaha, qunsuliyadaha iyo ergooyinka diblomaasiyadeed si waafaqsan Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

2. Shaqada Arrimaha Dibedda waa in loo fuliyaa si waafaqsan xeerarka Dalka iyo kuwa caalamiga ah, iyada oo mudnaanta koowaad la siinayo danaha Qaranka iyo danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed.

**Qodobka 5aad**
**Xuquuqda iyo Xirfadaha**

1. Dhammaan diblomaasiyiinta Soomaaliyeed iyo shaqaalaha shaqada arrimaha dibedda, waa in ay helaan xuquuqda uu sharcigu siinayo, waxaana la farayaa Wasaaradda Arrimaha Dibedda in ay dhaqangaliso ***Shaxda 2aad*** ee ku lifaaqan Qaraarkan, iyada oo la tashaneysa Wasaaradda Maaliyadda.

2. Dhammaan diblomaasiyiinta iyo shaqaalaha shaqada arrimaha dibedda, waxaa la farayaa in ay xirfadooda kor u qaadaan uguna adeegaan danaha Qaranka iyo muwaadiniinta Soomaaliyeed.

**Qodobka 6aad**
**Dhaqangalka**

Qaraarkan waxa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## LIFAAQ: JAANGOYNTA TIRADA DIBLOMAASIYIINTA / ERGOOYINKA SAFAARADAHA SOOMAALIYA KA HOWLGALAYA

***Shaxda 1aad: Jaangoynta Tirada Diblomaasiyiinta Safaaradaha / Ergooyinka.***

| | Safaaradda /Ergada | Heerka | Tirada Diblomaasiyiinta |
|---|---|---|---|
| 1 | USA-Washington | A | 5 |
| 2 | UN-New York | A | 5 |
| 3 | Italy | A | 5 |
| 4 | Germany | A | 4 |
| 5 | France | A | 4 |
| 6 | Switzerland | A | 4 |
| 7 | Belgium | A | 4 |
| 8 | Russia | A | 4 |
| 9 | UK | A | 5 |
| 10 | China | A | 4 |
| 11 | Saudi Arabia | A | 5 |
| 12 | India | A | 5 |
| 13 | Itoobiya | A | 5 |
| 14 | Jabuuti | A | 5 |
| 15 | Masar | A | 5 |
| 16 | Kenya | A | 5 |
| 17 | Eriteriya | A | 3 |
| 18 | South Afrika | A | 5 |
| 19 | Turkey | A | 5 |
| 20 | Uganda | A | 4 |
| 21 | Sudan | B | 4 |
| 22 | Tansaniya | B | 4 |
| 23 | Qatar | B | 4 |
| 24 | Kuweyt | B | 4 |
| 25 | Oman | B | 4 |
| 26 | Dubai Consulate | B | 4 |
| 27 | UAE | B | 4 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 28 | Bakistaan | B | 4 |
| 29 | Jeddah Consulate | B | 4 |
| 30 | Sweden | B | 4 |
| 31 | Zambia | B | 4 |
| 32 | Malaysia | B | 4 |
| 33 | Ciraaq | B | 4 |
| 34 | South Sudan | B | 4 |
| 35 | Yemen | B | 4 |
| 36 | OIC Mission | B | 3 |
| 37 | Nigeria | B | 3 |
| 38 | Canada | C | 3 |
| 39 | Serbia | C | 3 |
| 40 | Syria | C | 3 |
| 41 | Moroco | C | 3 |
| 42 | Algeria | C | 3 |
| 43 | Indonisia | C | 3 |
| 44 | Burundi | C | 3 |
| 45 | Libiya | C | 3 |
| | **Tirada Guud ee diblomaasiyiinta** | | **181** |

***Shaxda 2aad: Diblomaasiyiinta.***

| Tirada | Xilka | Tirada 5 | Tirada 4 | Tirada 3 |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Safiir/Qunsul Guud | 1 | 1 | 1 |
| 2. | Lataliyaha laad | 1 | 1 | |
| 3. | Lataliyaha 2aad | 1 | | |
| 4. | Xoghayaha laad | 1 | 1 | 1 |
| 5. | Xoghayaha 2aad | 1 | 1 | 1 |

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHAA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-27-2024
TAARIIKH SAXIIX: 01-04-2024
AVV Ahmed Abdi Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo
Iskaashiga Caalamiga

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الشؤون الخارجية
والتعاون الدولي

**Federal Republic of Somalia**
Ministry of Foreign Affairs and International Cooperation

MFA/FRS/SM/3817/2024

Tr: 13.03.2024

Ku: Golaha Wasiiradda JFS
Og: Xoghayaha Joogtada
Og: Wasiir ku xigeenka

Ujeeddo: Codsi Ansixin Sharciga Shaqada Arrimaha Dibadda

Golaha Wasiiradda ee sharafta leh waxa ay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga halkan idinkugu soo gudbineysaa codsi ansixin Qaraar kaa oo ku saabsan dhammeystirka dhaqangelinta sharciga shaqada Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga,

Hadaba, mudaneyaasha sharafta leh ka waxaan rajeyneynaa in aad naga aqbali doontaan codsiga sare ku xusan.

Mahadsanidin

Xill. Cali Maxamed Cumar
Siihayaha Wasiirka ahna Wasiiru dowlaha

Afgoye Road-KM 5, P.O. BOX 105; Mogadishu, Somalia | http://www.mfa.gov.so
Email: sm@mfa.gov.so , osm@mfa.gov.so

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL BULLETIN
الرسمية الجريدة

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 2aad Muqdisho, 30 Maarso 2014 Lr. 7

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

# FAAFIN SANADLE

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

**KOBNIIN**

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

BILAHA

SANADKA

**2014**

Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الرسمية الجريدة

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 1aad** **Muqdisho, 31' July 2014** **Lr. 3**

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

**KOBNIIN**

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

Bilaha

**JUUN, JULY**
**2014**

**XEER MADAXWAYNE Lr. 112** Taariikh: 05/09/2013

**Oggolaanshaha Sharciga Shaqada Wasaaradda Arrimaha Dibadda**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Xarafka 'C' iyo Qodobka 90aad, Xarafka 'F' Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka Lr. 615-XG-08-13 ee 05/08/2013, kuna saabsan soo gudbinta Ansixinta Golaha Shacabka ee Sharciga Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga.

MARKUU TIXGELIYAY: In loo baahan yahay in wax laga beddelo Sharciga ay haatan ku shaqeyso Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga.

**Waxa uu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo Xeerkaan, Waxaa la oggolaaday Sharciga dib u habaynta Shaqada ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga.

**Qodobka 2aad**

Waxaa Xeerkaan lagu baabi'iyay wixii sharci iyo xeer ah ee ka hor imaanaya Sharcigan.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkaan Dhaqangelayaa maalinta uu Madaxweynaha Saxiixo Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliyeed

**MUQDISHO: 05/09/2013**

XAFIISKA HANTIDHAWRIKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO. HA/1095/2013
TAARIIKH 21/09/2013
SAXIIXA NO.

Madaxweynaha J. F. S.
Maxamed Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA

# Sharciga Arrimaha Dibedda

**Taariikhda la-Ansixiyay**
7da Luulyo 2013

## Tusmo

Qodobka 1aad: Samaynta iyo baabi'inta Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha ..... 1
Qodobka 2aad: Xuduudaha sharciga ..... 1
Qodobka 3aad: Kamid noqoshada shaqaalaha wasaaradda ..... 1
Qodobka 4aad: Shuruudaha diblomaasiga dibedda loo dirayo ..... 2
Qodobka 5aad: Howlaha saraakiisha diblomaasiyiinta ah ..... 2
Waajibaadka Danjiraha: ..... 2
Waajibaadka La-Taliyaha: ..... 3
Waajibaadka Xoghayaha Iaad: ..... 3
Waajibaadka Xoghayaha IIaad: ..... 4
Waajibaadka Ku Qeybsanaha Arrimaha Ganacsiga (Commercial Attache`): ..... 4
Waajibaadka Ku Qeybsanaha Arrimaha Dhaqanka (Cultural Attache`): ..... 4
Qodobka 6aad: Ergooyinka diblomaasiyadda ..... 4
Qodobka 7aad: Xilalka Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha ..... 4
Howlaha Qunsuliyaddu waxay ka koobantahay: ..... 5
Qodobka 8aad: Darajada ..... 6
Qodobka 9aad: Kala mudnaanta ..... 6
Qodobka 10aad: Maqaamku ku-qaybsaneyaasha arrimaha ciidamada ..... 7
Qodobka 11aad: Magacaabis safiir siyaasadeed (political apppointee) ..... 7
Qodobka 12aad: U magacaabid iyo ka-fariisin xil ..... 7
Qodobka 13aad: Darajooyinka iyo qaybinta xilalka ..... 7
Qodobka 15aad: Siihayaha magacaaban iyo kan waqtiga cayiman ..... 8
Qodobka 16 aad: Siihayaha Qunsuliyadda ..... 8
Qodobka 17aad:Gunnada Shaqada Dibedda ..... 8
Qodobka 18aad: Gunnada u dhaxeysa labo xil ..... 9
Qodobada 19aad: Fasaxa Sanadeedka ..... 9
Qodobka 20aad: Ticketka fasax –sanadeedka ..... 9
Qodobka 21aad: Gunnada muddada xil-gudashada dibedda ..... 10
Qodobka 22aad: Gunnada Huga Haybad-dhowrka (labiska) ..... 10
Qodobka 23aad: Gunnada martigelinta ..... 11
Qodobka 24aad: Gunnada danjiraha ma-daganaha ah (none-reident Ambassador) ..... 11
Qodobka 25aad: Gunnada xamuulka dheeriga ah ..... 12

Qodobka 26aad: Canshuur dhaaf ..... 12
Qodobka 27aad: Gunnada Waxbarshada caruurta ..... 12
Qodobka 28aad: Xirfadda iyo aqoonta luuqadaha ajnabiga ..... 13
Barashada luuqadaha qasabka ah: ..... 13
Gunnada luqaddaha dheeriga ah (optional) ..... 13
Luuqadaha ajnabiga ee khiyaariga ah (*optional*) ..... 13
Qodobka 29aad: Daryeelka caafimaadka ..... 14
Qodobka 30aad: Kharajyada geerida ..... 14
Qodobka 31aad: Dayuurad raacidda Madaxda Ergada ..... 14
Qodobka 32aad: Hoyga ..... 15
Qodobka 33aad: Diyaarinta Madaxda loo magacaabay Ergo/Qunsuliyad Guud ..... 15
Qodobka 34aad: Taariikh nololeedka shakhsiga (CV) ..... 16
Qodobka 35aad: Natiijada Warbixinta Xun ..... 16
Qodobka 36aad: Hawlgabnimo ku timaada karti-xumo ..... 16
Qodobka 37aad: Qaabka dallacsiinta ..... 16
Qodobka 38aad: U soo beddelid Danjire Xarun Dhexe ..... 17
Qodobka 39aad: Muddada shaqada dibedda ..... 17
Qodobka 40aad: War-gelinta beddelaadda ka hor ..... 17
Qodobka 41aad: Shaqaalaha maxaliga ah ee ka hawl gala Ergooyinka dibedda ..... 17
Qodobka 42aad: Waxyaabaha reeban ..... 17
Qodobka 43aad: Dhaqanka qofka ..... 18
Qodobka 44aad: Mamnuucidda u shaqeyn hey'ado ajnebi ..... 19
Qodobka 45aad: Qoraallada Sirta ..... 19
Qodobka 46aad: Awoodda nidaam dejinta ..... 19
Qodobka 47aad: Dhaqangalka Sharciga ..... 19
Qodobka 48aad: Baabi'in ..... 19

## Qodobka 1aad: Samaynta iyo baabi'inta Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha

A. Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha waxaa lagu samayn karaa ama lagu baabi'in karaa Go'aanka Golaha Wasiirrada oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda Iyo Iskaashiga Caalamiga ah; iyadoo isla markaana sababaha keenay sameynta iyo baabi'inta lala socodsiinayo Guddiga Arrimaha Dibedda ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, isla markaana lagu soo saaro Dekareeto Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka ah.

B. Magacaabista Madaxa Ergooyinka, Qunsuliyadaha iyo Hawlwadeennada Diblomaasiyiinta ah; waa in la waafajiyaa isku-dheelitirka Habka Awood Qeybsiga Dalka.

## Qodobka 2aad: Xuduudaha sharciga

Xudduudaha Sharci ee Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Fadhiyada Qunsuliyadaha waxaa lagu sameynayaa Go'aanka Golaha Wasiirada oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, laguna soo saaro dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka.

## Qodobka 3aad: Kamid noqoshada shaqaalaha wasaaradda

Muwaadinka Soomaaliyeed ee doonaya inuu ka shaqeeyo Wasaaradda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah waa inuu soo buuxiyo shuruudahan:

a. Inuu yahay Soomaali; yaqaanana Af-Soomaaliga (Maay & Maxaa Tiri) hadal & qoraalba
b. Inuu ka diiwaan gashanyahay Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Dowlada Rayidka ah,
c. Haddii uusan kamid ahayn in la diiwaangeliyo
d. In la hubsado isagoo lamarinayo Hay'adaha Qaranka ee kushaqada leh in aanu dambi gelin,
e. Hadii aanu ahayn Xirfadle ama Shaqaalaha hoose, waa in aqoontiisu tahay ugu yaraan heer jaamacadeed, islamarkaana uu qoraal iyo kuhadalba si fiican u yaqaan ugu yaraan mid ka mid ah afafka Carabiga, Ingiriiska iyo Faransiiska,
f. In uu dhimirkiisu fiyowyahay, jir ahaan iyo iyo lixaad ahaanba gudan karo howlaha diblomaasiyadda,
g. In uu bulshada ku dhex leeyahay sumcad fiican,
h. In uu ku guuleysto Imtixaanka Qiimaynta Wasaaradda, iyo
i. In uusan leheyn wax balwo ah ee wax u dhimi karta sharaftiisa iyo gudashada waajibaadkiisa Qaran.

## Qodobka 4aad: Shuruudaha diblomaasiga dibedda loo dirayo

Diblomaasiga dibedda loo beddelayo waa inuu buuxiyo shuruudahan:

1. In uu buuxiyay shuruudaha kamid noqoshada shaqaalaha Wasaaradda ee kuxusan Qodbka 3aad,
2. In uu ugu yaraan laba sano ka shaqeeyay xarunta Wasaaradda,
3. In aqoontiisu tahay ugu yaraan heer jaamacadeed, ama khibrad dheer oo u dhiganta, islamarkaana akhlaaqiyaadkiisa, kartidiisa iyo Soomaalinnimadiisa lagu kalsoonyahay,
4. Danjirayaasha Magacaabid Siyaasadeed (Political Appointees) ku yimaada waa inay ugu yaraan Laba bilood xarunta ka howl galaan, si ay u bartaan shaqada Wasaaradda iyo waaxyaheeda, xilka iyo waajibaadka laga rabo, iyo inuu helo macluumaadka siyaasadeed, dhaqan iyo dhaqaale ee dalka loo magacaabay;
5. Shakhsiga xilka faqradda 4aad ku xusan loo magacaabayo, waa in uu xilal sare oo dawldeed hore u soo qabatay, waana in uu buuxiyo qodobka 3aad xarafaha "a, e, f, iyo h" ee Sharciga
6. Safiirka iyo diblomaasiyiinta kaleba waa in ayna hal dal joogin wax ka badan afar sannadoood, iyo
7. In uu qaato tababar gaar ah (Tababarka shaqada diblomaasiyadda dibedda- *"Diplomatic Foreign Service Training"*) oo uu kuqaato gudaha ama dibedda.

## Qodobka 5aad: Howlaha saraakiisha diblomaasiyiinta ah

Madaxa Ergada oo ahaan kara Danjire, Siihaye ama Qunsul Guud waa in uu fuliyo hawlaha uu u xilsaaran yahay si waafaqsan shuruucda Dalka, waxaana uu si gaar ah mas'uul uga yahay Safaaradda, Ergada ama Qunsuliydda iyo kormeerka iyo isku xirka dhammaan hawlwadeennada

**Waajibaadka Danjiraha:**

1. Wuxuu wakiil uga yahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waddanka uu joogo iyo kuwa uu ka wakiilka yahay oo aan fadhigiisa ahayn (Non-resident Ambassador), adkaynta iyo horumarinta xiriirka diblomaasiyadeed;
2. Wuxuuna madax u yahay dhammaan hawlwadeenada safaaradda ama Ergada, ha ahaadeen kuwa Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo ku-qeybsanayaasha Hey'adaha kale;
3. Ilaalinta danaha dalka iyo muwaadiniinta Soomaaliyeed, marba inta uu xaddidayo (oggolyahay) Sharciga Caalamiga Ahi;
4. La xaajoodka guud iyo dabagalka dhaqangelinta heshiisyada Dhexmara Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Dawladda uu la joogo iyo kuwa uu u xilsaaranyahay,
5. Kobcinta xiriirka saaxibtinnimo ee Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo dowlada iyo/ama dalalka uu u xilsaaran yahay ee dhinacyada dhaqaalaha, dhaqanka, iyo xiriirka cilmiyeed, si waafaqsan Axdiga Vienna "1961" ee Xiriirka diblomaasiyadda.
6. U-kuurgelidda sida lagu horumarin karo wax wada qabsiga iyo wax is dhaafsiga Dowladaha; isaga oo wixii xog ah ee arrinta ku saabsan u soo gudbinaaya Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

7. Wuxuu masuul ka yahay dhammaan hantida qaranka ee safaaradda ama Ergada,
8. Wuxuuu warbixin iyo talooyin(*Recommendations)* ka bixinayaa waxqabadka dhaqanka hawlwadeennada Safaaradda ama Ergada,
9. Wuxuu toosin iyo tillaabo anshax ka qaadayaa hawlwadeennada kukaca dhaqan xumo aan munaasib u ahayn sharaftooda.
10. Abuuridda iyo horumarinta jawi walaaltinimo iyo wada shaqayn ee hawlwadeennada dhexdooda; xallinta wixii khilaafaad ah ee ka dhex jira hawlwadeennada.
11. Wuxuu tababar khibradeed siinayaa, kuna dhiirigelinaya kor-u-qaadidda aqoonta iyo waxbarashada dibloomaasiinta iyo Hawlwadeennada Safaaradda Ama Ergada,
12. Wuxuu joogtaynayaa iskana xilsaarayaa mideynta, uruurinta iyo la kulanka jaalliyadda Soomaaliyeed eek u nool dalka uu joogo; isaga oo ku dhiiri gelinaya ilaalinta sharafta dalkooda, dadkooda iyo diintooda, ayna dhawraan shuruucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay,
13. Hubinta tirakoobka iyo diiwaangelinta jaalliyadaha Soomaaliyeed ee ku nool dalka, ama dalalka uu wakiilka ka yahay, iyo
14. Ku baraarujinta Jaalliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalka uu wakiilka ka yahay in ay da'yartooda baraan afka, hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliga.

**Waajibaadka La-Taliyaha:**

1. Waa kuxigeenka danjiraha xagga mas'uuliyadda Safaaradda ama Ergada, waxaana marka uu danjiruhu maqanyahayna uu qabanayaa dhammaan xilalkiisa, asagoo noqonaya siihaye (*Charge d' Affairs a.i);*
2. Wuxuu si gaar ah ugu xilsaaranyahay xuuraansiga arrimaha siyaasadda dalka uu joogo , abuuridda iyo horumarinta xiriirka labada dal,
3. Joogteynta warbixinnada cilaaqaadka siyaasadeed iyo iskaashiga u dhaxeeya Soomaaliya iyo dowladaha ay Safaaraddu wakiilka ka tahay (Non-resident Embassies), oo aysan xafiis uga furneyn Soomaaliya, iyo
4. Wuxuu kala taliyanaa danjiraha arrimaha xeerarka diblomaasiyadda, heshiisyada iyo sharciyada caalamiga ah.

**Waajibaadka Xoghayaha Iaad:**

1. Bixinta, cusboonaysiinta baasaboorada, dokumentiga dhoofintaanka, dhaafiyeyaalka, dal-ku-galka (visa) sharciyeynta dokumentiga iyo hawlaha madaniga ee dadka Soomaaliyeed, halkii aysan Qunsuliyadu ka furneyn,
2. Diiwaangelinta iyo tirakoobka jaalliyadda Soomaaliyeed ee ku nool dalka ay Safaaraddu ka furantahay iyo daryeelkooda;
3. Abaabulka barnaamijyada isdhaafsiga fanka, hiddaha iyo dhaqanka, isboortiga iyo cilmiga teknoolajiyada ee labda dal iyo
4. La socodka horumarka iyo waxbarashada ardada Soomaaliyeed iyo gacan siintooda.

**Waajibaadka Xoghayaha Iiaad:**

1. Wuxuu qaabilsanyahay tirakoobka, diiwaangelinta iyo xannaanada dhammaan hantida Maguurtada iyo Guurtada ah ee Dowladda ee taal Xafiiiska Safaaradda, Ergada, Qunsuliyadda, guriga Danjiraha, Qunsulka guud iyo aqallada xubnaha kale ee diblomaasiyiinta oo ay dowladdu bixiso kiradooda qalabkana ay leedahay
2. Maamulka xisaabaadka lacagta ee safaaradda ama Ergada, kharaj bixinta iyo xisaab celinta bil waiba, isagoo wixii lacag bixin ah la saaxiixaya Danjiraha ama ciddii markaas masuulka ka ah Safaaradda, Ergada ama Qunsuliyadda;
3. Kormeerka iyo lasocodka howsha shaqaalaha aan joogtada ahayn (local staff); isagoo si gaar ah isha ugu haynaya qorriinkooda, caymiskooda, fasaxyadooda, warbixintooda iyo marka ay shaqadu ka dhamaato siintooda, iyo
4. Ilaalinta, kaydinta iyo xannaanada dokumentiga, qalabka xafiiska iyo gaadiidka Safaaradda ama Ergada.

**Waajibaadka Ku Qeybsanaha Arrimaha Ganacsiga (Commercial Attache`):**

1. Wuxuu u xilsaaran yahay horumarinta iskaashiga dhaqaalaha iyo ganacsiga si waafaqsan Axdiga Vienna ee Xiriirka Qunsuliyadaha ee 1963;

**Waajibaadka Ku Qeybsanaha Arrimaha Dhaqanka (Cultural Attache`):**

1. Abaabulka barnaamijyada is-dhaafsiga waxbarashada, hiddaha, dhaqanka, fanka, isboortiga iyo cilmiga teknoolajiyada ee labada dal;

## Qodobka 6aad: Ergooyinka diblomaasiyadda

Ergooyinka dibloomaasiyaddu waxay ka koobanyihiin:

a) Safaarado
b) Ergooyinka joogtada ah ee Haey'adaha Caalamiga ah iyo kuwa Goboleed.
c) Ergooyin aan caadi ahayn

## Qodobka 7aad: Xilalka Ergooyinka diblomaasiyadda iyo Qunsuliyadaha

1. Xilalka Ergooyinka diblomaasiyadda waxaa ka mid ah:
   a) Waxa ay dalalka ay joogaan wakiil uga yihiin Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   b) Waxay dalalka ay joogaan uga wakiil yihiin danaha Jamhuuriyadda iyo tan muwaadiniinta Soomaaliyeed, inta uu xaddidayo (oggol yahay) sharciga caalamiga ahi;
   c) Waxay wada xaajood la yeelanayaan Dawladda dalalka ay joogaan;
   d) Waxay la xaajoonayaan isla markaasna xaqiijinayaan sida sharcigu qabo xaaladaha iyo horumarka waddamada ay joogaan, iyaga oo usoo gudbinaya warbixin Arrimahaa Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo

e) Waxay dhiirrigelinayaan xiriir saaxibtinnimmo ee dhexmara Dawladda Soomaliya iyo Dawladaha dalalka ay ka hawlgalayaan, si loo horemariyo xiriirka dhaqaale, dhaqan iyo saynis ee labada dal, si waafaqsan Axdiga Vienna ee 1961 kii ee xiriirka diblomaasiyadda.
f) Soo xereynta dhammaan dakhliga adeegyada ay qabtaan sida ugu dhaqsaha badan ama bishiiba mar.

**Howlaha Qunsuliyaddu waxay ka koobantahay:**

a) Ilaalinta danaha Dowladda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya iyo dadkeedu ku leeyihiin dalka ay joogaan ha ahaato mid shaqsiyeed iyo mid hey'adeed , inta uu xaddidayo sharciga caalamiga ah;
b) Horumarinta ganacsiga, dhaqaalaha, dhaqanka iyo xiriirka cilmiyeed ee dhexmara Soomaaliya iyo dalka ay joogaan ama kobcinta xiriirada saaxiibtinimo ee labada dal, sida waafaqsan Axdiga Vienna 1963dii ee xiriirada Qunsuliyadaha;
c) U kuur-gelidda si sharciga waafaqsan xaalada horumarka, ganacsiga, dhaqaalaha iyo dhaqanka ee waddanka uu ka hawlgalayo, iyada oo xogta arrimahaas la xiriira loo soo gudbinayo Madaxa Ergada
d) Bixinta Baasaboorrada, documentiga safarka iyo cusbooneysiinta ay u baahan yihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo bixinta dal-ku-gayada (Visaha) ama dokumentiga la siiyo dadka doonaya in ay u socdaalaan Soomaaliya;
e) Gacansiinta muwaadiniinta iyo hey'adaha Soomaaliyeed;
f) Waxay u shaqaynaysaa sida hey'ad diiwaangelineed, waxayna qabataa howlo maamul iwm oo aan ka hor imaaneyn shuruucda iyo xeerarka u degsan dalka martida loo yahay;
g) Dhowrista danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed, mid shaqsi iyo mid hey'adeed marka ay timaado Geeri iyo Dhaxal gudaha waddanka martida looyahay si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalkaasi;
h) Taakuleynta da'yarta iyo naafada Soomaaliyeed; gaar ahaan haddii shaqkhsiyaadkaasi ay damaanad daryeel u baahan yihiin, iyadoo la dhawrayo xuduudda uu oggol yahay sharciga iyo xeerarka dalka martida loo yahay iyo soo dhaweynta masuuliyiinta qaranka.
i) Metelidda ama suurtogelinta cid metesha dadka Soomaaliyeed ee laga doonayo maxkamad ama hey'ad kale oo ka tirsan waddanka martida loo yahay, iyada oo ladhowrayo shuruucda iyo xeerarka dalkaas, si loo badbaadiyo danaha muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ay u suurtogeli-weydo in ay iyagu waqtigaas difaacdaan xuquuqdooda;
j) Soo gudbinta dokumentiga shuruucda iyo xeerarka gaarka ah (juridical and extra juridical), si la isu barbardhigo qawaaniinta maxkamadaha Soomaaliya iyo kuwa caalamiga ah, haddii aysan jirin heshiis caalami ah oo u dhigma sharuucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay;
k) Xaq u lahaanshaha kormeerid iyo baritaan maraakiibta iyo dayuuradaha ka diiwaan gashan Soomaaliya iyo shaqaalahooda sida uu qabo sharciga Soomaaliya ee khuseeya arrimahaas;

l) Caawinaadda maraakiibta iyo dayuuradaha lagu xusay xarafka (K) ee qodobkan iyo shaqaalahooda, hubsashada qoraalka safarkooda iyo warqdaha maraakiibta, shaabadeynta waraaqaha markabka iyo baaritaan haddii ay is qabtaan saraakiisha iyo badmaaxyada sida uu qabo sharciga Soomaaliya, iyadoo la xurmaynayo sharuucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay,

m) Soo dhaweynta Wufuudda Qaranka ee Rasmiga ah iyo Sagootintooda, iyo

n) Fulinta hawl kasta oo ay u wakiilato Dawladdu oo aan ka hor imanayn sharuucda iyo xeerarka dalka martida loo yahay ama waafaqsan Axdiga Vienna ee xiriirka Qunsuliyadaha ee 1963dii, Qodobkiisa 5aad.

## Qodobka 8aad: Darajada

1. Darajooyinka dibloomaasiyiinta waxay u qaybsan yihiin sida soo socoto:
   a) Madaxa Ergadu oo la kala ah
      i) Danjire
      ii) Sii-haye
   b) Lataliyeyaal
   c) Xoghayeyaal
   d) Ku-qaybsaneyaal

2. Darajooynka xafiiska Qunsuliyaddu waa sida soo socoto:
   a) Qunsul Guud
   b) Qusul
   c) Waxaa kale oo jiri kara Qunsu-sharafeed

Qunsul-sharafeedka waxaa magacaabistiisa soo jeediya Wasiirka Wasaarada Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah; waxaana oggolaada Wasiirka Koowaad; Kadibna Madaxweynaha Jamhuuriyada Federalka ayaa dekreeto ku magacaaba.

## Qodobka 9aad: Kala mudnaanta

Saraakiisha xarunta dhexe iyo Diblomaasiyiinta ka hawl-gala dibadda waxay leeyihiin heerarka kala sarreynta ee hoos ku tilmaaman:

1. Agaasimeyaal Guud;
2. Danjireyaal iyo Siihayayaal Magacaaban (*Charge* d' Affairs en titre);
3. Lataliyeyaal\Qusulada Guud
4. Agaasimeyaasha Waaxaha;
5. Xoghayeyaasha (1aad & 2aad)
6. Ku- qaybsaneyaal (ganacsiga, dhaqanka & warfaafinta)
7. Madax-qaybeed

8. Shaqaalaha farsamoyaqaannada ah, kal-kaaliyeyaal, iwm

### Qodobka 10aad: Maqaamku ku-qaybsaneyaasha arrimaha ciidamada

Habmaamuska awgeed, ku-qaybsaneyaasha arrimaha ciidamadu waxay istaagayaan maqaamka danjiraha ku xiga. Haseyeeshee waa u madaxbannaan yihiin gudashada hawlahooda u gaarka ah, laakiin waxaa waajib ah in ay la socodsiiyaan/wargeliyaan Madax Ergada. Ku-qaybsanaha ciidamadu ma qaban karo jagada ku-simaha Madax Ergada, marka uu maqan yahay Madaxa Ergedu.

### Qodobka 11aad: Magacaabis safiir siyaasadeed (political apppointee)

Madaxweynaha jamhuuriyaddu, haddii ay jirto baahi qaran, kaddib marka uu dhegeysto Wasiirka Arrimaha Dibedda wuxuu u magacaabi karaa danjire (ugu badnaan 10%); kaas oo ay lagama maarmaan tahay in uu buuxiyo shuruudaha ka mid noqoshada shaqaalaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo diblomaasiyiinta dibedda loo dirayo ee ku kala xusan qodobbada 3aad iyo 4aad ee sharciga.

### Qodobka 12aad: U magacaabid iyo ka-fariisin xil

A. Iyadoo aan loo eegin tilmaamaha sharciga shaqaalaha Dowladda ee ku saabsan u magacaabidda darajooyinka kale, Danjireyaasha iyo Qunsullada Guud waa in lagu magacaabo Dekreeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda; taas oo ku imaneysa go'aanka Golaha Wasiiradda oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga Ah.

B. Lataliyeyaasha iyo xoghayeyaasha Ergooyinka safaaradaha iyo qunsuliyadaha guud waxaa magacaaba ama xilka ka qaada Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

### Qodobka 13aad: Darajooyinka iyo qaybinta xilalka

Shaqaalaha arrimaha dibeddu waxay ka kooban yihiin afar (4) qeybood:

| A | B | C | D/KH |
|---|---|---|---|
| Danjire,siihaye-Magacaaban, Lataliye, Qunsul guud | Xoghayeyaal, Ku qaybsane | Xirfadleyaal | Shaqale hose |

**Qodobka 14aad: Waajibaadka saraakiisha qunsuliyadda**

Waajibaadka saraakiisha qunsuliyaddu waa sida soo socota:

a) Qunsulka Guud wuxuu ka mas'uul ka yahay kormeerka iyo isu-duwidda dhammaan qaybaha shaqo ee xafiiska Qunsuliyadda guud.
b) Qunsulku waa ku-xigeenka Qunsulka guud, wuxuuna u xilsaaran yahay qabanayaa shaqada qunsuliyadda guud.
c) Qunsul-ku-xigeenku wuxuu ka kaaliya Qunsulka Guud hawlaha Qunsuliyadda guud.
d) Marka uu maqan yahay Qunsulka Guud, Qunsulka ayaa noqonaya ku simaha Qunsukla guud.
e) Ku qaybsanayaasha maamulka waxay mas'uul ka yihiin shaqooyinka ay sida gaarka ah ugu cayinto Wasaaraddu/qunsulka Guud, sida maamulka, xisaabaadka iyo farsamada iwm.
f) Meeshii ayna ka furnayn Qunsuliyada Guud, haddii aysan Wasaaraddu soo magacaabin; hawsha Qunsuliyadda waxaa loo dhiibi karaa sargaal uu safiirku u xilsaaro oo ka tirsan ergada.

**Qodobka 15aad: Siihayaha magacaaban iyo kan waqtiga cayiman**

1. Sii-hayaha magacaaban (*charge D'affaires en titre*), waxaa magacaaba Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga Ah; waxaana warqadda aqoonsiga siihayenimada ka guddooma Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Dalka loo magacaabay. Siihayahan waxaa sida badan loo magacaabaa marka labada dal xiriirkoodu uusan wanaagsaneyn, hooseeyo ama bilow yahay. Waxa uu si dhan u qabanayaa shaqada Danjiraha.
2. Marka Danjiraha goobta shaqada ka maqan yahay, waxaa xilka sii haynaya lataliyaha siyaasadda oo noqonaya siihaya waqtiga cayiman (*Charge d' Affairs a.i*), hadii uu lataliyuhu maqanyahay waxaa xilka qabanaya sarkaalka ku xiga xagga darajada.

**Qodobka 16 aad: Siihayaha Qunsuliyadda**

Marka uu Qunsulka Guud ka maqanyahay goobta shaqada, waxaa xilka Qunsulliyadda Guud qabanaya ku-xigeenkiisa.
Hadii ku-xigeenku maqanyahay, waxaa xilkaas qanabaya sarkaalka ku xiga xaga darajada.

**Qodobka 17aad:Gunnada Shaqada Dibedda**

1. Sarkaalka shaqada Dibedda ee ka howlgala Ergo diblomaasiyadeed ama Qunsuliyad w in lasiiyaa, gunno shaqada Dibadda, waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah; kadib marka

helo go'aan Golaha Wasiirada oo cuskana soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

2. Gunnada lagu bixiyo farqada 1aad waxaa bixinteedu ka bilaabaneysaa maalinta sarkaalka si rasmi ah loogu magacaabay xilka shaqada dibadda.
3. Marka uu sarkaalka goobtiisa shaqada uga tago sababahaan: beddel, dib-ugu-yeerid, howlgab, gunnada shaqada dibadda waxaa la siin karaa:
   a) Danjire, siihayaha magacaaban iyo Qunsul Guud Seddex bilood;
   b) Diblomaasiyiinta kala duwan iyo shaqaalaha kale laba bilood.

### Qodobka 18aad: Gunnada u dhaxeysa labo xil

Sarkaalka ka shaqeeya Safaaradda, Ergo ama Qunsuliyad loona beddelo goob kale, waxaa si waafaqsan qodobka 17aad xarafka 'E' uu gunno laba bilood ah ku sii leeyahay goobtii hore ee laga badalay; waxaana uu goobta cusub gunno ku leeyahay wixii waqtigaas ka danbeeya.

### Qodobada 19aad: Fasaxa Sanadeedka

1. Diblomaasiga ka howlgala safaarad, Ergo ama qunsuliyad Guud waxaa lasiin karaa 15 maalmood oo fasax –sanadeedkiisa ka mid ah oo uu ku qaadan karo gudaha dalka uu ka shaqeeyo, 15ka maalmood ee uharayna waxaa loogu biirinayaa fasaxiisa danbe.

2. Marka uu dhameysto laba ilaa saddex sanood ee shaqada dibedda, Sarkaalka howlaha dibedda wuxuu xaq u yeelanayaa fasax uu ku qaato dalkiisa asagoo isticmaalaya fasaxyadii u aaruuray ee lagu soo xusay farqada 1aad.waxaana laga bixinayaa kirada guriga muddo hal bil ah.

### Qodobka 20aad: Ticketka fasax –sanadeedka

1. Diblomasiga dibedda ka howlgala, wuxuu labadii sanoba xaqu leeyahay hal ticket-fasaxeed buuxa(sii socod iyo soo socod) fasax ugu qaato dalkiisa.

2. Isticmaalka *ticketka* fasaxa dalku wuxuu noqonayaa sida soo socota:
   a) Diblomaasiyiinta iyo dhamaan xubnaha rasmiga ah ee qoyskiisa waxay usafri karaan dalkooda (Soomaaliya), dibna waxay ugu noqon dalkii ay ka yimaadeen ilaa iyo inta uu sarkaalkau ku sugan yahay isla goobtii shaqada dibedda;
   b) *Ticketyada* fasaxa dalka waxaa sarkaalka iyo xubnaha rasmiga ee qoyskiisa la siin karaa marka uu sarkaalaka dhameysto labo sano oo buuxda ee xilkiisa goobta dibedda.
   c) *Ticketka* fasaxa dalka oo aan la qaadan ka hor inta aan loo beddelin goob kale wuu ka lumayaa. Haseyeesha, haddii Sarkaalka ay Wasaaraddu ku amarto in uu ka tago goobtiisa shaqada dibedda, toosna u aado goobta kale isagoon qaadan *ticketka* fasaxa dalka; wuxuu xaqa fasaxa dalka yeelanayaa kaddib marka uu la wareego xilki

shaqada ee goobta cusub; taas oo uu u caddeynayo Agaasimaha Guud, maadaama ay xaaladaasi ka duwan tahay habka caadiga ah oo looga oggolaanayo fasax sanadeedka.

3. Haddii diblomaasi ama xubin ka mid ah qoyskiisa uu beddesho qadka safarkiisa, xaq uma yeelanayo qiima ka duwan sicirka ticketka loo oggolaaday, xaqiisana wuxuu ku xadidanyhay qiimaha waddada ugu toosan ee loo oggolaaday in uu raaco.

4. Diblomaasi ama xubin qoyskiisa ee ku safraya ticketka fasaxa dalka, xaq uma yeelanayo in kharjka xamuulka dheeraadka ah ay dowladdu ka bixiso.

5. Xisaabta *ticketka* fasaxa dalka waxaa ku shaqo leh/lasiinayaa oo kaliya Ergada, Safaaradda ama Qunsuliyadda uu Sarkaalku ka howl galo.

6. (i) Ka sokow ticketka fasaxa dalka ee uu Sarkaalku leeyahay, waxa uu xaq u yeelanaya, muddada uu xilka hayo, laba ticket oo ah xaalad lama filaan ah (emergency) haddii diblomaasiga ama xubin qoysiiska ka mid ah uu doono in uu si degdeg ah ugu dhoofiyo Soomaaliya.
   (ii) Haddii diblomaasiga ama afadiisa /seygeeda, la siiyo ticket xaalad degdeg ah, wuxuu/waxay wadan karaan caruurta oo dhan.

F.G: Qoys waxaa sharciyaan loola jeedaa:
(i) Xaaska /seyga, haddii ay si joogta ah u wada noolyihiin.
(ii) Caruurta haddii ay si joogta ah ula noolyihiin waalidka.

## Qodobka 21aad: Gunnada muddada xil-gudashada dibedda

Diblomaasiga shaqo awgeed ugu soo noqda dalka, wuxuu qaadanaya gunnadiisa shaqada dibedda oo buuxda ugu badnaan labo bil, Haddii sarkaalka la ruqseeyo ama xilka laga qaado isagoo howl dibedda u jira, xaq uma yeelanayo wax gunno ah.

## Qodobka 22aad: Gunnada Huga Haybad-dhowrka (labiska)

Gunnada Huga Haybad-dhowrka waxaa la siin karaa oo qura marka Sarkaalka diblomaasiga ah laga beddelo Xarunta ee uu ku jeedo Ergo, Safaaradda ama Qunsuliyadda loo beddelay.
Gunnada Huga Haybad-dhowrka waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah kaddib marka la helo go'aanka Golaha Wasiirada oo cuskanaya soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

Gunnada Huga Haybad-dhowrka waxaa looga danleeyahay in la daryeelo Sarkaalka hawsha loo dirayo, lagana gacansiiyo kharjka uga baxaya dharka iyo qalabka kale ee uu u baahdo marka dibedda loo beddelo.

### Qodobka 23aad: Gunnada martigelinta

1. Safaaradaha, Ergada iyo Qunsuliyadaha waa in loo qoondeeyo gunno martigelin sanadeed, taas oo ay Wasaaradda Arrimaha Dibeddu xaddideyso. Qoondadaas waxa ay Wasaaradda Arrimaha Dibedda kala xisaabtameysaa madaxa Ergada.
2. Kutala-galka gunnada martigelinta waa in lagu daraa miisaaniyad –sanadeedka Wasaaradda Arrimaha Dibedda. Xisaab celinta waxaa la raacayaa hab-raaca ay dejisay Wasaaradda Maaliyadda iyo Qorsheynta.

### Qodobka 24aad: Gunnada danjiraha ma-daganaha ah (none-reident Ambassador)

a) Haddii uu Madaxa Ergada isku mar ka wakiil yahay dal ama ka badan, Wasaaraddu waa in ay u qoondeyso kharajka martigelinta dheeri ah sanadkii.

b) Madaxa Ergadu wuxuu qaadan karaa gunno martigelin dheeri ah, waana in uu la yimaado caddeymo dhab ah muujinaya in uu galay kharjkaas.

c) Kharashka martigelinta dheeraadka ah, waa loo celinayaa marka lahelo shuruudahan.

d) In wadarta hormarinta aysan marna ka badnaan afarmeelood meel (1/4) ku talagal sanadeedka.

e) Hormarinta kasta oo uu qaato waa in uu soo caddeeyo inta aysan dhamaan xisaab xirka seddex-biloodlaha ah ee miisaaniyad –sanadeedka.

f) Madaxa Ergadu ma qaadan karo hormarin kale, mana codsan karo kharj-celin uu galay saddex bilood gudahood, isagoon marka hore xisaab celin ka keenin hormarintii uu horay u qaatay. Haraaga kharaka aan la isticmaalin dhamaadka sanadka miisaaniyadda waa ka dhacayaa.

g) Madaxa Ergada ee isla markaas wakiil ka ah dal ama dhowr dal, ka sokow dalka uu rasmi ahaan deggan yahay, wuxuu kaxaysan karaa afadiisa, marka uu u socdaalayo dhamaan dalalka uu wakiilka ka yahay, iyadoo la dhowrayo shuruudaha soo socda:

(i) Booqashada afada Madaxa Ergadu ee dal waliba oo uu wakiil ka yahay waa in aysan ka badan laba mar sannad miisaaniyeedka gudahii.

(ii) Wadarta maalmaha sannad miisaaniyeedka uu madaxa Ergadu u codsan karo afadiisa gunno maalmeedka, inta uu ku jiro socdaalkiisa dalka ama dalalka uu wakiilka ka yahay waa in aysan marna aan isku darka socdaalkiisa ka badnaan labaataan casho.

## Qodobka 25aad: Gunnada xamuulka dheeriga ah

a. Diblomaasiyiinta iyo howlwadeennada, waxay xaq u leeyihiin, in laga bixiyo kharajka xamuulka hantidooda gaarka ah, marka loo beddelo dibedda ama dib loogu soo celiyo xarunta ama safaarad kale, iyadoo la raacayo wadda-mareenka loo oggolaaday.

b. Diblomaasiinta iyo hoawlwadeennada kaleba waxay xamuulkooda ku qaadan karaan dayuurad (sida amarku yahay) ilaa 100 Kgs, *ticket* waliba iyo 50Kgs *ticketka* barka ah, in aan ka badneyn qoyskiiba 350kgs, taas oo ay ku jirto miisaanka xorta ah oo shirkadaha dayuuradaha bixiso. miisaanka ugu harsan, inta ay xaqa u leeyihiin waxaa loo marsiinayaa xagga dhulka ama badda , sida ku cad miisaanka mid waliba hortiisa ku qoran:

| Darajada sarkaalka | Haddii uu qoys la socda | Haddii uu kaligii yahay |
|---|---|---|
| Madaxa Ergo, Saf. ama Qunsuliyad | **2.500 k.,** | **2.000kg.** |
| Lataliye, Qunsul, Xogh.1aad | **2.000kg.** | **1.500kg.** |
| Xogh.2aad, Ku-qaybsane | **1.000kg.** | **500kg.** |

Qaadidda xamuulka dayuuradda waa in la isticmaalo kuwa shirkadda qaranka. meelaha aysan ka howkgelin shirkadda qaranku, xamuulka waxaa looo adeegsan karaa shirkadaha dayuuradaha ajnabiga, iyadoo lagu dhaqmayo sicirka xamuulka.

## Qodobka 26aad: Canshuur dhaaf

Haddii xubin ka tirsan diblomaasiyiinta dibedda laga soo beddelo oo loo soo beddelo Xarun dhexe, isagoo soo dhamaystay waajibaadkiisa, howlgabay ama geeriyooday, waxaa laga cafinayaa dhamaan wixii canshuur dowldeed ah ee ku waajibtay hantidiisa gaarka ah ee uu ku dhaqmayo sida qalabka guriga iyo halgaari oo uu horay u isticmaali jiray.

## Qodobka 27aad: Gunnada Waxbarshada caruurta

1. Gunnada waxbarashada caruurta waxaa laga bixinaya ilmaha da'doodu u dhexayso 5ilaa 18sano.Gunnada waxbarashada caruurta waxaa lagu bixiyaa, tan iyo inta laga garayo dhamaadka sannad-dugsiyeedka socda.
2. Tirada caruurta uu diblomaasiga ku qaadan karo gunnada waxabarashada waa caruurtiisa/caruurteeda oo dhan.
3. Gunnada waxaa lagu bixin kaaraa caruurta ku qaadata waxbarashada dugsi ka furan goobta shaqada diblomaasiga. Waana in la keeno caddeynmaha diiwaan gelinta iyo lacag bixinta.
4. Goobta laga heli karo waxbarasho lacag la'aan ah, una qalanta mustawaha safaaradaha laguma bixin karo gunno waxbarsho.

## Qodobka 28aad: Xirfadda iyo aqoonta luuqadaha ajnabiga

**Barashada luuqadaha qasabka ah:**

a) Xubin shaqada dibedda waxaa looga baahan yahay, inta uusan ku soo biirin shaqada dibedda, in uu imtixaan uga gudbo mid ka mida labada luqadood (Ingiriis ama Carabi)oo qasab ku ah aqoontooda.

b) Haddii uu sarkaalku horay ugu guuleystay imtixaankii qasabka luuqadaha , wuxuu awoodaa, oo uu kala dooran karaa, codsina u bandhigan karaa Wasaaradda, ruqsad uu kor ugu qaado heerka barashadiisa luuqadaha, ama uu codsado barashada luuqad kale oo dheeri ah(*optional)*, kana duwan tii asaga horay loogu qorsheeyay ee barashada qasabaka.

**Gunnada luqaddaha dheeriga ah (optional)**

c) Haddii xubin shaqadu uu ku guuleysto barashada luuqad ajnabi ee dheeri ah oo waafaqsan tilmaamaha farqadda kore, kadibna Sarkaalkaas loo beddelo dal ay luuqadaas dheeriga ah ay ka tahay luuqadda rasmiga ee dalkaas ama si balaaran loo gu dhaqmo, sarkaalkaasi wuxuu muteysanayaa, muddada uu shaqaada kujoogo dalkaas, in la siiyo gunno luuqadeed , oo u kala qiimeysan sada soo socota:

(i) Haddii uu sarkaalku ku gudbay imtixaanka luuqadda dheeriga ah, dhibco heer caadiya ah, waxaa la siinayaa U.S $200/, bishiiba.

(ii) Haddiise uu saarakaalku uga gudbo imtixaanka luuqadda dheeriga ah dhibco heer sare ah Wasaaradduna ay caddeyso in uu gaaray heerkaas sare oo ay aqoontiisa luuqaddu u oggolaan karto in uu ku noqon karo tarjume, waxaa la siinayaa U.S.$300/-bishiiba.

d) Sarkaal iskuma qaadan karo gunno luuqad, wax ka badan hal luuqad dheeri ah, marnaba.

e) Sarkaal aan ka gudbin barshada luuqadda qasabka aha ama aan la xaqiijin in shaqada looqaatay looma beddeli karo shaqada dibedda. Saraakiisha shaqada dibedda iyo xaasaskooda waxaa loo oggolaan karaa lacag celin ay dowladdu ku bixiso kharajka waxbarashada oo ku kooban ilaa 120 saacadood ama tababar kaltan ah(*part time)* aan ka badneen lix (6) bilood inta uu socda, si ay ku bartaan luuqadda dalka ay joogaan ama luuqadda aad looga hadlo dalkaas, ayadoo ku xiran oggolaanshaha Wasaaradda.wax tijaabo ah ama kharaj imtixaan ee loo celinayo ma jirayo. Laakiin waa in lagu soo lifaaqo caddeymo iyo marqaatifur (*certificate)* uu soo saxiixo Madaxa Ergadu.

Qidmadda la siinayo Sarkaalka arrinta quseyso, waxay noqoneysaa lacagta looga dhaqmo dalka uu joogo ama lacagta U.S.

**Luuqadaha ajnabiga ee khiyaariga ah (*optional)***

1. French
2. Amharic.
3. Kisawahili.
4. Italian.
5. Urdu.

6. Spanish.
7. Chinese.

## Qodobka 29aad: Daryeelka caafimaadka

Saraakiisha diblomaasiyiinta ah iyo hawlwadeennadu inta ay dibedda joogaan, waxay xaq u yeelanayaan daryeel caafimaad.

a. Daryeelkaas waxaa sidoo kale lahaan kara, kuwa soo socda:
   i) Xaaska/Seyga.
   ii) Carruurta aysan da'dooda ka badneen 18 sano;
   iii) Adeegyaasha dibedda loo watay oo ay Dowladdu kharajkooda bixiso, una adeega Madaxa Ergada.

b. Daryeelka ma quseynayo:
   i) Shaqaalaha Ergada dibedda ka qorato *(Local Staff)*;
   ii) Markii qofka xaqa u leh daaweynta uu joogo Soomaaliya;
   iii) Marka xubin ka mid ah qoyska ee xaqa u leh uu deggan yahay dal aan ahayn goobta Sarkaalku ka hayo shaqada dowladda.

c. Dhammaan saraakiisha shaqada dibedda, howlwadeennada iyo qoysaskooda (sida kor ku xusan) waa in kharashka daryeelka caafimaadkooda la caymiyo, iyadoo waafaqsan nidaamka u degsan dalka ay joogaan.

d. Dal waliba waxaa lala macaamilayaa Isbitaalada leh addeeggayada daruuriga ah ee caafimaadka.

## Qodobka 30aad: Kharajyada geerida

Haddii ay geeri ku timaado xubin hawlwadeennada dibedda ah ama xubin ka tirsan qoysaskiisa isagoo ku sugan goobta shaqada dibedda, dhammaan kharajka ku baxaya howlaha marxuumkaas iyo dib u soo dhoofinta meydkaas waxaa bixineysa Dowladda.

## Qodobka 31aad: Dayuurad raacidda Madaxda Ergada

1. Madaxa Ergada ee laga beddelay Xarunta Wasaaradda ee ku sii jeeda goobtiisa shaqo (si toos ah), wuxuu mudan yahay in uu ku safro *ticketka* darajada labaad *(Business Class)*.
2. Afada Madaxa Ergadu waxay ku safri kartaa ticket-ka darajada labaad marka ay/uu, wehliso asaga/iyada isla duulimaadna yihiin oo qura. Xubnaha kale ee qoyska waxay ku safrayaan *ticket* darajada caadiga ah *(Economic class)*.
3. Marka uu shaqo gaaban ka qabanyo Xarunta Dhexe ama dibedda, safarku wuxuu noqonayaa mid shaqo, sidaa darteed Madaxa Ergadu wuxuu ku dhoofi karaa *ticket* darajada labaad *(Business Class)*.

4. Afada Madaxda Ergadu waxay ku safri kartaa *ticketka* darajada koowaad, iyadoo ku wehliso seygeeda hawl gaaban, lana socda Madax Sare oo ah VIP.
   Waxaa loo baahan yahay oggolaanshaha Wasiirka si ay afada Madaxa Ergadu ugu safarto *Ticketka* darajada koowaad, iyadoo ku wehlineyso seyigeeda gudashada hawl gaaban munaasibadda booqashada rasmiga ee Madaxa Dowladdu ama Xukuumaddu ku tegayaan dalka uu wakiilka ka yahay. Afadu waxay ku safreysa darajada koowaad marka ay la socoto seyigeeda, isla duulimaadkaas, ama ay la safreyso xaaska Madaxa Dawladda ama Xukuumadda, haddii kale waxay ku safreysaa darajada labaad *(Economic Class)*.
   Dhammaan saraakiisha kale waxay ku safrayaan darajada caadiga ah *(Economic Class)*.
5. Iyadoo ku xiran awoodda dhaqaale, madaxa Ergadu wuxuu safar ku kala bixinayaa dalalka uu wakiilka ka yahay, marka uu safarkaasi dan qaran awgeed lagama maarmaan yahay. Madaxa Ergada eek u guda jira socdaal dalalka uu ka wakiilka yahay, iyadoo ay dowladdu bixineyso kharajka, wuxuu kaxeysan karaa Sarkaal Diblomaasi ah ama haddii loo baahdo wuxuu wadan karaa Xoghayntiisa gaarka ah, haddii uu dhulka ku safrayo waxaa dheeraadah oo uu kaxaysan karaa darawal.
6. Haddii aysan Wasaaraddu tilmaan gaar ah ka soo saarin, ugu badnaan tirada safarada uu sannadkii Madaxa Ergadu ku kala bixin karo dal kasta oo uu ka wakiil yahay, waa in aysan ka badnaan laba socdaal.

## Qodobka 32aad: Hoyga

1. Madaxa Ergada/Qunsulka Guud waxa xaq u leeyahay guri goglan oo munaasib u ah mid kiro ah ama mid ay Dowladdu leedahay, loona dayactiro labadii sano mar.
2. Madaxa Ergadu/Qunsulka Guud oo la siiyey deegaan ay Dowladdu leedahay ama ay Dowladdu ku bixiso kiro muddo dheer ah, inta uusan la wareegin deegaanaas, waa in uu si dhab ah isaga hubiyo dhismaha iyo qalabka guurtada ah ee yaal. Waa in uu alaabtaas ka hubiyo waxa ku qoran liiska diiwaanka Dowladda ee yaal Xafiiska Ergada/Saldhigga.
3. Madaxa Ergada/Qunsuliyadda Guud ma dhalanrogi karo deegaanka la dejiyay haddii uusan oggolaansho ka haysan Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

## Qodobka 33aad: Diyaarinta Madaxda loo magacaabay Ergo/Qunsuliyad Guud

1. Madaxda loo magacaabay Ergooyinka ama Qunsuliyadda Guud inta uusan qaban xilkooda cusub ee dibedda, waa in ay helaan warbixin la xariirta dalka saldhigoodu noqonayo/ midka ay wakiilka ka noqonayaan, waana in ay ka haystaan macluumaad guud dalkaas (dalalkaas) sida: taariikhda dalka, qaab-dhismeedkiisa siyaasadeed, dhaqanka iyo horumarkooda dhaqan dhaqaale. Waa in ay sidoo kale fikrad ka haystaan axdiyada caalamiga ah *(International Conventions)*; kan diblomaasiyadda iyo kan xiriirka qunsuliyadda.
2. Madaxa loo magacaabay Jagooyinka kor ku xusan, waa in si buuxda loo baraa xiriirr
   labada dhinac u dhexeeya: Soomaaliya iyo dalka saldhigoodu noqonayo ama ay ka wal

noqon doonaan; iyada oo Wasaaradda Arrimaha Dibedda ay xog buuxda ee ku saabsan heerka xiriirka labada dal uu marayo ay siinayso, dhinaca kalana ay u caddeyneyso danaha gaarka ah ay Dowladdu wadankaas ka leedahay.

3. Haddii Madax loo magacaabay Ergo/Jago uu la yimaado diyaargarow la'aan iyo aqoon xumo howshiisa, Wasaaradda waxaa khasab ku ah in socdaalkiisa dib u dhigto inta uu ka soo bandhigayo wax taa ka duwan.
4. Qiimeyntaas waa in uu sameeyo guddi uu magacaabay Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
5. Dhammaan Saraakiisha diblomaasiyiinta kale, waa in ay maraan tabaabushaha kuwaa la mid ah, inta aysan u kicitimin halwaha loo xilsaaray ee dibedda, iyadoo ay kormeera-yaan: Agaasimaha Guud iyo Agaasimaha Waaxda ay quseyso ee Wasaaradda.

## Qodobka 34aad: Taariikh nololeedka shakhsiga (CV)

Iyadoo loola jeedo in lagu meel mariyo dhanka dallacsiinta u magacaabidda xil dibedda, Wasaaradda Arrimaha Dibeddu waa in ay u lahaato gal, dhammaan hawlwadeennada shaqada dibedda oo ay ku keydsan yihiin:

a. Taariikh nololeedka shakhsiga (CV)
b. Warbixin qarsoodi ah oo ku saabsan dhaqankiisa iyo waxqabadkiisa.

## Qodobka 35aad: Natiijada Warbixinta Xun

Diblomaasi amase hawlwadeen kasta oo ay ka timaadowarbixin xumi, waxay dhaxalsiin kartaa in la marsiiyo ciqaab sida waafaqsan sharciga shaqaalaha rayidka Dowladda.

## Qodobka 36aad: Hawlgabnimo ku timaada karti-xumo

a) Diblomaasi amase hawlwadeen kasta oo ka tirsan Wasaaradda oo loo arko in waxtarkiisu liito muddo labo sano oo xiriir ah, waxaa laga soo beddelayaa howsha uu hayo, laguna wareejinayaa meesha uu ka shaqeyn karo.
b) Diblomaasiga uu dal shisheeye soo eryo *(Persona non grata)* arrimo la xiriira akhlaaq-xumi iyo falal kale oo lid ku ah sharafta iyo sumacadda diblomaasiga awgeed (xiriirna aan la lahayn dan Qaran), kaddibna ay u caddaato Wasaaradda Arrimaha Dibedda in uu galay dembiga lagu soo eedeeyay, waa in Wasaaraddu tallaabo Sharciga waafaqsan ka qaadaa.

## Qodobka 37aad: Qaabka dallacsiinta

a) Dallacsiinta diblomaasiyiinta iyo haw-wadeennada Wasaaradda waa inuu waafaqsan yahay Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.

b) Jagada Danjire *(Career Dilomat)* waa A-3. Hase yeeshee, waxaa loo dallacsiin karaa A-2 iyadoo lagu salaynayo mudnaanta (***merit***) iyo waayo-aragnimo (**Seniority).**

### Qodobka 38aad: U soo beddelid Danjire Xarun Dhexe

Danjiraha soo dhameystay waajibaadkiisa dibedda, wuxuu ka qaban karaa Wasaaradda jago u dhiganta darajadiisa sida: Xoghayaha Joogtada, Agaasimaha Guud ama xilkii kale ee uu wasiirka Wasaaraddu u magacaabo; waxaana uu lahaanayaa tilmaantiisa Danjirenimo xagga habmaamuuska.

### Qodobka 39aad: Muddada shaqada dibedda

a) Diblomaasiga ka shaqeeya Ergo Diblomaasiyadeed ama Qunsuliyad Guud, lagama beddeli karo goobta shaqada, isagoon la shaqeyn ugu yaraan laba sanadood, laga billaabo maalinta uu shaqada la wareegay, haddii aan dan guud darteed si kale loogu baahan.
b) Diblomaasigu kuma negaan karo goobtiisa shaqada Dibedda wax ka badan afar sano.
c) Diblomaasigu kuma maqnaan karo dibedda wax ka badan sided sanadood oo xiriir ah.
d) Kaddib markuu soo dhameysto shaqada dibedda waa in uu Xarunta ka haw-galo ugu yaraan laba sanadood.

### Qodobka 40aad: War-gelinta beddelaadda ka hor

Sarkaalka diblomaasiga ah iyo kan Qunsuliyadda ee la doonayo in laga beddelo Safaarad/Ergo ama Qunsuliyad, loona beddelo mid kale amaba Xarunta Dhexe, waa in la siiyo laba bilood oo uu isku diyaariyo.

### Qodobka 41aad: Shaqaalaha maxaliga ah ee ka hawl gala Ergooyinka dibedda

1. Shaqaalaha maxaliga *(Local staff)* oo ay qaataan Ergooyinka, Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha waxaa lala gelayaa heshiss gaar ah (contract) oo waafaqsan shuruucda iyo xeerarka shaqaalaha dalka martida loo yahay.
2. Shaqaalaha Soomaaliyeed ee gudaha dalka laga diro *(Non Dilomatic Staff)* ee Safaaradaha/Qunsuliyadaha laga haw-geliyo, waxaa lagu maamulayaa Sharciga Shaqaalaha Soomaaliyeed.

### Qodobka 42aad: Waxyaabaha reeban

a) Sarkaalka diblomaasiga ah ama Qunsuliyadda iyo xubnaha kale waa in aysan:

i. ku kicin fal ku keeni kara tuhun, sharaftiisa, daacadnimadiisa ama u hoggaansanaanta la'aan dowladda.

ii. faafin ama uusan sababin faafinta qoraalo la xiriira hawlaha dowladda ama qaban war-saxaafadeed, haddii aysan ku imaan oggolaansho Madaxa Ergada ama Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda marka uu Sarkaalkaasi joogo Xarunta Dhexe.

iii. faafin warbixin sir ah ee uu ku helay maqaanka xilkiisa rasmiga ah, una gudbin cid aysan khuseyn, marka laga reebo hawlwadeennada shaqada ku leh oo ay u bannaan tahay in warbixinta caynkaas ahi ay gaarto. Mamnuuciddaasi waxay soconeysaa xataa marka diblomaasiga uu noqdo howlgab ama u ka tago xubinnimada shaqada diblomaasiyadda ama qunsuliyadda.

iv. Guddoomin ama uusan labisan billado *(Medals)* iyo astan *(decorations)* ajnebi, haddii aysan Wasaaradda horay ugu ruqseyn.

v. Guddoomin haddiyad qiimo sare leh ama maamus *"Testimonial"*, haddii uusan horay ugu oggolaan Madaxa Ergadu iyo Wasaaraddu, marka ay arrintu Madaxa Ergada khuseyso.

vi. Ka qeybgelin dhaqdhaqaaq siyaasadeed gudaha iyo dibedda dalka, haddii qeybgalkaasi ka horimaanayaan xilkiisa diblomaasi am qawaaniinta Dalka.

vii. Ka qeybqaadan shirkado iyo arrimo ganacsi marka laga reebo gudashada xilkiisa.

viii. Aqbalin xi lama hawlo ka hor imaanaya xilkiisa rasmiga ah.

ix. Ka qeybqaadan kutiri-ku-teen iyo in uusan sameyn maalgelin waxyeelayn karta xilkiisa rasmiga ah.

x. Xubnaha Diblomaasiyiinta, Qunsuliyadaha iyo kuwa Xarunta Dhexe ee ka baxsada Xafiiskooda ama bixiya warbixin sir ah, waxaa lala tiigsanayaa sharciga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

a) Shaqaalaha Wasaaradda iyo diblomaasiyiintu waa in aysan u oggolaan qoysaskooda ama xigtadooda la nool in ay ku kacaan arrimaha kor ku xusan.

b) Haddii aan dembi culus la gelin, waxaa lagu qaadayaa Sharciga shaqaalaha qofkii ku xadgudba qodobkaan.

## Qodobka 43aad: Dhaqanka qofka

1. Arrimaha aan loo oggoleyn diblomaasiyiinta, saraakiisha qunsuliyadaha iyo shaqaalaha ee ku xusan qodobka kore, waxaa kale oo ka mamnuuc ah:

i) In uu caadeysto nolol-qaameysan (deysane), uuna meel uga dhaco xushmadda diblomaasinimada.

ii) In uusan isku dayin ku daneysi ama wax ku yeeli diblomaasiyiinta kale culeys dibeddeed iyo cadaadis siyaasadeed oo la saaro madaxda.

iii) in uusan u oggolaan xubnaha qoyskiisa ama qaraabadiisa in ay jebiyaan dhaqanka xilka uu hayo.

2. Qodobbada qeexaya dhaqanka xilka ee kor ku xusan, waxay sidoo kale qabanayaan shaqaalaha Wasaaraddaha kale ee dulsaarka ku ah Ergooyinka iyo Qunsuliyadaha iyo dhamm shaqaalaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

### Qodobka 44aad: Mamnuucidda u shaqeyn hey'ado ajnebi

1. Xaasaska diblomaasiyiinta iyo saraakiisha Qunsuliyadaha waa in aysan, si kastaba, ka shaqeyn Safaarad ajnebi ama hay'ado kale oo dowlad ajnebi ah leedahay.
2. Iyadoo la eegayo baahida shaqada iyo haddii ay jiraan jagooyin bannaan, xaasaska diblomaasiyiinta iyo saraakiisha Qunsuliyadaha, waxaa laga hawlgelin karaa Ergooyinka iyo Qunsuliyadaha, laga reebo xaasaska/seyga Madaxda Ergada.

### Qodobka 45aad: Qoraallada Sirta

a) Dhammaan qoraalada sirta iyo nuquladooda looma bandhigi karo shaqsi aan loo amrin.
b) Qoraallada sirta ah waa in lagu asateeyo ereyga **(Sir ama Sir Culus) laguna soo gudbiyo Koleyga Diblomaasiga (Diplomatic Pouch).**

### Qodobka 46aad: Awoodda nidaam dejinta

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ahi waxay dejin kartaa nidaamyo iyo habab lagu hergelinayo Sharcigan iyo fasiraadiisa; marka lala tashado Guddiga Arimaha Dibadda ee Barlamaanka.

### Qodobka 47aad: Dhaqangalka Sharciga

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka uu Baarlamaanka ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### Qodobka 48aad: Baabi'in

Wax alla wixii ka hor imaanaya sharcigan ee horey loogu dhaqmaayay qaanuun ahaan waa la baabi'iyay.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 153** **Taariikh: 16/03/2024**

OPM - EXIT
20 MAR 2024
XRW - BIXIT

**XEER: SIYAASADDA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMEYNTA**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), iyo (f); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **WQM&HDH/XW/184/2023, ee ku Taariikheysan 06/04/2023** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Hormarinta Dhaqaalaha;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW09.66.03.24** ee **07/03/2024**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda ay leeyahay meelmarinta Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta;

**Waxa uu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW09.66.03.24** ee **07/03/2024**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad
## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Hormarinta Dhaqaalaha loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta

## Qodobka 3aad
## Dhaqangal

Siyaasaddan Qaran waxa ay dhaqangalaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-29-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV. Ahmed [illegible] Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga &
Horumarinta Dhaqaalaha
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة التخطيط والاستثمار والتنمية الاقتصادية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Planning, Investment and Economic Development
Office of the Minister

**Ref: WQM&HDH/XW/ 184 /2023** **Date: 06/04/2023**

**Ku:** **Ku: Ra'iisul Wasaaraha XFS**
MUQDISHO, SOMALIA

**UJEEDDO: SOO GUDBIN SIYAASADDA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMEYNTA**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**
Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxa ay, halkan si rasmi ah, kuugu soo gudbinaysa **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta**, si Golaha Wasiirrada loogu gudbiyo loona meel mariyo.

Mudane Ra'iisul Wasaare, baahi weyn ayaa loo qabaa meel marinta **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta** taas oo ujeedku yahay sidii sare loogu qaadi lahaa isla xisaabtanka, hufnaanta iyo sare u qaadista saameynta togan ee siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda horumarinta dalka. Sido kale, Siyaasadda ayaa guud ahaan sare u qaadi doonta ku dhaqanka Nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka ee Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladdad Federaalka iyo bahda horumarinta oo dhammantood ku wada howlan horumarinta dalka.

Mudane Ra'iisul Wasaare, Wasaaraddu waxa ay codsaneysaa in ajandaha Golaha Wasiirrada ee ugu horreeya lagu daro **Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta.**

Innga guddoon salaan iyo qaddarin diirran.

**Mahadsanid,**

Mohamud

**Xil. Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene)**
Wasiirka
Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH)

Waaxda Kormeeerka iyo Qiimeeynta

# Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta

Maarso 2023

## SOO GAABINNO

| | |
|---|---|
| AfDB | Bangiga Horumarinta Africa |
| DAC | Guddiga Kaalmada Horumarinta |
| FGS | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| FMS | Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka |
| KM | Maareynta Aqoonta |
| M&E | Kormeerka iyo Qiimeynta |
| WQM&HDH | Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha |
| QHQ | Qorshaha Horumarinta Qaranka |
| NGOs | Hay'adaha aan Dowliga Ahayn |
| NIMES | Hannaanka qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta isku xiran |
| OECD | Ururka Iskaashiga Horumarinta Dhaqaalaha |
| ODA | Kaalmada Horumarinta Rasmiga ah |
| SMART | Cad, la Cabbiri Karo, La Gaari karo, Waaqici ah Misna Xaddidan |
| ToR | Shuruudaha tix-raaca |
| PFM | Maareynta Maaliyadda Dowladda |
| WW&H | Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha |

**EREYGA WASIIRKA**

**TUSMADA**


**QEEXITANNO** ..... 3

**1. HORDHAC** ..... 5

1.1 EEGISTA JAWIGA GUUD ..... 5
1.2 GUULAHA DHOWAN LA GAARAY ..... 6
1.3 CAQABADAHA TAAGAN ..... 6
1.3 DABBAQISTA SIYAASADDA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA ..... 7

**2. UJEEDKA, MABADI'IDA. IYO BAAXADDA SIYAASADDAN** ..... 8

**2.1 UJEEDKA SIYAASADDA** ..... 8

2.2 MABAD'IIDA GUUD ..... 8
2.3 BAAXADDA ..... 10

**3. QAAB-DHISMEEDKA FULINTA** ..... 10

3.1 QAAB-DHISMEDKA SHARCIGA ..... 10
3.2 FULINTA, KORMEERKA IYO DIB-U-EEGISTA ..... 11

**4. WADA SHAQEYNTA HAY'ADAHA** ..... 11

4.1 GOLAHA SHACABKA IYO GOLAHA AQALKA SARE ..... 11
4.2 XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA IYO GOLAHA WASIIRRADA ..... 12
4.3 WASAARADDA QORSHEYTNA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA (WAAXDA KORMEERKA IYO QIIMEYTA) ..... 12
4.4 WASAARADAHA MAALIYADDDA (HEER FEDERAAL IYO HEER DOWLAD GOBOLEED). ..... 13
4.5 WASAARADAHA, WAAXYAHA IYO HAY'ADAHA (WW&H) FEDERAALKA AH ..... 13
4.6 WASAARADAHA QORSHEYNTA EE DOWLAD GOBOLEEDYADA (WAAXYAHA MAS'UULKA KA AH HOWLAHA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA) ..... 14
WAAXDA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA AYAA; ..... 14
4.7 WASAARADAHA, WAAXYAHA IYO HAY'ADAHA (WW&H) HEER DOWLAD GOBOLEED; ..... 15
4.8 DOWLADAHA HOOSE, GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA ..... 15
4.9 HAY'ADAHA AAN DOWLIGA AHEYN ..... 16
***4.9.1 Ururada Bulshada Rayidka ah, Bahda Horumarinta iyo Ganacsatada;*** ..... *16*
4.10 QAAB DHISMEEDKA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA QARANKA ..... 16
4.11 MAALIYADDA ..... 17

**5. SHURUUDAHA SIYAASADDA** ..... 18

5.1 SHURUUDAHA KORMEERKA ..... 18
5.2 SHURUUDAHA QIIMEYNTA ..... 19
***5.2.2 Heerarka Qiimeynta*** ..... *21*
5.3 SHURUUDAHA XIRIIRKA DADWEYNAHA IYO WARBIXINNADA. ..... 22
***5.1.1. Istiratiijiyadda Xiriirka Dadweynaha*** ..... *22*
***5.3.2 Shuruudaha Warbixinnada*** ..... *22*
***5.3.3 Qaab-dhismeedka Warbixinnada*** ..... *22*
5.4 BARASHADA IYO MAAREYNTA AQOONTA ..... 23
5.5 SHIRKADAHA IYO XIRFADLEYDA MADAXA BANNAAN EE KORMEERKA IYO QIIMEYNTA ..... 23
5.6 U HOGGAANSANANTA SIYAASADDAN ..... 24
***5.6.1 Faa'iidada iyo Dhiirigelinta*** ..... *24*
***5.6.2 Xayiraad*** ..... *24*

**6 HORUMARINTA KARAANKA** ..... 25

7. SAAMEYNTA SIYAASADDAN EE LA FILAYO ..... 25

**QEEXITANNO**

**Isla Xisaabtan (Accountability):** Waajibaadka lagu muujinayo in howlaha mashariicda loo qabtay si u hoggaansan xeerarka iyo heerka tayo ama warbixinta howlahaas loo soo gudbiyay si xaqiiqo ah, sax ah oo ku aaddan wax-qabadka.

**Hay'ad (Agency):** Isticmaalka ereygan ee dukumiintigan waxa loola jeeda hay'ad dowladeed sida hay'adaha ay dowladdu mamausho, ama ay dowladdu maalgeliso, shirkadaha dowliga ah iyo hay'adaha kale ee bixiya adeegga dadweynaha, badeecooyinka ama adeegyada kale.

**Hanti dhowris (Audit)**: Howlo madax-bannaan, xaqiijinayana ujeedooyin la dejiyay si sare loogu qaado tayada howl-gallada hay'adaha. Waxa ay ka cawineysa hay'adaha gaarista ujeeddooyinkooda iyaga oo lagu soo dabbaalayo nidaam habeysan, la dhowro si loogu qiimeeyo ama loogu hagaajiyo waxtarka maareynta khataraha, xakameynta howlaha iyo habsami u socodka howlaha.

**Waxtar (Effectiveness):** Xaddiga lagaga guuleystay barnaamijyada horumarineed, ama la filayo in looga guuleysto, iyada oo la eegayo ahmiyadaha howlahaas.

**Beekhaamin (Efficiency):** Tallabooyin lagu xaqiijinayo kheeyraadka dhaqaale ee la geliyo (deeqo, khibrad ama muddo) mashariicda loona beddelo natiijo wax-ku-ool ah.

**Qiimeeyn (Evaluation):** OECD/DAC ayaa ku qeexa qiimeynta "tallabooyin is xig-xiga lagana leeyahay ujeeddooyin lagu qiimeynayo wax tarka mashariic socota ama dhammaatay, barnaamij ama siyaasad, ujeedka,fulinta iyo natiijada ka dhalata. Ujeedku waa in la xaqiijiyo ku-habboonaanta iyo gaarista ujeedooyinka mashariicda, hufnaanta iyo wax tarka horumarka, saameynta iyo joogteenta guulaha mashariicda. Qiimeyn waa in ay horseeddaa helitaanka warbixinno sugan oo la adeegsan karo, kuwaas oo casharada laga bartay ay u adeegsan karaan go'aannada xiga deeq-bixiyaasha iyo dalalka deeqaha la siiyay" (OECD, 2000).

**Saameynta (Impacts):** Saameynta togan ama taban ee aas-aasiga ah ama aan aas-aasiga aheyn ee ka dhalato howlaha horumarinta, si toos ah iyo si dadban, loogu talagalay ama aan loogu talagalin.

**Tilmaame (Indicator)**: Arrimaha tiro ama tayo ahaan ama isbeddelada tusmeynaya hannaan sahlan ama lagu kalsoonaan karo kaas oo cabbiraya guulaha, soo shaac bixinayana isbeddelada ku dhacaya howlaha ama naga cawinaya qiimeynta wax-qabadka bahda horumarinta.

**Maareynta Natiijooyinka (Managing for results):** Istiraatiijiyad maareynayo lagu bar-tilmaameedsanayo wax-qabad, iyo gaadhista wax-soo-saarka, iyo saameynta. Isaga oo ka hadlaya Maareynta Natiijooyinka, Jonathan, ayaa yiri; " Ujeedka ugu dambeeya ee maareynta natiijooyinka waa in ay horseeddaa hannaan habeysan si loo hagaajiyo sida ay dowladdu u howl-gasho: in la horumariyo yoolal iyo ujeeddooyin lagu mareynayo natiijooyinka la filayo, in lagu habeeyo siyaasadaha iyo barnaamijyada dowladda si waafaqsan natiijooyinka dhabta ah, in miisaaniyadda lagu saleeyo sidii lagu gaari lahaa natiijooyinka la rabo in la gaaro, [illegible]yo siyaabaha lagu hagaajin karo wax-qabadka barnaamijyada, iyo in lagu war-geliyo cidda ay khuseyso x[illegible]'eg ayaa lagaga guuleystay gaarista yoolalka iyo

ujeeddooyinkaas.

**Kormeer (Monitoring):** OECD/DAC waxa ay ku qeexdaa kormeer "shaqo socota taas oo adeegsanysa hannaan xog uruurin ku aaddan tilmaamaha si looga siiyo maamulka iyo daneeyayaasha mashariicda socota ee horumarineed, warbixino oo ay ka mid ka yihiin xaddiga guulaha laga gaaray ujeeddooyinka iyo horumarka laga gaaray adeegsiga lacagaha loo qoondeeeyay mashariicda" (OECD, 2002).

**Miro (Outcome):** Saameynta laga gaaray muddada dhow (short-term) ama muddada dhexe (medium-term) ee wax-soo-saarka howlaha mashariicda.

**Wax-soo-saar (Outputs):** Wax-soo-saarka, raasumaalka ama adeegyada ka soo baxo mashariicda horumarineed, oo ay ka midka tahay is-beddellada ka dhasha howlaha kuwaas oo khuseeya gaarista natiijada.

**Wax-qabadka (Performance):** Heerarka ay howlaha horumarineed ama bahda horumarinta ay u raacaan shuruudaha, heerarka tayo, tilmaamaha la dejiyay ama guulaha natiijada wax-qabadkooda si waafaqsan yoolalka iyo qorsheyaasha degsan.

**Talooyin (Recommendations)**: Soo jeedimaha looga gol-leeeyahay sare u qaadista wax-tarka, tayada, ama heerka hufnaanta howlaha horumarineed, dib-u-qaabeynta ujeeddooyinka, iyo dib-u-qoondeynta lacagaha.Talooyinku waa in ay ku xiranyihiin gunaanadka.

**Natiijo (Results):** Wax-soo-saarka, natiijada ama saameynta (loogu tala galay ama aan loogu tala gelin, togan ama taban) ee howlaha horumarineed.

**Dib-u-eegis (Review):** Waa qiimeynta wax-soo-saarka ama horumarka laga gaaray fulinta siyaasad, qeyb-dhaqaale, hay'ad, barnaamij ama mashruuc loo sameeyo muddo xilliyeed ama si lama filaan ah. Si ka duwan Qiimeeynta, oo aalaba xoogga saarta natiijada (natiijada iyo saameynta) howlaha, dib-u-eegista waxa ay xoogga saareysa arrimaha la xiriira howl-gallada, sidaa daradeed waxa ay si dhow ugu xiran tahay howlaha kormeerka. Dib-u-eegis waxa ay qaab-dhismeed ahaan noqon kartaa dhacdo xilliyeysan halkaas oo looga hadlo wax-qabadka howl-gallada daneeyayaasha muhiim ka ah, sida kulammada sanadlaha ah ee sida wadajirka ah dib-loogu-eego caafimaadka, waxbarashada, biyaha IWM.

**Joogteynta (Sustainability):** Sii wadista ka faa'iideysiga howlaha horumarineed kadib marka mashariicda mugga leh ee kaalmada horumarinta la soo gebo-gebeeyo.

## 1. HORDHAC

Iyada oo la raacayo gaarista Dowladda Federaalka Soomaaliya ay gaatay nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta ku saleysan natiijada (Result-based Monitoring and Evaluation—RBM) waxa soo xoogeysatay baahida loo qabo horumarinta Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta waxqabadka mashariicda dowladda, barnaamijyada iyo siyaasadaha.

Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta waxa ay qeexeysaa kaalimaha iyo mas'uuliyadaha Wasaaradaha Dowladda, Waaxyaha iyo Hay'adaha (WW&H), hay'adaha fuliya mashariicda, oo ay ka midka yihiin hay'adaha aan dowliga aheyn ee maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, Qaramada Midoobay, iyo bahda horumarinta kale, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo ururada bulshada ay ku leeyihiin nidaamka kormeerka iyo qiimeynta taas oo dejineysa shuruudaha arrimaha la qiimeynayo, qiimeyntana sameeya, dhiraandhiriya, isla markaasna baahiya xogta qiimeynta si loogu adeegsado xogtaas go'aan qaadashada heerka sare.

Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeyntu waxa ay xaqiijineysaa dadaallada dowladda ee lagu doonayo in si xirfadeysan loog maareyo kheyraadka dadweynaha isla markaana la xaqiijiyo isla xisaabtan, hufnaanta iyo in la hagaajiyo tayada adeeeg bixinta la siinayo bulshada Soomaaliyeed.

### 1.1 Eegista Jawiga Guud

Kadib burburkii dowladdii dhexe sanadkii 1991kii, Soomaaliya waxa ay wajaheysay xasarado siyaasadeed, abaaro, macluul iyo amni darro in ka badan 30 sanadood. Burburka dowladdii dhexe ayaa horseeday horumarin la'aanta ama burburka dhamaan kaabeyaashii dhaqaalaha ee dalka. Hay'adaha gargaarka ayaa isku dayaya in ay buuxiyaan kaalintii adeeg bixinta ee dowladdi burburtay.

Tan iyo sanadkii 2000, iyada oo garab laga helayay bahda horumarinta iyo hormuudka bulshada, nidaam dowlad kumeel gaar ah ayaa la unkay, kaas oo sare u qaadday xasilloonida iyo soo kabashada uu dalka ka soo kabanayay qaskii siyaasadeed. Labaatankii (20) sano ee ugu dambeysay, dalka Soomaaliya ayaa ka sameeyay horumar lixaadle dhinacyada dowlad iyo hay'ad dhiska, ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed, kana gaaray guulo la dagaallanka kooxaha xagjirka ah, sare u kac ku yimid kobaca dhaqaalaha, iyo in la hagaajiyay nidaamka maamulka dowliga ah.

Si kastaba ha ahaate, waxaa weli jiro mugdi ku gadaaaman kala caddeynta iyo nidaam sharciyeysan oo qeexaya xiriirka wadashaqeyn ee Dowladda Federaalka ah iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, maadaama nidaamka Federaalka ah ee la qaatay yahay nidaam dowli ah oo ku cusub dalka.

Iyada oo la eegayo warbixinta Bangiga Adduunka, saboolnimada ayaa ah mid ku baahsan Soomaaliya iyada oo ku dhowaad boqolkiiba toddobaatan (70%) bulshada Soomaaliyeed ku noolyihiin in ka hooseysa heerka saboolnimada iyo in boqolkiiba sagaashan (90%) ku noolyihiin saboolnimo dhinacyo badan taas oo ay ka midka tahay caruur tabaaleysan iyo waxbarasho la'aanta dadka waweyn, biyo la'aan, nadaafad iyo koronto la'aan.[1]

Marka la eego qulqulka deeqaha, Soomaaliya waxa ay ka kala heshay dunida 2.1 (2020) iyo 1.2 (2021) bilyan doollar oo ah

---

[1] Somalia Economic Update: Investing in Social Protection to Boost Resilience for Economic Growth, World Bank Report (November, 2022) Accessible at https://documents.worldbank.org/en/publication/documents-reports/documentdetail/099645010242215445/p17502402429f5 e3872dbb193

Kaalmada Horumarinta Rasmiga ah (ODA). Sanadkii 2020, kaalmada ku wajahan horumarinta dalka ayaa gaaray 23% (1 bilyan oo doollar) marka la bar-bar dhigo sanadkii 2019 oo ay aheyd 854 milyan oo doollar). Sare u kacan kaalmada waxaa inta badan horseeday kaalmada lixaadka leh ee ka timid Bangiga Adduunka iyo Dowladda Jarmalka.[2]

In kasta oo ay kaalmada dibadda ee horumarinta iyo gargaarka ay waxtar u leeyihiin dadka u baahan adeegyada aas-aasiga ah, dib-usoo kabashada iyo kobaca dhaqaalahana ay kaalin mug leh ku leedahay, isla markaana ay horseeddo dib-u-dhiska hay'adaha dowliga ah, waxtar yar ayey ku leedahay amaba kumaba lahan marka la eego horumaritna siyaasadda dalka, gaar ahaan dhinacyada sarreynta sharciga, dowladnimada iyo hagaajinta bixinta adeegyada guud ee dadweynaha.

Xasillooni darrida siyaasadda kaliya ma horseedin isbeddelka hoggaanka sare ee Wasaaradaha ama Hay'adaha kala duwan ee dowladda balse waxa ay sidoo kale horseedday gaabis ku yimid dedaallada iskuduwida ee kormeerka iyo qiimeynta mashariicda, barnaamijyada, iyo siyaasadaha dowladda iyo kuwa hay'adaha gargaarka.

Maqnaanshiyaha cabir waxqabad ayaa horseeday musuq-maasuq baahsan, lacag lunsashada, nuglaansho baahsan iyo barakaca dadka ay ka soo barakacayaan deegaannadoodii.

### 1.2 Guulaha Dhowan la gaaray

Marka laga yimaado in dalku uu wajahayo caqabado khatartooda leh iyada oo lagu gudo jiro hubanti la'aanta uu keenay caabuqa COVID19, dhibaatada ayaxa, iyo sare u kaca ku yimid qiimaha badeecyooyinka ee suuqyada caalamiga ah, haddana waxaa jira rajo iyo fursado dib-loogu qaabeyn karo mustaqbalka dalka, lagu hagaajin karo dowladnimada, laguna bixin karo adeegyada dadweynaha iyada oo la marayo nidaamka isla xisaabtanka iyo hufnaanta.

Guulaha dhowaan la gaaray waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

- Qorshaha 8aad ee Horumarinta Qaranka (2016) oo horseeday diyaarinta Qorshaha 9aad ee Horumarinta Qaranka .
- Fulinta mashruuca tabar-siinta dowladda (Capacity Injection Project) kaas oo ka taageeray dowladda dhanka hagaajinta hay'adaha Dowladda Federaalka ah, sida horumarinta siyaasadaha iyo xeerar cusub.
- Dib-u-soo nooleeynta iyo awood siinta Hay'adda Tirakoobka Qaranka iyo Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta WQM&HDH, oo ay ka mid yihiin qaab-dhismeedka istiratiijiga ah iyo siyaasado cusub.
- Horumarinta Siyaasadaha Nidaaminta Maareynta Maaliyadda Dowladda
- Dastuurka ku-meel gaarka ah ee Federaalka iyo Dastuurrada Dowlad Goboleedyada.

### 1.3 Caqabadaha taagan

In kasta oo ay jiraan dadaallo xooggan oo laga sameeyay adkeynta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta casriga ah, haddana weli waxaa jira caqabado iyo arrimo ku hor-gudban kuwaas oo u bahaan in wax laga qabto, waxaana ka mid ah;

> **Dhaqanka Kormeerka iyo Qiimenta oo liita (Weak Monitoring and Evaluation culture):** Nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta waa mid ku cusub Soomaaliya baahida loo qabana inta badan waxa dhaliya deeq-bixiye yaasha halka hay'adaha dowliga ah aaney weli si buuxda ugama mid dhigin nindaamka kormeerka iyo

[2] Aid Flow in Somalia (June, 2021), Report, accessible at https://a ov.so

qiimeynta siyaasadahooda, barnaamijyadooda iyo mashariicda ay hir-galiyaan. Sidaa daradeed, dadaal yar ayaa lagu bixiyaa amaba lagumaba bixiyo in maclumaadka kormeerka iyo qiimeynta loo adeegsado go'aan qaadashada hay'adaha, in la horumariyo siyaasado ku dhisan xaqiiqooyin iyo in la'is waafajiyo diyaarinta miisaaniyadda, kheyraad u qoondeynta iyo maclumaadka laga helay kormeerka iyo qiimeeynta

2) **Nidaamka iyo Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta oo Liita (Weak M&E system and structures):** Nidaamka iyo qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeeynta ee haatan jira ayaa ah mid liita, kala baahsan iyo in ay jirto iskuduwid la'aan ka dhex jirta hay'adaha iyo heerarka farsamo taas oo caqabad ku ah soo saarista warbixinada kormeerka iyo qiimeynta. Kama dhex jiro hanaan kala warqaadasho cad iyo nidaam is-waafaqsan ee isku xira hay'adaha Dowladda Federaalka ah iyo Dowlad Goboleedyada taas oo hoos u dhigtay amaba hor-istaagtay xogta kormeerka iyo qiimeynta, taas oo waafaqsan heerarka caalamiga ah ee uruurinta, maareynta, baahinta xogta la helay si guud ahaan loo isticmaalo.

   Inta badan nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ee ka jira heer Federaal ama heer Dowlad Goboleed ma'ahan kuwo ku saleysan natiijo. Waxa ay diiradda saran howlaha iyo waxqabadka. Tani waxa ay saameyn taban ku leedahay baaxadda xogta la soo uruuriyay, tayada iyo helitaanka xogtaas si ay qeyb uga noqoto diyaarinta siyaasadaha ayaa ka mid ah liidnaanta nidaamka kormeer iyo qiimeyn ee haatan jira.

3) **Karaanka Hay'adaha oo Liidata (Weak Institutional Capacities):** Karaanka hay'adaha kormeerka iyo qiimeynta ee Dowladda Federaalka ah iyo kuwa Dowlad Goboleedyada ayaa ah mid liidata si ay usoo saaraan, baahiyaan isla markaana sare ugu qaadan adeegsiga warbixinada kormeerka iyo qiimeynta. Malahan khubaro iyo shaqaale xirfadleyaal ah oo kaga shaqeeya howlaha kormeerka iyo qiimeynta, qaab-dhismeedka iyo siyaasado lagu hago kormeerka iyo qiimeynta mashariicda, barnaamijyada iyo siyaasadaha. Ku dhowaad dhammaan hay'adaha kormeerka iyo qiimeynta malahan khubaro ka taageerta uruurinta xog tayo leh waxaana sidoo kale ka maqan kaabeyaasha iyo agabka sida, xog-keydiye yaasha (servers), software shati leh oo lagu soo saaro istaatistikada. Caqabadda kale ee weyn waa in hay'adaha kormeerka iyo qiimeynta aaney laheyn nidaam qaran oo laf-dhabar u noqon laheyd kormeerka iyo qiimeynta howlaha dowladda iyo daneeyayaasha kale. Dhaqaale yarida ayaa dowladda ka hor taagan in ay hesho hay'ado kormeer iyo qiimeyn oo waxtar u leh, iskuduwidda heerarka farsamo ee hay'adaha, xog tayo leh si loo gaaro xaddi baaxad leh iyo helitaan yarida xogta laga soo uruuriyay iyo midda lagu keydiyay xog-keydiyeyaasha daneeyayaasha kala duwan.

4) **Qaab-dhismeed Sharci oo Liita (Weak Legal Framework):** In kasta oo ay leedahay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta, oo mas'uul uga ah iskuduwidda howlaha kormeerka iyo qiimeynta, waxaa jirta baahi loo qabo nidaam qaran oo hago qaab-dhismeedka kaas oo saldhig u noqdo iskuduwidda dhismaha iyo howlaha kormeerka iyo qiimeynta.

### 1.3 dhaqan galinta Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta

Kormeerka iyo Qiimeeynta ayaa si lixaadle u noqonaya mid ay wada aqbalaan dowladaha iyo hay'adaha aan dowliga aheyn kuwaas oo ku howlan siyaasadaha dadweynaha, barnaamijyada iyo mashariicda kuwaas oo muwaadiniinta u muujinaya natiijooyin. Marka lagu daro, waxaa jira rabitaan buuxa oo ku aaddan qaadashada go'aanno ku dhisan xaqiiqooyin ee adeegga dadweynaha. Sidaa daraadeed, Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta waxa ay kaabeysa siyaasadaha kale ee dowladda si loo helo warbixin wa iyo in maclumaadka joogtada ah ee ku saleysan

go'aannada dhabta ah ee ku aadan gaarista natiijo miro dhal ah.

In kasta oo Dastuurka kumeel gaarka ah iyo dastuurkii 1979[kii] aysan si cad u xuseynin kormeerka iyo qiimeynta, Siyaasaddan Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeeynta waxa ay ku qottontaa qodobbada 10, 11 iyo 32 ee dastuurka kumeel gaarka ah. Qodobbadan waxa ay ku dhisan yihiin mabadi'da soo socota;

1) **Sharafka iyo Sinaanta Bini'aadamka (Human Dignity and Equity):** Marka la eego cutubka labaad (2[aad]) ee dastuurka kumeel gaarka ah, waxa uu xusayaa in dowladdu ay waajib ku tahay xaqiijinta dejinta xeerar, siyaasado iyo barnaamijyo u adeegayo mabadi'da sinaanta.
2) **Xuquuqda Helista Maclumaadka (Right to Access Information):** Sida ku xusan qodobka 32[aad] ee dastuurka kumeel gaarka ah, muwaadiniinta waxa ay xaq u leeyihiin helitaankaxogta ay hayso dowladdu. Sidaa daradeed, waa in lagu dadaala hufnaan si loo siiyo dadweynaha xog waqtiyeysan, la heli karo misna dhab ah kaas oo ku saabsan siyaasadaha dowladda, barnaamijyada iyo mashaariicda.

## 2. Ujeedka, Mabadi'ida. Iyo Baaxadda Siyaasaddan

### 2.1 Ujeedka Siyaasadda

Siyaasaddan waxa ay kobcin doontaa waxqabadka dowladda iyada oo loo marayo abuurista nidaam kormeer iyo qiimeyn iyo in la lagu hago howlaha kormeerka iyo qiimeynta heerka ugu sarreeya guud ahaan hay'adaha Dowladda Federaalka ah si loo fududeeyo soo saarista iyo isticmaalka warbixinno si loo gaaro go'aan qaadasho hufan iyo isla xisaabtan marka la fulinayo siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda guud. Haddaba si loo gaaro ujeeddooyinka, siyaasaddani waxa ay leedahay ujeeddooyinka istiraatiijigga ah ee soo socda;

1) In la qeexo heerka ugu yar iyo shuruudaha si loo maareyo hanaanka kormeerka iyo qiimeynta ee siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda guud, kuwaas oo waafaqsan mabad'ida, xeerarka iyo heerarka tayo ee qaranka iyo kuwa caalamiga ah.
2) In la aas-aaso isla markaana la how-geliyo Nidaamka Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimeynta, kaas oo leh farsamo wax-tar leh si loogu adeegsado warbixin joogto ah loona gaaro natiijooyinka iyo yoolka Qorshaha Horumarinta Qaranka.
3) In la dhiso karaanka hay'adaha qaran ee kormeerka iyo qiimeynta si loo fududeeyo howl-gelinta hanaanka qaran ee kormeerka iyo qiimeynta loona gaaro la socodka qiimeyn wax-tar leh iyo warbixin ku aaddan guulaha laga gaaray fulinta Qorshaha Horumarinta Qaranka, siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda. Hanankaas ayaa noqon doono mid hufan oo horseeda siyaasado, barnaamijyo iyo mashariic ay ka faa'iideystaan shacabka Soomaaliyeed.
4) In la dhiirigeliyo hanaanka go'aan qaadashada ku dhisan xaqiiqada dhabta ah loona adeegsado heerarka kala duwn ee dowladda iyada oo loo marayo wadiiqada xiriirka dadweynaha, baahinta iyo isticmaalka natiijooyinka kormeerka iyo qiimeeynta si loogu xoojiyo siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda wax-tarka leh.
5) In la qeexo qaab-dhsimeedka, kaalimaha iyo mas'uuliyadaha hay'adaha kala duwan ee ku howlan kormeerka iyo qiimeeynta siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda dowladda.

### 2.2 Mabad'iida Guud

Si loogu guuleysto ujeedooyinka Siyaasadda Qaran ee Ko /o Qiimeynta, shaqada kormeerka iyo qiimeynta iyo

curfiga dalka waa in ay hagaan mabad'iida soo socota:

1) **Lahaanshaha iyo Wadashaqeynta (Ownership and Collaboration):** Hay'adaha dowliga iyo kuwa aan dowliga aheyn waa in ay xaqiijiyaan ka qeybgelinta daneeyayaasha marka la qorsheynayo, la hirgelinayo iyo marka la asteynayo natiijada siyaasadaha, barnaamijka iyo mashariicda guud, taas oo wax tar u leh bulshada Soomaaliyeed. Howlaha kormeerka iyo qiimeynta wadajirka ah oo ee qayb ka yihiin daneeyayaasha ayaa la dhiirigelinaya si loo gaaro heerka ka qeyb qaadashada tan ugu sarreysa, wadajirka, lahaanshaha iyo fulinta mashariicda. Howlaha kormeerka iyo qiimeynta waxaa loo qabanaya si furan, hufan, laga wada tala-geliyay, lagana wada qeybgeliyay daneeyayaasha horumarinta ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed.
2) **Isla xisaabtan iyo Daah-furnaan (Accountability and Transparency):** Dhamaan deeeqaha loo asteeyay horumarka waa in la xisaabiyaa, natiijada ka soo baxdana lala wadaago inta ay khuseyso qaab ay si fudud ugu heli karaan warbixinnada. Wasaaradaha Dowlada Goboleedyada, waaxyaha iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ayaa lagula xisaabtami doona waxqabadka iyo filashada mashariicda sida ay muujineyso warbixinnada hannaanka kormeerka iyo qiimeynta. Waa in dadweynaha lala wadaago warbixinno ku filan oo ku saabsan siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda guud iyo sidoo kale maclumaadka kormeerka iyo qiimeynta ee la xiriira howlahaas.
3) **Maareynta Natiijooyinka iyo Barashada (Managing for Results and Learning):** Hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn waa in ay dhiirigeliyaan maareynta ku saleysan natiijada si loo xaqiijiyo in siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda ay yihiin kuwo ku qottoma natiijooyinka laga rabo ayaa dadweynaha lagula wadaagi doona si cad oo muuqata. Kormeerka iyo Qiimeynta waa in ay hagtaa warbixinnada ay dadka isticmaalayaan iyo warbixinnada ay u baahanyihiin, oo ay ka midka yihiin siyaasiyiinta, fuliye-yaasha, iyo shacabka Soomaaliyeed. Warbixinnada ka dhasha kormeerka iyo qiimeynta waa in si waqtiyeysan , la gaari karo lana isticmaali karo loo diyaariyo si ay u hagto go'aannada siyaasdaha barnaamijyada.
4) **Qiimaha lacagta iyo kafaaiidaysiga (Value for Money and Utility):** warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta waa in ay fududeeyaan go'aan ka qaadashada in siyaasad, barnaamij ama mashruuc uu yahay mid waxtar leh marka laga eego lacagta ku baxday, iyo waxa lagu qabtay ama guulaha laga gaaray in meesha laga saaro wax-qabad la'aanta iyo ku noq-noqoshada hal-mashruuc oo la fuliyo. Marka la billaabayo ama la qabanayo howlaha kormeerka iyo qiimeynta, waa in uu jiraa niyad wanaag ku aaddan in natiijada, falanqeynta, gunaanadka iyo talooyinka warbixinnada loo isticmaalo go'aannada masiiriga ah ee mashariicda. Isticmaalka natiijada kormeerka iyo qiimeynta waa in ay ka muuqataa waxtarka ku habboon ee waqtiyeysan oo ay ka geysaneyso geeddi-socodka go'aan qaadashda ku saleysan warbixinnada la hayo, isla xisaabtanka ku aaddan natiijada iyo barashada. Natiijada iyo in casharrada laga bartay kormeerka iyo qiimeynta waa in lala wadaago inta ay khuseyso, taas oo horseedeyso jawaab celin wax-ku-ool ah.
5) **Nidaamka weydiimaha, Anshaxa iyo Hufnaanta (Systematic Inquiry, Ethics and Integrity):** Hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga aheyn waa in ay u hoggaansamaan heerarka farsamo ee ugu sareeya, qaabka wada xiriirka iyo hanaanka xaqiijinta iyo in warbixin dhameystiran la baadi-goobo marka la qabanaayo howlaha kormeerka iyo qiimeynta si dadka ay u fahmaan, u fasirtaan si dhab-ahna ugu adeegsadaan warbixinadaas. Si taxadar leh waa in looga fiirsadaa adeegsiga tiknoolojiyadda soo baxeyso ee loo adeegsado nidaamka qiimeynta. Si loo xaqiijiyo isticmaalka iyo kalsoonida lagu qabo natiijooyinka kormeerka iyo qiimeyta, curfiga howlaha kormeerka iyo qiimeynta ay adeegsadaan hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn waa in loogu kuur galaa si dhex-dhexaadnimo leh isla markaana u hoggaansan heerarka caalamiga ah, xeerka anshaxa ee nidaamka xog-uruurinta, falanqeynta, warbixinnada iyo ilaalinta xogta ay bixinayaan dadweynaha.

### 2.3 Baaxadda

Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxaa lagu dhaqayaa dhammaan WW&H Dowladda Federaalka ah iyo kuwa Dowlad Goboleedyada iyo sidoo kale bahda horumarinta ka taageerto Soomaaliya iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ee taageera ama ka fuliya dalka siyaasado, barnaamij iyo mashariic.

Siyaasadda ayaa dulmar ka bixineysa qaab-dhismeedka nidaamka kormeerka iyo qiimeynta dalka, shuruudaha ugu yar ee laga doonaayo hay'adaha ku howlan kormeerka iyo qiimeynta, kaalinta iyo mas'uuliyadaha daneeyayaasha (Dowliga iyo kuwo aan dowliga aheyn) ee ku howlan fulinta siyaasadaha, barnamijyada iyo mashaariicda dalka. Siyaasaddan ayaa loo adeegsan doona in lagu fududeeyo la socodka, qiimeynta iyo warbixinnada la xiriira fulinta iyo horumarka laga gaaray Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo guulaha laga gaaray ballan-qaadyada qaran ee ay gasho Dowladda Federaalka Soomaaliya ee heer gobol iyo heer caalami sida yoolalka Horumarinta Waarta ee loo yaqaanno (Sustainable Development Goals (SDGs).

## 3. Qaab-dhismeedka Fulinta

Si loo gaaro ujeeddooyinka guud iyo shuruudaha lagu xusay Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxa ay ku xidhnaan doonta qaab-dhismeedka fulinata ee hoos ku xusan;

### 3.1 Qaab-dhismedka Sharciga

#### 1) Dastuurka Kumeel Gaarka ah

Sharciyadda kormerka iyo qiimeynta waxaa laga soo qaatay qodobka 69$^{aad}$ ee dastuurka kumeel gaarka ah, kaas oo qeexaya in ay tahay waajibaadka Golaha Shacabka in uu la xisaabtamo, kormeero hay'adaha qaranka iyo in la xaqiijiyo fulinta xeerarka dalka.

#### 2) Nidaamka Maareynta Maaliyadda Dowladadda

Ballan qaadka Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ku dhaqanka nidaamka maaliyadda waxaa muujinayo hagaajinta ay ka sameysay dhanka maareynta maaliyadda dowladda. Wasaaradda Maaliyadda ayaa dejisay nidaamka maareynta maaliyadda dowladda ee loo yaqaanno (PFM) kaas oo dhaliyay qorsho howleeedyo muddada u dhaxeyso 2021-2024. Qorshahan ayaa dejiyay hagaajinta dhabta ah ee loo baahanyahay si loo helo ku dhaqan nidaamka maareynta maaliyadda sare.

Marka la dejinayay qorshaha, Wasaaradda Maaliyadda ayaa xaqiijisay in ay ka wada qeyb galaan dhammaan waaxyaha dowladda ee ay khuseyso iyo bahda horumarinta ka taageerta Soomaaliya. Tani waxa ay horseedday in la helo qorshe dhameystiran iyo mudnaanta arrimaha loo baahan yahay in wax laga qabto. Sidoo kale, iyada oo ay hoggaamineyso Wasaaradda Maaliyadda, fulinta qorshahaas ayaa xoojinaya xiriirka Dowladda Federaalka ah iyo Dowlad Goboleedyada, dhismaha aas-aas adag oo ku aaddan in Soomaaliya yeelato nidaam maaliyadeed federaal ah mustaqbalka dhow.[3]

- **Daah-furnaanta iyo Isla xisaabtanka (Accountability and Transparency):** dhammaan Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha (WW&H) dowladda iyo daneeyayasha bahda horumarinta ayaa lagula xisaabtami doona natiijooyinka horumarinta la isku raacay ee ku saleysan Qorshaha-Horumarinta Qaranka, siyaasadaha,

[3] https://mof.gov.so/the-ministry/pfm-reforms

barnaamijyada iyo mashaariicda.

- **Anshaxa iyo Hufnaanta (Ethics and integrity):** dhammaan WW&H ee dowladda waxa ay dhiirigelinayaan mabad'iida dhex-dhexaadnimo iyo u hoggaansanaanta heerarka caalamiga ah iyo cabirrada natiijooyinka horumarka, iyo in loo isticmaalo howlaha kormeerka iyo qiimeynta si ay ku dheehantahay hufnaan iyo madaxbanaani.

### 3.2 Fulinta, Kormeerka iyo Dib-u-eegista

Fulinta siyaasadda waxaa mas'uul uga noqonaya Dowladda Soomaaliya Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH. Sidoo kale, waxaa loo baahanyahay taageerada iyo ballanqaadka dhammaan daneeyayasha nidaamka kormeerka iyo qiimeynta si fulinta siyaasaddani u noqoto mid guuleysata. Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa hubin doonta fulinta siyaasadda iyada oo si dhow u kormeeri doonta in kormeerka iyo qiimeynta si qumaati ah loo qaatay marka ay timaado barnaamijyada guud, si waafaqsan ujeeddooyinka siyaasadda. Waaxdu waxa ay dejin doonta tilmaamaha iyo heerka ugu yar ee lagu fulin doono kormeerka, qiimeynta iyo wax-qabadka si loo xaqiijiyo hagaajinta joogtada ah ee natiijooyinka horumarka.

Dhammaan mashariicda iyo barnaamijyada waa in ay lahadaan miisaaniyad lagu qabanayo howlaha kormeerka iyo qiimeynta, ka hor inta aan la ansixin mashariicdaas ama barnaamijyadaas. Shuruudaha ugu yar ee kormeerka iyo qiimeynta waa in ay ka mid noqdaan in howlaha ay yeeshaan tilmaammo (indicators) la cabbiri karo, la gaadhi karo, ku habboon isla markaana muddeysan (SMART) marka la fulinayo iyo natiijada intaba; xog gundhig ah oo ku saabsan tilmaamana mashaariicda ama barnaamijyada; iyo eegista lagu sameynayo qiimeynta la cayimay. Qorshaha ayaa tixgelin doono dhammaan arrimaha kale ee ku xusan siyaasaddan.

Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa mari doonta labo dib-u-eegis iyada oo loo marayo nidaamka ka wada qeyb qaadasho, marka ay dhammaato shan (5) sano kasta, taas oo waafaqsan fulinta Qorshaha Horumarinta Qaranka. Kan hore ayaan noqonaya eegista muddada dhexe (mid-term review) labao sano iyo badh kasta iyo kan kale oo ah sanadka ugu dambeeya (final term review) ee shan sano kadib.

Qiimeynta muddada dhexe waxa ay diiradda saari doonta horumarka laga gaaray fulinta siyaasaddan iyo in la qiimeeyo in ay saxan tahay iyo in kale guud ahaan jihada istiraatiijiga ee ay siyaasaddu ku socoto. Sida daradeed, qiimeynta muddada dhexe waxaa loo naqshadeyn doona in ay wax ku biiriso muddada ka dhiman fulinta siyaasadda iyo hagaaajinta lagu talo bixiyay la dabbaqo, meelaha lagama maarmaanka ah. Qiimeynta ugu dambeyso ayaa la sameyn doona dhamaadka shanta (5) sano waxaana diiradda lagu saari doona saameynta fulinta siyaasaddan.

## 4. Wada Shaqeynta Hay'adaha

Si loo fuliyo siyaasadda, kaalimaha iyo mas'uuliyadaha dowladda Fedeeraalka iyo Dowlad Goboleedyada waxa ay noqonayaan sida soo socota:

### 4.1 Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka sare

Baarlamanka Soomaaliya ayaa:

1) Ansixin iyo meelmarin Dhaqan gelin doona shuruucda ku habboon ee kaabaya fulinta siyaasadda dowladda ee kormeerka iyo qiimeynta;
2) Ku kor-joogteeyn doona laanta fulinta dhaqangelinta siyaasadda qaran ee kormeerka iyo qiimeynta;
3) U isticmaalka maclumaadka laga helo kormeerka iyo qiimeynta si loo gaaro go'aanno ku saleysan maclumaad dhab ah, lagulana xisaabtamo dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn isticmaalka deeqaha iyo kheeyraadka;
4) Kormeer iyo qiimeyn ku sameyo siyaasadaha, qorshayaasha, barnaamijyada iyo mashariicda iyada oo ay gudanayaan guddi hoosaadyada baarlamaanka waajibaadkooda.
5) Dib-u-eegis ku sameeya isla markaana ansixiya miisaaniyadda kormeerka iyo qiimeynta ee Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha dowladda marka lasoo bandhigo miisaaniyadda qaranka;
6) Dib-u-eegis ku sameeya warbixin sanadeedka ku aaddan heerka dhaqangelinta siyaasadaha, iyo qorshayaasha dowladda sida ay soo diyaariso Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, lana soo mariyay Golaha Wasiirrada si loo xaqiijiyo loona ansixiyo.

### 4.2 Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada

Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada ayaa:

1) Ansixin ama diidi doona fulinta qodobbada lagu xusay siyaasaddan Qaran;
2) Kormeeri doona fulinta qodobbada lagu xusay siyaasaddan;
3) Bixin doona jiho-siyaasadeed ka dhalata talo-bixinnada warbixinnada natiijooyinka kormeerka iyo qiimeynta;
4) Bixin doona tilmaamaha fulinta siyaasaddan;
5) Adeegsan doona warbixinta laga helo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta dowladda si loo qaato go'aanno ku saleysan xogo xaqiiqo ah ..

### 4.3 Wasaaradda Qorsheytna, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (Waaxda Kormeerka iyo Qiimeyta)

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeeynta ayaa:

1) Qaadan doonto dowr hoggaamineed, tilmaami doonta howlaha farsamo, iskuduwidda iyo fulinta howlaha kormeerka iyo qiimeynta sida ku cad siyaasaddan;
2) Taageeri doonta howlgelinta waaxyo ama unugyo kormeer iyo qiimeyn ee laga hirgeliyo heerarka kala duwan ee dowladda sida Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha;
3) Leh mas'uuliyadda guud iyada oo la wada shaqeyn doonta dhammaan WW&H dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn si loo naqshadeeyo, la iskugu duwo isla markaana loo sameeyo qiimeynta barnaamijyada iyo mashaariicda laga fuliyo dalka Soomaaliya.
4) Dhiirigelin iyo taageero siin doonta tabo-barrada iyo dhisidda karaanka kormeerka iyo qiimeeynta dowladda Soomaaliya heerar keeda kala duwan;
5) Xaqiijin doonta in dhammaan WW&H iyo hay'adaha aan dowliga aheyn u hoggaansamaan, horumariyaan isla markaana fuliyaan nidaam kormeer iyo qiimeyn shaqeynaya iyo in si joogta ah u ay soo saarto, baahiso warbixinno ku jaan go'an siyaasadda

6) Si dhow ula shaqeyn doonta daneeyayaasha ay khuseyso kormeerka iyo qiimeynta, horumarin doonta isla markaana dhidibbada u aasi doonta nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka.
7) Dhiirigelin doonta horumarinta dhaqan dalbanaya, isla markaana isticmaalaya xogta iyo maclumaadka kormeerka iyo qiimeynta.
8) Marka la sameeynayo qiimeyn, waaxdu waxa ay iskugu yeeri doonta daneeyayaasha si loo siiyo kulan-howleed (workshop), si loo xaqiijiyo loona baahiyo natiijada qiimeynta;
9) Kormeeri doonta isla markaana xaqiijin doonta u hoggaansanaan dhab ah iyo in siyaasaddan ay ka fuliyaan hay'adaha dowladda iy o kuwa aan dowliga aheyn guud ahaan dalka iyaga oo loo gudbin doono Golaha Wasiirada warbixin sanadeedka u hoggaansanaanta siyaasaddan.
10) U isticmaali doonta macluumaadka kormeeerka iyo qiimeynta ee la yaal WW&H si loogu qaato go'aanno ku dhisan xaqiiqada.
11) Ka qayb ahaanshiyaha Waaxda kormeerka iyo qiimaynta qorsheynta barnaamijyada, siyaadaha iyo mashaariicda dalka si ay u sameyso kormeer iyo qiimaynn joogta ah oo ku salaysan qorshayaasha ay sida qotada dheer u la socdeen.
12) In ay waaxda diyaariso tilmaamayaasha iyo caddaymaha

### 4.4 Wasaaradaha Maaliyaddda (Heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed).

Wasaaradaha Maaliyadda ayaa;

1) Taageerida waaxyaha ama unugyada la aas-aasay ee ka shaqeeya kormeerka iyo qiimeynta oo ka jira dhammaan WW&H ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed;
2) Xaqiijin doona in lacago ku filan loogu qoondeeyo miisaaniyadda qaranka ee sanadlaha ah iyo miisaniyadda Dowlad Goboleed walba si loo taageeri howlaha kormeerka iyo qiimeynta , si waafaqsan siyaasaddan;
3) Dhiirigelin doona dhaqanka kormeeerka iyo qiimeynta ku saleysan natiijada xaqiiqada ah si loo qorsheeeyo, loo diyaariyo isla markaana loo qoondeeyo miisaaniyadda dowladda.
4) U isticmaali doona macluumaadka laga helo nidaamka dowladda ee kormeerka iyo qiimeynta si loogu qaato go'aanno ku saleysan xaqiiqada.

### 4.5 Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha (WW&H) Federaalka ah

WW&H Federaalka ah ayaa;

1) Xaqiijin doona unkidda waaxyaha ama unugyada kormeerka iyo qiimeynta in ay helaan shaqaale iyo miisaaniyad ku filan si ay u gutaan howlaha kormeerka iyo qiimeynta;
2) Abuuri doona isku xir waxtar leh oo u dhaxeeya qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeynta wasaaradaha iyo wasaaradaha dhiggooda ah ee heer Dowl ed iyo hay'adaha kale ee dowliga ah.

3) Fududeyn doona kobcinta karaanka shaqaalaha iyada oo la raacayo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ku saleysan natiijooyinka xaqiiqada ah;
4) Si joogto ah usoo saari doono isla markaasna baahin doona warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta (si seddex biloodle ah ama si sanadle ah) sidoo kalana bixin doona maclumaadka lagama maarmaanka ah iyo sidoo kale in ay hubiyaan in agabka aqoonta laga heli karo dhammaan heerarka kala duwan ee dowladda;
5) Kormeeri doona isla markaana xaqiijin doona waxtarka fulinta siyaasaddan;
6) Isku howli doona kormeerka siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda ka socda qeybaha ay mas'uulka ka yihiin iyo in Dowlad Goboleedyada ay kala shaqeeyaan siyaasaddan Wasaaradaha ay khuseyso iyo daneeyayaasha kale;
7) Fududeyn doona isla markaana taageeri doona abuurista Kooxda Shaqada Farsamada Kormeerka iyo Qiimeynta kaas oo ka kooban daneeyayaasha muhiimka ah;
8) Isticmaali doono macliumaadka kormeeerka iyo qiimeynta si loo helo go'aan qaadashada ku dhisan xaqiiqada.

### 4.6 Wasaaradaha Qorsheynta ee Dowlad Goboleedyada (Waaxyaha mas'uulka ka ah howlaha Kormeerka iyo Qiimeynta)

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa;

1) Bixin doonto dowr hoggaamineed iyo tilmaamidda heerka farsamo si la'iskugu duwo loogana fuliyo siyaasaddan heer Dowlad Goboleed.
2) Aas-aasi doonta waaxyo ama unugyo ka shaqeeya kormeerka iyo qiimeynta oo ka jira dhammaan WW&H ee heer Dowlad Goboleed;
3) Taageeri doonta waaxyaha kormeerka iyo qiimeynta in ay la shaqeeyaan WW&H ee heer Dowlad Goboleed iyo hay'adaha aan dowliga aheyn si loo fuliyo howlaha kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada iyo mashaariicda laga fulinayo heer Dowlad Goboleed;
4) Abuuri doonta isku xirka qaab-dhismeedka koormeerka iyo qiimeeynta Wasaaradaha Dowlad Goboledyada iyo geeddi-socodka howlaha, si waafaqsan siyaasaddan Qaran;
5) Isku duwi doonta isla markaana qaban doona howlaha kormeerka iyo qiimeeynta barnaamijyada iyo mashariicda laga fulinayo heer Dowlad Goboleed;
6) Dhiirigelin doonta isla markaana taageri doona howlaha tabo-barka iyo karaan dhiska la xiriira kormeerka iyo qiimeynta ee heer Dowlad Goboleed.
7) Xaqiijin doonta in dhammaan WW&H iyo hay'adaha aan dowliga aheyn u hoggaansayihiin siyaasaddan, horumariyaan nidaam kormeer iyo qiimeyn shaqeynaya iyo in si mar-mar ah ay usoo saaraan una baahiyaan warbixinnada, si waafaqasan siyaasaddan Qaran;
8) Si dhow ula shaqeyn doonaan waaxyaha kormerka iyo qiimeynta iyo daneeyayaasha kale ee muhiimka ah, taageeri doonaan xoojinta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta qaranka;
9) Dhiirigelin doonta horumarinta dhaqanka dalbashada iyo isticmaalka xogta iyo maclumaadka kormeerka iyo qiimeynta ee heer Dowlad Goboleed;
10) Kormeeri doonta isla markaana xaqiijin doona u hoggaansanaanta iyo ka fulinta siyaasaddan dhammaan WW&H iyo hay'adaha aan dowliga ahyen ee heer Dowlad Goboleed iyada oo la soo gudbinayo warbixin sanadeedka u hoggaansanaanta ee Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta;
11) Isticmaali doonta warbixinnada kormeeer meynta si loo helo go'aan qaadashada ku dhisan

xaqiiqada.

### 4.7 Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha (WW&H) heer Dowlad Goboleed;

WW&H ee heer Dowlad Goboleed ayaa;

1) Xaqiijin doona in laga unko waaxyaha/unigyada kormeerka iyo qiimeynta dhammaan WW&H ee heer Dowlad Goboleed, dowladaha hoose (gobollada iyo degmooyinka) iyada oo la siinayo shaqaale iyo miisaaniyad ku filan gudashada howlaha kormeerka iyo qiimeynta;
2) Abuuri doona isku xirka u dhaxeeya qaab-dhismeedka koormeerka iyo qiimeeynta Dowlad Goboledyada iyo geeddi-socodka howlaha lamidka ah ee kala dhexeeya Dowladda Federaalka iyo waaxyaha ka mas'uulka ah kormeerka iyo qiimeynta ee heer Dowlad Goboleed;
3) Fududeyn doona howlaha karaan dhiska ee dhamaan shaqaalaha iyada oo la marayo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ku saleysan natiijada;
4) Si joogto ah usoo saari doono isla markaasna baahin doona warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta (si seddex biloodle ah ama si sanadla ah) sidoo kalana bixin doona maclumaadka lagama maarmaanka ah iyo agabka aqoonta in laga heli karo dhammaan heerarka kala duwan ee dowladda;
5) Kormeeri doona isla markaana xaqiijin doona waxtarka fulinta siyaasaddan;
6) Isku howli doona kormeerka siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda ka socda qeybaha ay mas'uulka ka yihiin iyo in Dowlad Goboleedyada ay kala shaqeeyan siyaasaddan wasaaradaha ay khuseyso iyo Daneeyayaasha kale;
7) Fududeyn doona isla markaana taageeri doona abuurista Kooxda Shaqada Farsamada Kormeerka iyo Qiimeynta kaas oo ka kooban Daneeyayaasha muhiimka ah;
8) Isticmaali doonta macluumaadka kormeeerka iyo qiimeynta si loo helo go'aanno qaadashada ku dhisan xaqiiqada.

### 4.8 Dowladaha Hoose, Gobollada iyo Degmooyinka

Dowladaha Hoose ayaa;

1) Xaqiijin doona in laga unko waaxyaha/unigyada kormeerka iyo qiimeynta iyada oo la siinayo shaqaale iyo miisaaniyad ku filan gudashada howlaha kormeerka iyo qiimeynta;
2) Abuuri doona isku xirka u dhaxeeya qaab-dhismeedka koormeerka iyo qiimeeynta gobollada iyo degmooyinka iyo geeddi-socodka howlaha lamidka ah ee kala dhexeeya heer dowlad goboleed;
3) Fududeyn doona howlaha karaan dhiska ee dhamaan shaqaalaha iyada oo la marayo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ku saleysan natiijada;
4) Si joogto ah uga uruurin doona xogta iyo maclumaadka miyiga iyo magaalooyinka goobahaas;
5) Si joogto ah usoo saari doono isla markaasna ona warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta sidoo

kalana bixin doona maclumaadka lagama maarmaanka ah iyo in la hubiyo in agabka aqoonta laga heli karo dhammaan heerarka kala duwan ee dowladda iyo daneeyayaasha kale ee muhiimka ah;


6) Kormeeri doona isla markaana xaqiijin doona in siyaasaddan laga fuliyo gobollada iyo degmooyinka;
7) Fududeyn doona isla markaana taageeri doona abuurista Kooxda Shaqada Farsamada Kormeerka iyo Qiimeynta ee heer gobol iyo degmo kaas oo ka kooban Daneeyayaasha muhiimka ah;
8) U isticmaali doona macluumaadka kormeeerka iyo qiimeynta si helo go'aan qaadashada ku dhisan xaqiiqada.


### 4.9 Hay'adaha aan Dowliga Aheyn

#### 4.9.1 Ururada Bulshada Rayidka, Bahda Horumarinta iyo Ganacsatada;

1) Waa in ay waafajiyaan barnaamijyadooda Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo in la xaqiijiyo in barnaamijyada iyo mashaariicdu ay u hoggaansanyihiin waajibaadka dowladda ee warbixinnada;
2) In ay bixiyaan xog tayo leh isla markaana waqtigeeda la joogo oo ku aaddan fulinta iyo waxqabadka barnaamijyada iyo mashaariicda;
3) Waa in ay ka qeyb qaataan dejinta qorshaha qaranka, geeddi-socodka kormeerka iyo qiimeynta ee heerarka kala duwan ee dowladda;
4) Waa in ay u hoggaansamaan ayna taageeraan fulinta Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta;
5) Waa in ay taageeraan howlaha dowladda ee ku aaddan dedaallada karaan dhiska si loo adkeeyo dhaqanka kormeerka iyo qiimeynta;
6) Waa in ay isticmaalaan macliumaadka kormeeerka iyo qiimeynta si loo helo go'aan qaadashada ku dhisan xaqiiqada.
7) Waa in ay si hufan uga qeyb galaan howlaha Kooxda Shaqada Farsamada ee Kormeerka iyo Qiimeynta oo ay aas-aastay Waaxda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta.

### 4.10 Qaab dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka






**4.11 Maaliyadda**

Hirgelinta Siyaasadda Qara ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxtar leh waxa ay u baahantahay maaliyad ku filan isla markaana la joogteyn karo si loo gaaro ujeeddooyinka iyo bartilmaameedyada siyaasaddan. Sida daradeed, kormeerka iyo qiimeynta waa in uu ka mid noqdaa heerarka qorsheynta iyo miisaniyadda siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashariicda WW&H ee heer Federaal iyo kuwa heer Dowlad Goboleed ayaa u qoondeyn doona miisaaniyad ku filan howlaha kormeerka iyo qiimeynta ee heer walba.

Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxa uu ujeedkeeda yahay in miisaaniyad ku filan loo qoondeyo Kormeerka iyo Qiimeynta mashariicda dowladda, barnaamijyada iyo siyaasdaha. Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxay kalo uu ujeedkeeda yahay in ugu yaraan boqolkiiba shan (5%) loo qoondeeyo Komeerka iyo Qiimeynta miisaaniyadda mashariicda dowladda iyo kuwa hay'adaha horumarineed si loo sameeyo kormeer, dab-gal iyo qiimeyn. Waxa la sadaalinaya in qoondadani ay xoojin doonto daah-furnaan, isla xisaabtan iyo in miisaaniyadda lagu saleeyo waxqabadka iyo in sare u qaaddo go'aan qaadashada ku saleysan xaqiiqada ee heerarka kala duwan ee hay'adaha dowladda

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH ayaa ı noqon doonta maareynta isla markaana sinaan ugu

qeybin doonta 5% waaxyaha/unugyada kormeerka iyo qiimeynta ee WW&H ee Dowladda Federaalka ah. Waaxda ayaa si daah-furan ugu soo bandhigi doonta isticmaalka miisaaniyadda sanadlaha ah ee waaxda kormeerka iyo qiimeynta hay'adaha dowladda ee ay khuseyso.

Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta waxa ay sidoo kale rajeyneysa in dhammaan mashariicda, siyaasadha iyo mashariicda hay'adaha aan dowliga aheyn ay lahaadan miisaaniyad loo qoondeeyay howlaha kormeerka iyo qiimeynta ee barnaamijayada, siyaasadaha iyo mashariicda la hirgeliyay si sare loogu qaado isla xisaabtanka iyo hagaajinta bixinta adeegyada shacaba Soomaaliyeed la siinayo.

## 5. Shuruudaha Siyaasadda

### 5.1 Shuruudaha Kormeerka

Guddiga Kaalmada Horumarinta (DAC) ee Ururka Iskaashiga iyo Horumarinta (OECD) ayaa ku qeexay kormeerka sida "Howl socota oo isticmaaleysa nidaam is-xig-xiga oo lagu uruurinayo xog ku aaddan tilmaamo cayiman si loo siiyo maamulka iyo Daneeyayaasha muhiimka ah ee mashariicda horumarineed ee socda taas oo tilmaameysa xaddiga horumarka iyo guulaha laga gaaray ujeeddooyinka iyo sidoo kale horumarka isticmaalka lacagaha loo qoondeeyay". (OECD, 2002)[4]. Sida daraadeed, siyaasaddani waxa ay u baahantahay geeddi-socod joogto ah oo lagu uruurinayo laguna diiwaangelinayo maclumaad si loo raad-raaco horumarka laga gaaray natiijada ay gaarayaan dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn si loo go'aamiyo horumarka fulinta howlaha, guulaha laga gaaray ujeeddooyinka iyo isticmaalka lacagaha. Kormeerku waxa uu ka dhici karaa heer walba, oo ay kamid yihiin dowladaha hoose, Dowlad Goboleedyada, Federaalka iyo sidoo kale heer mashruuc ama barnaamij.

Iyada oo la eegayo jawiga guud ee Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta, siyaasaddu waxa ay dejineysaa shuruudaha kormeerka iyo qiimeynta ee soo socda;

1) Dowladda iyo hay'adaha la shaqeeya ayaa dejin doona una bandhigi doona hay'adaha dowladda ee ay khuseyso iyo fulinta qorsheyaasha heer hay'adeed ama waaxyaha iyo in la'is waafajiyo miisaaniyadda iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka, kaas oo qeexaya howlaha ay tahay in la qabto, istiraatiijiyadaha miro dhalka ah, kheyraadka loo baahanyahay, natiijada kormeerka iyo qiimeynta iyo qaab-dhismeed muujinayo howlaha gelaya, wax soo saarka iyo sidoo kale tilmaamaha guulaha.
2) Si loo fududeeyo kormeerka iyo warbixinnada, WW&H ayaa sameyn doono qorshaha kormeerka iyo qaab-dhismeedka iyo howlaha kormeerka oo mari doona heerarka soo socoda:

    - **Kormeerka howlaha galo:** in la go'aamiyo in maaliyadda iyo qalabka la geliyay loo isticmaalay si waafaqsan qoondadii iyo qorshihii loogu tala galay;
    - **Kormeerka wax soo saarka:** tan ayaa lagu sameyn doona iyada oo la eegayo qoraallada ka faalloonayo horumarka iyo booqashada goobaha howlaha ka socdaan si loo xaqiijiyo dhab ahaan wax soo saarka marka lala eego bartilmaameedyada;
    - **Natiijada Kormeerka:** in la qiimeeyo natiijada iyo ujeeddooyinkii la gaadhay;
    - **U hoggaansanaanta Kormeerka** kormeer lagu sameeynayo xeerarka dowladdad iyo mudnaantooda.

[4] Based on OECD (2002), Glossary of Key Terms in Evaluation an Based Management, OECD, Paris.

3) Waaxda ama unigyada kormeerka iyo qiimeynta, iyaga oo kaashanaya Daneeyayaasha ay khuseyso, ayaa sameyn doona tilmaamaha kormeerka iyo qiimeynta iyaga oo bixin doona xogta gundhigga u ah iyo bartilmaamaha.
4) Siyaasaddani waxa ay soo bandhigeysa hannaanka qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeynta isku xiran taas oo loo isticmaali doono in lagu cabbiro waxqabadka ku saleysan tiir-tilmaameedyada ee ku xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka 9aad (QHQ9).
5) Si loo taageero fulinta howlaha kormeerka iyo qiimeynta qaranka, dhamaan WW&H ayaa abuuri doono isla markaana howlgelin doona unugyada kormeerka iyo qiimeynta si loo fuliyo howl-maalmeedka, loo taageero loona kormeero fulinta hannaanka kormeerka iyo qiimeynta qaranka.
6) Dhammaan WW&H ayaa qaadan doono nidaamka maareynta xogta ee ku dhisan tiknoolojiyadda casriga ah si loo uruuriyo, nidaamiyo, isla markaana loo falanqeeyo xogta kormeerka uu soo saaray iyo sidoo kale in la qeexo warbixinnada horumarka ee joogtada ah.
7) Waaxda iyo unigyada kormeerka iyo qiimeynta ayaa lahaanaya mas'uuliyadda kowaad marka ay timaado qabashada howlaha kormeerka ee la xiriira hay'adahooda, si kastaba ha ahaate, waaxda mas'uulka ka ah isku duwidda howlaha kormeerka iyo qiimeynta qaranka waa tan qaranka taas oo leh xuquuqda qabashada howlaha kormeerka aan muddeysneyn ee barnaamijyada iyo mashaariicda taas oo laga hirgelinayo in ka badan hal (1) Dowlad Goboleed.
8) Hay'adaha aan dowliga aheyn ayaa fududeyn doona howlaha kormeerka ee la xiriira barnaamijyada iyo mashaariicda ay fuliyaan iyada oo loo marayo nidaam kormeer iyo qiimayn Wadajir ah.
9) Dhammaan WW&H, iyaga oo la shaqeynayo waaxyaha mas'uulka ka ah isku duwidda howlaha kormeerka iyo qiimeynta, ayaa horumarin doona isla markaana u hoggaansami doona soo saarista warbxinnada muddeysan ee soo socda;

    - Warbixinnada seddex billaha ah
    - Warbixinnada sanadlaha ah

10) Warbixinnada kormeerka ayaa loo isticmaali doona wax ka barashada hagaajinta fulinta barnaamijyada iyo go'aan qaadashada. Warbixinnada kormeerka ayaa siin doona barnaamijyada ahmiyadaha leh isla markaana la wadaagi doona wasaaradaha ay khuseeyso, Golaha Wasiirrada iyo Golaha Shacabka si ay uga qaataan maclumaadka iyo tallabooyinka ku habboon.
11) Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo kaashaneysa waaxyaha kormeerka iyo qiimeynta Dowlad Goboleedyada, wadatashina la sameyneysa Daneeyayaasha kale ayaa horumarin doonto tilmaamaha iyo heerarka kormeeerka, hab-raacyada lagu shaqeynayo, qaab-dhismeedka iyo qorsheyaasha kormeerka, qalabka iyo qaababka warbixinnada.

### 5.2 Shuruudaha Qiimeynta

Guddiga Kaalmada Horumarinta (DAC) ee Ururka Iskaashiga iyo Horumarinta (OECD) ayaa qeexa kormeerka sida "howl socota oo isticmaaleysa nidaam is-xig-xiga oo si ujeeddo leh loogu qiimeynayo mashaariicda, barnaamijyada iyo siyaasadaha socda iyo kuwa la dhameystiray, iyada oo laga eegayo naqashaddooda, fulinta iyo natiijooyinka la gaadhay. Ujeedka ayaa ah in la go'aamiyo ku habboonaanta iyo fulinta ujeeddooyinka, hufnaanta horumarka, waxtarka, saameynta

iyo joogteynta howlahaas" (OECD, 2002)[5] .

Marka laga hadlayo Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeeynta Qaranka, siyaasaddu waxa ay dejineysa shuruudaha qiimeynta loo baahanyahay ee soo socda;

1) **Qorshaha qiimeynta qaranka iyo warbixinnada qiimeynta:** Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH waa in ay sameysaa qorshaha 5ta sano ee qiimeynta qaranka oo ku dhisan Qorshaha Horumarinta Qaranka iyada oo kaashaneysa WW&H iyo hay'adaha aan dowliga aheyn isla markaana ay ansixiyaan Golaha Wasiirrada.
2) Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH ayaa fulin doonta howlaha qiimeynta ee heer Federaal sida ku xusan siyaasaddan iyada oo waaxyaha kormeerka iyo qiimeynta heer Dowlad Goboleed qaban doonan howlaha ku jaan-go'an Dowlad Goboleedkooda si waafaqasan qodobka 3.2 ee siyaasaddan.
3) Si dib-u-eegis loogu sameeyo isla markaana loo bixiyo talo siyaasadeed iyo dhinacyda kala duwan, dhammaan WW&H ayaa fududeyn doona qiimeynta howlaha sida ay iskugu raaceen waaxyaha mas'uulka ka ah isku duwidda howlaha kormeerka iyo qiimeynta.
4) Qiimeynta ayaa noqon karta mid gudaha ah ama mid dibedda ah iyada oo ay ku xirantahay ujeeddooyinka ama sida ay u go'aamiyaan waaxyaha isku duwidda.
5) Siyaasaddani waxa ay soo bandhigeysa hannaanka qaab-dhismeedka kormeerka iyo qiimeynta isku xiran ee loo yaqaanno (NIMEF).
6) Waaxyaha mas'uulka ka ah qiimeynta waa in ay xaqiijiyaan in miisaaniyad ku filan loo qoondeeyay qiimeynta sida ay tilmaameyso siyaasaddan.
7) Siyaasaddani waxa ay ka dooneysa Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH iyo waaxyaha dhiggeeda ah ee Wasaaradaha Dowlad Goboleeedyada in ay diyaariyaan isla markaana ay qabtaan qeybaha iyo noocyada qiimeynta ee soo socoda;

    - **Qiimeynta ka horreysa (Ex ante evaluation):** Qiimeyntani waxaa la sameynayaa ka hor inta aanan siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca la fulin si loo ogaado naqshadda howlaha, loo helo tilmaamaha gundhigga ah, bartilmaameedka iyo natiijooyinka la filayo. Qiimeynta noocan ahi waxa ay wadataa daraasad gundhig ah iyo qiimeynta baahida jirta;
    - **Qiimeynta Geeddi-socodka (Process evaluations):** Qiimeynta geeddi-socodka waxa ay diiradda saareysa waxa la gelinayo howlaha iyo tillaabooyinka la qaadayo waxaana ka mid ah; qiimeynta muddada dhexe iyo qiimeynta joogtada ah si loo hagaajiyo tillaabooyinka isla markaana ay wax tar ugu noqoto howlaha muddada dhiman;
    - **Qiimeynta dambe (Ex post Evaluations):** Qiimeynta ayaa ah mid kooban si go'aan looga qaato wax soo saarka iyo saameynta howlaha;
    - **Qiimeynta Sanadihii hore (Meta Evaluations):** dulmarka qiimeyntii hore ee lagu sameeyo howlaha la midka ah ee la qabanaya sanado badan.

### 5.2.1 Tilmaamaha lagu dooranayo qiimeynta howlaha

Qiimeyntu waa in marka hore ay tixgelisaa shuruudaha soo socda isla markaana ay go'aamisaa qaybaha ahmiyad ballaaran

[5] Based on OECD (2002), Glossary of Key Terms in Evaluation and [redacted] Management, OECD, Paris.

u leh shaqada, marka la eego marxaladda guud iyo in warbixinnada qiimeynta ay si qayaxan ku xusan shuruudaha lagu saleeyay qiimeynta;

1) **La xiriira (Relevance):** Qiimeyntu waa in ay sharraxdaa xaddig howlaha siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca ay ula xiriiraan baahida iyo ahmiyadaha Ummadda Soomaaliyeed iyo in qiimeyntu ay waafaqsan tahay siyaasadaha horumarinta qaranka iyo himilooyinka deeqbixiye yaasha. Intaa waxaa dheer, qiimeynta waa in ay sharraxdaa xaddiga howlaha mashruuca iyo wax soo saarkiisaba ay ugu jaan go'an yihiin guud ahaan yoolka mashariicda.
2) **Waxtarka (Effectiveness):** Qiimeynta waa in ay eegto isla markaan bixisaa xaddiga ay howlaha siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca uu gaaray ama la filayo in uu gaaro, ujeeddooyinka la qorsheeeyay iyo arrimaha saameynta ku leh ama caqabad ku ah gaarista ujeeddooyinka howlaha.
3) **Beeqaamin (Efficiency):** Qiimeynta waa in ay eegto isla markaan bixisaa xaddiga loogu isticmaalay kheyraadka ugu yar (lacag, dad, waqti iyo agab) si loo gaaro wax soo saarka ugu badan. Sidoo kale waxa ay qiimeyn doonta xaddiga howlaha siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca uu ugu guuleystay natiijooyinka sida ugu macquulsan/raqiisan.
4) **Saameynta (Impact):** Qiimeyntu waa in ay go'aamisaa in howlaha siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca ay saameyn toosan ama mid dadban; taban ama togan, wanaagsan ama xun ku leedahay nolosha dadka Soomaaliyeed.
5) **Joogteynta (Sustainability):** Qiimeynta ayaa tibaaxi doonta xaddiga faa'iidada howlaha siyaasadda, mashruuca ama barnaamijka usii socon doonaan kadib marka deeqaha howlahaas joogsadaan. Qiimeyntu waa in ay cabbirtaa heerka dhaqaale, farsamo, iyo jawiga joogteynta siyaasadda, barnaamijka ama mashruuca.

### 5.2.2 Heerarka Qiimeynta

Shuruudaha qiimeynta ee siyaasaddan waa in ay la kulmaan heerarka soo socda;

1) **Isticmaalka (Utility):** Qiimeynta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga dhex sameeyo waa in loo qorsheeya isla markaana loo fuliyaa iyada oo la raacayo ujeedka mabad'iida guud ee siinta maclumaadka looga baahanyahay dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada daneeyayasha kala duwan si ay go'aanno masiiri ah ugu qaataan,
2) **Saxnaanta iyo Kalsoonida (Accuracy and credibility):** Hanaanka qiimeynta iyo natiijadiisaba waa in ay noqdaan kuwo sax ah isla markaana lagu kalsoonaan karo. Xogta la uruuriyay waa in ay noqotaa mid sugan raacsanna nidaamka cilmi baadhista, sidoo kale falanqeynta iyo warbixinnada waa in ay ku saleysnaadan xog sax ah, ansaxsan isla markaana lagu kalsoonaan karo.
3) **Suurtogalnimada (Feasibility):** Qiimeynta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga dhex sameeeya waa in ay noqotaa mid wax-ku-ool ah iyo in ay u qalanto waqtiga, lacagta iyo cududda shaqaale ee la geliyay.
4) **Ka wada qeyb qaadasho (Participatory):** Qiimeynta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga dhex sameeeya waa in loo fuliyaa qaab ku saleysan ka wada qeyb qaadasho kuna dheehantahay daah-furnaan. Dhammaan qiimeynta siyaasadaha iyo barnaamijyada daneeyayaasha waa in lagala tashada, lagana qeyb geliyaa inta lagu gudo jiro geeddi-socodka qiimeynta iyada oo la siinayo maclumaad ku filan oo ku saabsan qiimeynta iyo cawaaqibta ka dhalan karta. Sidoo kale waa in la helaa afkaartooda ku aaddan naqshadeynta iyo fulinta siyaasadaha, iyo barnaamijyada.
5) **Habboon (Propriety):** Qiimeynta Jamhuuriyadda [illegible]a Soomaaliya laga dhex sameeeya waa in loo maraa

sifo sharci ah isla markaana anshax ku dheehantahay taas oo waafaqsan anshaxa cilmi barista iyo xeerka anshaxa xirfadleyda sameeya baaritaannada.

6) **Dhex-dhexaadnimo (Impartiality)**

### 5.3 Shuruudaha Xiriirka Dadweynaha iyo Warbixinnada.

#### 5.1.1. Istiraatiijiyadda Xiriirka Dadweynaha

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH waa in ay diyaarisa istiratiijiyad xiriir dadweyne oo looga gol-leyahay in dhidibbada loogu aaso hanaanka kormeerka iyo qiimeynta, in la dhiirigeliyo xoojinta dhaqanka kormeerka iyo qiimeynta iyo sidoo kale in la dhiirigeliyo dhaqangelinta siyaasaddan. Istiratiijiyaddas waa in ay ku jirtaa nidaamka jawaab-celinta, baahinta maclumaadka ee heerarka kala duwan iyo in Daneeyayaasha dhexdooda iyo sidoo kale in ay fududeyso wacyigelinta, u qareemidda iyo awood siinta hay'adaha si loo muujiyo wax soo saarka iyo natiijada kormeerka iyo qiimeynta.

#### 5.3.2 Shuruudaha Warbixinnada

Dhammaan hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga aheyn waxa laga doonaya in ay soo gudbiyaan wabixinnada seddex billaha ah, kuwa sanadka bartamihiisa ah iyo kuwa sanadlaha ah ee ku aaddan hirgelinta siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka ama waafaqsan heerarka, hababka iyo muddada warbixinnada ee ay dejisay Waaaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH si sax ah isla markaana aan ka dib-dhaceynin muddadii loogu talagalay in la soo saaro warbixinnada. Hababka xog uruurinta, falanqeynta iyo warbixinnada waxaa dejin doona Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo lagala tashanayo WW&A iyo hay'adaha aan dowliga aheyn.

Si loo wadaago warbixinno iyo maclumaad waqtiyeysan waa in lagu baahiyaa nidaamka ku dhisan tikoonolojiyadda ay wada arki karaan dhamaan Daneeyayaasha, dadweynaha iyo inta ay khuseysana ay ka bixin karaan faallo. Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH ayaa abuuri doonta nidaam xog-keydiye (database) dhexe ah si, si joogto ah loogu falanqeeyo maclumaadka laguna muujiyo howlaha waxqabadka siyaasadda. Dhammaan WW&A iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ayaa xaqiijin doono in hanaanka warbixinnada lagu shubo, si joogto ah barta xog-keydinta dhexe. Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH ayaa si joogto ah u diyaarin doonta warbixinnada waxqabadka ee lagu baahiyay xog-keydinta si looga dooda fagaarayaasha kala duwan.

#### 5.3.3 Qaab-dhismeedka Warbixinnada

Si loo xoojiyo loona ballaariyo xiriir dadweyne iyo wadatashi joogto ah oo ka dhexeeya dhammaan Daneeyayaasha, siyaasaddani waxa ay dalbaneysa in la sameeyo warbixinno dhinac walba ah (joog & gudub) dalka gudihiisa si loo xaqiijiyo qorsheynta iyo hirgelinta siyaasadaha, mashariicda iyo barnaamijyada waxtarka leh.

#### 5.3.4. Warbixinnada Gudubka ah

Heer Federaal, Dhammaan WW&A waa in ay usoo gudbiyaan warbixinnada kala duwan Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH. Warbixinnada wasaaradaha waa in ay noqdaan kuwo isku daro maclumaadka laga helo Daneeyayaasha kuwaas oo ay soo gudbinayaan waaxyaha [illegible]da kormeerka iyo qiimeynta ee wasaaradaha. Waaxda

Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH waa in ay falanqeysa warbixinnada la soo gudbiyay si loogu gudbiyo Golaha Wasiirrada iyo Golaha Shacabka si ay uga doodaan una qaataan, haddii loo arko muhiim. Warbixinnadan waa in loo isticmaala dejinta siyaasadaha iyo tallabooyinka isla markaana loo isticmaalo qorsheynta iyo dejinda miisaaniyadda.

### 5.3.5. Warbixinnada Joogga ah

Heerka Dowlad Goboleedyada, Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa fududeyn doonta warbixinnada heerka gudubka ah (ee u dhaxeeya WW&H Federaalka ah iyo hay'adaha aan dowliga aheyn) iyo warbixinnada joogga ah (ka soo bilowda degmooyinka, gobollada, Dowlad Goboleedka iyo heer Federaal). WW&H Dowlad Goboleedka waa in ay usoo gudbiyaan warbixinanda waaxda kormeerka iyo qiimeynta ee wasaaradaha qorsheynta Dowlad Goboleedyada, kuwaas oo si joog ah ugu soo gudbin doona warbixinanda Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH si loo soo saaro warbxinta guud ee waxqabadka iyo warbxinnada la xiriira kormeerka iyo qiimeynta. Warbxinnada waa in ay muujinayaan dhammaan maclumaadka laga soo uruuriyay Daneeyayaasha degmooyinka, gobollada iyo heer Dowlad Goboleed.

## 5.4 Barashada iyo Maareynta Aqoonta

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo la tashaneysa Daneeyayaasha kale, waa in ay billowda isla markaana fududeysa horumarinta istiraatiijiyadda barashda iyo maareynta aqoonta oo laga hirgelinayo dalka oo qeyb ka ah nidaamka kormeerka iyo qiimeynta la filaayo. Sababo la xiriira barashada iyo maareynta aqoonta dowliga ah iyo midda hay'adaha aan dowliga aheyn, taas oo bixin doonta qiimo isla markaana haajin doonta waxqabadka dhismaha feker, dhaqanka iyo agabka barashada kormeerka iyo qiimeynta iyada uu hadafku yahay in barnaamijyada iyo mashariicda iskula beddelaan hadba duruufaha isbeddelaya, si wax-ku-ool ahna loo cabbiri karo waxtarka barnaamijyada laga fuliyo meelaha adag iyo in la kordhiyo waxtarka iyo hobboonaanta mashariicda si sare loogu qaado barashada iyo sare u qaadidda karaana dadka ee heerarka kala duwan.

Dhammaan WW&H iyo hay'adaha aan dowliga aheyn waa in ay:

1) Dhiirigeliyaan dhaqanka barashada iyo u isticmaalka waayo-aragnimada laga kororsaday howlaha si loogu qaato go'aano ku dhisan xaqiiqada;
2) Fududeyaan kulamada aqoon kororsiga, kulan howleedyada/shirarka daneenayasha ku howlan iyo helitaanka aragtidooda ku aadan arrrimaha laga hadlayo;
3) In ay soo saaran aragtidooda la xiriirta saameynta ay yeelatay aqoonta cusub, oo ay ka midka tahay in la diiwaan geliyo waayo-aragnimada laga kororsaday, geeddi-socodka iyo warbixinnada sheegaya guulaha iyo hanaanka ugu fiican.

## 5.5 Shirkadaha iyo xirfadleyda madaxa bannaan ee kormeerka iyo qiimeynta

Waa shirkadaha ama shakhsiyaadka aqoonta u leh kormeerka iyo qiimeeynta iyo kuwa siiya adeegyada madaxa bannaan dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn oo ay ka midka yihiin deeq bixyaasha;

Siyaasaddan waxa ay ka dooneysa shirkadahaas ama shakhsiyaadkaas xirfadleyda ah in ay;

1) Iska diiwaangeliyaan wasaaradda dowladda ee ma[illegible]ah diiwaangelinta shirkadaha;

2) U hoggaansamaan isla markaana ay taageraan hirgelinta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta qaranka, si dhidibbada loogu aaso dhaqanka kormeerka iyo qiimeynta dalka;
3) a taageeraan dowladda dhinacyada awood siinta, iyada oo laga qeyb qaadanayo madasha iyo goleyaasha barashada ee kormeerka iyo qiimeynta
4) sticmaalan isla markaana ay dhiirigeliyaan isticmaalka hannaanka kormeerka iyo qiimeynta qaranka;
5) U hoggaansanaanta tilmaamaha ay bixiso dowladda iyo heerarka ay dejiso Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo la tashaneysa daneeyayaasha muhiimka ah, si loo go'aamiyo heerka shuruudaha dhinacyada kale (third-party) ee kormeerka iyo qiimeynta sida shirkadaha iyo shakhsiyaadka.

### 5.6 U Hoggaansananta Siyaasaddan

Dhammaan WW&H dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheyn waa in ay u hoggaansamaan tilmaamaha iyo shuruudaha siyaasaddan sida heerarka, habka howlgallada ee ay dejisay Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH taas oo hageysa geeddi-socodka kormeerka iyo qiimeynta. Hadaba si dhidibbada loogu aaso dhaqanka kormeerka iyo qiimeynta ee dalka iyo in si saxan loo fuliyo isla markaana loo dhaqangeliyo siyaasaddan, dowladda ayaa diyaarin doonta faa'iidooyinka iyo dhiirgelinta ku habboon iyo xayiraadaha ka dhasha u hoggaansanaanta iyo u hoggaansanaan la'aanta siyaasaddan ee hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn.

#### 5.6.1 Faa'iidada iyo Dhiirigelinta

U hoggaansanaanta shuruudaha ah in loo soo gudbiyo xogta kormeerka iyo qiimeynta, nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta Qaranka iyo warbixinnada ayaa loo adeegsan doonaa in laga dhigto tix-raaca u hoggaansanaanta iyo qoondeynta kheyraadka/deeqaha. Faa'iidada iyo dhiirigelinta ku habboon ayaa noqon karta;

1) In la siiyo shahaaddo loogu aqoonsanayo u hoggaansame si loo muujiyo u hoggaansanaanta shuruudaha siyaasaddan;
2) In lagu abaal mariyo fursadaha tabo-barrada iyo karaan dhis dheeriga ah, sida safarro dalka dibaddiisa waayo-aragnimo laga soo kororsanayo;
3) Kheyraad lacageed oo ay kamidka tahay qoondada miisaaniyadda oo loo kordhiyo

#### 5.6.2 Xayiraad

Xayiraado lagu soo rogayo cidda aanan u hoggaansamin shuruudaha siyaasaddan ayaa mar walba suurto gal ah, iyada oo ah go'aanka mar walba ugu dambeeya, si loo xaqiijyo u hoggaansanaanta siyaasaddan. Haddaba, xayiraaaha ayaa la fulin doona si loo ilaaliyo hantida dadweynaha iyo adeegyada la siiyo. Iyada oo loo marayo ansixinta Golaha Wasiirrada, waax kormeerka iyo qiimeynta ee (heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed) ayaa la siin doona sharciyad ay ku xayiraan hay'adaha, dowladda iyo kuw aaan dowliga aheyn, kuwaas oo ku guul darreystay u hoggaansamaan siyaasaddan. Xayiraadda waxaa lagu saleyn doona warbixinnada Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, waxaana ka mid noqon kara/doona;

1) Warqadaha Canaanta;
2) Talo soo jeedin ku addan talabooyin laga qaadayo ciddii aanan u hoggaansamin siyaasaddan sida in laga xayiro deeqaha ama laga yareeyo qoondada miisaaniyadda.

## 6 Horumarinta Karaanka

Laga billaabo marka la dhaqangeliyo siyaasaddan, Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo la kaashaneysa daneeyayaasha kale, (hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn oo ay kamidka yihiin bahda horumarka), waa in ay qabataa sahan dalka oo dhan ah laga fuliyo kaas oo lagu ogaanayo heerka kormeerka iyo qiimeynta dalka si loo ogaado gaabiska ka jira nidaamka kormeerka iyo qiimeynta dalka iyo talooyinka muhiimka ah ee loo baahanyahay in tallaabooyin laga qaato si loo xaliyo gaabiskaas.

Sida ku xusan Keyd-Aqooneedka Furan ee Bangiga Adduunka "Waa lama huraan in dal uu sameeyo daraasad lagu ogaanayo heerka kormeerka iyo qiimeynta dalka haddii la rabo in dalkaas uu horumariyo hindiseyaal ku addan mashariic iyo siyaasado lagu hagaajinayo saameynta kormeerka iyo qiimeynta[6]. Daraasaddan ayaa horseedi doonta horumarinta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta, kaabeyaasha loo baahanyahay iyo cududda dadka looga baahan yahay heer walba. Intaa waxaa dheer in fulinta hufan ee siyaasaddani ay dalbaneyso nidaam adag, si joogto ah u korinayo karaanka howl-wadeennada dowladda, si loo xoojiyo waxtarka kormeerka iyo qiimeynta.

Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo la kaashaneysa daneeyayaasha muhiimka ah, waa in ay horumarisaa istiraatiijiyadda qaran ee karaan dhiska hanaanka kormeerka iyo qiimeynta, oo uu ka mid yahay manhaj ku dhisan natiijooyinka daraasada heerka kowaad ee kormeerka iyo qiimeynta qaranka.

Si loo xaqiijiyo dhaqangelinta hufan ee nidaamka qaran ee kormeerka iyo qiimeynta, Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee WQM&HDH, iyada oo kaashaneysa hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga aheyn, waa in ay horumarisaa karaanka kormeerka iyo qiimeynta ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed. Dedaallada karaan dhiska waxaa kamid ah heerka farsamada, maamulka iyo karaanka hay'adaha ay ku gudanayan waajibaadkooda.

## 7. Saameynta Siyaasaddan ee la Filayo

Siyaasaddan ayaa la filayaa in ay yeelato saameynta soo socota;

1) Dhiirigelinta afkaar iyo fulinta barnaamijyo hufan oo wax tar leh oo ku qottoma go'aanno ku saleysan xaqiiqada;
2) Sare u qaadista isla xisaabtanka, daah-furnaanta marka ay timaado qoondeynta kheyraadka iyo naqshadeynta barnaamijyada iyo fulintoodaba;
3) Sare u qaadista wadashaqeynta ururada bulshada rayidka, ururada aan dowliga aheyn, deeq bixiyaasha caalamiga ah iyo bahda horumarinta;
4) Sare u qaadista u hoggaansanaanta ku dhisan xeerarka dhaqangalka ka ah dalka;
5) Siyaasad waxtar leh, barnaamijyo iyo mashaariicda muhiim-ka ah;
6) Xoojinta nidaam dhexe oo ku aaddan kormeerka, qiimeynta iyo maareynta xogta.

---

[6] Shepherd, Geoffrey. 2011. Conducting Diagnoses of M&E Systen ities. PREM Notes; No. 16. World Bank, access on January 23rd ,2023 https://openknowledge.worldbank.org/handle 54

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**PXeer Ra'iisal Wasaare Lr. 154** **Taariikh: 21/03/2024**

**XEER: HABRAACA DIIWAANGALINTA IYO SUGIDDA MILKIYADDA GAADIIDKA DHULKA**

XRW - BIXIT
21 MAR 2024
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), iyo (f); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **MTCA/OM/13/2024** ee ku taariikheysan **27/02/2024** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW09.66.03.24** ee **07/03/2024**, kuna saabsan ansixinta **Habraaca Diiwaangalinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** muhiimadda uu u leeyahay amniga Dalka Habraaca Diiwaangalinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka;

**Waxa uu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW09.66.03.24** ee **07/03/2024**, kuna saabsan ansixinta **Habraaca Diiwaangalinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Habraaca Diiwaangalinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka.

**Qodobka 3aad**

**Dhaqangal**

Habraacani waxa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-28-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed [redacted] Ciilale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA
Xukuumadda Federaalka
Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة النقل والطيران المدني
مكتب الوزير

SOMALI FEDERAL REPUBLIC

The Ministry of Transport and Civil Aviation

Office of The Minister

**REF: MTCA/OM/231/2024** **February 27, 2024**

**Ku: Ra'iisal Wasaaraha XFS**
**Og: Garyaqaanka Guud ee Dowladda**
**Og: Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**
**Og: Agaasima Guud ee Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada**
**Og: Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada**
**Og: Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada**

**Ujeedo: Soo gudbin Habraaca Diiwaan-Gelinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka**

Mudane Ra'iisal Wasaare

Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada XFS, waxay usoo gudbinaysaa Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha XFS Habraaca Diiwaan-Gelinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka Soomaaliya oo soo maray dhammaan habraacyadii iyo xeerarkii sharciga ahaa si uu dhaqngal unoqdo looguna soo gudbiyo Golaha Wasiirada.

Sidaas darteed, waxan kaa codsanaynaa Mudane Ra'iisul Wasaare in lagu daro habraacan ajandaha kulanka Maalinta Khamiista Taariikhduna ay tahay 29/02/2024, maadaama uu muhiim u yahay Dalka si Golaha Wasiiraddu ay uga qabsadaan shaqada uga aaddan.

Salaan iyo qadarin Mudane ra'iisul Wasaare.

**Xil. Fardowsa Cismaan Cigaal**
**Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada XFS**

**Shangani, Mogadisho-Somalia**
**Email:** fardowsa1@gmail.com, info@motca.gov.so, minister@motca.gov.so
**TEL:** +252-907798745/+252-61444097

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## WASAARADDA GAADIIDKA IYO DUULISTA HAWADA

## HAB-RAACA DIIWAAN-GELINTA IYO SUGIDDAMILKIYADDA GAADIIDKA DHULKA

**Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Gaadiid & Duulista Hawada 2024**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA

جمهـــــورية الصـــومـــال الفيـــدراليـــة
مكـــتب المحامي العام للـدولة

THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

**Summad: XGG/053/2024** **27/02/2024**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Og: Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci ku saabsan **"HAB-RAACA DIIWAAN-GELINTA IYO SUGIDDA MILKIYADDA GAADIIDKA DHULKA"**

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WC&AD/XAWSH&H/1103/2024** ee ku taarikheysan **25/02/2024** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "Hab-raaca Diiwaan-gelinta Iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci **Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa "Hab-raaca Diiwaan-gelinta Iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka"" oo ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka diib markii uu darsay Nuqulka Hab-raacani oo abuuraya hannaan lagu sugayo milkiyadda gaadiidka dhulka, laguna bixinayo summad (taargo) cusub ee gaadiidka kala duwan, uuna ku daray Ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci. Xafiisku waxa uu ku talinayaa in la saxiixo Hab-raacani, maadaama aanay ka hor imaanayn dastuurka iyo shuruucda dalka, ka dib marka la dhammeystiro hab-raaca ansixinta.

**FG:** Waxa halkan ku lifaaqan Hab-raacani Sare ku xusan.

**Wabillahi Towfiiq**

**Avv. Xassan Axmed Caamir**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA
Address: State House, Villa Somalia
Tel:+252 (0)613242015 | E-Mail:archive@sag.gov.so sag@sag.gov.so,

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**
**Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada**

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والاتفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
**Ministry of Justice and Constitutional Affairs**
**Office of Director Legislation and Agreement Department**

**Summad: WC&AD/XAWSH&H/1103/2024** **Tr. 25/02/2024**

Mudane Garyaqaan,

**Ujeeddo: Soo-gudbin "Hab-raaca Diiwaan-gelinta Iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa **Hab-raaca Diiwaan-gelinta & Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka**, oo abuuraya hannaan lagu sugayo milkiyadda gaadiidka dhulka, laguna bixinayo summad (taargo) cusub ee gaadiidka kala duwan kuwa rayidka, ciidanka, ganacsiga, diblomasiyiinta, qaramada midoobay iyo kuwa gargaarka.

Hab-raacan oo ay diyaarisay **Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada**, waxay Wasaaradda Cadaaladdu ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan hab-raacyada.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiisa sharci ee ku aaddan hab-raacan ka guto, si hab-raaca ansixintu u dhammeystirmo.

Mahadsanidiin.

Mudane Xasan Axmed Call
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 26/02/2024

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# WASAARADDA GAADIIDKA IYO DUULISTA HAWADA

## HAB-RAACA DIIWAAN-GELINTA IYO SUGIDDAMILKIYADDA GAADIIDKA DHULKA

**Sharcigan waxaa laga soo xigtay**
**Xeerka Gaadiidka Dalka ee soo baxay 2007**

**Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Gaadiid & Duulista Hawad 2024**

# CUTUBKA 1AAD:
# HORDHAC

## Qodobka 1aad:
## Hordhac

Dhammaan Gaadiidka ku sugan Dalka ama kuwa soo galaya, Gaadiidka Yar-yar Gaadiidka waaweyn, Gaadiidka Xamuulka, Gaadiidka Dowladda, Gaadiidka Ciidanka, Gaadiidka leh Taarikada Ganacsiga, Gaadiidka Safaaradaha, Gaadiidka Hay'adaha Caalamiga ah, Gaadiidka Gurmadka Deg-dega, Gaadiidka Dab-damiska iyo Gaadiidka Mootooyinka noocadooda kala duwan – oo ay ku jiraan kuwii horey u joogay dalka iyo kuwa cusub ee ka soo dega Dekadaha, Garoomada diyaaradaha, ama ka soo galaya Xudduudaha Dalalka deriska nala ah– Waxaa lagu dhaqayaa Habraaca Diiwaan-gelinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka kaas oo lagasoo xigtay Xeerka Gaadiidka Dalka ee soo baxay 2007.

## Qodobka 2aad:
## Ujeeddo

Ujeeddada habraacan waa in la xoojiyo lana casriyeeyo nidaamka qaadashada Dukumiinti-yada ay bixiso Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada, iyo in la dhaqan geliyo habraaca adeegyada Gaadiidka.

## Qodobka 3aad:
## Habraaca Diiwaan Gelinta & Sugidda Milkiyadda Gaadiidka

Habraacyadaan cusub ee Diiwaan gelinta gaadiidka iyo sugidda milkiyaddooda waxay suurta-gelinayaan in dhammaan Gaadiidku uu helo Sharciyad dhameystiran taas oo sare u qaadeysa Amniga iyo Dhaqaalaha Dalka.

# CUTUBKA 2AAD:
# HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA RAYIDKA NOOCYADIISA KALA DUWAN

## Qodobka 4aad:

## Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - waana in khidmadda loo jideedayay ay la socotaa.

2. **Wasaaraddu,** ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee Gaadiidka Rayidka, waxa ay hubin doontaa Faah-faahinta ku xusan Arjiga codsiga, haddii ay Wasaaraddu u aragto in gaariga aanu soo buuxin shuruudaha diiwaan gelinta, Wasaaradda waxa ay u direysaa in uu soo maro nidaamka tijaabada Bad-qabka Gaadiidka iyo hubinta Xadaynta Xamuulka.

3. Gaari walba ama Tareelle kasta waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha iyo Sumadda Taarikada Wasaaradda Gaadiidka.

4. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, Aqoonsigiisa, Sanadka la sameeyay, nooca gaariga, midabka, VIN numberka iyo Tirada bustanka (cylinder motor).

5. Haddii ay timaaddo xaalad is beddel ah oo wax u dhimaysa saxnimada macluumaadka u diiwaangashan gaari kasta, qofka ama shirkada iska leh gaarigaas waa in ay ku wargelisaa Wasaaradda oo ay la wadaagtaa xaaladda isbeddelka soo cusboonaaday.

6. Qofka ama Shirkadda Magacooda iyo Xogtooda lagu diiwaan galiyay gaariga ayaa ah Milkiilaha, illaa iyo inta laga sameynayo kala wareejin sharci ah iyo Diiwaan gelin xogta Milkiilaha cusub.

## Qodobka 5aad:

## Shuruudaha Diwaangelinta gaadiidka rayidka

1. Waa in Arjiga codsiga diiwan-gelinta ay ku caddahay dhammaan Xogta Gaariga.
2. Milkiilaha waa in uu keenaa Kaarka Aqoonsiga Qaranka "National ID" ama Baasaboor "Passport" ama Laysinka Darawal-nimada, Haddii ay shirkadi leedahay Milkiyadda waa in ay keentaa Shatiga Shirkadda oo aan dhacsaneyn.
3. Waa in uu keenaa Shahaado caddeynaysa hawl galnimada gaadiidka oo ka soo baxday shirkadda soo saartay "Manufacturing Certificate"
4. Waa inuu keenaa Caddeynta Warqadda iibsiga Gaariga.
5. Shahaadada Bedqabka gaadiidka iyo waafaqsanaanta shuruudaha ilaalinta deegaanka.
6. Haddii Gaarigu yahay nooca aan Xabaddu karin "Bullet Proof" waa in Milkiilaha uu la yimaadaa Ogolaanshiyaha Wasaaradda Amniga.
7. Waa in Milkiilahu keenaa Warqadda Caddeynta Bixinta Canshuurta soo dejinta iyo Caddeynta bixinta khidmada loo jaangooyay adeega.

## Qodobka 6aad:
## Bixinta Taarikada "Vehicle Plate" & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga

1. Marka uu Milkiilaha ama Shirkadda Gaadiidka iska leh ay soo buuxiyaan Shuruudaha Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka ee ku xusan Qodobka 5aad, Waxay Waaxda Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka "PRA" marsiineysaa Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka ee ku xusan Qodobka 4aad.

2. Dhameystirka Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka kadib, Waxaa loo gudbinayaa Marxaladda ugu danbeysa oo ah Daabacaadda, bixinta Taarikada & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga.

## Qodobka 7aad:
## Muuqaalka & Naqshadda Taarikada Gaadiidka Rayidka

1. Muuqaalka iyo naqshadda taarikadda gaadiidka rayidka waa sida ku cad figure 1 – figure 6

Figure 1




Figure 2



Figure 3





Figure 4




Figure 5






Figure 6



# Qodobka 8aad:
# Muuqaalka & Naqshadda Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka Rayidka

1. Muuqaalka iyo naqshadda Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka waa sida ku cad Figure 7 – Figure 9

| | |
|---|---|
| Figure 7 |  |
| Figure 8 |  |
| Figure 9 |  |

# CUTUBKA 3AAD:
# HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA XAMUULKA

## Qodobka 9aad:
## Shuruudaha Diwaangelinta gaadiidka Xamuulka am Tareelle

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - waana in khidmadda loo jideedayay ay la socotaa.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee Gaadiidka, waxa ay hubin doontaa Caddeynta ujeeddada iyo baahida loo qabo gaadiidkaas.
3. Waa in Arjiga codsiga diiwan-gelinta ay ku caddahay dhammaan Xogta Gaariga.
4. Milkiilaha waa in uu keenaa Kaarka Aqoonsiga Qaranka "National ID" ama Baasaboor "Passport" ama Laysinka Darawal-nimada, Haddii ay shirkadi leedahay Milkiyadda waa in ay keentaa Shatiga Shirkadda oo aan dhacsaneyn.
5. Milkiiluhu waa in uu keenaa Shahaado caddeynaysa hawl galnimada Gaadiidka oo ka soo baxday shirkadda soo saartay "Manufacturing Certificate"
6. Milkiiluhu waa inuu keenaa Caddeynta Warqadda iibsiga Gaariga.
7. Shahaadada Bedqabka gaadiidka iyo waafaqsanaanta shuruudaha ilaalinta deegaanka.
8. Warqadda sugitaanka milkiyadda oo ka soo baxday Maxkamad ama Nootaayo sharci ah.
9. Waa in Milkiilahu keenaa Warqadda Caddeynta Bixinta Canshuurta soo dejinta iyo Caddeynta bixinta khidmada loo jaangooyay adeega.

## Qodobka 10aad:
## Kaarka Lahaanshaha & Taarikada Gaadiidka Xamuulka ama Tareellaha

1. Marka uu Milkiilaha ama Shirkadda Gaadiidka iska leh ay soo buuxiyaan Shuruudaha Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka ee ku xusan Xarafka "B" Waxay Waaxda Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka "PRA" marsiineysaa Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka ee ku xusan Xarafka "A"

2. Dhameystirka Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka kadib, Waxaa loo gudbinayaa Marxaladda ugu danbeysa oo ah Daabacaadda, bixinta Taarikada & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga.

3. Muuqaalka kaarka lahaanshiyaha iyo Taarikada gaadiidka Xamuulka ama Tareellaha waxa ay lamid noqon doonaan nooca Gaadiidka Rayidka, hadii loo baahdana waxaa lagu dari karaa Macluumaad dheeraad ee gaarigu leeyahay.

# CUTUBKA 4AAD:
# HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA DOWLADA "GD"

## Qodobka 11aad:
## Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Dowladda waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - khidmadda Gaadiidka Dowladda waxa ay noqoneysaa kaliya bixinta qiimaha Agabka, waxaana lagu dhaqayaa xeer iyo System Diiwaan-gelineed oo u gaar ah.

2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee gaadiidka Dowaladda, waxa ay hubin doontaa ujeeddada iyo baahida loo qabo gaadiidkaas in uu yahay mid u qalma isticmaalka hay'adaas.

3. Habraacan waxa uu Hay'adaha Dowlada ku waajibinayaa in Dekaddaha Dalka aanu kasoo bixi karin Gaadiid Dowladeed oo aan diiwaan-geshaneyn ama aan wadanin Taariko Dowladeed.

4. Habraacan waxa uu farayaa Dhamaan Hay'addaha Dowladda Federalka iy

Dowlad Gobaleed-yada inay soo diiwaan geliyaan Gaadiidka Dowladeed ee Gacantooda ku jira.

5. Habraacan waxa uu Gaadiidka Dowladeed ee aan diiwaan-geshaneyn u aqoonsanayaa mid lagu isticmaalayo Sharci darro, Mas'uuliyadda ka dhalatana waxaa qaadaya cidda aan u hoggaansamin Sharciga.
6. Gaari walba oo Dowladeed waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshiyaha Hay'adda Dowladeed ee loogu talagalay Isticmaalkiisa iyo Sumada Taarikada Gaadiidka Dowladda "GD"
7. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga dowladda, aqoonsigiisa, sanadka la sameeyay, nooca gaadiidka, midabka iyo VIN numbera tirada bustanka (cylinder motor) iyo xogta Wakiilka Hay'adda Gaariga ugu qoran.
8. Haddii ay dhacdo xaalad is beddel ah oo wax u dhimaysa saxnimada macluumaadka ku diiwaangashan Gaari kasta, hay'adda gaariga ku qoran waa in ay ku wargelisaa wasaaradda isbeddelkaas oo ay u soo gudbiyaan wasaaradda.
9. Hay'adda Magaceeda lagu diiwaan galiyay gaariga ayaa ah Milkiilaha gaariga, haddii aanay si sharci ah ugu wareejin Hay'ad kale oo Dowladeed.
10. Kala wareejinta Gaadiidka Dowladda ee Hay'adaha dhaxdooda ah waxa ay yeelaneysaa Habraac kala wareejin iyo Shuruudo u gaar ah.

## Qodobka 12aad:
## Shuruudaha Diiwaan gelinta gaadiidka Dowlada

1. Waa in ay keenaan; Arjiga codsiga Hay'adda Dowladeed ee iska leh Gaadiidka iyo Caddeynta Milkiyadda.
2. Waa in Hay'adda Dowladeed ee loo diiwaan gelinayo Gaadiidka ay keentaa Warbixinta Gaariga la diiwaan-gelinayo iyo Ujeeddada Isticmaalka Gaariga.
3. Waa in Hay'adda Dowladeed ay keentaa Caddeymaha Iibsiga, Deeqaha Dowladaha kale iyo Warqadaha Canshuur dhaaf-ka.

## Qodobka 13aad:
## Soo saarista Kaarka Lahaanshaha & Taarikada Gaadiidka "GD"

1. Marka ay Hay'ad Dowladeed soo buuxiso Shuruudaha Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowaladda, Waxa ay Waaxda Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda "GD" u diiwaan-gelineysaa si waafaqsan Sharciga.
2. Dhameystirka Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka kadib, Waxaa loo gudbinayaa Marxaladda ugu danbeysa oo ah Daabacaadda, bixinta Taarikada & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga .
3. Muuqaalka kaarka lahaanshiyaha iyo Taarikada gaadiidka Dowaldda waxa uu noqon doonaa mid ay ku dhameystiran tahay Xogta Gaariga.

# CUTUBKA 5AAD:
# HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA CIIDANKA

## Qodobka 14aad:
## Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda ee Ciidamada

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Ciidanka waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - khidmadda Gaadiidka Ciidanka waxa ay noqoneysaa kaliya bixinta qiimaha Agabka, Waxaana lagu dhaqayaa xeer iyo System Diiwaan-gelineed oo u gaar ah.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee gaadiidka Ciidanka, waxa ay hubinaysaa ujeeddada iyo baahida loo qabo gaadiidkaas iyo in uu yahay mid u qalma isticmaalka hay'adaha.
3. Habraacan waxa uu Hay'adaha Ciidanka ku waajibinayaa in Dekaddaha Dalka aanu kasoo bixi karin Gaadiid Ciidan oo aan diiwaan-geshaneyn ama Taarko Ciidan aan wadanin.
4. Habraacan waxa uu farayaa Dhamaan Hay'addaha Ciidanka Heer Federaal iyo Heer Dowlad-Gobaleed-ba inay soo diiwaan geliyaan Gaadiidka Ciidan ee Gacantooda ku jira.
5. Habraacan waxa uu Gaadiidka Ciidan ee aan diiwaan-geshaneyn

aqoonsanayaa mid lagu isticmaalayo Sharci darro, Mas'uuliyadda ka dhalatana waxaa qaadaya cidda aan u hoggaansamin Sharciga.

6. Gaari walba oo Ciidan waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha Hay'adda Ciidan ee loogu talagalay Isticmaalkiisa iyo Sumada Taarikada Gaadiidka Ciidan.
7. Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka Ciidan waa in ay ku jirtaa dhammaan faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga Ciidanka, aqoonsigiisa, sanadka la sameeyay, nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN numberka tirada bustanka (cylinder motor) iyo xogta Wakiilka Hay'adda Gaariga ugu qoran.
8. Haddii ay dhacdo xaalad is beddel ah oo wax u dhimaysa saxnimada macluumaadka ku diiwaangashan gaari kasta, hay'adda gaariga ku qoran waa in ay ku wargelisaa wasaaradda.
9. Hay'adda ciidan ee magaceeda lagu diiwaan galiyay gaariga ayaa ah Milkiilaha gaariga, haddii aanay si sharci ah ugu wareejin Hay'ad kale oo ciidan.
10. Kala wareejinta Gaadiidka Ciidan ee Hay'adaha ciidanka dhaxdooda ah waxa uu yeelanayaa Habraac kala wareejin iyo Shuruudo u gaar ah.

## Qodobka 15aad:
## Shuruudaha diiwaan gelinta Gaadiidka Ciidanka

1. Hay'adaha Ciidanka waa in ay keenaan; codsiga Hay'adda Ciidan ee iska leh Gaadiidka iyo Caddeynta Milkiyadda.
2. Waa in Hay'adda Ciidan ee loo diiwaan gelinayo Gaadiidka ay keentaa Warbixinta Gaariga la diiwaan-gelinayo iyo Ujeeddada Isticmaalkiisa.
3. Waa in Hay'adda Ciidan ay keentaa Caddeymaha Iibsiga, Deeqaha Dowladaha kale iyo Warqadaha Canshuur dhaaf-ka.

## Qodobka 16aad:
## Soo saarista Kaarka Lahaanshiyaha & Taarikada Gaadiidka

1. Marka ay Hay'adda Ciidan ee Gaadiidka iska leh ay soo buuxiso Shuruudaha Diiwaan-gelinta Gaadiidka Ciidanka , Waxa ay Waaxda Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda "GD" u diiwaan-gelineysaa si waafaqsan Sharciga.
2. Dhameystirka Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka Ciidanka kadib, Waxaa loo gudbinayaa Marxaladda ugu danbeysa oo ah Daabacaadda, bixinta Taarikada & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga .

## Qodobka 17aad:
## Muuqaalka & Naqshadda Taarikada Ciidanka

1. Muuqaalka iyo naqshadda taarikada gaadiidka ciidanka waa sida ku cad tusaalaha figure 10 & figure 11






Figure 10

Figure 11




## CUTUBKA 6AAD:
## HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA GANACSIGA

### Qodobka 18aad:
### Hanaanka qaadashada Taariko Ganacsi

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Ganacsiga waxaa lagu hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - khidmadda Gaadiidka Ganacsiga waxa ay 30% ka yar tahay Khidmadda loo jideedayay Gaadiidka Rayidka, waxaana Taarikada Ganacsiga la isticmaali karaa Hal mar oo kaliya "One time use",

2. kadib marka Ganacsadaha laga iibsado Gaariga oo uu sifo sharci ah ku wareejiyo Gaariga Milkiyaddiisa, Wasaaradda ayaa u sameyneysa kala wareejin iyo Hab-Diiwaan-gelin Dhameystiran.

3. Milkiilaha Cusub ee soo iibsaday Gaariga waxa uu qaadanayaa Taarikada Gaadiidka Rayidka isagoo bixinayaa khidmadda loo jideeyay.

4. Wasaaraddu, waxa ay burburineysaa/Baabi'ineysaa Taarikada Ganacsi e

kumaal-gaarka ahayd, iyadoo System-ka Diiwaangelinta lagu keydinayo xogteeda iyo xogta taarikada cusub ee lagu badalay.

5. Gaadiidka Marka uu ka soo dego Dekadaha Dalka, Shirkadda Ganacsi ee soo degsatay gaadiidka waxa ay Wasaaradda usoo gudbineysaa warqad Tiimbareysan oo ay ku cadahay xogta Gaariga oo dhamaystiran.

6. Shirkadda Ganacsi ee soo dejisay gaadiidka waxaa laga doonayaa inay keento Caddeymaha Bixinta Canshuurta soo dejinta, iyo Caddeynta bixinta khidmada loo jaangooyay adeega.

## Qodobka 19aad:
## Soo saarista Buugga Lahaanshiyaha & Taarikada Gaadiidka Ganacsiga

1. Gaadiidka Ganacsiga waxaa loo sameynayaa Taariko KMG ah, Dhammaan Xogta Gaariga waxaa lagu qorayaa Buuga Milkiyadda.
2. Shaxda, naqshadda taarikada gaadiidka ganacsiga waa sida ku cad tusaalaha figure 12




Figure 12

# CUTUBKA 7AAD:
# HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA DIPLOMAASIYIINTA "DIPLOMATS"

## Qodobka 20aad:
## Hanaanka Diiwaan gelinta Gaadiidka Diplomaasiga ama Safaaradaha

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Diblomaasiga ama Safaaradaha waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Arimaha Dibadda, kadib waxay u soo gudbinaysaa Wasaarada Gaadiidka Marka codsiga uu soo gaaro Wasaarada waxa ay marineysaa Habraaca Diiwaangelinta Gaadiidka Diblomaasiga sida uu jideynayo habraacan, khidmadda Gaadiidka Diplomaasiga waxa ay noqoneysaa kaliya bixinta qiimaha Agabka.

2. Diiwaan-gelinta Gaadiidka Diblomasiga, waxa ay noqoneysaa kaliya bixinta qiimaha Agabka, sida uu jideynayo Habraacan.

4. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin gaadiidka Diblomacy-ga ama Safaaradaha Waxa ay hubinaysaa ujeeddada iyo baahida loo qabo isticmaalka Gaadiidkaas.

5. Gaari walba oo Safaaradeed waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshiyaha iyo Sumada Taarikada Diblomaasiga "CD".

6. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, sida Aqoonsiga, Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.

## Qodobka 21aad:
## Muuqaalka & Naqshadda Taarikada Gaadiidka Diplomaasiga / Safaaradaha

1. Muuqaalka iyo naqshadda taarikada gaadiidka diplomaasiga / safaaradaha waa sida ka cad figure 13




Figure 13

## CUTUBKA 8AAD:
## HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA HAY'ADAHA UN- Ka"UNITED NATIONS"

## Qodobka 22aad:
## Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Qaramada Midoobay

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Qaramada Midobay ama UN -ka waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Arimaha Dibadda, kadib waxay u soo gudbinaysaa Wasaarada Gaadiidka, Marka codsiga uu soo gaaro Wasaarada waxa ay marineysaa Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka UN -ka sida uu jideynayo habraacan, khidmadda Gaadiidka UN-ka waxa ay noqoneys

kaliya bixinta qiimaha Agabka.

2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee gaadiidka ee Qaramada Midoobay, waxa ay hubinaysaa ujeeddada iyo baahida loo qabo nooca Gaadiidkaas.

3. Gaari walba oo Qaramada Midoobay ay leeyihiin waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshiyaha iyo Sumada Taarikada UN-ka

4. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.

5. Muuqaalka iyo nashqadda taarikada gaadiidka un-ka waa sida ku cad figure 14

Figure 14



# CUTUBKA 9AAD:
# HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA MASHAARIICDA "GM"

## Qodobka 23aad:

## Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Mashaariicda

1. Codsiga Diiwaan gelinta gaadiidka Mashaariicda waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Arimaha Dibada, kadib waxay u soo gudbinaysaa Wasaarada Gaadiidka marka codsiga uu soo gaaro Wasaarada waxa la raacayaa sida uu jideynayo habraacan, waana in khidmadda la jideeyay ay la socotaa.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee Gaadiidka Mashaariicda, waxa ay xaqiijineysaa.
   - Macluumaadka mashruuca iyo hay'adaha Maalgeliya.
   - Bixinta diiwaan gelin gaar ah oo ku xiran nooca Mashruuca.
   - La socodka iyo qiimeynta isticmaalka Gaadiidka ee Mashruuca.
3. Gaari walba oo ka mid ah Gaadiidka Mashaariicda waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshiyaha iyo Sumada Taarikada Gaadiidka Mashaariicda "GM"
4. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.

## Qodobka 24aad:
## Soo saarista Kaarka Lahaanshiyaha & Taarikada Gaadiidka Mashaariicda "GM"

1. Muuqaalka iyo nashqadda taarikada gaadiidka mashaariicda waa sida ku cad figure 15




Figure 15

## CUTUBKA 10AAD:
## HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA GARGAARKA

### Qodobka 25aad:
### Hab raaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka Gargaarka

1. Codsiga Diiwaan gelinta gawaarida gargaarka waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka sida uu jideynayo habraacan, waana in khidmadda la jideeyay ay la socotaa.

2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee Gaadiidka Gargaarka, waxa ay hubinaysaa Ujeeddada iyo baahida loo qabo isticmaalka Gaadiidkaas.

## Qodobka 26aad:
## Shuruudaha Hay'adaha Gar-gaarka, kuwa Dowliga ah iyo kuwa aan Dowliga ahayn

1. Dukumentiyada Aqoonsiga hay'adda Gargaarka Deg-degga ah sida Shahaaddooyinka Asaasiga ah, iyo caddeymaha inay yihiin Hay'ad sharci ah oo haysata Rukhsadda bixinta Adeeg-yada Gargaarka Deg-degga ah.
2. Qalabka lagama-maarmaanka u ah arrimaha Gar-gaarka Deg-degga, sida Qalabka Caafimaadka, Isgaarsiinta deg-degga, Iyo qalabka samata bixinta.
3. Noocyada gaadiidka gurmadka ee laga oggol yahay Dalka, Cabbirka, iyo awoodda xamuulka.
4. Calaamadeynta Gaadiidka, iyo Astaamaha muujinaya in gaadiidku yahay mid loogu tala galay Gar-gaarka deg-degga, sida midabka iyo astaamaha gaarka ah.
5. Gaari walba oo ka mid ah Gaadiidka gar-gaarka waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha iyo Sumada Taarikada Gar-gaarka Deg-degga ah, taas oo noqon karta Gaadiidka UMBLANCE ama Deb-damiska IWM.
6. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.

## Qodobka 27aad:
## Soo saarista Kaarka Lahaanshiyaha & Taarikada Gaadiidka Gar-gaarka Deg-degga

1. Muuqaalka iyo nashqadda taarikada gaadiidka gargaarka deg-degga waa sida ku cad figure 16 – figure 17

| | |
|---|---|
| Figure 16 |  |
| Figure 17 |  |

# CUTUBKA 11AAD:
# HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA MOOTADA BAJAAJ & MOOTO SADDEX LUGLEYDA

## Qodobka 28aad:

## Hanaanka Diiwaan gelinta Gaadiidka Mooto Bajaajta & Mooto Saddex Lugleyda

1. Codsiga Diiwaan gelinta Mooto Bajaajta & Mooto Saddex lugleyda, waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka sida uu jideynayo habraacan, waana in khidmadda la jideeyay ay la socotaa. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala gadisan ee mootooyinka, waxa ay hubinaysaa Ujeeddada iyo baahida loo qabo Mootadaas.
2. Shirkadaha ka Ganacsada Mootooyinka noocyadooda kala duwan waxaa laga doonayaa Shuruudaha soo socda:
   A. Arjiga codsadaha oo ay ku caddahay macluumaadka Mootada
   B. Aqoonsiga Milkiilaha sida; National ID-ga ama Baasaboorka, Laysin ama Shatiga shirkadda leedahay oo aan dhacsaneyn.
   C. Shahaado caddeynaysa hawl galnimada Gaadiidka Mootada kaas oo kasoo baxday shirkadda soo saartay.
   D. Shahaadada Bedqabka gaadiidka iyo waafaqsanaanta shuruudaha ilaalinta deegaanka.
   E. Warqadda sugitaanka Milkiyadda oo ka soo baxday Maxkamad ama Nootaayo sharci ah.
   F. Bixinta khidmadda loo jaangooyay adeega.
3. Mooto Bajaaj ama Mooto Saddex Lugleey walba oo ka mid ah mootooyinka ka howl gala Dalka waa in ay yihiin kuwo ka diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha iyo Sumada Taarikada Mootada.
4. Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka Mootada waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta Mootada, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.

## Qodobka 29aad:
## Soo saarista Kaarka Lahaanshiyaha & Taarikada Mooto Bajaajta ama Saddex Lugleyda

1. Shaxda, naqshadda taarikada gaadiidka mooto 3 lugleyda waa sida ku cad figure 18 – figure 23

Figure 18





Figure 19



Figure 20





Figure 21




Figure 22






Figure 23



## CUTUBKA 12AAD:
## HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA MOOTADA LABO LUGLEYDA

### Qodobka 30aad:

### Hanaanka Diiwaan gelinta Gaadiidka Mooto 2 Lugleyda

1. Codsiga Diiwaan-gelinta mooto 2 Lugleyda ah waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka sida uu jideynayo habraacan, waana in khidmadda la jideeyay ay la socotaa.

2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee mootooyinka 2 Lugleyda ah waxa ay hubinaysaa ujeeddada iyo baahida loo qabo Mootadaas.

3. Shirkadaha ka Ganacsada Mootooyinka noocyadooda kala duwan waxaa laga doonayaa Shuruudaha soo socda:

   A. Arjiga codsadaha oo ay ku caddahay Macluumaadka Mootada
   B. Aqoonsiga Milkiilaha sida; National ID-ga ama Baasaboorka, Laysin ama Shatiga shirkadda leedahay oo aan dhacsaneyn.
   C. Shahaado caddeynaysa hawl galnimada Mooto 2 lugleyda ah taas oo ka soo baxday shirkadda soo saartay.
   D. Shahaadada Bedqabka Mootada iyo waafaqsanaanta shuruudaha ilaalinta deegaanka.
   E. Warqadda sugitaanka milkiyadda oo ka soo baxday Maxkamad ama Nootaayo sharci ah.
   F. Bixinta khidmada loo jaangooyay adeega.
4. Mooto 2 lugoodlay walba oo ka mid ah Mootooyinka ka howl gala Dalka waa in ay yihiin kuwo ka diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha iyo Sumada Taarikada Mootada.
5. Kaarka Lahaanshiyaha Mootada waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta Mootada, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Mootada, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka Mootada ku qoran.

## Qodobka 31aad:
## Soo saarista Kaarka Lahaanshaha & Taarikada Mooto 2 lugoodlayda

1. Muuqaalka iyo naqshadda taarikada gaadiidka mooto 2 lugleyda waa sida ku cad figure 24 – figure 29

Figure 24





Figure 25




Figure 26





Figure 27




Figure 28






Figure 29



## CUTUBKA 13AAD:
## Cusbooneysiinta Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka

### Qodobka 32aad:
### Cusbooneysiinta Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka

1. Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka waxaa la cusbooneysiin karaa marka ay timaado saddex xaaladood mid"
   a. Haddii uu lumo ama ciladoobo.
   b. Haddii ay jirto marxaladda ku xusan Qodobka 4aad (5),(6) mid kood.
   c. Iyo mar kasta uu maro tijaabada bedqabka gaadiidka oo la sameeyo sannadkiiba hal mar.

## CUTUBKA 14AAD:
## Tariifada Khidmadda Gaadiidka Rayidka iyo Mootooyinka

### Qodobka 33aad:
### Noocyada Taariifada

Dhammaan, noocyada kal duwan ee Gaadiidka Rayidka iyo Mootooyinka, waxa ay Dowladda Soomaaliya u sameysay Tariifo khidmad laga qaadayo adeegyada bixinta Taarikada iyo Kaarka lahaanshaha Gadiidka, Sida uu jideynayo habraaca diiwan-gelinta iyo sugida milkiyada Gadiidka.

Haddaba; iyadoo Wasaaradda Gaadiidka ay ka duuleyso horumarinta iyo casriyeenta adeeg-yada Gaadiidka iyo sare u qaadista dakhliga dowladda, waxa ay Wasaraddu dib u diiwaan-gelin cusub ku sameyneysaa Dhammaan Gaadiidka Dalka iyadoo wasaaraddu ay bixineyso noocyo cusub oo Taariko casri ah iyo Kaarka lahaanshaha Gaadiidka.

### Qodobka 34aad:
### Noocyada Gaadiidka Rayidka & Mootooyinka

- Taarikada Gaadiidka Rayidka & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Mooto 3 lugleyda & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Mooto 2 Lugleyda & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiid Rimoorka & Kaarka lahaanshaha

SHAXDA KHIDMADA GAADIIDKA RAYIDKA & MOOTOOYINKA

| S/N | Magaca Tariifada | Khidmadi loo jideeyay |
|---|---|---|
| 1 | Taarikada Gaadiidka Rayidka & Kaarka lahaanshaha Gaadiidka | **$138** |
| 2 | Taarikada Mooto 3 lugleyda & Kaarka lahaanshaha Mootada | **$90.5** |
| 3 | Taarikada Mooto 2 Lugleyda & Kaarka lahaanshaha Mootada | **$72.5** |
| 4 | Taarikada Gaadiidka Rimoorka & Kaarka lahaanshaha Rimoorka | **$94.5** |
| 5. | Taarikada Gaadiidka Ganacsiga & Kaarka lahaanshaha | **$0.00** |
| 6. | Taarikada Gaadiidka Mashaariicda & Kaarka lahaanshaha | Waxaa lagu jaan- goynayaa qiimaha Mashruuca |

## Qodobka 35aad:
## KHIDMADDA NOOCYADA GAADIIDKA AAN RAYIDKA AHAYN

Dhammaan, noocyada kal duwan ee Gaadiidka aan Rayidka aheyn, malahan wax Tariifo ah mana jirto wax khidmad ah oo Dowladda ay ka qaadeyso.

Bixinta adeegyada Taarikada iyo Kaarka lahaanshaha Gadiidka aan Rayidka ahayn waxaa ku waajibaya kaliya bixinta qiimaha Agabka, Sida uu jideynayo habraaca diiwan-gelinta iyo sugida milkiyada Gadiidka aan Rayidka ahayn.

Haddaba; iyadoo Wasaaradda Gaadiidka ay ka duuleyso horumarinta iyo casriyeenta adeeg-yada Gaadiidka iyo sare u qaadista dakhliga dowladda, waxa ay Wasaraddu dib u diiwaan-gelin cusub ku sameyneysaa Dhammaan Gaadiidka Dalka iyadoo wasaaraddu ay bixineyso noocyo cusub oo Taariko casri ah iyo Kaarka lahaanshaha Gaadiidka.

**Noocyada Gaadiidka aan Rayidka ahayn**

- Taarikada Gaadiidka Dowladda & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiidka Ciidanka & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiidka Diplomacy-ga & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiidka UN-ka & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiidka Gargaarka & Kaarka lahaanshaha

# Dhammaad